Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 52.

Muqdisho, 29 Diseembre 1974.

*(2)* Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Caasha Maxamed Warsame, maalintii 14-6-1973, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, Jidka 26 Juun uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa afar gees addimihiisuna ahaayeen 20x20 kuna fadhiye 400 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii degmadaas:

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG-3-23-1000 ee 15-10-1973, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 30x20 kuna fadhiya 600 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 30.
Galbeed waxaa ka xga: Dhul lamb. 23.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 25.

Muqdisho, 2 Jennayo 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(3)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Aadan Cabdi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 5-12-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar ah 20x16,50 kuna fadhiya 330 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxa ka xiga: Jid.
Koofur waxa ka xiga: Dhul lamb. 33.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 29.
Bari waxa ka xiga: Dhul lamb. 27.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulkka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guu, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Jennayo 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(4)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Diiriye Nuur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 22-7-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21 Oktoobar, oo leh qiyaas rektangolaar ah 30x40 kuna fadhiya 1200. mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 200.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 190.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulkka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guu, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Jennayo 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(5)* *Maxamed Cabdi Saciid*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad / Muqdisho, 28 Jeńayo 1975 L. 2 R. 1

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 5, Tr. 25 Agosto 1974 — *Sharci Khasab kaga dhigaya Beeraleyda Muuska inay beeraan Waxyaalaha la cuna (Cash Crops).* Bog. 42

SHARCI L. 6, Tr. 4 Jenayo 1975 — *Xeerka Habka Madaniga ah Buugga 1 qaybta V Awoodda Garsooraha — Qodobkiisa 80 aad oo la kordhiyey.* » 43

SHARCI L. 7, Tr. 8 Jenayo 1975 — *Ratification of Agreement between the Somali Democratic Republic and the Arab Republic of Libya — Tripoli 4th September, 1972.* » 44

SHARCI L. 7, Tr. 8 Jenayo 1975 — *Meelmarin Heshiis Dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaaliyaa iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Liibyaa — Tripoli 4tii Sebt. 1972.* » 45

SHARCI L. 7, Tr. 8 1975 — *Meelmarin Heshiis Dhexmaray oo ah Nuqul Carabi ah.* » 46

SHARCI L. 8, Tr. 14 Jenayo 1975 — *Beddelaad Sharci Lambar 28 Taarikh 14 Febbrayo 1972 oo ku saabsan Guddiga Barista Dacwooyinka.* » 47

Madbacada Dwladda — Muqdisho

SHARCI L. 9, Tr. 15 Jenayo 1975 — *Mideynta Guddiga Abaalmarinta iyo Guddiga Dallacaadda Shaqaalaha.* Bog. 48

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 9 Jenayo 1975, L. 15 — *Beddelaad Jaalle G. Dhexe Cisman Maye.* » 49

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 15 Jenayo 1975, L. 16 — *Magacaabidda Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta.* » 50

XEER WASAARADDA CAAFIMAADKA, 31 Diseembre 1974, L. 17 — *Sicirka Iibka Daawada Dadweynaha.* » 51

XEER WASAARADDA MAALIYADDA, 1 Jenayo 1975, L. 18 — *Tacriifadda Sigaarka, Siigaro.* » 52

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 31 Diseembre 1974, L. 19 — *Dhul dowladeed la Siiyay Jaalle Faaduma Saciid, ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis (Lido) kuna fadhiya mq. 2.800.* » 54

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYNI, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Naada Dhul 11 Jenayo 1975 — *Cabdullahi Maxamad Nuur. (6)* Bog. 57

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Naada Dhul 11 Jenayo 1975 — *Caasha Ibrahim iyo Khadiija Ducaale. (7)* » 57

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Naada Dhul 11 Jenayo 1975 — *Turabali Jaafer Raashid Muraaji iyo Asharafali, Asadali Xayderali iyo Tahera. (8)* » 58

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, Buugga Kaydka Lamb. 2540-7 Hadhsigiisuna aha 6.959,10 — *Axmad Cali Aadan. (9)* » 58

MAXKMAADDA GOBOLKA BANADIR, Buugga Lacagta N. D. R. 4951 Shs. 1.250 — *Aadan Cabdi Cilmi. (10)* » 59

MAXKMAADDA GOBOLKA BANADIR, Buugga Lacagta N. D. R. 2181/4 Shs. 310 —*Faaduma Xasan Nuur (11)* » 59

MAXKMAADDA GOBOLKA BANADIR, Buugga Lacagta N. R. D. 9006 Shs. 2.211 — *Maxamed Maxamuud Axmed. (12)* » 60

# BOGGA KOOWAAD S H A R C I

**SHARCI L. 5, Tr. 25 Agosto 1974.**

**Samayn Sharci khasab kaga dhigaya Beeraleyda inay beeraam waxyaalaha la cuno (Cash Crops).**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad tii 2aad ee kacaanka Oiitoobar, 1969;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

a) Beeraleyda Muuska ee beerahoodu ku yaalliin dhinacyada labada Webi Juba iyo Shabeelle — waxa hadda iyo wixii ka dambeeya, qasab lagaga dhigayaa inay ku beeraan beerahooda qayb aan ka yarayn 5% (boqolkiiba shan) waxyaalaha ay ka mid yihiin galley, mesaggo, beriis, saliid, suuf iwm.

b) Si loo hirgeliyo sharcigan, xubnaha dawladda ee ku saqada lihi, waa inay beeraleyda siiyaan abuurka loo baahan yahay iyo wixii taageero lagama maarmaan ah.

Qodobka 2aad

Xoghayahay Wasaaradda Beeraha, isagoo la tashanayaa Wakaaladda Muuska; Wakaaladda Cuntada Deg-Dega ah (Crash Programme) iyo Wakaaladda Horumarinta Beeraha (ADC), waa inuu soo saaro amaro idaari ah oo ku saabsan habka toosan ee sharcigan lagu fulinayo.

Qodobka 3aad

Qofkii jebiya qodobda sharcigan ama u hoggaansami waaya xeerarka iyo amarada uu oo saaro Xoghayaha Beeruhu wuxuu mutaysan doonaa dembi ciqaabtiisu aanay ka badnayn 6 bilood oo xadhig ah iyo ganaax ah laba jibbaar qiimaha wixii laga rabay inuu beero.

Qodobka 4aad

Dembiyada ku lug leh sharcigan waxa ku shaqo yeelan doonta Maxkamadda Badbaadada Ummdda.

Qodobka 5aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa isla markiiba waxaana lagu soo saarį doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 25 Aogosto 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

**SHARCI L. 6, Tr. 4 Jenayo 1975.**

**Xeerka Habka Madniga ah Buugga I qaybta V — Awoodda Garsooraha — qodobkiisa 80 aad oo la kordhiyey.**

MADAXWENYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad tii 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 34 ee soo baxay 22-9-1974 — Nidaamka Garsoorka;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 19 ee soo baxay 27-7-1974 — Xeerka Habka Madaniga ah;

ISAGOO AQOONSAN In ey lagama maarmaan tahay dacwooyinka Dawladda iyo Wakaaladaha Madaxa-bannaan ey dhinac ka yihiin si xilkasnima ah looga difaaco Maxkamadaha;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA:

In Xeerka Habka Madaniga ah — Buugga I qaybta V — Awoodda Garsoooraha lagu kordhiyo sida hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

*Qodobka 80 bis*

1. Dacwooyinka Dawladda iyo Wakaaladaha Madaxa-bannaan ey dhinac ka yihiin, Garsooraha waxaa waajib ku ah in uu xaqiijiyo, daryeelo oo uu si xilkasnima ah u difaaco danta guud.

2. Garsooraha, waxaa laga doonayaa in uu ku dadaalo xoolaha Dawladda iyo Wakaaladaheeda Madax-bannaan si aan marna si sharci darra ah xuquuqdooda loo dhaafsiin Maxkamadaha hortooda, xataa haddii eysan si habsami ah u difaacin xubnaha Wakiilka u ah Dawladda, mar walba waa inuu isagu iskiisa u ilaaliya danaha guud, isagoo dhowrayo Sharciga.

Qodobka 2aad

*Dhaqan gelin*

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa marka laga bilaabo taariikhda 15-12-1974, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga as ee Dawladda Soomaaliyeed.

Muqdisho, 4 Jenayo 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

**SHARCI L. 7, Tr. 8 Jenayo 1975.**

**Ratification of agreement between the Somali Democratic Republic and the Arab Republic of Libya — Tripoli, 4ah September, 1972.**

THE PRESIDENT

OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The First and Second Charters of the Revolution of 21st October, 1969 and Law No. 1;

HAVING SEEN Law No. 59 of 20th September, 1972 on the Establishment of the National Shippin Line Agency;

HAVING SEEN The Agreement between the Somali Democratic Republic and the Arab Republic of Libya signed in Tripoli on 4th September, 1972;

HAVIING SEEN The Agreement of Establishment and Statues of the National Shipping Line;

TAKING NOTE of the approval of the Supreme Revolutionary Council of Secretaries of State;

PROMULGATES

the following Law:

Article 1

The Protocol Agreement signed in Tripoli on 4th September, 1972 between the Somali Democratic Republic and the Arab Republic of Libya is hereby Ratified and shall have the force of a Law in the Somali Democratic Republic.

Article 2

This Law is deemed to have come into force on 21st June, 1974.

Article 3

Any Law or provision contrary or inconsistent with this Law is hereby repealed.

2. This Law shall come into force immediately and shall be published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 8 January 1975.

*Jaalle Major General Mohamed Siyad Barre*
PRESIDENT
of the Supreme Revolutionary Council

**SHARCI L. 7, Tr. 8 Jenayo 1975.**

**Meelmarin Heshiis Dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqradiga Soomaalyaa iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Liibya — Tripoli — 4tii Sebtember, 1972.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKU ARKAY Xaanshida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar, 1969 iyo Sharciga 1aad;

MARKU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 59 ee 20kii Sebtember, 1972 kuna saabsanaa Dhismaha Wakaladda Gaadiidka Badda;

MARKU ARKAY Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyaa iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Liibya laguna saxeexay Tripoli 4tii Setember, 1972;

MARU ARKAY Heshiiska Dhismaha Sharikadda Gaadiidka Badda;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU XEERAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyey Heshiiskii la kala saxeexday 4tii Sebtember, 1972 ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Soomaaliyaa iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Liibya. Heshiisku wuxuu yeelan doonaa Astaan sharci wuxuuna ka mid noqonayaa sharciyada u degsan Dalka.

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galkiisu ahaa 21kii Juun, 1974.

Qodobka 3aad

Sharci allaale sharciga ka horjeeda ama aan la soconin sharcigan waa la buriyey.

2. Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa si degdeg ah waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 8 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

## تصديق على الاتفاقية المبرمة بين
## جمهورية الصومال الديمقراطية والجمهورية العربية الليبية
## طرابلس — ٤ سبتمبر ١٩٧٢م
## رئيس المجلس الاعلى للثورة

بعد الاطلاع : على الميثاق الاول والثانى لثورة ٢١ اكتوبر ١٩٦٩م وعلى القانون رقم ١ ،

بعد الاطلاع : على القانون رقم ٥٩ الصادر فى ٢٠ سبتمبر ١٩٧٢م المختص بوكالة الخطوط الوطنية للملاحة ،

بعد الاطلاع : على الاتفاقية المبرمة فى طرابلس ٤ سبتمبر ١٩٧٢م بين جمهورية الصومالية الديمقراطية والجمهورية العربية الليبية ،

بعد الاطلاع : على اتفاقية تأسيس شركة الخطوط الوطنية للملاحة،

اعتبارا : لقرا المجلس الاعلى للثورة ومجلس سكرتيرى الدولة،

**أصدر**

القانون التالى : — مادة ١

لقد تم التصديق على اتفاقية تأسيس الخطوط الوطنية للملاحة المبرمة بين جمهورية الصومال الديمقراطية والجمهورية العربية الليبية فى ٤ سبتمبر ١٩٧٢م ٠

ويكون لها صفة شرعية فى جمهورية الصومال الديمقراطية ٠

مادة ٢

قصر سريان مفعول هذا القانون عن ٢١ يوليو ١٩٧٤م ٠

مادة ٣

أ — أى قانون مخالف أولا ينطبق على هذا القانون يعتبر لاغيا ٠

ب — يسرى مفعول هذا القانون حالا وسينشر فى الجريدة الرسمية للدولة ٠

مقديشو ٨ يناير ١٩٧٥م **ختم / جالى اللواء محمد سياد برى**

**رئيس المجلس الاعلى للثورة**

SHARCI L. 8, Tr. 14 Jenayo 1975.

**Beddelaad Sharci lambar 28 taarikh 14 Febbrayo 1972, oo ku saabsan Guddiga Baarista dacwooyinka.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshada 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambar 28 taarikhdiisuna tahay 14 febbrayo 1972;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dowladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Qodobka 1aad ee xubintiisa 2aad Sharciga lambarkiisu yahay 28 taarikhdiisuna tahay 14 febbrayo 1972 oo ku saabsanaa Guddiga Baarista Dacwooyinka waa la beddelay, waxaana loo aqrin doona sida soo socda:

2. Guddigaa wuxuu ka koobanyahay:

b) Guddomiyaha Guddiga Cadaaladda iyo Sharciga — Guddomiye

t) Laba xubin oo ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka kana mid ah Guddiga Cadaaladda iyo Sharciga. — Xubin

j) Garyaqaanka Guud ee Dowladda. — Xubin

x) Agaasimaha Guud ee Shaqaalaha Dowladda. — Xubin

kh) Agaasimaha Waaxda Guddiga Baarista Dacwooyinka Shaqaalaha Dowladda iyo Dadweynaha — Xoghaaye

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta la saxiixo, waxaana lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdishu, 14 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

**SHARCI L. 9, Tr. 15 Jenayo 1975.**

**Mideynaya Guddiga Abaalmarinta iyo Guddiga Dallacaadda shaqaalaha.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga Tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU ARKAY Sharciga Tirsigiisu yahay 2 ee baxay 1dii Abrile 1973 iyo beddelaadii lagu sameeyey;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Guddiga Abaalmarinta ee lagu dhisay Sharciga Tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 19 Oktoobar 1970 iyo Guddiga Dallacaadda Shaqaalaha ee lagu dhisay Sharciga Tirsigiisu yahay 2 ee soo baxay 1dii Abrile 1973, waa la mideeyey, waxaana loo aqoonsan doona Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 2aad

*Habka Shaqada*

Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta wuxuu ku shaqayn doonaa habka lagu tilmaamay Sharciyada kor ku xusan.

Qodobka 3aad

*Xeerar hoose*

Haddii loo baahdo, Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka, wuxuu soo saari doonaa xeerar hoose oo lagu nidaaminayo maamulka iyo hawlaha Guddiga.

Qodobka 4aad

*Dhaqan gelid*

Sharcigu wuxuu dhaqan gelayaa marka uu soo saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Qodobka 5aad

*Burin*

Xeer kasta ama hab kasta oo khilaafsan Xeerkan, waa la buriyey.

Muqdisho, 15 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

# BOGGA LABAAD

## XEER

### XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

**Tr. 9 Jenayo 1975, L. 15.**
**Beddelaad Jaalle G. Dhexe Cusmaan Maye.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARAE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda kowaad iyo tan labaad ee Kacaankii 1969kii;

MARKUU ARKAY Sharciga lagu dhisay Maxmadda Badbaadada Dalka ee Muqdisho oo tirsigeisu yahay 3 soona baxay 10-1-1970;

MARKUU TIGELIYEY Iney tahay lagama marmaan in G. Dhere Cismaan Maye oo ah Kuxiggeynka Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Muqdisho laga wareejiyeyo xilkaas, sababtoo ah in uu Jaamacadda Ummadda u go'o;

MARKUU DHEGEYSTAY Ra'yiga Guddoonshaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo kan Xeer Ilaaliyaha Guud ee isla Maxkamadaas;

WUXUU GUDDOONSHAY

Qodobka 1aad

In G. Dhex Cismaan Maye Macallin oo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed laga wareejiyo hawsha hor lagu soo tilmaamay ee uu ka hayo Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud M.B.D. Muqdisho, loona beddelo Jaamacadda Ummadda, marka laga bilaabo taariikhda Dekretadaan.

Qodobka 2aad

Dekretadaan, waxaa lagu faafindoonaa «Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda» JDS.

Muqdisho, 9 Jenayo 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka Lamb. 1, Bogga Lamb. 78.*
*Muqdisho, 14 Jenayo 1975.*
*Hantidhawrka Guud:*
G. Dhexe CABDILLAHI WARSAME NUUR

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr. 15 Jenayo 1975, L. 16.**
**Magacaabidda Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARAE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga Tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU ARKAY Sharciga Tirsigiisu yahay 2 ee soo baxay 1dii Abrile 1973 iyo beddelaadii lagu sameeyey;

ISAGOO ARKAY Sharciga Tirsigiisu yahay L. 9 ee 15-1-1975 ee lagu mideeyey Guddiga Abaalmarinta iyo Dallacaadda Shaqaalaha;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodobka 1aad

In Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin loo magacaabay inay ka koobnaadaan Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Golaha ee Kacaanka:

1) Jaalle Gaashaanle Sare Ismaaciil Cali Abokor oo ah Madaxxweyne Kuxigeenka G.S.K. isla markaana ah Guddoomiyaha Guddiga Siyaasadda — Guddoomiye

2) Jaalle Gaashaanle Sare Maxmud Geelle Yusuf oo ah Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka kana mid ah Guddiga Nabadsugidda — Xubin

3) Jaalle Gaashaanle Dhexe Cabdirisaaq Maxamud Abuukar oo ah Guddoomiyaha Guddiga Bulshada — Xubin

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhapan gelayaa marka uu soo saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 15 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

**XEER WASAARADDA CAAFIMAADKA**
**Tr. 31 Diseembre 1974, L. 17.**
**Sicirka iibka Daawada Dadweynaha.**

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 23 iyo 29 ee sharciga lambarkiisu yahay 76 taarikhdiisuna tahay 27 Dishember 1970;

ISAGOO ARKAY Iney tahay lagaama maarmaan in la xaddido sisirka iibka daawada dadka tafaariq ahaan (al minuto) oo Farmashiyoyaalka (Iskaashatooyinka) iyo dukaamada Dawladaha Hoose ee daawada ay kaooa iibiyaan dadweynaha;

KA DIB MARKII Uu la tashi la yeeshtay Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga iyo kan Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;

ISAGOO ARKAY Warqadda lambarkeedu yahay GSK-S-55-C-1 894,taarikhkh 29 Dishembar 1974; oo ku saabsan habka sicirka daawooyinka;

## WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo socda:

### Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo 1da Jannaayo 1975 waxaa awood loo siiyay Iskaashatooyinka daawada iyo dukaamada Dowladaha Hoose ee Daawada iney macaash ahaan ku darsadaan 20% sicirka daawada iyo waxyaalaha la xiriira (affini) oo ay kaga gataan Wakaaladda Keenidda iyo Soosaaridda Daawooyinka «WAKSOD».

### Qodobka 2aad

Loo ma ogola qof kasta ama iskaashato kasta oo ay lajiraan dukaamanka Daawada ee Dowladaha Hoose in ay macaash oo ka badan 20% ay ku darsadaan sicirka ay kaga gataan Wakaaladda «WAKSOD».

### Qodobka 3aad

Qofkii ku xad gudba xeerkan waxaa lagu qaadi doonaa ciqaabta lagu tilmaamay Qodobka 29aad ee sharciga lambarkiisu yahay 76 taariikhdiisuna tahay 27 Dishembar 1970.

### Qodobka 4aad

Hayadaha Dowladda oo ku howl leh kontrolka ascaarta waxaa laga

Qodobka 5aad

1) Xeerkan waxaa lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

2) Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin xeerkan waa la baabi'iyay.

Muqdisho, 31 Dishembar 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Caafimaadka
*Tr. Maxamed Cali Nuur*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaan lamb. 1, bogga lamb. 1;*
*Muqdisho, 4 Jenayo 1975.*
*Hantidhawraha Guud:*
G. Dhexe CABDILLAHAI WARSAME NUUR

---

**XEER WASAARADDA MAALIYADDA**
**Tr. 1 Jenayo 1975, L. 18.**
**Tacriifadda Siigaarka, Siigaro, Tubaakada biibka, Tubaakada canka iyo Tarraqa ee Hirgelaya Subaxnimada.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANIGA oo arkay Waraaqdii koobaad iyo Waraaqdii labaad ee Golaha Sare ee Kacaanka;

ANIGA oo arkay Sharcigii oo tiradiisu ahayd 18 ee soo baxay 30kii Luuliyo 1955; kuna saabsanaa: Sigaarka iyo Tarraqa;

ANIGA oo arkay Sharcigoo 28-11-1962, Qodobkiisa 1aad (L. 297);

ANIGA oo arkay Sharcigoo 11-4-1963, Qodobka 2aad;

ANIGA oo arkay Sharciga 24 oo soo baxay bishii Maarso 1972kii;

ANIGA oo tixgelinaya ra'yiga uu soo jeediyay Mareeyaha Guud ee Wakaaladda madax-bannaan ee Sigaarka iyo Tarraqa; kuna saabsan dareelidda Sigaarka Dalka lagu sanceeyo iibkiisa iyo si looga hortago dhibaatada ka mid xagga ascaarta ee alaabta dibadda laga keeno oo maalin walba kor u socda; haa ahaato alaabta sameeysan amma tan cayriinka ahba; waxaan garaystay, in kor loo qaado, qaymiga lagu iibiyo: Sigaarka, Siigaro, Tubaakada biibka ioy Dibadda laga keeno iyo Sigaarka Dalka lagu sanceeyaba;

WAXAAN GOOYAY

Qodobka 1aad

QAYMIGA TACRIIFADDA ee Sigaarka, Siigaraha, Tubaakada biibka, Tubaakada canka iyo Tarraqaba oo Dadweynaha looga iibin doono, inta ka billaabanta [illegible]

## ALAABTA DIBADDA LAGA KEENO

**Sigaar:**

— Benson & Hedges KSF
1 Kg. Sh. 300 — Baakadda 20ka Sh. 6 — Xabbaddii Sh. 0,30
— Rothmans KSF
1 Kg. Sh. 300 — Baakadda 20ka Sh. 6 — Xabbaddii Sh. 0,30
— Embassy KSF
1 Kg. Sh. 250 — Baakadda 20ka Sh. 5 — Xabbaddii Sh. 0,25
— Cambridge KSF.
1 Kg. Sh. 250 — Baakadda 20ka Sh. 5 — Xabbaddii Sh. 0,25
— Ten Cent (Kaali)
1 Kg. Sh. 100 — Baakadda 20ka Sh. 2 — Xabbaddii Sh. 0,10

**Tubaakada biibka:**

— Erinmore Flake (20 Qas)
1 Kg. Sh. 160 — (qasacii 2 ozs) Halkii Qasac Sh. 8.00

**Siigaro:**

— Slim Pantanella
(200 xabbo) — 1 Kg. Sh. 240 — halkii xabbo Sh. 1,20
— Vautier Perfecto
(200 xabbo) — 1 Kg. Sh. 200 — halkii xabbo Sh. 1,00
— Korona
(200 xabbo) — 1 Kg. Sh. 200 — halkii xabbo Sh. 1,00
— Tabatip
(200 xabbo) — 1 Kg. Sh. 120 — halkii xabbo Sh. 0,60

## ALAABTA DALKA LAGU SANCEEYO

**Sigaar:**

— Waaberi
1 Kg. Sh. 180 — Baakadda 20kaSh. 3,60 — hal xabbo Sh. 0,18
— Ubax
1 Kg. Sh. 150 — Baakadda 20iia Sh. 3,00 — hal xabbo Sh. 0,15
— Shabeel
1 Kg. Sh. 130 — Baakadda 20ka Sh. 2,60 — hal xabba Sh. 0,13

**Tubaakada canka la geliyo:**

— Tubaakada canka
1 Kg. Sh. 25 — (50 baakadood x 20 gr.) 1 baaka Sh. 0.50

**Tarraqa dalka:**

— Tarraqa «Hillaac»
1 Kg. Sh. 20 — (100 qasaadood) — halkii qasac Sh. 0,20

Qodobka 2aad.

Go'aankani wuxuu dhaqan galayaa aubaxnimada.

Qodobka 3aad

Go'aankani wuxuu beddelayaa; go'aankii lambarkiisu ahaa WST-2604-74 taariikhdiisuna ahayd 22kii Oktoobar 1974kii.

Muqdisho, 1 Jenayo 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda
*Dr. Cabdiraxmaan Nuur Xersi*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 2.*
*Muqdisho, 6 Jenayo 1975.*
*Hantidhawraha Guud:*
G. Dhexe CABDILLAHI WARSAME NUUR

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**Tr. 31 Dishembre 1974, L. 19.**

**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponbilità) Jaalle Faaduma Saciid Waxdqeen — Ku yaal Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis — (Lido), kuna fadhiya mq. 2.800.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Xaashadii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 115 taarikhdeeduna ahayd 13 Settembre 1956;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 taarikhdeeduna ahayd 23 Maajo 1961;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Xaaji Cali Geedi Shadoor, taarikhdu markay ahayd 11-3-1958, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Cabdulcasiis — (Lido);

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 3-2 soona baxday 15-2-1960, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshalla lamb. 8190, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 259aad taarikhduna ahayd 10 Seteembre 1960;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 5699 ee 16-7-1961 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Xaaji Cali Geedi Shadoor uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 5.000, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 2.000 loona tiriyay Xaajo Cali Geedi Shadoor sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 23-12-1961;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Shariif Aaden Ebdow taarikhdu markay ahayd 9-11-1966, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Cabdulcasiis (Lido);

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta rasmiga ah ee Dowladda lamb. 4-8 soona baxday 15 Agosto 1974, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 4433, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 19aad taarikhdeeduna ahayd 26 Dishembre 1967;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 981 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkoodu ahaa 4433 laguna aqoonsaday fadhigii 9aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay ahayd 7-5-1968, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 100758 ee 12-2-1968, kuna soo baxday Xafiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Sheriif Aadan Ebdow uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 4.864, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhul weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.216 loona tiriyay Shariif Aaden Ebdow sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 14-2-1968;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 4020 taas oo beddeshay midii hore, laguna aqoonsaday fadhigii 22aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay ahayd 26-10-1974, kuna saabsaneed dhismo (2) laba guri;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijinta Farsamada ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud, Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taarikhdeeduna ahayd 8-12-1974, taaso oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lamb. 4020 ee 2-10-1974 laguna xaqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsant tahay;

ISAGAA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla osta di abitabilità) daggannaashada guriga ku dhisan aXmbar Degmada Cabdulcasiis (Lido), laguna siiyay xaashida lamb. 4258 ee 19-11-1974 oo Dawladda Hoose ee Xamar oo waafaqsa nnaqshadda Guriga;

ISAGA OO ARKAY Qoral (Atto) lamb. 884 Reb. taarikh. 15 Febraiyo 1968 lagu diiwaan geliyay Xamar 15-2-1968 al n. 135 Atti Pubblici Vol. 18, oo ah caddeynta Nataayada Dr. Xasan Warsama Cali taas oo Sheriif Aaden Ebdow ka gaday kuna wareejiyay Xersi Faarah Cissa wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 1.216, kuna yaal Xamar Degmada Cabdulcassis (Lido);

ISAGA OO ARKAY Qoral (Atto) lamb. 11087 Reb. taarikh. 9 Oktoobar 1969 lagu diiwaan geliyay Xamar Nofembre 1969 Atti Pubblici Vol. 19, oo ah caddeynta Notaayada Dr. Cumar Xaaji Moxamed Bod taas oo Xersi Faarax Ciisa ka gaday kuna wareejiyay Xaaji Cali Geedi Shadoor wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ku fadhiya mq. 800, kuna yaal Xamar Degmada Cabdulcasiis (Lido);

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 3093 Reb. taarikh. 20 Oktoobar 1974, lagu diiwaan geliyay Xamar 24-10-1974 al n. 310 Atti Pubblici Vol. 20, oo ah caddeynta Notaayada Dr. Maxamed Xasan Jasti taas oo Xaaji Cali Geedi Shadoor ka gaday kuna wareejiyay Faaduma Saciid Waxdeen wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 2.800, kuna yaal Muqdisho — Degmada Cabdulcasiis (Lido);

ISAGA OO AQOONSAN labada gobol oo dhulka ah oo ay xuquuqdiisi la wareegtay Jaalle Faaduma Saciid Waxdeen, waxaana lagu mideeyay dhul ku fadhiya mq. 2.000 + 800 = mq. 2.800, kana dhisan, guri beer iyo darbi wareegsan sida naqshadda hagaasan lamb. 4020 ee 2 Oktoobar 1974 uu guddiga Dhismaha ku oggolaaday fadhigoodii 22aad taarikhdeeduna aheyd 26 Oktoobar 1974;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa sismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) loona aqoonsaday Faaduma Saciid Waxdeen, dhul ku fadhiya mq. 2.800, kuna yaal Muqdisho — Degmada Cabdulcasiis — (Lido).

Muqdisho, 31 Dishembre 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Moxamed Xawaadle Madar*

*WAA ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 1.*
*Muqdisho, 4 Jenayo 1975.*
*Hantidhawraha Guud:*
G. Dhexe CABDILLAHI WARSAME NUUR

# BOGGA SEDDEXAAD
## TALOOYNI, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Maxamed Nuur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 4-1-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolaar ah 30x20 kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 34.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 27.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiikan uga arkii karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Jenayo 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(6)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caasha Ibraahim Axmed iyo Khadiija Ducaale Geelle, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 9-12-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolaar ah 15x27 kuna fadhiya 405 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiikan uga arkii karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Jenayo 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(7)* *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Turabali Jaafer Raashid Muraji, Asadali, Xayderali iyo Tahera., u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 17-12-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Boondere, oo leh qiyaas mt. 34; 30; 18; 40; 16.40 kuna fadhiya 798 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Moxamud Cali Daahir ilo Faaduma Moxamed Kulmie.
Koofur Xaaja Muuse Xaaji Moxamed.
Galbed Wadada ex Romolo Gessi.
Barį Faaduma Kulmie Hadafoow.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiikan uga arkii karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Jenayo 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(8)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

### AXMED CALI AADAN — ARJILE IYO BANKIGA

Kaydka iyo amaahda Soomaaliyeed laanta Hargeysa Doodeeliye

### X E E R

Axmed Cali Aadan wuu i hor yimi issaga oo ah ninka haysta Buugga kaidka lamb. 2540-7 hadhsigiisuna aha 6959-10 (lix kun sagaal boqol iyo sagal iyo konton iyo toban santi). Wuxu i tusal warqadii maamulaha Bankiga kaydka iyo ammahda laanta Hargeysa u ku caddeyey in buugga kaydku ka lumay.

Waxaan halkan ku bixinaya amarka aniga oo cuskanaya qodobka 27 ee xeerka lambarkiisu yahay 2 ee 9kii Sebtember, 1965 buugga kaydka lambarkiisu yahay 648-7 la tirtiro.

Waxaan amar ku bixinaya:
a) In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.
b) Lacagta ah So. Sh. 6.959,10 Bankigu u celiyo arjilaha 30 casho dabadeed marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Laqoray, 1dii Diisambar 1974.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Hargeysa
*(9)* *Xasan Xaaji Yusuf*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIIR

Waxaa aqriyay dacwadan:

Markay arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Keydsiga iyo amaahda, waxaan ogaaday iney tahay shaqadeeyda.

Arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaa cadeynayaa dhumidii buuga lacagta (ammortamento libretto) n. D. R. 4951 Shs. 1.250.

Waxaa amrayaa in loo sameeyo buugga ninka la yiraadho Aaden Cabdi Cilmi, muddo 30 beri ah, oo ay ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo Bollettino Ufficiale oo Dawladda, haddaan qof kale oo ku shaqeenayaa usan yirin.

Waxaa kale ka codsanayaa in Buggaas gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qofkale oo k sita wakaale shaki aan laheyn, iyadoo la sugayo 30kaas beri oo aan soo sheegnay.

Muqdisho, 13-1-1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda
*Jaalle Yasiin Shire Faarax*

*(10)*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIIR

Waxaa aqriyay dacwadan:

Markay arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Soomaalida waxaan ogaaday iney tahay shaqadeeyda.

Arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaan cadeynayaa dhumidii buugga lacagta (ammartamento libretto) n. D. R. 2181-4 Shs. 310.

Waxaan amrayaa in loo sameeyo buugga gabadha la yiraahdo Faaduma Xasan Nuur, muddo 30 beri ah, oo ay ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo Bollettino Ufficiale oo Dawladda, haddaan qor kale oo ku sheeganayaa usan jirin.

Waxaa kale ka codsanayaa in Buuggaas gacanta laga saaro gabadha la yiraahdo Faaduma, ma qofkale oo ka sita wakaale shaki aan laheyn, iyadoo la sugaayo 30kaas beri oo aan soo sheegnay.

Muqdisho, 14-1-1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda
*Jaalle Yasiin Shire Faarax*

*(11)*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIIR

Waxaan arkay dacwadan:

Markay arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga keydsiga iyo Amaahda waxaan ogaaday iney tahay shaqadeeyda.

Arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaan cadeynayaa dhumidii buugga lacagta (ammortamento libretto) n. D. R. 9006, Shs. 2.211.

Waxaan amrayaa in loo sameeyo Buugga ninka la yiraahdo Maxamed Maxamuud Axmed, muddo 30 beri ah, oo ay ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo Bollettino Ufficiale oo Dawladda, haddaan qor kale oo ku sheeganayaa usan jirin.

Waxaa kale ka codsanayaa in Buuggaas gacanta loogu saaro ninka magaciisa kor ku qoran, ama qof kale oo ka sita wakaale shiki aan laheyn, iyadoo la sugayo 30kaas beri oo aan soo sheegnay.

Muqdisho, 16-1-1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

*(12)* *Jaalle Yasiin Shire Faarax*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

**Sannadka 3aad** Mogadishu, 1 Febrayo 1975 **L. 2**

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxîi ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 10, Tr. 16 Disembere 1974 — *Ratification of Concention.* Bog. 63

SHARICI L. 10, Tr. 16 Disembere 1974 — *Meel-marin Heshiis.* » 64

SHARCI L. 11, Tr. 15 Jenayo 1975 — *Meel-marin Heshiis Ganacsi iyo dhaqaale oo dhexmaray J. D. S. iyo Imaaraadka Carabta ee Midoobay.* » 65

SHARCI L. 12, Tr. 15 Jenayo 1975 — *Meel-marin Heshiis dhexmaray J. D. S. iyo Jamhuuriyadda Dimuqoraadiga ee Dadka Yaman.* » 66

SHARCI L. 13, Tr. 24 Jenayo 1975 — *Wareejinta Wakaaladda Gaadiidka Badda.* » 67

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 14 Jenayo 1975, L. 20 — *Magacaabid Kacaanka Degmada Garbahaarey Qaybta Wakiilada Beesha.* » 68

Madbacada Dwladda — Muqdisho

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 15 Jenayo 1975, L. 21 — *Dhul Dawladeed la siiyay Maxamuud Moxamed Cisman ku yaal Muqdisho Jidka Maxamuud Harbi (ex Via Antonio Cecchi).* Bog. 70

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8 Jenayo 1975, L. 22 — *Dhul Dawladed loona geliyay (Libera disponibilità) Jaalle Cosman Cumar Ibrahim.* » 72

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYNI, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

MAXKAAMDDA GOBOLKA BANADIR, 25 Jenayo 1975 — *Dhumid Jeegga L. 13465, Sh. So. 1.000, uu leeyahay Faarax Faahiye Faarax. (13)* Bog. 73

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED, 16 Jenayo 1975 — *Heerka Sarrifka Lacagta Qalaad. (14)* » 73

BOLIMOG 20 Jenayo 1975 — *Ka soo guurinta Xisaabaadka faa'iidaha iyo khasaaraha ku Tacalluqaan Sannadka 1973-1974 30ka Juuniyo 1974. (15)* » 74

BOLIMOG 20 Jenayo 1975 — *Estratto del conto profitti e perdite Esercizio 1973-1974, 30 Giugno 1974. (15)* » 75

WAKAALADDA MARMARKA IWM. (I.S.M.A. - S.p.A.) 20 Jenayo 1975 — *Ogeysiis Shir. (16)* » 75

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR. *(17)* » 76

# BOGGA KOOWAAD
## SHARCI

**SHARCI L. 10, Tr. 16 Disembere 1974.**
**Ratification of Concention.**

THE PRESIDENT

OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVIING SEEN The first and Second Charters of the October Revolution;

TAKING NOTE Of the approval of the Supreme Revolutionary Council and Council of Secretaries;

PROMULGATES

The following Law:

Article 1

*Ratification of Convention*

The International Convention on the Suppression and Punishment of the Crime of Apartheid signed in New York by the Permanent Representative of the Somali Democratic Republic to New York on 2nd August, 1974 is hereby ratified.

Article 2

*Legal validity*

The Convention shall have the force of law in the Somali Democratic Republic and shall constitute an integral part of the laws of the Somali Democratic Republic.

Article 3

*Entry into Force*

This law shall come into force immediately and shall be published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 16 Disember 1974.

*Jaalle Major General Momaxed Siad Barre*
PRESIDENT

**SHARCI L. 10, Tr. 16 Disembere 1974.**
**Meel marin Heshiis.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaahidii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

WUXUU SOO SAARAYAA

Shariga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyey Heshiiska ka dhexeeya Qaruumaha, kuna saabsan in la baaba'sho lana ciqaabo Midab Gumeysiga (Apartheid) taaso ay Dawladda Soomaaliyeed ay saxiixday bishii Agisto 2di 1974.

Qodobka 2aad

Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu yeelan doonaa astaan sharci, waxaanu ka mid noqon doonaa sharciyada lagaga dhaqmo Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galyaa isla marka la soo saxiixo waxaana lagu saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdishu, 16 Desembere 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

**SHARCI L. 11, Tr. 16 Jenayo 1975.**

**Meelmarin Heshiis ganacsi yo dhaqaale oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Imaaraadka Carabta ee Midoobay.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan labaad ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Imaaraadka Carabta ee Midoobay ee la saxiixay 21kii Sebtember 1974;

MARKUU ARKAY Baahida loo qabo Iskaashi xagga Dhaqaalaha ee dhexmaro labada dal gaar ahaanna horumarinta Ganacsi iyo Dhaqaale ee labada dal;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii ka soo baxay G.S.K. iyo Xoghayayaasha lamb. XGX-19-257-74 ee 26kii Diisambar 1974;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday Heshiiska la kala saxiixday 21kii Sebtember 1974, kuna saabsanaa Iskaashi xagga dhaqaalaha iyo Ganacsiga ka dhexeya Soomaaliya iyo Imaaraadka Carabta.

Heshiisku wuxuu yeelanaya astaan Sharci wuxuuna ka mid noqonaya Sharciyada u yaal Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 26kii Diisambar 1974, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdishu, 15 Jenayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA

**SHARCI L. 12, Tr. 15 Jenayo 1975.**
**Meelmarin Heshiis gaar (Special Protocol) oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee dadka Yaman.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan labaad ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Dadka Yaman ee la soxiixay 28kii Agoosto 1974;

MARKUU ARKAY Baahida loo qabo horumarinta ganacsiga ee labada Dal;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go' aankii ka soo baxay G.S.K. iyo Xoghayayaasha Lambar. XGX-19-256-74 ee 26kii Diisembar 1974;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday Heshiiska la kala saxiixday 28kii Agoosto 1974, kuna saabsanaa Horumarinta Ganacsiga ee Soomaaliya iyo Jamhuuriadda Dimoqraadiga ee Dadka Yaman.

Heshiisku wuxuu yeelanaya astaan Sharci wuxuuna ka mid noqonaya Sharyada u yaal Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 2aadd

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 26kii Diisambar 1974, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdishu, 15 Jenayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 13, Tr. 24 Jenayo 1975.
Wareejinta Waèaaladda Gaadiidka Badda.

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Liibya 4tii Sebtember, 1972;

ISAGOO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 59 ee 20kii Sebtember, 1972;

ISAGOO AQOONSADAY Baahida weyn ee loo qabo Horumarinta Gaadiidka Badda;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

### WUXUU XEERAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo 21-5-1974 Wakaaladda Gaadiidka Badda laguna dhisay Sharciga lamb. 59 ee 20kii Sebtember, 1972, kana mid ahaan jirtay Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda waa la baab'yey.

### Qodobka 2aad

Hantida iyo qaanta Wakaaladda Gaadiidka Badda ee Qoddobka sare lagu baab'yey, waxaa lagu wareejiyey Sharikadda Gaadiidka Badda laga bilaabo 21-5-1974 (National Shipping Line).

### Qodobka 3aad

Hantida iyo qaanta Wakaaladda waxaa loo tixgelinayaa gundhiggana u noqonayaan saamiga (Share) Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya ay ku darsatay Sharikadda Qodobka 2aad ku xusan.

### Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Agosto, 1974 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdishu, 24 Jenayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

# BOGGA LABAAD

## XEER

### XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

Tr. 14 Jenayo 1975, L. 20.

Magacaabid Guddiga Kacaanka Degmada Garbahaarey Qaybta Wakiillada Beesha.

### WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1d iyo tan 2d ee Kacaanka 21ka Oktooba 1969ka;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 1972, lagu naadiyey faafinta rasmiga ah ee 21-9-1972, kuna saabsan maamulka Dowladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka lambarkiisu yahay 102 ee 26-9-1973 ee Madaweynaha G.S.K. kuna saabsan dhismo Gobol cusub;

ISAGOO OQASDAY Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Wakiillada Beesha ee Guddiga Kacaanka Degmada Carbahaarrey, nagaalo madaxda Gobolka Gado, iyadoo la waafajinayo qodobka 10d lambarkiisa 3d, xarafka (c) ee sharciga kor ku tilmaamaan;

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka Gobolka Gedo;

### WUXUU GOOYEY

#### Qodobka 1aad

Dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxan-yahiin waxaa loo maga-

caabay inay noqdaan Idaarda Guddiga Kacaanka Degmada Garbahaarrey qaybta Wakiillada Beesha:

1. Jaalle Maxamed Aadan Cabdi;
2. » Sheekh Busuri Sheekh Qaasim;
3. » Xasan Gargaar Cusmaan;
4. » Sheekh Aadan Mataan Yacquub;
5. » Cusmaan Cigaal Cali;
6. » Xasan Xirsi Faarax;
7. » Macallim Cabdi Maxamed Duqow;
8. » Sheekh Cali Xasan Daahir;
9. » Xabiiba Xaashi Geelle;
10. » Buulle Shaaciye Cali;
11. » Sheekh Cabdi Yuusuf;
12. » Cabdullahi Cartan Nuur;
13. » Moxamed Ciise Samantar;
14. » Sheekh Maxamed Sahal;
15. » Moxamed Cabdille Moxamed;
16. » Sheekh Cabdi Muxumed;
17. » Sheekh Cismaan Moxamed Cilmi.

Qodobka 2aad

*Dhaqan gal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20-10-1974. waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdishu, 14 Jenayo 1975.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. G. Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga 19.*
*Muqdishu, 18 Jenayo 1975.*
*Hantidhowraha Guud:*
G. Dhexe CABDILLAHI WARSAME NUUR

## XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 15 Jenayo 1975, L. 21.

**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Dr. Moxamuud Moxamed Cismaan, èu yaal Muqdishu, Jidèa Moxamuud Harbi (ex Via Antonio Cecchi).**

### XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Xaashadii Koowad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer L. 144 soona baxday 23 Maajo 1961;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensatay Xaawa Cismaan Faarax taarikhdu markay ahayd 21-6-1951 kuna weydiisatay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdishu Jidka Moxamuud Xarbi kuna dhacaaya qaybta III Sub-Centrale;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, a weydiistay, ogeysiis ahaan loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 1-5 soona baxday 10-5-1962, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda 1.4105, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 309°aad taarikhduna ahayd 22 Abrile 1963;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 9696 taas oo boddoshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 4105 laguna aqoonsaday fadhigii 11aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay ahayd 22 Agosto 1972, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 16403 oo 2 Oktoobar 1963 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Xaawa Cismaan Faarax uu bixisay lacag dhan Sh. So. 1.872, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 312, loona tiriyay Xaawa Cismaan Faarax sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 10 Oktoobar 1963;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka saga ah;

ISAGA OO ARKAYXaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taarkhdeeduna ahayd 12-11-1974 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lamb. 9696 ee 21 Agosto 1972 laguna haqiijiyay sida ay naqshadda guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilità) daggannaashada guriga ku dhisan Xamar Jidka Moxamuud Harbi laguna siiyay xaashida lamb. 9818 ee 26 Agosto 1972 oo Dawladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Qoraal dardaaran ah lamb. 354, taarikhdeeduna ahayd 23 Maarso 1965, lagu diiwaan goliyay Maxkamadda Degmada Xamar, caddeynta Garsoore Sheekh Xusen Sheekh Abubaker taas oo Xaawa Cismaan Faarax kuna wareejisay kuna hibeeysay Dr. Moxamuud Moxamed Cisman wax allale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah, ka dhisan daar cusub, Jidka Moxamuud Harbi (Ex Antonio Cecchi);

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladeed (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis. Wuxuu soo saaraya;

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, (Concessione e conseguente libera disponibilità) loona aqoosaday Dr. Moxamuud Moxamed Cisman, dhul ku fadhiya mq. 312, kuna yaal Muqdisho, Jidka Moxamuud Harbi.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

*Inj. Maxamed Xaaji Xawaadle*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*

*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 3.*

*Muqdisho, 21 Jenayo 1975.*

*Hantidhawraha Guud:*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**Tr. 8 Jenayo 1975, L. 22.**

**Dhul Dowladeed loona gacan geliyay (Libera Disponibilità) Jaalle Cisman Cumar Ibrahim.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqadoo Koowad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxday 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 41 soona baxay 13-9-1973;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jenayo 1967;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed 1.50 ee Reb. taarikhdu markay ahayd 21 Abrile 1974 laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. L. 6 ee 1Jenayo 1974, taas oo lagu siiyey Jaalle Cismaan Cumar Ibrahim cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mdh. 400 kuna yaal Xamar Xaafadda Xamar Jeb-Jeb;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilità) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar Xaafadda Xamar Jeb-Jeb laguna siiyay xaashida lamb. 4237 ee 14 Oktoobar 1974 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taarikhdeeduna aheyd 14-12-1974 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar 1.9946 4 Sett. 1972 laguna haqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Libera Disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis. Wuxuu soo saaraya;

X E E R

In loo aqoonsan yahay Jaalle Cismaan Cumar Ibrahim milkiyada dhulka Dowladdeed oo ku fadhiya mq. 400, ku yaal Muqdisho, Xafadda Xamar Jeb-Jeb.

Muqdisho, 8 Jenayo 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xaaji Xawaadle*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 2.*
*Muqdisho, 14 Jenayo 1975.*
*Hantidhawraha Guud:*

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYNI, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Faarax Faahiye Faarax.

Markaan arkay Qod. 69 D. L. 1969 N. 2.

Waxaa cad dhumista Jeegga wareegta L. 13465, kuna qorantahay Sh. So. 1.000 (kun) shilin ee ee Bankiga Keydsiga iyo amaahda, waxaan idiinta amreeyna in loo cusooneysiiyo mar labaad Jeegga, aan kor ku sheegnay muddo 15 beri oo ka bilaabata markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga (B. U.) haddaan la helin cid sheegta waana in gacanta laga saaro Jaallaha magaciisa kor ku qoran yahay ama qof sita wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayso 15 beri.

Muqdisho, 25 Jenayo 1975.

*(13)* Guddoomiha Maxk. Gobolka
*Dr. Yasiin Shire Faarax*

## BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

**Xeer Lambar 67 ee 16-10-1975.**
**Heerka sarrifka lacagaha qalaad.**

### TALIYAHA BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Sebteembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee29kii Oktoobar 1964, kuna saabsan Xeerkt u detgsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed, inuu caddeeyo marwalba qiimaha beddelan karo lacagteenna.

SAAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsisigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Addunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Qarnka Soomaaliyeed.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

ASAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 173 ee 16-1-75, sida Sharciga Bankiga Qaranka Soomaaliyeed, Lr. 27 ee

## WUXUU GUDDOONSHAY

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga Ah, uu ahaan doono sida hoos muuqata, laga bilaabo 16-1-75, waxaana go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya.

| Lacagta Qalaad | | Heerka Iibsashada oo Sh. So. ah | Heerka Gadidda oo Sh. So. ah |
|---|---|---|---|
| US $ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK £ | 1.00 | 14.6223 | 14.9147 |
| DM. | 1.00 | 2.6207 | 2.6731 |
| Lit. | 104.13 | 1.0000 | —— |
| Lit. | 102.05 | —— | 1.0000 |
| F. Fr. | 1.00 | 1.4146 | 1.4429 |
| Sw. Fr. | 1.00 | 2.4345 | 2.4832 |
| Dj. Fr. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 16-1-1975.

CUMAR AXMED CUMAR
*T'aliyaha*

*(14)*

---

**BOLIMOG Shirkad Saahmi ah**

**Hantideedu tahay Sh. So. 1.500.000 — Muqdisho**

Ka soo Guurinta xisaabaadka Faa'iidaha iyo Khasaaraha ku tacalluqsan Sannadka 1973-1974 — 30ka Juuniyo 1974

| *Xisaabaha* | *Lihid* | *Laga lihid* |
|---|---|---|
| Lihidda | 522.794,84 | |
| Makhasiirta | | 917.810,59 |
| Khassaradda ee sannadka | 395.015,75 | |
| | 917.810,59 | 917.810,59 |

Muqdisho, 20 Jenayo 1975.

Guddoomiyaha Guddiga Maamulka
*Maxamed Cawaale Liibaan*

**BOLIMOG S. p. A.**

**Capitale Sh. So. 1.500.000 — Mogadiscio**

---

ESTRATTO DEL CONTO PROFITTI E PERDITE

Esercizio 1973-1974 — 30 Giugno 1974

| *Conti* | *Attivo* | *Passivo* |
|---|---|---|
| Attivo | 522.794,84 | |
| Spese | | 917.810,59 |
| Perdita d'Esercizio | 395.015,75 | |
| | 917.810,50 | 917.810,50 |

Mogadiscio, 20 Gennaio 1975.

IL PRESIDENTE
*Mohamed Awale Liban*

*(15)*

---

**WAKAALADDA MARMARKT IWM. — I.S.M.A. - S.p.A.**

---

OGEYSIIS SHIR

Waxaa la ogeysiinayaa dadkii ka mid ah Warshadda Marmarka IWM. (I.S.M.A. - S.p.A.) in uu jiro fadhi caadi ah oo lagu dhigayo saldhigga Warshadda Kiimikada Soomaaliyeed (I.C.S. - S.p.A.) ee Muqdisho, maalinta bishu ay tahay 13-3-1975 saacaddu markay tahay 4.30 galabnimo, hadduu shirku ku dhammaan waayana mar labaadka bisha Maarso maalinta ay tahay 29-3-1975 isku saacadda kor ku qoran.

Shirkaa assaga ah waxaa laga hadli doonaa arrimaha hoos ku taalla:

1) Magacaw xubin Guddiga Maamulka oo beddelaya xubin Guddiga maamulka ka mid ah oo ka baxay.

2) Wixii kale oo soo raaca.

Muqdisho, 20 Jenayo 1975.

MAAMULAHA GUDDIGA

*(16)*

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Waxaa arkay dacwadan:

Markay arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Soomaalida, waxaan ogaaday iney tahay shaqadeeyda.

Arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65, n. 2;

Waxaan cadeynayaa dhumidii bugga lacagta (Ammortamento libretto) n. 6003-4, Shs. 15.100.

Waxaan amrayaa in loo sameeyo buugga ninga la yiraahdo Xaaji Cumar Maxamed Axmed, muddo 30 beri ah oo ay ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo B. U., haddaan qof kale oo ku sheeganayaa usan jirin.

Waxaan kale oo idiinka codaaneynaa in Buugga gacanta laga saaro, ninka magaciisa kor qoran yahay, ama qof kale oo ka sita Wakaale shaki aan laheyn.

Muqdisho, 1-2-1975.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

*(17)* *Jaalle Yasiin Shire Faarax*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad | Muqdisho, 10 Febrayo 1975 | L. 1, R. 2

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 14, Tr. 13 Febberayo 1975 — *Sharci Canshuur ka dhaafid.* Bog. 79

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 13 Jenayo 1975, L. 23 — *Awoodda Kormerka iyo baarista maamulka Xoolaha Gargaarka Abaarta.* » 80

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 20 Jenayo 1975, L. 24 — *Billad Maar ah.* » 81

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 30 Jenayo 1975, L. 25 — *Kordhin lagu samayey Xeerka Fulinta ee Maxkamadda B. Dalka.* » 82

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 10 Disembere 1974. L. 26 — *Dhul Dawladeed la siiyay Xaawa Cismaan Faarax.* » 85

XEER WASAARADDA GANACSIGA, Tr. 3 Febrayo 1975, L. 27 — *Ogolaansho Heshiis dhexmaaray Wakaaladda Horumarinta Xoolaha iyo Shirkadda lagu Magacaabo Hendrikson.* Bog. 86

---

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 11 Jenayo 1975, Beddelaad Naado Dhul — *Axmed Rooble Cali iyo Nuur Mahaddale Nuur. (18)* Bog. 88

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 27 Jenayo 1975, Buugga Lacagta L. 4494, Sh. So. 103,70 — *Xuseen Ibrahim. (19)* » 89

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 4 Febrayo 1975, Jeegga Wareega L. 0876, Sh. So. 300, uu leeyahay *Jaalle Maxamed Cabdi Saciid. (20)* » 89

---

# BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

**SHARCI L.14, Tr. 13 Febberayo 1975.**
**Sharci Cashuur ka dhaafid.**

GUDDOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINAAYA Goaankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAAREY

Qodobka 1aad

Waxa cashuurta Furdada laga dhaafey alaabta ku qoran lifaaqa «A» oo sharcigan ka mid ah ee lagu isticmaayo dhismaha jidadka magacyadoodu hoose ku dhiganyihiin oo ay someyneyso Dawladda Hoose ee Muqdisho;

1. Jidka Maxamuud Xarbi oo ka billaabmaaya Waddada Jamaal Cabdi Naasir kuna dhammaanaya Waddada Ummadda;
2. Jidka Jaalle Sarreeyo Gaas Maxamed Siyaad Barre oo ka billaabmaya Waddada Jesiira soona dhex maraya Degmada Wadajir;
3. Jidka ka bilaabmaya Villa Baydhabo kuna dhammaanaya Waddada Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre.

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqangeli doonaa marèii la saxeexo, waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 Febberayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

LIFAAQA « A »

| | | |
|---|---|---|
| Naafto | 250.000 | Litir |
| Bansiin | 32.000 | » |
| Gaas | 5.000 | » |
| Saliid | 5.000 | » |

# BOGGA LABAAD

## XEER

### XEER MAXDAWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

**Tr. 13 Jenayo 1975, L. 23.**
**Awoodda Kormeerka iyo baarista maamulka Xoolaha Gargaarka Abaarta.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tan 2aad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Baahida loo qabo in Guddiga Caddaaladda iyo sharciga ee Golha Sare ee Kacaanka loo xilsaaro kormeerka iyo baarista xoolaha loogu tala galay gargaarka abaarta;

ISAGOO TIXGELINAYA Sharcigii 1aad ee soo baxay 6dii disembar 1974, ee lagu dhisay Guddiga Caddaaladda iyo Sharciga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Guddigga Caddaaladda iyo Sharciga ee lagu dhisay Sharciga tirsigsu tahay 1 ee soo baxay 6dii Disembar 1974, waxaa awood loo siiyey inuu kormeero, baaro, markii loo baahdo maamulka xoolaha loogu tala galay gargaarka abaarta.

Qodobka 2aad

Marka uu maamulayo howsha lagu tilmqmay qod. 1 ee xeerkan, Guddiggu wuxuu yeelanayaa awoodda iyo habka shaqada ee lagu xusay qodobada sharciga tirsigiisu yahay 1 ee soo baxay 6dii Disembar 1974.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa islamarka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Iagalle S. G. Maxamad Siyaad Barre*

XEER MAXDAWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 20 Jenayo 1975, L. 24.

**Billad maar ah oo hawikarnimo ee la siiyey Jaalle Adan Maxamed Qaalib oo ah agaasimaha Hawlaha Guud ee Gobolka Shabeelaha Dhexe.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga Tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1970;

MARKUU ARKAY Sharciga Tirsigiisu yahay 9 soona baxay 28 Jannaayo 1975;

MARKUU EEGAY Hawlihii 1973dii ka hirgalay Gobolka Shabeelaha Dhexe, gaar ahaan Degmada Jowhar, oo lahaa dhismo, horukac iyo kicin ku dhisan caddaalad, sinnaan, wadajir iyo wada shaqayn;

MARKUU QARAWSADAY In Jaalle Adan Maxamed Qaalib oo ah Agaasimaha Hawlaha Guud ee Gobolka Shabeelaha Dhexe uu si kacaannimo iyo xilkasnimo hantiwadaagnimo leh u gutay waajibaadkii ka saarnaa Dalkiisa;

WUXUU GUDDOONMIYEY

Qodobka 1aad

In Jaalle Adan Maxamed Qaalib oo ah Agaasimaha Hawlaha Guud ee Gobolka Shabeelaha Dhexe lagu maamuuso Billad Maar ah oo Hawlkarnimo, laguna siiyo shaqadaas uu habsamida iyo xilkasnimada ugu qabtay Dalka awgeed.

Muqdisho, 20 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

## XEER MAXDAWEYNAHA GOLAHA SAER EE KACAANKA

**Tr. 20 Jenayo 1975, L. 25.**

**Kordhin lagu samayey Xeerka Fulinta ee Maxkamadda B. Dalka.**

### GUDDOONSHAHA

### GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Kowaad iyo Tan Labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 16 iyo 54 soo baxay 2dii Maarso 1972;

MARKUU ARKAY Baahida loo qabo in wax lagu kordhiyo Xeerka Funlinta ee Maxkamadda Badbaadada Dalka si uu u noqdo mid hantida Dadweynaha laga xado lgu soo celin karo;

### WUXUU GUDDOOMIYEY

#### Qodobka 1aad

*Wareejinta xoolaha dadka u xiran M.B.D.*

1. Hantida uu leeyahay qof u xiran Maxkamadda Badbaadada Dalka oo loo haysto, dembi ah Xatooyo Xoolo Dadweyne (Peculato) ama dembiyada kale oo ciqaabtoodu tahay DIL iyo hantiguurin (confisca), ma geli karaan wareejin ha ahaato iib ama siismo.

2. Haddii loo baahdo in qayb hantidaas la soo sheegay ah la wareejiyo waa in fasax oggolaasho ah laga helaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee M.B.D., laakiin fasaxa noocaas ahi waa in uu yahay mid aan wax u dhimi karin damaanadii daynka iman kara (garanzia del debito eventuale.

#### Qodobka 2aad

*Heshiisyada ka soo horjeeda sharcigan*

1. Wax alla iyo wixii heshiis kala-wareegsi ah oo la sameeyo taariikhda qofka la xiro ka dib, kana soo horjeeda qodobka kowaad oo

Qodobka 3aad

*Qabashada hantida ninka Qaamaysan oo si' iihayaano iyo raadgadasho ah ugu dhigan qof saddexaad*

1. Garsooraha Fulinta ee Maxkamadda Badbaadada Dalka wuxuu qabanayaa wax allaale iyo wixii hnti ah oo loo garto in lagu gaday lacag uu leeyahay ninka qaamaysani dabadeedna sì raadgadid ah iyo khayaano ah loogu dhigay qof saddexaad.

Qodobka 4aad

*Aqoonsashada hantida si' raadgadasho iyo khayaano ah loogu dhigo qof saddexad*

1. Aqoonsashada hantida uu leeyahay ninka qaamaysani oo sì khayaano iyo raadgadasho ah ugu dhigan qof saddexaad waxaa gaaraya Guddi ka kooban Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Garsooraha Fulinta iyo Lataliye ka mid ah Lataliyaasha Maxkamadda Badbaadada Dalka, isla Guddigaas baana la noqon kara go'aanka haddii la garto i n uusan dow ku dhisnayn.

2. Qofka saddexaad oo sheeganaya in uu leeyahay Xoolaha ayaa laga doonaya in uu caddeyo in aan xoolahaasu ka imaan xagga ninka qaamaysan.

Qodobka 5aad

*Hantida Dadweynaha oo la siiyey qof saddexaad*

1. Hantida laga lunsaday Dadweynaha waxaa laga soo celinayaa xataa qofka uu siiyo ninka dembiga xatooyada Xoolaha Dadweynaha galay, markii la helo warqado xafiiseed oo sidaas sheegaya ama caddayn kale oo u dhigmata.

2. Qofka qaatay hantidaas waxaa loola dhaqmayaa sidii qof saddexaad oo qaamaysan (Terzo debitore).

Qodobka 6aad

*Dacwadda la xiriirta hantida ninka qaamaysan*

1. Hantida uu leeyahay qof u xiran Maxkamadda Badbaadada Dalka oo loo haysto dembiyadii lagu soo sheegay qodobka Kowaad, ma geli karto wax dacwad ah oo laga furo Maxkamadaha Caadiga ah xarigga ka dib. Laakiin wixii dacwad ah oo horay u dhextiil ninka xiran iyo cid kale oo ka horeysay xarigga loo cuskan maayo qodobkaan.

Qodobka 7aad

*Goorta ninka loo ictibaarayo sidii nin xiran oo kale*

1. Ninka eedeysan waxaa loo ictibaarayaa sidii nin xiran oo kale xataa haddu bannaanka ku joogo xoriyad ku meel gaar ah ama isagoo ka dhuumanaya Sharciga.

Qodobka 8aad

*Bixinta kharajka fulinta*

1. Waxaa Xfiiska Fulinta ee Maxkamadda Badbaadada Dalka loo siinayaa awood in uu ka bixin karo lacagta loo soo xereeyo Dawladda wixii kharaj ah oo hagaajin iyo maamul ah ee ku baxa xoolaha inta u dhexeysa qabashada iyo xaraashka.

2. Waxaa kale oo Xafiiska Fulinta bixin karaa wixii kharaj ah oo lagu gunaynayo Lataliyaasha Teknikada ah iyo Shaqaalaha ka shaqeeya Xafiiska Fulinta (Personale impiegatizio), iyadoo kharajkaas qiyaastiisa lagala tashanayo Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka.

Kharajkaas waxaa la bixinayaa markay la haboonaato Madaxa Xafiiska Fulinta.

Qodobka 9aad

*Kordhinta hawsha garsooraha Fulinta ee M.B.D.*

1. Hawsha Garsooraha Fulinta ee Maxkamadda Badbaadada Dalka oo ku tilmaaman Qod. 2aad ee Xeerka tirsigiisu yahay 16 ee soo baxay 2dii Maarso 1972 waxaa lagu kordhiyey inta soo socota:

Garsooraha Fulinta ee Maxdbaadada Dalka wuxxu fulinayaa xukunnada Maxkamadda Badbaadada Dalka qof gaar ugu rido nin sarkaal Dawladeed ah ama ahaan jiray, xukunnadaas oo ka yimid Qod. 242 X.C. oo ah Maamul xumayn xoolo qof gaar ahi leeyahay (malversazione a danno di privati).

Qodobka 10aad

*Wareejinta hantida uu soo qabto Xofiiska Fulinta*

1. Garsooraha Fulinta ee M.B.D. waxaa awood loo siinayaa in uu hantida la qabto ku wareejin karo Dawladda, iyadoo sideeda ah (trasferimento in natura), haddii uu garto in taasu u faaiido badan tahay danta caamka ah.

2. Hantidaas waxaa lagu wareejinayaa Dawladda markay soo qiimeeyaan Guddi tekniko ah oo aqoon leh, oo uu magacaabayo Garsooraha Fulinta, waxaana loogu wareejinayaa Dawladda qiimaha ay u gartaan Guddigaasu.

Muqdisho, 30 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**Tr. 10 Disembere 1974, L. 26.**

**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concssione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Xaawa Cismaan Faarax.**

## XOGAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Xaashaddii Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynuunkii Kowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer L. 115 soona baxday 13kii Sett. 1956;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensatay Xaawa Cisman Faarax taarikhdu markay ahayd 24-4-1957 kuna weydiisatay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Wardigley;

ISAGA AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, L. 6 soona baxday 1 Juuno 1957, iyadoo aan cidna horstaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 9838, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho — fadhigoodii 209°aad taarikhduna ahayd 31 Agosto 1957;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 5201 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 9838 laguna aqoonsaday fadhigii 222°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay ahayd 23 Maggio 1958, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada L. 305 ee 25 Lug. 1957 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Xaawa Cismaan Faarax uu bixisay lacag dhan Shs. So. 3.520, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 880, loona tiriyay Xaawa Cisman Faarax sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 2 Agosto 19757;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waada Dhismaha iyo Dhulka, taarikhdeeduna ahayd 12-11-1974 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar 5201 ee 6-5-1958 laguna xaqiijiyay sida ay naqshaddu dhiska waafaqsan tahay;

ISAGA OO AKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Degmada Wardrigley laguna siiyay xaashida 1.4300 ee 5 Nov. 1974 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO AQOONSAN in la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismada iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Xaawa Cisman Faarax, dhul ku fadhiya mq. 880, kuna yaal Muqdisho — Degmada Wardigley.

Muqdisho, 10 Disembere 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan*

*WAA ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 54.*
*Muqdisho, 16 Disembere 1974.*
*Hantidhawraha Guud:*
G. Dhexe CABDILLAHI WARSAME NUUR

---

**XEER WASAARADDA GANACSIGA**

**Tr. 3 Febrayo 1975, L. 27.**

**Ogolaansho Heshiis dhexmaray Wakaladda Horumarinta Xoilaha iyo Sihrkadda lagu Macgacaabo «Hendriksin».**

WASAARADDA GANACSIGA

ISAGOO ARKAY Heshiiskii Deynta Horumarinta (Development Credit Agreement) qodobka VII qaybta 7.01 (e).

ISAGOO ARKAY Heshiiskii Mashruuca (Project Agreement) qodobka 2.03.

ISAGOO ARKAY Heshiiska Deyn Gudbinta (Subsidiary Loan Agreement) qodobka IV, qaybta 4.01 (a).

ISAGOO ARKAY Sharcigii meel marinta beshiisyada kor ku qoran ee lambarkiisu ahaa 21 taariikhdiisuna ahayd 5 Juunyo, 1974 ee ku soo

ISAGOO AKHRISTAY Heshiiska dhexmaray Wakaaladda Horumarnta Xoolaha Tr. 1-10-1974 ee tilmaamaysay in heshiiska Wakaaladda iyo Shirkadda dheeemaray uu toosan yahay.

## WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

### Qodobka 1aad

In Heshiiska dhexmaray Wakaaladda Horumarinta Xoolaha iyo shirkadda «Hendrikson» bishii Oktoobar 3, 1974 in la ogolaaday, loona aqonaaday inuu ka mid yahay Heshiisyada rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

### Qodobka 2aad

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 3 Febrayo 1975.

*Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud*
Xoghayaha Dawladda Wasaar. Ganacsiga

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Axmed Rooble Cali iyo Nuur Mahaddalle Nuur, maalintii 16-7-1960, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan 4° Km., Jidka Afgoye, uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rektangolaar addimihiisuna ahaayeen 76,90x65 kuna fadhiye 5000 mdh., sababtoo a in uu is beddelay qorshihii meeshaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 394468 ee 8-3-61, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 76,50x65 kuna fadhiya 4.972,50 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socta:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Fabbellini Ugo.

Galbeed waxaa ka xiga: Cali Cumar Sheegon.

Bari waxaa ka xiga: Axmed Maxamed.

Muqdisho, 11 Jenayo 1975.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Maxamed Cabdi Saciid*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Garsooruhu hadduu arkay dacwadda kor ku qoran uu tixgaliyey waxa ay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga keydka iyo Ammaahda.

Hadduu ogaaday in hawsha ay ku jirto, awooddiisa: haddu arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 L. 2 wuxuu caddeynayaa. Lumiddii Buugga Lacagta (ammortamento libretto) L. 4494 oo ay ku qorreyd lacag Sh. So. 103,70 ah uuna leeyahay Xuseen Cosoble Ibraahim.

WUXUUNA AMRAYAA

In Xuseen Cosoble Ibraahim loo sameeyo, buug cusub 30 Maalmood ka dib markii amarkaan lagu shaaciyo Faafinta rasmiga ah ee Dawladda, haddii intaas cidina soo caban weydo waana in buu ga cusub gacanta loo galiyo jaallaha kor ku magacaaban ama qof Wakaalad Sharci ah ka sita.

Muqdisho, 27 Jenayo 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir

*(19)* *Dr. Yaasiin Shire Faarax*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Maxamed Cabdi Saciid;

Markaan Arkay Qod. 69 D. L. 1969 N. 2;

Waxaa cad dhumista Jeegga wareega L. 0876, kuna qoran yahay Sh. So. 300 (sadexboqol) shilin ee Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda Laanta 1aad, waxaan idiinka amreynaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Jeegga aan kor ku sheegnay muddo 15 beri oo ka bilaabato amrkii lagu dhigo Faafinta Rasmiga (B.U.) haddaan la helin cid sheegtaa waana in gacanta laga saaro Jaallaha magaciisa la yiraahdo Axmed Xaaji Yuusuf oo joogo Bangiga Keydsiga iyo Amaahda ee Berbera, ama qof sita wakaalad Sharci ah ayadoo la sugayo 15 beri.

Muqdisho, 4 Febrayo 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka

*(20)* *Dr. Yaasiin Shire Faarax*

---

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الرسمية الجريدة

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Muqdisho, 14 Febbrayo 1975 **L. 1 R. 2bis**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa **2 laba shilin** — Rukunka iyo qoritaanku **waxaa** la **weydiistaa** Laanta Maamulka **Faafinta Rasmiga** ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN


## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 14 ee 4 Febbrayo 1975, — *Dacwadaha Dawladda dhinac ka tahay.* *Bog. 79 bis*

## BOGGA LABAAD

### XEER

### W. M.

## BOGGA SEDDEXAAD

### W. M.

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

**SHARCI L. 14 Tr. 4 Febrayo 1975.**
**Dacwadaha Dawladdo dhinac ka tahay.**

## GUDDOOMIYAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tan 2aad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Baahida loo qabo dacwooyinka Dawladda dhinac ka tahay loo wareejiyo Maxkamadda Badbaadada Dalka;

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

*WUXUU SOO SAARAYAA*

Sharciga soo socda :-

Qod. 1aad

Dacwadaha madangia ah iyo kuwa idaariga ah (Civil and amministrative Cases) ee Dawladdu dhinac ka tahay waxa awood loo siiycy Maxkamadda Badbaadada Dalka, oo keli ah.

Qod. 2aad

Dacwadaha lagu tilmaamay qod. 1aad, ee hadda la yaalla (Pending) Maxkamadaha Caadiga ah ama looga qaatay Racfaan Maxkamadaha Sare, waa in loo wareejiyo Maxkamadda Badbaadada Dalka, laga bilaabo marku sharcigani hirgalo.

Qod. 3aad

i) Dacwadaha Dawladdu dhinac ka tahay waxa qura oo daafici kara Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo loo xilsaaray inuu ilaaliyo dan ta Dawladda;

ii) Lama oggola, hadda wixii ka dambeeya in cid kale daafacdo ama Maxkamadda horteeda uga doodo Wasaaradaha, Wakaaladaha, Xubnaha kale ee Dawladda, iyo Shirkadaha iyo Mashaariicda Dowladda Soomaaliya qaybta ku leedahay.

Qod. 4aad

Sharciganj wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha G.S.K. waxaana lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 4 Febrayo 1975. .

KU DHAQAN XAFIISKA D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad Muqdisho, 15 Febberayo 1975 L. 2, R. 2

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 15, Tr. 30 Disembere 1974 — *Sharciga Mu-saaniyadda Sannadka 1975.* Bog. 93

SHARCI L. 16, Tr. 9 Febberayo 1975 — *Aqoonsasho How-qab Abaalgud gaar ahaaneed.* » 108

---

## BOGGA LABAAD

### XEER

### W. M.

---

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

### W. M.

---

Madbacada Dwladda — Muqdisho

# BOGGA KOOWAAD
# S H A R C I

**SHARCI L. 15, Tr. 30 Disembere 1974.**
**Sharciga Miisaaniyadda Sannadka 1975.**

## GUDDOOMIYAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU Rasmi ahaan u soo saaraayaa Xeerkaan hoos ku qoran;

Qodobka 1aad

*Miisaaniyadda*

Dawladdu waxay awood u leedahay inay soo ururiso Dakhliga iyo inay bixiso kharajka ku dhigan Miisaaniyadda halkan ku xiran ee dhan Sh. So. 953.456.465, marka laga bilaabo ida Jenayo ilaa 31ka Disember 1975 iyadoo la raacayo habka iyo ni daamka ku qoran sharciyada lacagta.

Qodobka 2aad

*Isbaddelka*

1. Isbaddelka dhex mara laba madax oo kala duwan waxa awood u leh Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha.

2. Isbaddelka dhex mara madax-xigeenada isku madax amba ha ahaadeen kharashka caadiga amba ha ahaadeen mashruucyada waxa awood u leh Xoghayayha Wasaaradda Maaliyadda.

3. Isbaddelka lacagta hoos timaada madax-xiga walba oo u ka la dhigan xuruufta waxa awood u leh Xoghayayaasha Wasaaradaha. Isbaddelka caynkaas ee ku saabsan Miisaaniyadda Dawladaha Hoose waxa awood u leh Gudomiyayaasha Gobolada.

Qodobka 3aad

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadu wuxuu awood u looyahay haddi loo baahdo in uu kayd ka dhigo dhammaan ama qayb lacagta ku jirta madax xige walba miisaaniyadda sannadkan 1975.

Qodobka 4aad

Sharciganj wuxuu dhaqan galayaa ida Jennayo 1975 Waxaanu ka mid yahay Sharciyada rasmiga ah ee Dawladda Soomaaliyeed.

Muqdisho, 30 Disembere 1974.

*S. G. Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA

## WARBIXIN MIISAANIYADEED 1975

1. 1974 waxaa ku buxsamay sanadkii shanaad ee Miisaaniyadda tan iyo intii Kacaanku dhashay. Sanadka gudihiisana talaabooyin dhawra ayaa dhalku qaaday haddii laga eego dhinac walba. Kacaanku waa dhismay, maamulida dalkuna waxeey isubedeshey mid hantiwadaag ah oo awood dadka usiineeysa iney si lixaad leh uga qayb qaataan dhismaha iyo talada dalkaba. Fududaynta maamulka oo la bilaabay 1971 si wacan ayey u hirgashay. Taasuna wexeey awood dawladda u siisay in eey dalka oo dhan gaadho, qorsheynta dhaqaalaha iyo horumarinta bulshadana laga dhigo kuwo saldhig aqooneed ku fadhiya.

Miisaaniyadda dalku wexeey lasocotay isbedelka dalka ka socda taas oo danteedu tahay in laga dhigo hub lagu fulin karo siyaasadda Kacaanka.

2. Sanadkii 1973 waxaa la bilaabay Miisaaniyad urursan oo isugaynaysa dawladda dhexe iyo dawladaha hoose. 1974 waxa la sii hagaajiyey kalasoocida miisaaniyadda iyo faah faahinteeda. Miisaaniyadda 1975 waxaa ku urursan dawladda dhexe, kuwa hoose iyo Wakaaladaha dawladda. Habka cusubi waa guul wayn oo horay u dhigaaya maamulidda hantida ummadda.

3. Waxa aad loo ammaani karaa sida eey dawladdu kor ugu qaaday dakhliga. Shantii sano oo u dhexaaysey 1969-1974 dakhligu wuxuu kordhay 110% ama 20% sanadkiiba, kordhiimahaas waxa ugu wacan tolayntii hantida, Sicirka aduunka oo kor u kacay, Keenidda badeecadda oo kororтay iyo ururinta lacagta oo lagu dadaalay.

4. Kharashku siyaabo kala duwan ayuu u kordhay afartii sano oo u dhexaaysey 1969-1973 wuxuu kordhay guud shaan 31% lana mid ah 7% sanadkiiba. Sanad lacageedka 1974 xaalkiisu waa gooni. Kharashka caadiga ahi wuxuu kordhaayaa 33% marka loo eego 1973. Korsiimahaasu wuxu ka badan yahay dhamaan kuwii muddadii u dhexaysay sannadihii 1969-1973. Sababtu waa mushaharka shaqaalaha oo batay iyo kharashka ololaha horumarinta 1971 waxa la fuliyey 49% laakiinse 1973 inta la fuliyey waa in macquul ah. Tan loo baahanyahay in halkaan lagu sheego waa kharashka horumarinta oo si baas ugu xiran kaalmada iyo deynta shishaayaha oo ahayd 60% (1971) — 75% (1973) — 67% (1974-1978).

5. Inkasta oo kharashku kor u kacay miisaaniyadda dawladdu marna iskuma deyin ineey lacag abuurto (inflation). Waxa kale oo jirta in lacagta dalka gudihiisa deeyn bixintu (internal financial position) aad u badatay. Wuxu kor u kacay 275 milyan. (+69.1%) 1972-1973 iyo 253 (+37.6%) December 1973 ilaa September 1974. Sanooyinkii hore deeynku wuxuu u badnaa soodegin bedeeco iyo wixi la mid ah. Sanadii u dambaysey se wuxu u badnas maalgelin iyo khiimaha oo kor u kacay.

in natiijadeeda sanadka cusub bilihiisa la arko. Fidinta deeyntu iyo badinta kharashka dawladdu wexeey keeneen ku isticmaal xad dhaaf ah lacagta adag.

Guud ahaan lacagtu (money supply) waxba iskama bedelin taas oo muujineeysa in deeynku u badnaa mid wax logu keennay. Kobid ahaan xaalka lacagtu wexeey ku ururs an tahay.

TAB. 1

| | *Dic. 1972* | *Sep. 1973* | *Dic. 1973* | *Sep. 1974* |
|---|---|---|---|---|
| Deynka | 398 | 555 | 673 | 926 |
| Khasnada | 20 | 80 | 46 | 1 |
| Lacagta adag (saafi) | 293 | 261 | 249 | 98 |
| Lacagta guud (Money Supply) | 518 | 547 | 608 | 742 |

Sicirka kacay, keenidda badatay iyo maaliintu wexeey yaraay yeen kaaydka lacagta adag. Miisaaniyadda lacagta dibedda sanocyinkan dambo aad beey u xumaatay taas oo ku timi keenidda badeecadda oo badatay iyo dhoofiinta oo yaraatay. Inkasta oo lacagta dibedda inaka soo gashaa eey badatay (1972-206, 1973-333, 1974-620) miisaaniyadda dibedda dhiniin (Deficit) beey kuxirantay.

TAB. 2

| | *1972* | *1973* | *1974* |
|---|---|---|---|
| Badeecadda iyo Haawl | —167 | —423 | —733 |
| Bedelid lacageed | 118 | 180 | 281 |
| Bedelid Raasumaal | 154 | 198 | 384 |
| Qalad iyo dhaafit | 5 | — | — |
| Qiyaas SDR | 14 | — | — |
| | 124 | — 45 | — 68 |

6. Heerka miisaaniyadda dibaddu mareeysa wuxu inoo tilmaamaaya in eeyno xoogeena saaro sidii wax looga qaban lahaa soo saaridda iyo dhoofinta loona yareeyn lahaa soodeginta.

7. Xoolaha oo ah lafdhabartii dhaqaalaha dalka, waxa sanadkii 1974 loogu talagalay 33.9 milyan (1973 - 14.3). Ujeedooyinka laga leeyahay horumarinta xoolaha, waxa weye in la wanaajiyo sinjiga, nooca xoolaha iyo in la kordhiyo tarankooda, lana xoojiyo caafimaadka xoolaha. Markaas ayay noo suurtoobayaa inaan d haqaale ahaan uga faa'iidaysano barwaaqada xoolaha ee dalkeena. Sidaa awgeed, waxa la hirgeliyey sanadkan 16 mashruuc oo ku taxaluga xoojinta caafimaadka xoo-

Daawad xoolaha oo sannadkii 1975 miisaaniyadda loo kordhiyey, waxay ka koobnayd So. Sh. 3 milyan oo caadi ah iyo So. Sh. 5.3 milyan O.H.R.M. loogu talagalay. Waxtarka kooxaha daaweynta xoolaha, oo qalab iyo gaadiidba u dhanyahay, waa mid dhaqaalaha reer miyiga ama dalka horukac iyo taran joogta ah u keeni doona. Maadama 1974 lagu magacaabay sanadkii dhaqaalaha, dadaalka dadka iyo dawladda kuma koobnayn xoolaha keliya, ee wuxu ku fidsana Xubnaha kala duwan ee dhaqaalaha beeraha, barwaaqada badda iyo berriga.

8. Beeraha waxa lagu isticmaalay maalgelin ballaaran, iyadoo loo jeedo in la gaaro isku fillaansho deg deg ah, xagga cuntada xabuubka, kordhinta tacabka miraha iyo alaabta ceyrin oy u baahan yihiin Warshaduhu. *Hase yeeshe, tacabkii hoos buu u dhacay, sababto ah roob yari iyo isdhimida biyaha Webi Shabeelle.* Sidaa darteed, mashaariicda horumarintu, waxay xoog saarayeen xoojinta waraabinta iyo dhismaha biyo-xireenada, si lo ballariyo dhulka ka durugsan agagaarka Webiyada; isla markaana laga faa'idalsto xoogga biyaha oo laga dhaliyo xoogga korontada.

Waxa kaloo sị xoog leh looga dhaqaaqay baarista iyo beerista miro kala duwan, oo xagga cuntada iyo dhoofinta dibedda qaayo weyn lahaan kara, haddii ay guul ku dhammaadaan. Mashaariicda beerista Timirta, Suufka, Liinta macaan, Buuriga iyo Bariiska dhammaan heer bilow ah ma dhaafin.

Dhismaha Iskaashatooyinka beeraha, oo u horseedaya hantida tacab-wadaagga ah, waxa la siiyay kaalmo xoog leh, si ay iska-waxuqabso ugu dhistaan makhaasiino, xaafiisyo, uguna gataan qalabka beeraha. Isla sanadkaasna Mashruuca deg-degga ah ee cuntadu talaaboyin dheer buu qaaday.

9. Muddo dheer ayaa la ogaa, in dalka Soomaaliya oo la beeri karo, u ballaaran yahay, dhowaan ayaa la ogaaday yididiilada weyn ay Soomaaliya leedahay dhinaca soosaaridda kalluunka. Waxa xil weyn layska saaray sidii loo kordhin lahaa soosaaridda iyo dhoofinta barwaaqada badda oo baahi weyn loo qabo suuqa dibedda iyo gudahaba. Sanadkan gudihiisa, wax-suurtogal noqday in la abuuro 20 Iskaashatooyin kalluumaysatada, iyadoo looga jeedo in noloshooda kor loo qaado, in tacabka kalluunka la badiyo. Iskaashatooyinka waxa ku baxay lacag dhan So. Sh. 5 filyan, taasoo lagu dhisay saldhigyo, qalab loo iibiyey ama doonyo iyo gaadiid.

Si looga faa'idayato kalluumaysiga badweynta, waxaan heshiis la galay dalka Midowga Sofiyeeti oo dhinaca sahamiska naga taageeray. Kadibna, waxa wadajir labada dawladood u abuureen Shirkad Kalluumaysi oo lagu ismay «Somalifish» oo door weyn ka ciyaari doonta xagga horumarinta guud ee kalluunka. Waxay kaloo Shirkaddu maamuli doonta tababarka iyo taageerada Iskaashatooyinka. Tacabkii kalluumaysigu kor ayuu u kacay, sanadkan waxa nasoo gashay So. Sh. 7.7 milyan (1973 - 3 milyan). Isla sanadkan, waxa hirgashay Shirkadda Gaadiidka Badda, oo

midna badeecadda caadiga qaado. Maraakiibtaas waxay ku kaceen So. Sh. 80 milyan. Dawladda Carabta ee Liibya ayaa dhowaan nala shirkooday oo boqolkiiba 49% raasumaalka la wareegtay.

10. Tacabka xoolaha, beeraha iyo badda sanadba kan ka dambeeya, Warshadaha dalka ayaa sancadeeya. Warshadaha dawladdu waxay soo saareen tacab u qiimihiisu dhanyahay So. Sh. 309.6 milyan, una kala baxa badeeco dalka gudihiisa lagu isticmaalay (So. Sh. 226.6 milyan) iyo badeeco libedda loo dhoofiyey (So. Sh. 43 filyan) lana mecna ah, lacag adag oo wadanka soo gashay.

Hawlaha Warshadaha laga qabtay waxay u kala qaybsameen: cusaybinta warshadihii hore, ballaaris ama hagaajin iyo hirgelinta mashaariic cusub oo irjta ama ka baxsan qorshaynta shanta sano. Dhammaan 10 mashruuc oo wax laga qabtay, waxay ku kaceen So. Sh. 87.1 milyan oo So. Sh. 55.2 dalka gudihiisa laga maalgeliyey (dibedda - 31.9 milyan).

Waxa kaloo gacanta la saaray mashaariic aan ku jirin qorshaynta Warshadda Hargaha ee Kismaayo. Waaaxne runtii guul ahaa diyaarinta dhismaha saddex Warshadood oo gallayda shiida Warshadahaas oo laga dhisi doono Xamar, Burco iyo Galkacayo, waxa ku bixi doona So. Sh. 13.9 milyan.

11. Ulajeedada ugu weyn ee dhaqaalaha, waa munafacaadka dadka misna dadka keliya ayaa hormariya dhaqaalaha iyo dhaqanka, hadday aqoon cilmi iyo caafimaad helaan. Sanadkan 1974 waxa dalka ka curtay kacaan tacliimeed, kadib amrkii la hirgeliyey qoraalka Af Soomaaliga. Siyaasadda cusub ee tacliinta waxa saldhig u ah: hirgelinta Far Soomaaliga, waxbarashada dadka waaweyn, O.H.R.M. iyo fidinta guud ee waxbarashada.

Ololaha Horumarinta Reer Miyiga waa ujeedooyin badan tahay waxay ballan qaadaysa faafinta akhriska iyo qorinka, badbaadinta caafimaadka dadka, daaweynta xoolaha iyo tirinta guud ee dadka iyo eeoolaha soomaaliyeed oo dhan. Ololahaas ay kumanaal arday, shaqaale iyo Ciidamada Qalabka Sida ka qayb galeen, waxa loogu tala galay kharash aan ka yarayn So. Sh. 22.3 milyan. Inkaasta oo u run ahaan labajibaarkeed gaaray.

12. Iyadoo lagu cilmi qabo dawrka wayn u ka ciyaaro Raadiyuhu xagga warfaafinta hanuuninta iyo faafinta waxbarashada, ayaa la hirgeliyay mashaariic xoojinaysa Raadiyaha Muqdisho iyo Hargeysa. Waxa kaloo gobollada laga dhisay saldhigyo loogu talagalay warfaafinta iyo isgaarsiinta wararka. Waxa kale oo qabqaabadeeda lagu jira Radiyaha laayaska arko (TV.).

13. Siday balluntu ahayd waxaa sannadka 1975ka la sii waday howshii ku saabsanayd isku uruurinta Miisaaniyadaba xubnaha Dawladda oo dhan. Runahaantii sannadka 1975 waxaa Miisaaniyadda Dawladda lagu soo daray Miisaaniyadaha Wakaaladaha. Haddaba Miisaaniyadda Dawladdu waxay ka kooban tahay Miisaaniyadda Dawladda Dhexe kuwa Dawladaha Hoose iyo kuwa Wakaaladaha. Isugeyntoodu iminka way

dhantahay isla markaana waxay muujineysaa kala baxsanaantooda. Sidaasina waxaa surtoogelisay habkii cusbaa ee miisaaniyadda loo dajey sannadkii hore.

14. Sannadka '75 dhakliga iyo kharashka guud waxay gaarayaan lacag dhan Shs. 1.376.974.397, lacagtaasoo ka badan Shs. 181.619.212 (15%) markii la barbar dhigo qiyaastii 1974 lacag dhan shs. 953.456.465 (69%) oo ka mid ah lacagta kor lagu shaagay waa miisaaniyadda dawladda, inta kale oo dhan Shs. 423.517.932 (31%) waa lacagta ku baxeysa mashaariicda ka baxsan miisaaniyadda.

15. Lacagta Miisaaniyadda Dawladda ee 1975 waxay ka badantahay tii 1974 lacag dhan Shs. 85.090.010 (10%). Dakhliga joogtada ihi wuxuu dhanyahay Shs. 871.820.992 (91%), kharashka joogtada ahna waxaa lagu qiyaasay lacag dhan Shs. 633.297.437 (66%). Waxa halkan ka muuqaneysa dheeraad dhan Shs. 238.523.555 (25%) waxaana la galinaysa Miisaaniyadda raasumaalka.

16. Dakhliga joogtada ihi wuxuu kor u kacay lacag dhan Sh. 129.019.988 (17%) hadii la garab dhigo qiyaastii 1974. Lacagta dhan Shs. 70.677.906 oo ka mid ah lacagta kororsiimada waxa lagu qiyaasay inay ka imaanayso, cashuurta wax soo-saaridda iyo kharashka. Isla madax-xige ahaan waxaa ka soo galeysa lacag dhan Shs. 485.113.133 oo dhan (56%) dakhliga joogtada ah. Wax kale oo isaguna in la sheego u baahan dakhliga hantida oo keenaya kororsiima dhan 61.834.255. Waxaana ka soo galeysa lacag dhan Shs. 244 693.972 (28%) dakhliga joogtada ah.

Guud ahaan kororsiimada dakhliga joogtada ah waxaa u sabab ah ascaarta oo kacday taasoo keentay in qiimaha lagu cashuurayo bato iyo ballarashada hawlaha Wakaaladaha.

17. Kharashka joogtada ah waxaa ku birtay lacag dhan Shs. 58.598.458 (10%) haddii loo eego qiyaastii 1974. Sababaha u kharashkani la kordhay waxay yihiin dad badan oo shaqooyin la siiyey iyo hawlahii oo ballaartay.

18. Miisaaniyadda raasumaalka ihi waxay gaareysaa lacag dhan Shs. 320.159.028 waxaana ku kordhay Shs. 26.491.552 (9%) markii loo eego tii sannadkii hore. Dakhliga miisaaniyaddan waxa ugu weyn dheeraadka miisaaniyadda joogtada ah oo dhan Shs. 238.523.555. Dakhliyada kale ee miisaaniyadani waxay is dhimeen Shs. 43.929.978 waxaana ugu wacan amaahdii Dawladdu soo qaadan jirtay oo layaareeyay. Miisaaniyadan inteeda badan waxaa lagu kharash gareeynayaa hantigelinta muuqda. Miisaaniyadan waxaa ka dhiman lacag dhan 74.248.310 waxaana lagu kabayaa deynta intaa leeg.

19. Sidaan horeba u sheegnay miisaaniyadda waxay ka koobantahay Miisaaniyadda Dawladda dhexe kuwa Dawladaha hoose iyo kuwa Wakaaladaha markii la isku darayey miisaaniyadahaa waxa ka baxay wixii xubnuhu is weydaarsadeyn waxaana la qaatay xaasilka keliya.

Markaa Dakhliga Daw. Dhexe wuxuu noqday Shs. 585.848.310 waxaaney tahay 61% ee Miisaaniyadda Dawladda dhan; kharashkeeduna wuxuu dhanyahay Shs. 694.100.000 oo ah 73%. Isdhimidda halkan ka muuqataawaxaa lagu kabayaa dheeraad laga helay Miisaaniyadda Wakaaladaha.

Dakhliga iyo kharashka Dawladaha Hoose waxa lagu qiyaasay inay isku dhawyihiin waxayna imaanayaan 7% miisaaniyadda Dawladda dhan. Sidaana waxaa la gaarayaa markii la eego xaasilka ka soo baxa isdhaafdhaafka lacageed ee dhexmara Dawladda dhexe iyo Dawladda Hoose.

Haddii aan u nimaadno Wakaaladaha, dakhligoodu wuxuu noqonayaa Shs. 296.279.845, oo ku imaanayaa 32% miisaaniyadda dhan. Kharashkooda waxaa lagu qiyaasay Shs. 187.230.085 (20%). Dheeraadka halkan ka soo baxaya waxaa dhammaantiiba lagu wareejinayaa Miisaaniyadda Dawladda Dhexe si loogu buuxiyo iodhimmideeda. Halkan waxaa lagu cadeynayaa inaan Wakaaladaha miisaaniyadda dhan loo gelinin dakhligooda iyo kharashkooda joogtada ah ee loo galiyey kaliya xaasilka. Sidaa daraadeed dakhliga alaabada iyo hawlaha ee miisaaniyadda Dawladda dhan kuma jiraan ka wakaaladahu. Sidaasoo kalo waxaa laga yeelay kharashka shaqaalaha iyo alaabada.

20. Dakhliga iyo kharashku Dawladda dhexe waxaa lagu qiyaasay sannadka 1975 Shs. 705.100.000 waxaana ku kordhay lacag dhan Shs. 37.307.153 (6%) markas loo eego qiyaastii Dakhlige joogtada ihi wuxuu noqonayaa 667.082.394 (95%) dakhliga idil. Kharashka joogtadihisa waxaa noqonayaa Shs. 583.170.462 (83%) Kherashka idil. Harkaa waxaa ka soo baxay dheeraad joogtada ah oo noqonaya Shs. 83.911.932. Dakhliga joogtada ah waxaa ku kordhay lacag dhan Shs. 64.732.394 (11%) kolka loo eego kii sannadkii hore kharashka joogtada ihi wuxuu kor u kacay 48.701.760 (9%) marka la barbar dhigo kii 1974, markaa waxaa inoo soo baxayaa dheeraad joogta ah oo ka badan kii sannadkii hore lacag dhan Shs. 16.030.634 (24%).

21. Meelaha ugu waaweyn ee dakhliga kordhay ka yimid waxaa ka mid ha:

— Cashuurta keenida alaabta; waxayna kor u kacday Shs. 35.000.000 sababtuna waxay tahay ascaarta dibadda oo badatay.

— Cashuurta maamulka iyo tirada waxa ku biirtay Shs. 14.000.000 sababtuna ta hore ayey ku xirantahay.

— Cashuurta sonkorta iyo khamriga, waxa ku kordhay Shs. 20.000.000 sababtuna waxay tahay heerkii cashuurta oo kor loo qaaday.

— Cashuurta gadidda iyo qaybta faa'iidada ee Wakaaladaha wax ku kordhay ku dhowaad Shs. 5.000.000 sbabtuna waxay tahay ballaraahada hawlaha wakaaladaha

22. Kharashka joogtada ah ee kordhayna wuxuu ka yimid shaqaalaha iyo alaabada waxaana u sabab ah hawlahii Dawladda oo batay. Tusaala ahaan waxaan u qaadan karnaa Wasaaradaha hoos ku taxan oo mid walba lacagta ku hor qorani kharashkeeda joogtada ah ku biirtay:

| | | | |
|---|---|---|---|
| Wasaaradda | Caashaandhigga | Shs. | 12.500.000 |
| » | Waxbarashada iyo Bar. | » | 7.705.018 |
| » | Beeraha | » | 6.118.496 |
| » | Tacliinta Sare | » | 5.814.767 |
| » | Gaadiidka | » | 3.140.518 |

23. Sidaan horeba u sheegnay miisaaniyadda joogtada ah waxaa ka soo baxaya dheeraad dhan Shs. 83.911.932, kaasoo lagu darayo miisaaniyadda raasumaalka ah kana noqonaysa lacagteeda oo dhan Shs. 121.929.538.

Kharashka miisaaniyadda raasumaalka wuxuu badankiisu ku baxayaa hantigeliin Dawladdu toos u saeyneyso miisaaniyadda raasumaalka waxay isdhimaysaa Shs. 23.348.310 waxaana lagu kabayaa deynta dibadda.

Hantigeliinka waxaa ugu muhimsan kan ay sameyneyso Wasaaradda Sancadda oo lagu qiyaasay Shs. 24.020.000 looguna talagalay dhismaha Warshadaha iyo Makiinadahooda, ka Wasaaradda Beeraha oo dhan Shs. 18.749.000 oo lagu kharash gareynayo mashaariicda biyo waraabinta iyo makiinadaha, ka Wasaaradda Macdanta iyo biyaha oo gaaraya lacagta dhan Shs. 15.843.750.000 looguna talagalay mashaariicda biyada, ka Waxbarashada oo lagu qiyaasay 7.750.000 oo lagu kharash garcynayo dugsiya cusub oo la dhisayo.

24. Haddii aynu kharashka Dawladda dhexe hawl iyo dhaqaale ahaan u kala soocno waxaa la qiyaasayaa (Markii laga saare deyn gudiga) inay hawlaha guud qaadanayaan. Shs. 314.187.072 (45%) oo dhamaanteedba ah kharash joogta ah. Hawlaha beesha iyo dhaqaalaha waxay ku kacayaan lacag dhan 231.769.702 (34%). 62% oo lacagtan dambe ka mid ah waa kharash joogta ah inta kalena waa kharash raasumaal ah.

Ugu dambeyn kharashka hawlaha mujtamaca wuxuu dhanyahay Shs. 142.362.551 (21%) wuxuuna u badanyahay mid joogta ah (91%).

25. Miisaaniyadaha Dawladaha Hoose ayagoo isku jira waxa lagu qiyaasay lacag dhan Shs. 77.915.570, taasoo ka badan Shs. 3.000.311 (4%) tii sannadkii hore.

Inkastooy miisaaniyadu guud ahaan isxirayso haddana labadooda dhinac, ka joogtada ah iyo raasumaalka isma dhelitriayaan. Sida dhabta ah dakhliga joogtada ahi wuxuu dhan yahay Shs. 76.387.714 (98%). Kharashka joogtada ihina wuxuu gaarayaa Shs. 55.177.379 (71%), haddaba meeshan waxaa ka soo baxaya dheeraad joogta ah oo dhan Shs. 21.210.335 oo lgau kabayo isdhimidda miisaaniyadda raasumaalka.

26. Markii loo eego sannadkii ina dhaafay dakhliga joogtada ah waxaa ku kordhay lacag dhan Shs. 10.952.861 (17%) sababta ugu weyn ee dheeraadkan keentay waxay tahay Dawladda Hoose ee Xamar oo aad u kordhisay hawsheedii ganacsiga, xaasilkii ka soo baxayna miisaaniyadda ku soo darsaty. Hase ahaatee dakhliga joogtada ahi uma kordhin sidii laga filaayey maxaa yeelay abaartii oo guud ahaan hoos u dhigtay dakhligii degmooyinka qaarkood. Waxa kaloo ayaduna waxyeela kule dakhliga Miisaaniyadda Dawladda Hoose in sannadkan Miisaaniyadahoodu laga reebay lacago hore loogu shubi jirey ay kana mid yihiin lacagtii iskaa-wax-u-qabso iyo dakhligii ka soo gali jiray galleyda oo hadda loo warsejiay laamaha ganacsata.

27. Kharashka joogtada ah waxa ku korortay lacag dhan Sh. So. 8.679.307 (19%), waxaana u sabab ah kharashka shaqaalaha iyo kan alaabada iyo hawlaha ee Dawladdaha oo kordhay kharashyada aad u kordhay waxa ka mid h maamulka laamaha ceelasha oo Dawladaha Hoose lagu wareejiyay iyo shaqaal cusub oo la qoray.

28. Miisaaniyadda raasuumaalka ahi ee Dawladda Hoose waxa lagu qiyaasay sannadka 1975 lacag dhan Sh. So. 22.738.191 waxaana dhammaantaad wax yar mooyaane laga masruufayaa dheeraadka miisaaniyadda joogtada ah. Lacag dhan So. Sh. 14.211.014 (62%) waxa lagu khaarashgareynayaa hantigeliin ay Dawladaha Hoose toos u sameynayaan, inta kalene waxa loogu talagaley lacag wareejin ah oo la siinayo Dawladda Dhexe iyo deyn gudid.

Haddii kharashka Dawladaha Hoose, marka laga reebo deyn gudida, loo kale-sooco hawl iyo dhaqaale ahaan waxa la qiyaasayaa in hawlaha guud qaadanayaan lacag dhan So. Sh. 31.747.429 (42%). Lacagtaasi waxay ka kooban tahay kharash joogta ah (47%) iyo mid raasuumaal ah (53%). Hawlaha beesha iyo dhaqaalaha waxa ku baxaysa lacag dhan So. Sh. 36.085.166, waxayna u badantahay kharash joogta ah (93%). Hawlaha mujtamaca waxa ku baxaysa lacag dhan So. Sh. 7.344.988, dhammaanteedna waa kharashka joogtada ah.

30. Sidii aan horeba u sheegnay sannadkan 1975 waa kii ugu horreeyey ee miisaaniyadaha wakaaladaha lagu daray tan Dawladda, Taasna waxa loo yeelay si loo kormeero hantida guud ee dalka, isla markaana laga maamulo meel keliya.

31. Guud ahaan miisaaniyadda Wakaaladahu waxay muujinaysii marka uga reebo wareejinnada dhexmara iyaga iyo Dawladda Dhexe, dakhli guud oo lagu qiyaasay Sh. So. 296.170.845; taasoo ka badan kii sannadkii hore lacag dhan Sh. So.58.286.899 (24%). Qodobka ugu muhiimsan ee dakhliga wakaaladuhu waxa weeye macaashka guud ay sameeyaan, waxana lagu qadaray Sh. So. 237.983.682 (80%). Lacagtan waxa ku jira cashuurta, faa'iidada, qeybta faa'iidada Dawladda iyo kaydyada kala duwan. Qodobka kale oo isna muuhiim ihi waa amaahda ay gudaha iyo

32. Dakhliga kor lagu soo faahfaahiyey ee Wakaaladaha waxa lagu kharashgareynayaa hantigelliin ay ku baxayso lacag dhan Sh. So. 159.859.747. Hantigelliinkani wuxu ka koobanyahay mid raasumaal raaga ah (dhismo, qalab iwm) oo ku kacaya Sh. So. 123.320.036, iyo mid badeecad ah oo isna ku kacaya 36.539.711. Wakaaladahu dakhligooda waxay ka gaadanayaan lacag dhan Sh. So. 25.210.062 oo ay ku kordhisanayaan hantidooda lacagta ah. Lacagta dhan Sh. So. 109.040.760 waa lacagta saafiga ah ay u wareejinayaan Dawladda Dhexe. Lacagtaasi waxay u kala baxdaa cashuurta gadidda oo dhan So. Sh. 54.475.311, qaybta faa'iidada Dawladda oo lagu qiyaasay Sh. So. 50.107.083 iyo wareejin raasumaal oo saafi ah oo dhan Sh. So. 4.458.366.

## GABAGABEEYN

Sanooyinkaan dambe dadaa lku wuxuu ahaa in la gudbo dheeliga Miisaaniyadda iyo in xal loo helo wixii yar yar oo la mid ah. Haddase ka dib markii eey badateen mashaakilka dalka oo u baahan xal waxaa lagama maarmaan ah in miisaaniyadda lagu fadhiisiyo sal dhaqaale. Cashuur badan oo hartay majirto inkastoo oo eey karta lagama maarmaan in iyada xataa si wacan loo habeeyo. Sieeyno hantiwadaagga ugu helo sal dhaqaale waxaa loo bahan yahay isbeddel weyn oo ku saabsan dhaqaalaha dalka. Isbeddelkaasu waa in uu saamaay yaa (1) Xagga beeraha; (2) Xoolaha; (3) Kalluunka; (4) Sancada; (5) Aqoonta iyo halka deeyn bixinta.

Midda ugu weyn oo loo baahan yahay waa in eeynu ognahay waxa eeynu rabno iyi sida eeynu ku heli lahaayn hubki iyo qalabkii eeynu ku gaari lahaayn wexeeynu rabno. Wexeeynu u baahannahay qorshaayn aqoon iyo cilmi ku fadhidda. Waa in eeynu naqaan intee ba eeynu u baahannahay si marka hore eeynu ugu yaraan uga maarano cunada dibedda laga keeno, islamarkaasna waa in eeynu naqaan haa eeytahay in uu ka soo baxo.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 14 Jenayo 1975 — *Jeegga Wareega oo uu leyahay Guddoomiyaha Gobolko Sh. Dhexe. (50)* » 261
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 3 Maarso 1975 — *Jeegga wareega L. 010580 Sh. So. 592, oo uu leyhay Cali Mazamed Nuur. (51)* » 261
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 17 Maarso 1975 — *Jeegga wareega L. 6049( Sh. So. 1.800 oo uu leyahay Cabdullahi Maxmed Munye. (52)* » 162
MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, Tr. 15 Maarso 1975 — *Buugga Lacagta L. 1863, Sh. So. 1.852, uu leyahay Buun Jibril Cabdi, Ku celin. (52)* » 262
MAKAMADDA GOBOLKA BAYDHABO, Tr. 18 Feberayo 1975 — *Buugga L. 1788 Sh. So. 2.000 wey ledahay Madiina Maxamed Cusman. (Ku celin 52)* » 263

# BOGGA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 26, Tr. 6 Maarso 1975.

**Sharciga wa-ka-baddelka habka ururinta iyo xaraynta ajuurooyinka badda, geegida Dayuuradaha yo xoolaha nool.**

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Go'aanèii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU DHAQAN GELINAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Urrurinta iyo xaraynta ajuurooyinka*

Ajuurooyinka badda ee ku saabsan barroosinka iyo k xirashad dakadda ee marakiibta, ajuurada geeida dayuuradaha iyo tan xoolaha nool ee la dhoofiyo, waxa ururin doona furdadaha markii xaashi amar ka helaan xubnah ku shaqa leh.

Ajuurooyinka kor lagu soo sheegay furdaduhu waxay ku shubi donaan madax-xigaha ku habboon ee miisaaniyadda Dawladda marka laga reebo 50% ajuurada xoolaha nool, taasoo la siinayo Wakaaladda Horumarinta Xoolaha.

Waxa wax laga baddalay aydoo la waafajinayo niddaamka sare, sharciya ajuurooyinka ku saabsanaa ee ay lahayeen Wakaaladda Dakadaha Soomaaliyeed iyo Wakaaladda Horumarinta Xoolaha, Lr. 1 ee 7-1-75 iyo Lr. 34 ee 26-2-1970.

Qodobka 2aad

*Hirgelin*

Sharci kasta oo kan ka soo horjeeda ama aan la socon waa la baabiiyey. Sharcigani wuxu dhaqangalayq maalinta la saxeexo waxana lagu saari doonaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Qof kasta qasab bay ku tahay inuu dhawro ilaaliyana sharciga.

Muqdisho, 6 Maarso 1975.

MADAXWEEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

# BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLOHA SARE EE KACAANKA

Tr. 4 Disember 1974, L. 50.

Magaalo Madax Degmo oo laga bedeley meeshii hore.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida koowaad iyo tan Labad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52, taarikh 8-6-1972, lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21 Setembar 1972 — dhamaaystirka lambar, 1 ilaa Lambar. 9;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaxweynaha G.S.K., lambar 49, taariikh 8-2-1973, laga naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 28-2-1973, dhamaaystirka lambar. 3 ilaa lambar 2, lagu dhicay Gobollada iyo Dogmooniyka;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaxweynaha G.S.K. lambar 66, taariikh 23-11-1973, lagu naadiyay Faafinta Rasmiga ah ee 15-7-1973 lambar 13 Bis, lagu dhinay Gobolka Sanaag;

MARKUU OGAABAY Inaay tahay lagama maarmaan in magaalo-madaxda Degmooyinka Lass Qoray iyo Gar-adag, ka tirsan Gobolka Sanaag, laga bedele meesha ay hastan ka yaaliin, si loo daryeelo donaha Dadweynaha ka nool Degmooyinkaas;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Qaranka ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO DHEGELISTAY Ra'yi Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU XEER KA DHIGAY

Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda Xeerkan lagu naadiyo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, Magaalo Madaxda Degmooyinka Lass Qoray iyo Garadag waxay ahaan doonaan sida halka hoose ku qoran:

1. Magaalo-madaxda Dedgmada Lass Qoray waxay ahaan doontaa Badhan oo haatam ah tuulo Degmada ka tirsan;

2. Magaalo-madaxda Degmada Garadag waxay ahaan doontaa Ceel-Afweyn oo haatan ah tuulo isla Degmadaas ka tiraan.

Qodobka 2aad

*Dhaqan gal*

Xeerkani isla maalinta lagu naadiyo Faafinta Rasmiga ah ayuu dhaqan galayaa:

Qodobka 3aad

*Xeer la tirtiray*

Marka Xeerkani dhaqan galo waxa la baabiyay Xeer iyo amarkii Xeerkan qilaafsan ama aan la karin.

Muqdishu, 4 Disembere 1974.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dowladda Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax*

---

**XEER WASAARADDA GARSOORKA IYO ARRIMAHA DINTA**
**Tr. 24 Febberayo 1975, L. 51.**
**Abuurid Xabsiyaal.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKUU ARKAY Qodobka 2 ee Sharciga Xabsiyada, Lamb. 7 ee 30iik iDsembar 1971;
MARKUU DHAGEYSTAY Taliyaha Ciidanka Asluubta;
MARKAY U MUUQATAY Baahida loo qabo Xabsiyo;
Wuxuu ku dhaqaaqayaa:

Qodobka 1aad

In Haawaay oo ka mid ah Degmada Baraawe iyo Buurweyn oo ka mid ah Degmada Jalalaqsi mid walba hal xabsi oo lagu hayn karo maxaabiista xukuman, xarigoodu in kastaba ha ahaadee, iyo kuwa aan xukunaynba laga sameeyo; waa inay ahaadaanna xabsiyo dad ku noolaan karo oon cafimaadka maxaabiista wax yeelayn.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan geli doonaa marka faafinta rasmiga ah (Official Bulletin lagu soo qoro.

Muqdisho, 24 Feberayo 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta
*Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 51.*
*Muqdisho, 8 Maarso 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

**Tr. 11 Maarso 1975, L. 52.**

**Magacaabidda Guddiga Kacaanka Degmooyinka — Jowhar, Balcad, Cadale, Aadan Yabaal.**

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 juun 1972, lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-9-1972, kuna saabsan maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan ee lambarkiisu yahay 12120 ee 13-12-1972 ee hore loogu magacaabay qaybaha Wakiillada Beesha ee Guddiga Kacaanka ee Gobolka Banaadir intii aan saddexda Gobol loo qaybin;

ISAGOO ARKAY Xeerka lambarkiisu yahay 49 ee 8-2-1973; lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 28-2-1973; dhamaystirka lambar 3 ilaa 2;

ISAGOO OGAADAY Inay lagama maarmaan tahay in loo magacaabo Wakiillada Beesha ee Guddiyada Kacaanka Degmooyinka Jowhar, Balcad, Cadale iyo Aadan Yabaal;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka Gobolka Shabeelaha Dhexe;

## WUXUU XEERAY

### Qodobka 1aad

Magacaabidda Guddiga Kacaanka Degmooyinka Jowhar, Balcad, Cadale iyo Aadan Yabaal, qaybahooda Wawiillada Beesha.

Ka bilaabanta 20-10-1974, dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxanyahiin waxaa loo magacaabay inaay noqdaan xubno Guddigada Kacaanka Degmooyinka ay ku hoos qoran yahiin:

### DEGMADA JOWHAR

1. Jaalle Cabdulqaadir Xasan Cali;
2. » Sheekh Xanafi Sheekh Bashiir;
3. » Sheekh Maxamed Sheekh Cabdi;
4. » Maxamed Mukarram Yaxya;
5. » Cabdi Sheekh Jees;
6. » Maxamed Maxamuud Shadoor;
7. » Feyley Maxamed Maxamuud;
8. » Maxamed Maxamuud Geedi;
9. » Cali Sheekh Cumar;
10. » Cabdulle Maxamed Rooble;
11. » Aamina Cabdulle Maxamed;
12. » Baar Cabdulle Maxamed;

13. » Xuseen Maxamed Cumar;
14. » Axmed Xaaji Boorre;
15. » Maryan Saciid Xasan;
16. » Xasan Ismaaciil Deeqle;
17. » Maryan Jibriil Aadan.

DEGMADA BALCAD

1. Jaalle Sheekh Saalax Macallim Cabdi;
2. » Cabdi Sabriye Barkhadle;
3. » Nuur Makaraan Maxamed;
4. » Maxamed Daahir Abuukar;
5. » Raaliya Cismaan Maxamed;
6. » Caasha Axmed Xaaji;
7. » Cismaan Xuseen Cabdi;

KU DHAQAN XAFIIS DAWLADEED

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Muqdisho, 25 Maarso 1975 **L. 4, R. 3**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريده شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxfi ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 26, Tr. 6 Maarso 1975 — *Wax ka baddelka*

Qodobka 2aad

*Dhaqan gal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20-10-1974, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 11 Maarso 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 56.*
*Muqdisho, 15 Maarso 1975.*
*Hantidhowraha Guud*
G. Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

---

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

**Tr. 26 Febberayo 1975, L. 53.**
**Magacaafidda Guddiga Kacaanka Degmada Afmadow Qaybtiisa Wakiillada Beesha.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8-6-1972, lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-9-1972, dhammeeystirka lambar 1 ilaa 9, kuna saabsan Maamulka Dowladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeer Wasaaradda lambarkiisu yahay 12124, taariikh 13-2-1972 ee hore loogu magacaabay Guddiga Kacaanka Degmada Afmadow qaybtiisa Wakiillada Beesha;

ISAGOO ARKAY Xeer Wasaaradeedka lambarkiisu yahay 118 ee 1-1-1974 oo Degmada Afmadow loogu bedelay derejada (B);

ISAGOO OGAADAY Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Wakiillada Beesha ee Guddiga Kacaanka Degmada Afmadow, iyadoo la waafajinayo qodobka 10iid lambarkiisa 3aad xarafka (c) ee sharciga xaggan sare ku tilmaaman;

ISAGOO TIXGELINAYA Talada uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka Gobolka Jubbada Hoose;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Magacaabidda Guddiga Kacaanka Degmada Afmadow Qaybtiisa Wakiillada Beesha.

Dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxanyihiin waxaa loo magacaabay inay ka noqdaan xubno Guddiga Kacaanka Degmada Afmadow Qaybtiisa Wakiillada Beesha:

1. Jaalle Aadan Cumar Sheekh Cabdi;
2. » Carab Maxamuud Cumar;
3. » Shide Gaaboow Guure;
4. » Maxamed Sheekh Cali Cigaal;
5. » Xaaji Maxamed Sheekh Cabdullaahi Cumar;
6. » Faaduma Xasan Cabdulle;
7. » Cabdi Shoongolow Aadan;
8. » Sahra Daahir Xuseen;
9. » Shaallow Xaaji Khaliif;
10. » Maxamed Cabdulle Cismaan;
11. » Cabdullahi Xaaji Cali Sulub;
12. » Maxamed Sheekh Aweys;
13. » Raage Qadiid Xuseen.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa ka bilaabanta 20-10-1974, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 26 Febberayo 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Arrilmaha Gudaha
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA

Tr. 16 Jenayo 1975, L. 54.
Giimaha Timirta.

## XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKII uu rakay go'aankii 1aad iyo kan 2aad ee kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKII uu arkay Sharciga Lambarkiisu yahay 17ka oo soo baxat 17ka Jun 1967 ee ku saabsanaa ilaalinta qiimaha Alaabta lagama maarmaanka ah;

MARKII uu ogaaday in loo baahan yahay in sicir loo gooyo Timirta;

AYADOO la dhaqan gelinaaya go'aankii ay gaareen Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

## WUXUU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDA

### Qodobka 1aad

Qiimaha Timirta wuxuu noqodoona sida aanu u goynay ee hoos ku qoran, laga bilaabo 17 Jannaayo 1975.

| | |
|---|---|
| Qiimaha ay WGU (ENC) kiiladii ku gadayso . . | Sh. So. 2,5442 |
| Qiimaha ay D. Hoose kiladi ku gadaysa . . . . | Sh. So. 2,7586 |
| Qiimaha Dukaanleyda kiiladi ku gadayaan . . . | Sh. So. 3,00 |

### Qodobka 2aad

Xeerkaan lagu soo saaridoona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda; wuxuu tirayaa Xeer kastoo ka soo horjeeda, waxaa lagu amrayaa qof waliba inuu dhowro, dadka kalena dhowrsiiyo Xeerkan isaga ah.

Muqdisho, 16 Jenayo 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Jaalle Axmed M. Maxamuud*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**Tr. 10 Disember 1974, L. 55.**

**Cad dhul Wowladeed, gateen Jaallayaasha Cali Maxamuud Cali Umal iyo Maria Luisa Virdis, ku yaal Muqdisho — Valle Nord agagaarka Kasa Bobolare, kuna fadhiya mq. 780.**

XOGHAYAHA DAWALDDA

ISAGA OO ARKAY Xaashaddii Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxay 23 Maggio 1961;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Maxamed Moxamuud Sanlibaax taarikhdu markay ahayd 27-1-1963 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Valle Nord agagaarka Kasa Bobolare, kuna dhacaaya qaybta VII Esterna;

ISAGA AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladd L. Soona baxay , iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 11.811, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose, ee Muqdisho, fadhigoodii 362aad taarikhduna ahayd 14-12-1965;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 58720 ee 4-5-1966 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Maxamed Moxamuud Sanlibaax uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 390, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 780, loona tiriyay Maxamed Moxamuud Sanlibaax sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahay 8 Maajiyo 1966;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) 1.555 Reb. taarikh. 11-6-1965 lagu diiwaan geliyay Xamar 15-10-1972, L. 712 Qoraal Dowladeed, buugga 20 oo ah Caddeeynta Maxkamadda Gobolka Xamar taas oo Maxamed Moxamuud Sanlibaax ka gaday kuna wareejyay Aadan Cosmaan Moxamed «Aden Impero» wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 780, kuna yaal Muqdisho — Valle Nord;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 13534 Reb. taarikh 7 8-1974 lagu diiwaangeliyay Xamar 7-8-1974 L. 228, qoraal Dowladeed, Buugga 20 oo ah Caddeynta Nataayada Dr. Xasan Warsama Cali taas oo Aadan Cosmaan Maxamed «Aden Impero» ka gaday kuna wareejiyay Cali Maxamuud Cali Umal iyo Maria Luisa Virdis wax allaale wixii xuquuq ah

oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 780, kuna yaal Muqdisho -- Valle Nord agagaarka Kasa-Bobolare;

X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed, gateen Cali Maxamuud Cali Umal iyo Maria Luisa Virdis, oo ku yaal Muqdisho — Valle Nord, Agagaarka Kasa - Bobolare kuna fadhiya mq. 780.

Muqdisho, 10 Disembar 1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 52.*
*Muqdisho, 16 Dicembar 1974.*
*Hantidhawrka Guud*
G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**Tr. 27 Agosto 1975, L. 56.**
**Dhul gatay Jaalle Cabdi Jaamac — ku fadhiya mq. 4.995, kuna yaal Muqdisho — Km. V,Jidka Afgooye.**

XOGHAYAHA DAWALDDA

ANNAGOO ARAGNAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 115 Settembre 1956;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Jaalle Maxamuud Cabdi Nuur taarikhdeeduna ahayd 9-4-1960, uu ku weydiisanayay dhul dhismo Dowladeed kuna Yaal Muqdisho — Km. V — Jidka Afgooye;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyay Xafiiska ku shaqa lahaa, laguna dhabacay xashid Rasmiga ah ee Dowladda lamb. 4 taarikhdeeduna ahayd 1-10-1960;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga Farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 6966 bishi 9 Sett. 1963, soona gudubtay fadhigii 318°aad ee 9 Settembre 1963;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu tahay L. 2664 taarikhdeeduna ahayd 7 Nav. 1960, in Jaalle Maxamuud Cabdi Nuur, uu dhiibay Xafiiska Canshuurta Dadban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 499,50, oo ah qiimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay 1017521 taarikhdeeduna ahayd 12 Nov. 1963, in ninka kor ku magacaaban la siiyay dhul ku fadhiya mq. 4.995, kuna yaal Muqdisho — Km. V — Jidka Afgooye;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 1071 taarikhdeeduna ahayd 17 Abril 1973, oo lagu qoray buuga Cashuurta Dadban L. 162 Atti Pubblici Vol. 20, oo lagu dhigay Notayaha Dr. Max'ed Xasan Jasti, oo ku saabsan kalagadasho dhul uu iibsaday Jaalle Maxamuud Cabdi Nuur oo ka gatay Jaalle Cabdi Cigaal Jaamac — dhulka la mid ah mq. 995, kuna yaal Muqdisho — Km. 5° — Jidka Afgooye;

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Cigaal Jaamac la siiyay uuna gatay dhul Dowladeed ee ku fadhiya mq. 4.995, kuna yaal Muqdisho — Km. 5° — Jdka Afgooye.

Muqdisho, 27 Agosto 1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, Foglio n. 35.*
*Mogadiscio, li 5 Settembre 1974.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Ten. Col. Abdullahi Warsame Nuur.

---

**XEERB ANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA - Lamb. 69 ee 9-03-1975.**

**Tr. 9 Maarso 1975, L. 57.**
**Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.**

AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA DHEXE EE SOO MAALIYA

MARKUU ARKAY Qodobka 13aad Xubintiisa 4aad, ee Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembar, 1968, ee awood buuxda siinaya Agaasimaha Guud, markuu maqanyahay Guddoomiyuhu.

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964,

kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, inuu marwalba caddeeyo qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

ASAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaadii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiiyey Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

ASAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 175 ee 9-03-1975, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lr. 27 ee 26-11-1968 uu dhigayo.

## WUXUU GUDDOONSHAY

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 10-3-1975, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

| Lacagta Qalaad | | Heerka Iibsashada oo ah Sh. So. | Heerka Gadidda oo ah Sh. So. |
|---|---|---|---|
| US $ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK £ | 1.00 | 15.1384 | 15.4412 |
| Dm. | 1.00 | 2.7131 | 2.7673 |
| Lit | 101.03 | 1.0000 | ——— |
| Lit. | 99.01 | ——— | 1.0000 |
| F. Fr. | 1.00 | 1.4934 | 1.5233 |
| Sw. Fr. | 1.00 | 2.5577 | 2.6089 |
| Dj. Fr. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 9-3-1975

SACIID MAXAMAD CALI
Agaasimaha Guud
Guddoomiyaha K. M. G.

XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA - Lamb. 70 ee 17-03-1975.
Tr. 17 Maarso 1975, L. 58.
Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

## GUDDOOMIYAHA AGAASIMAHA GUUD
## EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Setembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna;

AYAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaadii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya;

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna;

AYAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 176 ee 17-03-1975, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lr. 27 ee 26-11-1968 uu dhigayo;

## WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 17-03-1975, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya.

| Lacagta Qalaad | | Heerka Iibsashada oo ah Sh. So. | Heerka Gadidda oo ah Sh. So. |
|---|---|---|---|
| US $ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK £ | 1.00 | 14.8356 | 15.1324 |
| Dm. | 1.00 | 2.6860 | 2.7396 |
| Lit. | 102.04 | 1.0000 | ——— |
| Lit. | 100.00 | ——— | 1.0000 |
| F. Fr. | 1.00 | 1.4785 | 1.5081 |
| Sw. Fr. | 1.00 | 2.5065 | 2.5567 |
| Dj. Fr. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 17-03-1975.

SACIID MAXAMAD CALI
Agaasimaha Guud

CUMAR AXMAD CUMAR
Guddoomiyaha

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Jilacow Caddow, maadintii 10-12-1963, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, Jidka Afgooye uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektangolar, addimihiisuna ahaayeen 50x30, kuna fadhiye 1500 mdh., sababtoo ah in uu is baddelay.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 545004 ee 42x25, kana baxday xafiiskaan, wxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 13x25, kuna fadhiya 1075 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.
Bari waxaa ka xiga: Axmed Jilacow.

Muqdisho, 5 Maarso 1975.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(44)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Axmed Jilacow Cabdow, maalintii 9-12-1963 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, Jidka Afgooye uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektangolar addimihiisuna ahaayeen 50x30 kuna fadhiye 1500 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii meeshaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 545006 ee 1-1-1964, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 43x25, kuna fadhiya 1075 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Maxamed Jilacow.
Bari waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.

Muqdisho, 5 Maarso 1975.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(45)* *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasna Hiraabe Dhiblaawe, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 25-2-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar ah 21x34 kuna fadhiya 714 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: dhul dawladeed.
Koofur waxaa ka xiga: Jidka Maka al Mukarama.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid yar iyo Jkada Rootiga.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga boodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 9 Maarso 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(46)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Macow Axmed Cusmaan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 7-11-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Y'aaq-Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar ah 15,50x20 kuna fadhiya 310 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 31.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Dhul dwaladeed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga boodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 18 Maarso 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(47)* *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A D H U L*

Waxaa leydin ogeysiinayaa in Jaalle Xaaji Cali Xasan Sabriye (Xoogsay) uu Xafiiskaan keenay taarikhdu markay ahayd 13-1-1975 arji uu ku weydiisanayo ruqsad Milki ah in loogu ogolaado cad dhul ah uu haatan asagu deganyahay kuna yaal degmadatan Belet-Weyne Xaafadda Kooshin, laanta Aainin k una taal galbeedka waddada laamiga ah ee **Xamar.**

Sidaas aawadeed ruux kasta ee dhulkaas dacwad ka qabaasi waa inuu soo qadima dacwad inta aysan dhamaanin 30ka maalmood ee Ogeysiiskaani ku dhegan-yahay looxa Ogeysiisyada degmadatan ee Dawladda Hoose oo ka bilaabata maalinta taariikhdu ay tahay 21-1-1975 illaa 19 Febberayo 1975.

Muddaadaas aan kor ku soo sheegnay wixii ka dambeeya ruux allaale ruuxii dacwad keena xafiiskaan lagama ogolaandoono ee waa in 30kaas maalmood ka hor la soo qadimo dacwad ka hojeeda Naadadaas dhulka oo wan kor soo sheegnay.

B. Weyne, li 21 Jennayo 1975.

Guddoom. Guddiga Kacaanka Degmada B. W

*(48)* *G. Maxamed Cartaan*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A D H U L*

Waxaa dhamaan la ogeysiinayaa dadweynaha degan Belet Weyne in Jaalle Maxamed Ibraahim Cabdi uu keenay xafiiskaan taarikhdu markay ahayd 21-9-72 arji uu ku weydiisanayo gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Belet Weyne xaafadda Hormarka kuna fadhiya 863,60 soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxa ka xiga: Jid yar.
Koofur waxaa ka xiga: Jid yar.
Galbeed waxaa ka xiga: Dugsiga Masaarida iyo Khaliif Jumcaale.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Sidaas aawadeed qof allaale qofkii daneynaaya dhulkaas waa inuu keenaa Xafiiskaan dacwad ka horjeeda naadadaan inta aysan dhamaanin muddada 30 (sodonka) maalmood ah oo ay ku dhegan-tahay looxa ogeysiisyada degmada ee Dawladda Hoose, oo sharci ahaanta looga doodi karo.

Belet Weyne, 15-6-1972.

Ufficiale Sviluppo Affari Distrettuali

*(49)* *Magg. Faarax Maxamed Soleymaan*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Ku: Bankiga Qaranka Soomaaliyeed — Xamar.

Og: Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed Laanta Jowhar — JOWHAR.

Guddoomiyaha Maxkamada Gobolka Sh. Dhexe; Markii uu arkay weydiinta uu soo jortay Guddoomiyaha Gobolka Sh. Dhexe ee uu ogaaday inay tahay shaqada xafiiskani.

Markii uu arkay Qoddobka 69 Xeerka L. yahay 2 ee soo baxay 9-9-1965.

Wuxuu caddeynayaa dhumidda Jeeg wareegto ah L. yahay 002532

KU DHAQAN XAFIIS DAWLADEED

# FAAFIN RASMI AH
# الجـــريدة الرســـمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهـــورية الصـــومال الديمقراطيـــة

**Sannadka 3aad** Muqdisho, 25 Maarso 1975 **L. 4, R. 3**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريـــده شـــهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 26, Tr. 6 Maarso 1975 — *Wax ka baddelka habka ururinta iyo xaraynta ajuurooinka Badda.* Bog. 245

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Cabdullahi Maxamed Munye.

Markaan arkay Qod. 69 D. L. 1969 N. 2.

Waxaa cad dhumista Jeegga wareegga Lr. 6049, kuna qorantahay Sh. So. 1.800 (kuniyosideedboqol) shilin, ee Bankiga Ganacsiga Ummadda, waxaan idiinka amreynaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Jeegga aan kor ku soo sheegnay muddo 15 beri oo ka bilaabato markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga, haddaan la helin cid sheegata waana in gacanta laga saaro Jaallaha magaciisa kor ku qoran yahay yahay ama qof kale oo sita wakaalad sharci ah.

Muqdisho, 17-3-1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka
*Dr. Yasiin Shire Faarax*

*(52)*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

Waxaan akhriyey dacwaddan;

Markan Arkay waxay ku saabsan tahay ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Soomaalidda laanta Kismayo, ee aan ogaadiy in ay tahay shaqa xafiiskan;

Waxaan Arkay Qod. 69 D. L. 9-9-65 N. 2;

Waxaan caddeeynayaa dhumidda buuga lamb. 1863 ku qoran lacag dhan 1.852 (kunsideedboqolkoton iyo laba Shs.)

Waxaan amrayaa in loo cusbooneysiyo buun Jibriil Cabdi Muddo 15 (shan iyo tobaan) beri ah oo laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah (Bollettino Ufficiale), haddan la helin qof kale ee buugga sheegta.

Waxaan kaloo la amrayaa in buuga gacanta laga saaro gabadha magaceeda kor ku qoran tahay ama qof kale oo ka sitaa wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismayo, 15 Maarso 1975.

Guddoom. Maxkamadda Gobolka J. Hoose
*Dr. Xuseen Faarax Hilowle*

*(Ku Celin 52)*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA BAYDHABO

Markii aan arkay Weydiyinta ay soo qoratay Jaalle Madiina Moxamed Cusman, 40 jir ah degan Baldhabo Xaafadda Berdale, oo aan ogaaday in ay tahay shaqada Xafiiskan;

Markaan arkay qodobka 69 D. L. 9-9-1965 L. 2;

Waxaa cad dhumidda Buugga Lamb. yahay 1788 oo ay ku qorantahay lacag dhan 2000 (labakun) Sh. Bangiga keyda iyo amaahda Laanta Baydhabo waxaan amrayaa in loo cusboonelsiiyo mar labaad Bugaas Haweeneyda la yiraahdo Madiina Moxamed Cusman muddo 30 Beri ah oo ka bilaabato markii lagu dhigo Xeerka Faafinta Rasmiga ah haddi aan la helin qof kale oo sheeganayo.

Bangigaas waxaa loo caddeynayaa in Buugga gacanta laga saaro Haweeneyda magaceeda aan kor ku soo sheegay ama qof ka sita wakaalad cad iyadoo la sugayo 30ka beri.

Baydhabo, 18-2-1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka B.
*Dr. Cabdi Muse Mayw*

*(Ku celin 52)*

KU DHAQAN XAFIIS DAWLADEED

# FAAFIN RASMI AH

# الجـــريدة الرســـمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهـورية الصـومال الديمقراطيـة

Sannadka 3aad | Muqdisho, 1 Abrile 1975 | L. 4

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxíi ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 27, Tr. 12 Maarso 1975 — *Wax ka Beddel Sharciga Dhowritaanka Badaadada Ummadda.* Bog. 190

SHARCIGA L. 28, Tr. 1 Maarso 1975 — *Dhisidda Wakaaladda Hoteellada.* » 192

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 24 Febbraiyo 1975, L. 59 — *Magac Bedellid.* Bog. 197

XEERKA MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACANKA, 8 Maarso 1975, L. 60 — *Jinisiyada Soomaalida.* » 198

XEERWASAARADDA ARRIMAHA GARSOORKA IYO DIINTA, 10 Maarso 1975, L. 61 — *Magacaabid Guddi.* » 199

XEER WASAARADDA GANACSIGA, 24 Maarso 1975, L. 62 — *Diiwaan geleinta iskaashiga Xijiga Hawl-Wadaag ee Degmada Qandala.* » 200

XEER WASAARADDA GANACSIGA, 24 Maarso 1975, L. 63 — *Diiwaan gelinta skaashatada Ganacsiga sahanee Degmada Kismaayo.* » 201

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 29 Maarso 1975 — *Naada Dhul Jaalle Makaraan Mahdi Geedi. (53)* Bog. 202

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 6 Febrayo 1975, — *Buugga lacagta L. 432-285, Sh. So. 1000 uu leeyahay Cabdulle Muude Xuseen. (54)* » 202

CONCERIA & CALZATURIFIO SOMALIA - S.p.A. - 30 Maarso 1975 — *Ogeysiis Shir Caadi ah. (55)* » 203

SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA S.p.A. - 30 Maarso 1975 — *Avviso di convocazione di Assemblea Ordinaria e Straordinaria. (56)* » 203

SOCIETA' COMMERCIALE ITALO SOMALA - S.C.I.S - - S.p.A. - 30 Maarso 1975 — *Avviso di Convocazione di Assemblea Ordinaria. (57)* » 204

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA - S.A.I.S - S.p.A. 30 Maarso 1975 — *Avviso di Convocazione di Assemblea Ordinaria. (58)* » 205

SOCIETA' NUCLEARE SOMALA - S.p.A. - 3 Abril 1975 — *Convocazione di Assemblea. (59)* » 206

SOCIETA' NUCLEARE SOMALA - S.p.A. - 3 Abril 1975 — *Ogeysiis isugu yeerid ah. (59)* » 206

# BOGGA KOWAAD

## S H A R C I

SHARCI L. 27, Tr. 12 Maarso 1975.
Wax ka beddel sharciga «Dhowritaanka Badbaadada Ummada».

ISAGOO TIXGELINAAYA GO'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

Qod. 1aad

*Caddeyn*

Haddii aan si kale loo micneyn, ereyada hoos ku qoran waxa loola jeedaa sida soo socota :

DEMBIYADA KONTOROBAANKA Waxaa loola jeedaa kuwa ku xusan qodobka 14 ee sharciga L. 54 taariikh 10 Settembar 1970 «Dhowritaanka Badbaadada Ummadda» iyo kuwa ku tilmaaman qodobka 24 Sharciga lamb. 1 taariikh. 31 Maarso 1961, iyo qof kasta ee ganacsata ah oo qariya waxyaabaha 1aad ee dadweynuhu u baahan yahay (genere di prima necessita').

WAXYAABAHA DADWEYNUHU U BAAHAN Waxaa loola jeedaa waxkasta oo cunno gelaaya ama la cabaaya laakiinsee aalkolo aan ku jirin, daawo, iyo dharka (abbigliamento).

Qod. 2aad

*Kontrobaan*

Qodobka 14 ee sharciga lamb. 54 taariikh. 10 settemb. 1970 waxaa lagu kordhiyey 2 xubnood oo dheeraad ah ee loo aqoonsan doono (5) iyo 6 loona akhriyi doono sida soo socota:

5. Dembiyada kontrobaanka ee ku xusan sharciga 54L. taariikh. 10 settemb. 1970, iyo kuwa lagu tilmaamay Qod. 24 ee sharciga

(Decreto Legislativo) Lamb. 1 taariikh. 31 Maarso 1961, waxaa ciqaabtooda la gaarsiin karaa DIL haddii :

(i) ay caddaato inuu eedeysanuhu ula kasay dembiga (con dolo);

(ii) xoolaha kontrobaanka (smuggled goods) ay gaarayaan ama ay ka badan yihiin 100.000/=shs. (boqol kun Shilin So.)

(iii) ay jiraan waxyaabaha dembiga cusleyn kara oo kordhin kara ciqaabta.

6. Qof kasta oo ganacsata ah iyadoo lagu jiro waqtiyada dhibaatada (stato di emergenza) qariya ganacsato awgeed waxyaabaha 1aad ee dadweynaha u baahanyahay (genere di prima necessita'), wuxuu galayaa dembi, wuxuuna muteysanayaa ciqaabta ay gaarayaan :

1. Qodobada 9 iyo 10 ee sharciga tirsigiisu yahay 17 taariikh. yahay 17-7-1967 haddii qiimaha waxa la qriyey aan ka badneyn Shs. 100.000/= (boqolkun Shiliin So.)

2. Ciqaab DIL ah haddii qiimaha waxaa la qariyey ay gaaraayaan ama ka badanyihiina Sh. 100.000/= (boqol kun Shs. So.) oo la socda shuruudaha ku tilmaaman xubinta 1aad ee qodobkaan.

Qod. 3aad

Si loo helo Garsoor toosan oo ku dhisan caddaalad, waxaa had iyo jeer waajib ku ah Maxkamaddu intaaney xukunkeeda ku dhawaaqin inay si gaar ah u tixgeliso waxyaabaha dembiyada cusleeya iyo kuwa fududeeya sida ku tilmaaman sharciga ciqaabta (aggrevating and axtenuaaing circomstances).

Qod. 4aad

*Burin Sharciga*

Sharci kasta ee qodobada sharcigan ka soo horjeeda ama aan la socon karin waa la baabi'yey;

Qod. 5aad

*Dhaqan gelid*

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa 19 maarso 1975 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 12 Mar. 1975

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*

GUDDONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 28, Tr. 1 Maarso 1975.
**Dhisidda Wakaaladda Hoteellada.**

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU DHAQAN GELINAYAA

Sharciga soo socda :

HABKA GUUD

Qod. 1aad

1. Wakaaladda Hoteellada ayaa halkan lagu dhisal oo hadda kaddib la odhan doono «Wakaalad» si loo daryeelo Hoteellada Dawladda.

2. Wakaaladdu waxay tahay mid madax bannaan oo jirid iyo shakhsiayd qaanuuni ah leh.

3. Wakaaladdu waxay u hoggaansami doontaa xeerkan iyo xeerarka soo socda:

a) Xeerka lamb. 16 ee soo baxay 1dii Abril 1970 iyo toosintii ka dambaysey ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan iwm.

b) Xeerka lab. 36 ee soo baxay 22kii Abriil 1972 ee Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

t) Xeerka lamb. 58 ee soo baxay 31kii Luulyo 1972 ee Lacagaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodob. 2aad

*Xarunta iyo Laamaha Wakaaladda*

Xarunta Wakaaladdu waxay ahaan doontaa magaaladda Muqdisho, haddii loo baahdo se waxay ku yeelan doontaa Laamo Gobollada iyo Degmooyinka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Qod. 3aad

*Ujeeddooyinka Wakaaladda*

Ujeeddooyinka Wakaaladda waxay tahay :

1°. Inay dhisto, horayna u mariso Hoteellada, guryaha cuntada (Restourants), baararka iyo wuxii la xidhiidha iyo inay qaaddo xilka soo dejinta iyo qaybinta khamrada iyadoo raacaysa sharciyada arrimahaas u yaalla.

2°. Waxay Wakaaladdu awood u leedahay inay maamusho Hoteellada, guryaha cuntada ee Dawladda, dukaammada cashuur la'aanta iyo ganacsiga khamrada.

3°. Wakaaladdu waxay shirkado dalka gudihiisa ah ama kuwo shisheeye ahba kula sharaakoobi kartaa wixii mashaariic ah, ee shaqadeeda khuseeya markii ay kala tashato Xoghayaha Wasaaradda Dalxiiska.

4°. Wakaaladdu waxay awood gaar ah u leedahay inay keligeed soo dejiso khamrada dalalka kale lagu sameeyo iyadoo ka gadaysa khamradaas iyada ah Hoteellada Dawladda oo qudha iyo inay dibedda u dhoofiso Khamrada dalka gudihiisa lagu sameeyo. Wakaaladda way ka reeban tahay inay khamrada ka gaddo qof aan ajnebi ahayn.

5°. Wax alla wixii alaab ah ee la damco in lagu gado dukaammada cashuur la'aanta (Free duty shops) waxa soo dejin karta Wakaaladdan oo qudha, iyadoo ruqsad ka haysato Wasaaradda Ganacsiga.

6°. Dukaammada cashuur la'aanta ee kor ku xusan waxa ka mid ah Dukaanka dibloomaasiinta, dukaammada ku yaal gegooyinka dayuuradaha ee ay dadka dhoofayaa wax ka gataan iyo kuwa furdooyinka ku yaalla ee ay Maraakiibta baxaysa wax ka iibsato.

Qod. 4aad

Wakaaladdu waxay awood u leedahay, iyadoon ku xad gudbin Xeerkan, awood ay ku fulin karto ujeeddooyinka ku xusan qodobka seddexaad ee xeerkan.

Qod. 5aad

*Ilaalinta Guud ee Wakaaladda*

1. Ilaalinta guud ee Wakaaladda waxaa yeelan doona Xoghayaha Wasaaradda Dalxiiska;

2. Xoghayaha wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo awaamir ama talooyin markay ugu muuqato inay hagaajinayso maamulka Wakaaladda.

## QAYTA II

## Dhismaha Wakaaladda

Qod. 6aad

*Maareeye*

1. Wakaaladda waxaa madax u noqon doona Maareeye Guud, waxaana lagu magacaabi doonaa Dekreeto uu soo saaro Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaya ra'yiga Xoghayaha Wasaaradda Dalxiiska.

2. Wakaaladdu waxay ka kooban doontaa waaxyo, xubno iyo laamo, waxayna haddii loo baahdo laamo ka furan kartaa Gobollada iyo Degmooyinka si ay u gudato hawsha loo xilsaaray.

Qod. 7aad

*Hawsha Maareeyaha Guud*

1. Maareeyaha Guud waxaa loo xilsaaray, isagoo masalaaya Wakaaladda, fulinta ujeeddooyinka ku xusan qodobka saddexaad ee xeerkan, hawshiisuna waxay tahay :

a) Inuu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay :

b) Waxaa uu mas'uul ka noqon doonaa habka maamulka shaqada Wakaaladda, wuxuuna awood u yeelan doonaa inuu sameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda :

t) Wuxuu mas'uul ka noqon doonaa lacagta Wakaaladda;

j) Inuu ku dhawaayo wixii qaraar ah ee deg deg ah asagoo isla markaa ogeysiinaya Xoghayaha Wasaaradda Dalxiiska;

x) Inuu bixiyo wixii amar lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan:

kh) Inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Wakaaladda ee caadi ah;

d) Inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Wakaaladda ee aan caadi ahayn isagoo ka haysta oggolaansho qoraal ah Xoghayaha Wasaaradda Dalxiiska.

2. Marka uu shaqada ka maqnaado Maareeyaha Guud ama ay jiraan asbaab ka reeba shaqada, waxaa uu u magacaabi doonaa ku simaha Sarkaal ka tirsan waaxyaha Wakaaladda isagoo ka haysta oggolaasho Xoghayaha Dawladda.

Qod. 8aad

*Xuquuqda qaynuniga iyo dhaqaalaha ee shaqaalaha wakaaladda*

Xuquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa xukumi doona xeerka lamb. 36, taariikh 22 Abriile 1972 ee ku saabsan shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodob. 9aad

*Magacawga Agaasimayaasha*

Wakaaladdu waxay lahaan doontaa Agaasime ama Agaasimeyaal waaxood oo lagu magacaabi doono Dekreeto uu soo saaro Guddoonshaha G.S.K. isagoo tixgelinaya ra'yiga Xoghayaha Wasaaradda Dalxiiska.

Qod. 10

*Qoriinka Shaqaalaha*

Shaqaalaha ay u baahantahay wakaaladdu waxay u qoran kartaa si toos ah iyaga oo raacaya sharciyada u dhisan qorista Shaqaalaha ama waxay ka soo ammaanaysan kartaa shaqaalaha ee Dawladda.

Qod. 11aad

*Raasamaalka Wakaaladda*

Raasamaalka Wakaaladdu wuxuu ka kooban doonaa :

1. Wixii ay hanti lahaan jirtay Wakaaladdii hore loo oran jiray N.A.T.;

2. Wixii gargaar ah ee laga helo Dawladda, ama ururrada caalamiga ah ama dadka gaar ahaantood u shaqeysta.

3. Kaydka gooni looga dhigo Wakaaladda macaashka la qaybiyo.

4. Lacagta ay Wakaaladdu ka hesho shaqooyinka ay qabato iyo ta ay qaadato marka alaab ay leedahay la isticmaalo.

5. Kirada ka soo gasha Wakaaladda daaraheeda ama alaabta kale ay kirayso.

6. Wixii kale ee lacag soo gasha Wakaaladda.

Qod. 12aad

*Miisaaniyadda Wakaaladda*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda ku saabsan sannadka maaliyadda soo geleysa isagoo faahfaahinaaya kuna muujinaaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, wuxuuna hor dhigi doonaa si loo oggolaado Xoghayaha Wasaaradda Lacagta iyo Wasaaradda Dalxiiska.

2. Miisaaniyadda lacagta sannadka ee Wakaaladda waa in ay ahaaaa mid la socota oo tixgelisa miisaaniyadda Dawladda.

Qod. 13aad

*Xidhitaanka Miisaaniyadda*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horreysa sannadkasta waa inuu isku dubbardaa miisaaniyad xiritaanka ee sannadka la soo dhaafay isagoo isku hagaajiyey xisaabtii sannadkaa iyo bandhiggii macaashka iyo kharaaradda Wakaaladda, taasna uu u gudbiyo Wasaaradda Lacagta iyo tan Dalxiiska.

2. Xoghyaha Wasaaradda Dalxiiska wuxuu awood u leeyahay isagoo la tashanaya Xoghayaha Wasaaradda Lacagta inuu oggolaado miisaaniyadda xiritaanka wuxuuna amar ku soo bixin doonaa in lagu qoro Faafina Rasmiga ah ee Dawladda ayadoo ay kharajka bixinayso Wakaaladdu.

Qod. 14aad

*Amaah Sharci ah*

Wakaaladdu ayadoo haysata guddoonka Xoghayaha Wasaaradda Dalxiiska wax waa ka amaahan kartaa mu'asasadaha amaahda ee dibedda iyo Bankiyada gudaha si ay u hirgeliso xalkii la saaray ama ujeeddooyinkii Wakaaladda.

Qod. 15aad

*Shaqaale*

Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee Xeerka shaqaalaha Dawladdu, Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxaha iyo Shaqaalaha kale ee Wakaaladdu ma geli karaan ganacsi amase farsamo lid ku ah danaha iyo ujeeddooyinka Wakaaladda.

Qod. 16aad

*Maamulka Lacagta*

Maamulka lacagta ee Wakaaladda waxaa xukumaaya xeerka Lr. 58 ee soo baxay 31kii Luulyo 1972 ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

**QAYBTA III**

**Qodobka Xirtaanka**

Qod. 17aad

*Xeerarka Guud*

Guddoonshaha GSK wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Dalxiiska, inuu guddoomiyo xeer guud oo Wakaaladda xukuma si looga hortago dhibaatada ka iman karta wixii aan ku sheegnay xeerkan.

Qod. 18

1. Sharcigani hore ayuu ka dhaqan gelayaa waxaana lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

2. Sharcigani waa inuu ka mid noqdaa sharciyada Rasmiga ah iyo xeerarka JDS.

3. Qof waliba waa inuu dhawraa oo tixgeliyaa kuna qasbaa dadka kale in ay dhawraan sharcigan.

Muqdisho, 1-3-75

*(Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre)*
Madaxweynaha G.S.K.

# BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER MADAXWEYNAHA GOLOHA SARE EEE KACAANKA**
**8 Maarso 1975, L. 59.**
**Magac Bedelid.**

ISAGOO ARKAY Xaashidii kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaanuunkii Kowaad ee 21kii Oktoobar, 1969;

ISAGOO TIXGELIYEY Habka lagu maamulo Xabsiyada dalalka Hantiwadaagga ah iyo ujeeddada laga leeyahay haynta qofka ku gefa nidaamka mujtamaca;

ISAGOO ARKAY Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Asluubtu;

ISAGOO DHEGEYSTAY Ra'yigii Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

In magacii Ciidanka Xabsiyada loo beddeley Ciidanka Asluubta.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan geli doonaa marka faafinta rasmiga ah lagu soo qoro.

Muqdisho, 8 Maarso 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta
*Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 24 Feberayo 1975, L. 60.**
**Jinsiyada Soomaalida.**

ASAGOO ARKAY Xaashidii koowaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 iyo sharciga lambar. 1 ee 21 Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Sharcigii 22 Diseember 1962, lambar, 28 ee jinsiyada Soomaaliya iyo habkii lagu dhaqan gelinlahaa;

ASAGOO ARKAY Arjigoodii iyo xaashiyadii ku lifaaqnaa, ay ku weydiisteen inay jinsiyada Soomaalida ka noqdaan;

ASAGOO ARKAY Xogwaran Wasaaradda Arrimaha Gudaha lambar. ADM/21/A-0293 ee 22-1-1975;

ASAGOO ARKAY Qodobka 11, qaybta (a) ee sharciga 22-12-1962 lambar 28 ee jinsiyada Soomaalida;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in laga qaado xeerkii lagu siiyey jinsiyada Soomaalida Jaallayaasha hoos ku qoran;

ASAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAY

Qod. 1aad

Si degdeg ah in looga qaado jinsiyada Soomaalida Jaallayaasha ·

1. Maxamed Cabduraxmaan Axmed,
2. Saalim Cawad Saalim,
3. Saciid Caamir Saalim,
4. Cabdullahi Cumar Saalah.

Qod. 2aad

Xeerkii wuxuu dhaqan gelayaa marka Jaalle Guddoomiyaha G.S.K. soo saxiixo, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 8 Maarso 1975

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*(S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*(S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib)*

**XEER WASAARADDA GARSOORKA IYO DIINTA**
**Tr. 10 Maarso 1975, L. 61.**
**Magacaabid Guddi.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka;
ISAGOO ARKAY Xeerka tiradiisu yahay 49 ee soo baxay 8 Maajo 1974;
ISAGOO AQOONSADAY In lagama maarmaan ay tahay in la dhiso Guddi cusub oo ka kooban Sharciyaqaannada ka tirsan Waaxda Sharci Dejinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka hoos ku qoran :

Qod. 1aad

*Magacaabid Guddi*

Waxaa la magacaabay Guddi Tashiga iyo Samaynta Sharciyada oo saldhigiisu yahay Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta Waaxda Sharci Dejinta

Qod. 2aad

*Xubnaha Guddiga*

Guddiga wuxuu ka kooban yahay Jaallayaasha hoos ku qoran :

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Agaasimaha waaxda sharciga dejinta | — | Guddoomiye |
| 2. | Dr Cabdirisaaq Cali Xaaji | — | Xubin |
| 3. | Dr. Yuusuf Cilmi Rooble | — | « |
| 4. | Dr. Yaasiin Xaaji Xuseen | — | « |
| 5. | Dr. Sheekh Aadan Yuusuf | — | « |
| 6. | Dr. Yaslam Cabadalla Saciid | — | « |
| 7. | Prof. Karl-Heinz Beyer | — | « |
| 8. | Dr. Manjit Singh | — | « |

Qod. 3aad

*B a a b i ' i s*

Waxaa la baabi'iyey Guddigii ku soo baxay Xeerka tiradiisu yahay 49 ee soo baxay 8 Maajo 1974.

Qod. 4aad

*Dhaqan gelin*

Xeerkan si degdeg ah buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Soomaaliyeed.

Muqdisho, 10 Maarso 1975

*Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen*
XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta

**WASARADDA GANACSIGA, 24 Marso 1975, L. 62.**

**Diiwaan gelinta iskaashatata Xijiga Hawl-Wadaag ee Degmada Qandala.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKEY Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AREY Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4-10-1973;

ISAGOO ARKEY Xeer-Guddomiyaha G.S.K. ee lambarkiisu yahay 8, oo soo baxay 23-12-1974, kuna saabsanaa Habka Diiwaan Gelinta Iskaashatooyinka;

ISAGOO ARKEY Arjigii uu soo qorey Guddomiyaha Iskaashatada Xijiga «Hawl-Wadaag» ee Degmada Qandala, kuna weydiisanaayey in Iskaashatadaasi la diiwaan geliyo;

ISAGOO TIXGEILAHAYA Taladii Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada Qandala — iyo kan Gobolka Bari — Boosaaso;

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Xijiga ee lagu magacaabo «Hawl-Wadaag», saldhiggeedu yahay Magaalada Madaxda Degmada Qandala, shaqdeeduna tahay guritaanka Xijiga ku yaallo Degmada Qandala, waxaa laga diiwaan galiyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaraadda Ganacsiga, taas oo waafaqsan qobolka 15aad ee Sharciga lambarkiisu yahay 40ka, oo dhaqan galay 4-10-1973.

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo qoro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Iskaashatada Xijiga «Hawl-Wadaag» waxay yeelanaysaa aqoonsi gaar ah oo sharci ku dhisan. Xeer-Gaarkeeduna wuu dhaqan galayaa.

Muqdisho, 24-3-1975.

XOGHAYHA DAWLADDA

*Jaalle Axmed M. Maxamud*

**WASAARADDA GANACSIGA, 24 Marso 1975, L. 63.**

**Diiwaan Gelinta «Iskashatada Ganacsiga Sahan» ee Degmada Kismaayo.**

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKEY Go'aanka 1aad, iyo kan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKEY Sharciga Lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo dhaqangaley 4-10-73;

ISAGOO ARKEY Xeer-Guddomiyaha G.S.K. ee lambarkiisu yahay 8 ee 23-12-74, kuna saabsanaa Habka Diiwaan Gelinta Iskaashatooyinka;

ISAGOO ARKEY Arjigii uu soo qorey Guddomiyaha Iskaashatada Ganacsiga «Sahan» kuna weydiisanaayey in Iskaashatadaasi la Diiwaan Galiyo;

ISAGOO TIXGALINAAYA Taladii Guddiyada Iskaashatooyinka ee Degmada Kismaayo iyo Gobolka J. Hoose;

### AMAR XEER

### Qodobka 1aad

Iskaashatada Ganacsiga ee lagu magacaabo «Sahan», fadhigeedu yahay Xaafadda Farjanno ee Kismaayo, Shaqadeeduna tahay inay hore umariso Ganacsiga Degmada Kismaayo waxaa laga diiwaan galiyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taasoo waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga lamb. 40 ee 4-10-1973.

### Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo qoro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Iskaashatada Ganacsiga «Sahan» waxay yeelaneysaa aqoonsi gaar ah oo sharci ku dhisan. Xeergaarkeeduna wuu dhaqan galaayo.

Muqdisho, 24 Marso 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Jaalle Axmed M. Maxamud*

# BOGGA SADDEXAAD
## TALOOYIN ISGARSIIN IYO WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Makaraan Mahdi Geedi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 1-3-75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaad, oo leh qiyaas rektangolaar ah 27x10 kuna fadhiya 270 mdh.

SOOHDIN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid yar iyo Beerta cagaarka danta Guud.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dawladeed.
Bari waxaa ka xiga: Jidka Hawl-Wadaag.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhul oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 29 Marsoo 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(53)*

---

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Waxaan arkay dacwadan:
Markaan arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Soomaalida, waxaan ogaaday inay tahay shaqadeeyda.

Arkay Qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaan cadeynayaa dhumidii buugga lacagta (ammortamento libretto) n. D. R. 432-284, Shs. 1.000.

Waxaan amraysa in loo sameeyo buugga ninga la yiraahdo Cabdulle Muude Xuseen, muddo 30 beri ah, oo ay ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo Bollettino Ufficiale ee Dawladda, haddaan qof kale oo ku sheeganayaa usan jirin.

Waxaa kale idiinta codsaneynaa in Buugga gacanta looga saaro, ama qof kale oo ka sito Wakaale.

Muqdisho, 6-2-1975.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA
*Jaalle Dr. Yasiin Shire Faarax*

*(54)*

CONCERIA E CALZATURIFICIO SOMALIA — S. p. A.

Saldhigeedu yahay Muqdisho — Sahmiyaasheedu Shs. So. 1.800.000

## OGEYSIIS SHIR CAADI AH

Dadka qeybaha ku leh Sharikadda Conceria e Calzaturificio Somalia oo saldhigeedu yahay Muqdisho, waxaa la isu yeeray in ay ka soo qeyb galaan shirka caadiga ah oo lagu qaban doono xaruunta Sharikadda, maalinta 17 abrile 1975, 17ka galabnimo, fadhiga ugu horeeya; haddi se fadhigaas suuro galiwaayo, waxaa mar labaad la isugu imaan doona maalinta 21ka abriile 1975, 17ka galabnimo, sii loga hadlo go'aana laga gaaro arimaha soo socda:

1. Xoog warranka Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarayaasha;
2. Hordhig miisaaniyadda iyo dheefWeynta Sharikadda ilaa 31ka Diseembar 1974;
3. Magacaabidda Guddiga Maamulka iyo tan Baarayaasha.

Waxaa xaq uu leh in ay shirka ka soo qeyb galaan, dadka qeybaha ku leh Sharikadda oo na ku qoran buuga Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, ama kwa waqtigaas dhigaan sahmiyaashoodi Banki ku yaal Muqdisho, ama xaruunta Sharikadda.

Muqdisho, 30 Marsoo 1975.

*(55)* GUDDIGA MAAMULKA

---

SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA — S. p. A.
Sede Sociale: CHISIMAIO (Repubblica Democratica Somala)
Capitale Sociale int. versato Shs. So. 3.000.000,00

## AVVISO DI CONVOCAZIOINE
## DI ASSEMBLEA ORDINARIA E STRAORDINARIA

Gli Azionisti della Società Romana in Somalia — S.p.A. — sono convocati in Assemblea Ordinaria e Straordinaria in Lugano, presso lo Studio dell'Avv. Tito Tettamanti, in Via Pioda n. 14, per il giorno 11 giugno 1975 alle ore 9,30, in prima convocazione ed occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 30 giugno 1975 nello stesso luogo ed alla stessa ora, per deliberare sul seguente:

## ORDINE DEL GIORNO

*PARTE ORDINARIA:*

1. Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. Bilancio e Conto PePrdite & Profitti dell'esercizio chiuso al 31 Dicembre 1974 e deliberazioni relative;

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Ku: Bankiga Qaranka Soomaaliyeed — Xamar.

Og: Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed Laanta Jowhar — JOWHAR.

Guddoomiyaha Maxkamada Gobolka Sh. Dhexe; Markii uu arkay weydiinta uu soo jortay Guddoomiyaha Gobolka Sh. Dhexe ee uu ogaaday inay tahay shaqada xafiiskani.

Markii uu arkay Qoddobka 69 Xeerka L. yahay 2 ee soo baxay 9-9-1965.

Wuxuu caddeynayaa dhumidda Jeeg wareegto ah L. yahay 002532 ee ay ku tiil lacag tiradeedu than tahay Sh. So. 3615 (saddexkun lixboqol toban iyo shan) shilin, Bankiga Qaranka Soomaaliyeed taliska Muqdisho.

Wuxuu amrayaa in loo cusboonelsiiyo mar labaad jeegaas wareegtada ah Guddoomiyaha Gobolka Sh. Dhexe, muddo 30 beri dhexdeeda ee ka bilaabata markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah, haddii aanla helin qof kale oo sheegta.

Bangigaas waxaa loo caddeynayaa in jeegaas wareegtada ah gacanta laga saaro Guddoomiyaha kor ku qoran ama qof ka sita wakaalad cad oo aan shaki ku jirin.

Jowhar, 14-1-1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka
*(50)* *Dr. Cabduraxmaan Maxamad Cumar*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Cali Maxamed Nuur.

Markaan arkay Qod. 69 D. L. 1969 N. 2.

Waxaa cad dhumista Jeegga Wareega Lr. 010580 kuna qorantahay Sh. So. 592 ee Bankiga Ganacsiga Soomaaliya — Taliska Guud, waxaan idiinka amreyna in loo cusbooneysiiyo mar labaad Jeegga aan kor ku soo sheegnay muddo 15 beri oo ka bilaabata markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga, haddaan la helin cid sheegata, waana in gacanta laga saara Jaalle Cali Maxamed N. ama qof sita Wakaalad Sharci ah ayadoo la sugayo 15 beri.

Muqdisho, 3-3-1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda
*(51)* *Dr. Yasiin Shire Fiirax*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Cabdullahi Maxamed Munye.

Markaan arkay Qod. 69 D. L. 1969 N. 2.

Waxaa cad dhumista Jeegga wareegga Lr. 6049, kuna qorantahay Sh. So. 1.800 (kuniyosideedboqol) shilin, ee Bankiga Ganacsiga Ummadda, waxaan idiinka amreynaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Jeegga aan kor ku soo sheegnay muddo 15 beri oo ka bilaabato markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga, haddaan la helin cid sheegata waana in gacanta laga saaro Jaallaha magaciisa kor ku qoran yahay yahay ama qof kale oo sita wakaalad sharci ah.

Muqdisho, 17-3-1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka
*Dr. Yasiin Shire Faarax*

*(52)*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

Waxaan akhriyey dacwaddan;

Markan Arkay waxay ku saabsan tahay ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Soomaalidda laanta Kismayo, ee aan ogaadiy in ay tahay shaqa xafiiskan;

Waxaan Arkay Qod. 69 D. L. 9-9-65 N. 2;

Waxaan caddeeynayaa dhumidda buuga lamb. 1863 ku qoran lacag dhan 1.852 (kunsideedboqolkoton iyo laba Shs.)

Waxaan amrayaa in loo cusbooneysiyo buun Jibriil Cabdi Muddo 15 (shan iyo tobaan) beri ah oo laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah (Bollettino Ufficiale), haddan la helin qof kale ee buugga sheegta.

Waxaan kaloo la amrayaa in buuga gacanta laga saaro gabadha magaceeda kor ku qoran tahay ama qof kale oo ka sitaa wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismayo, 15 Maarso 1975.

Guddoom. Maxkamadda Gobolka J. Hoose
*Dr. Xuseen Faarax Hilowle*

*(Ku Celin 52)*

---

13. » Xuseen Maxamed Cumar;
14. » Axmed Xaaji Boorre;
15. » Maryan Saciid Xasan;
16. » Xasan Ismaaciil Deeqle;
17. » Maryan Jibriil Aadan.

DEGMADA BALCAD

1. Jaalle Sheekh Saalax Macallim Cabdi;
2. » Cabdi Sabriye Barkhadle;
3. » Nuur Makaraan Maxamed;
4. » Maxamed Daahir Abuukar;
5. » Raaliya Cismaan Maxamed;
6. » Caasha Axmed Xaaji;
7. » Cismaan Xuseen Cabdi;
8. » Faaduma Cabdikariin;
9. » Axmedey Maxamed Mirwaaq;
10. » Maxamed Bodeey Cali;
11. » Macoow Ibraahim Arwaax;
12. » Maxamed Yuusuf Qoordheere;
13. » Maxaadeey Xasan Hadaafoow.

DEGMADA CADALE

1. Jaalle Sheekh Maxamed Cadaawe Xasan;
2. » Sheekh Cabdillaahi Moxamed;
3. » Cismaan Maxamuud Hiraabe;
4. » Sheekh Maxamuud Maxamed Cariif;
5. » Cabdille Maxamed Xasan;
6. » Mako Nuur Macoow;
7. » Maxamed Hilowle Xaaji Cade;
8. » Xuseen Maxamed Gacal;
9. » Zahra Macalin Isaaq.

DEGMADA AADAN YABAAL

1. Jaalle Yuusuf Maxamuud Cabdulle;
2. » Saciido Tooxoow Maxamed;
3. » Cabdulle Cali Faarax;
4. » Xasan Nuur Shuute;
5. » Madiina Caddow Calasow;
6. » Cabdulle Tooxow Maxamed;
7. » CaliA xmed Cali;
8. » Jimcaale Caddaan Maxamed;
9. » Cismaan Siyaad Axmed.

Qodobka 2aad

*Dhaqan gal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20-10-1974, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 11 Maarso 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb.* 56.
*Muqdisho, 15 Maarso 1975.*
*Hantidhowraha Guud*
G. Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

---

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

**Tr. 26 Febberayo 1975, L. 53.**
**Magacaafidda Guddiga Kacaanka Degmada Afmadow Qaybtiisa Wakiillada Beesha.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8-6-1972, lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-9-1972, dhammeeystirka lambar 1 ilaa 9, kuna saabsan Maamulka Dowladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeer Wasaaradda lambarkiisu yahay 12124, taariikh 13-2-1972 ee hore loogu magacaabay Guddiga Kacaanka Degmada Afmadow qaybtiisa Wakiillada Beesha;

ISAGOO ARKAY Xeer Wasaaradeedka lambarkiisu yahay 118 ee 1-1-1974 oo Degmada Afmadow loogu bedelay derejada (B);

ISAGOO OGAADAY Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Wakiillada Beesha ee Guddiga Kacaanka Degmada Afmadow, iyadoo la waafajinayo qodobka 10iid lambarkiisa 3aad xarafka (c) ee sharciga xaggan sare ku tilmaaman;

ISAGOO TIXGELINAYA Talada uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka Gobolka Jubbada Hoose;

3. Determinazione del numero e nomina dei componenti il Consiglio di Amministrazione;
4. Nomina del Collegio Sindacale a norma di legge.

*PARTE STRAORDINARIA:*

1. Riduzione del Capitale Sociale in relazione alle perdite accertate e conseguente modifica dell'art. 5 dello Statuto Sociale.

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti inscrittn nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assmeblea e che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede Sociale n Chisimaio o gli Uffici di Recapito della S.A.I.S. in Italia, Piazza degli Affari, 3, Milano, oppure presso le seguenti casse:

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana — Lugano (Svizzera).
— Credito Italiano — Sede di Milano.

Mogadiscio, 30 Marzo 1975.

*(56)* IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

---

**SOCIETA' COMMERCIALE ITALO SOMALA — S.C.I.S. — S.p.A.**
**Sede legale: MOGADISCIO (Repubblica Democratica Somala)**
**Capitale Sociale int. versato Shs. So. 5.000.000,00**

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Commerciale Italo Somala — S.C.I.S., sono convocati in Assemblea Ordinaria presso gli Uffici di Recapito della S.A.I.S in Italia, Piazza degli Affari, 3, Milano, il giorno 12 giugno 1975 alle ore 11 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 19 giugno 1975 alla stessa ora e nello stesso luogo, per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. Bilancio e Conto perdite & Profitti dell'esercizio chiuso al 31 Dicembre 1974 e deliberazioni relative;

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assmeblea e che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede Sociale in Mogadiscio, o presso gli Uffici di Recapito della S.A.I.S. in Milano, Piazza degli Affari, 3, oppure le seguenti casse:

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana — Lugano (Svizzera).
— E.I.F.A., Via Pioda n. 14, Lugano (Svizzera).
— Credito Italiano, Sede di Milano.

Mogadiscio, 30 Marzo 1975.

*(57)* IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

**SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA — S.A.I.S. — S.p.A.**

**Sede Sociale: MOGADISCIO (Repubblica Democratica Somala)**

**Capitale versato Shs. So. 1.200.000,00**

## AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Agricola Italo Somala — S.A.I.S. — sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano presso lo Studio dell'Avv. Tito Tettamanti, in via Pioda, 14, per il giorno 11 giugno 1975 alle ore 11,30 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 30 giugno 1975, nello stesso luogo ed alla stessa ora, per deliberare sul seguente:

### ORDINE DEL GIORNO

1. Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;

2. Bilancio e Conto Perdite & Profitti dell'esercizio chiuso al 31 Dicembre 1974 e deliberazioni reltiave;

3. Determinazione del numero e nomina dei componenti il Consiglio di Amministrazione;

4. Nomina del Collegio Sindacale a norma di legge.

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea e che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede Sociale in Mogadiscio o presso gli Uffici di Recapito della Società in Italia, Piazza degli Affari, 3, Milano, oppure presso le seguenti casse:

— Credito Italiano, Sede di Milano;

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana — Lugano (Svizzera).

Mogadiscio, 30 Marzo 1975.

*(58)* IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

**SOCIETA' NUCLEARE SOMALA S.p.A.**
**Capitale Sociale Shs. So. 1.000.000**
**Iscritta al Tribunale di Mogadiscio n. 796 Registro Soc.**
**Sede di Mogadiscio**

## CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA

I Signori Azionisti sono invitati a partecipare all'Assemblea Generale Ordinaria che si terrà il giorno 21 Aprile 1975 alle ore 10 presso gli Uffici dell'AGIP — Attività Minerarie, 1° Palazzo ENI in San Donato Milanese (Italia) e, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 28 Aprile 1975 alla stessa ora e luogo per discutere e deliberare sul seguente:

## ORDINE DEL GIORNO

1. Relazione del Consiglio di Amministrazione e del Collegio Sindacale.
2. Bilancio al 31 Dicembre 1974 e deliberazioni relative.
3. Nomina dei componenti il nuovo Consiglio di Amministrazione ed il Consiglio Sindacale.

Possono intervenire gli Azionisti che hanno diritto al voto ai termini dello Statuto Sociale.

Mogadiscio, 3 Aprile 1975.
*(59)*

IL PRESIDTEN
*Ing. Emilio Pacchiarotti*

---

**SHIRKADDA NUCLEARE SOMALA S.p.A.**
**Maalka asaasiga u ah shirkadda dhammaanna lagu shubay Shs. 1.000.000 ku dhigan Maxkamadda Muqdisho Lam. 796 bugga Shirkaddaha Saldhigeedu yahay Muqdisho**

## OGEYSIIN ISUGU YEERID AH

Waxaa la ogeysiinayaa dadka ku jira ururka guud caadiga, ay isuku imanayaan maalinta 21 Abril 1975 marka saacadu tahay 10 subaxnima, fadhigaaso lagu qaban doono xaruunta xafiisiadda AGIP — Attività Minerarie, sarta 1 ENI ku taal San Donato Milanese (Italia) ee marka labaad maalinta 28 Abril 1975 saacadu iyomeesha lagu qaban doono ee yihiin sida fadhiga kowaad, si looga hadlo Waxyaalaha Hoos ku yaala:

## AJENDADA MAALINTA AH

1. Warbixinta guddiga maamulka iyo hanti dhowrka.
2. Goaankii misaaniyadda sannadka 1974.
3. Doorashada guddiga maamulka iyo hanti dowrka.

Waxaa ka soo qeybgelikaro dadka ku jra shirkadda oo xag uu leh sida Sharciga uu qoran.

Muqdisho, 3 Abril 1975.
*(59)*

GUDDOMIYAHA
*Ing. Emilio Pacchiarotti*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Muqdisho, 10 Abbril 1975 | L. 1, R. 4

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 29, Tr. 12 Marso 1975 — *Qodobka 1aad ee Xeerka tirsigiisu yahay 52 soona baxay 1dii Sebtember 1970,waxaa lagu siyaadiyey, Laamaha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobollada.* Bog. 363

SHARICI L. 30, Tr. 2 Abbril 1975 — *Toosin Sharci Lamb. yahay 15 soona baxay 30-1-1975.* » 364

SHARCI L. 30, Tr. 2 Abriil 1975 — *Toosin Sharci Lamb. Huga garsooridda (taga).* » 365

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 20 Disember 1974, L. 64 — *Koobnaanta cusub ee Guddiga Kacaanka Gobalka Bay.* » 367

Madbacada Dwladda — Muqdisho

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-CAANKA, Tr. 20 Disember 1974, L. 65 — *Dhismo Guddiga Kacaanka ee Gobollada cusub; Gedo, Bakol, Sannaag iyo Galguduud.* Bog. 368

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-CAANKA, Tr. 6 Marso 1975, L. 66 — *Billad Maar Hawlkarnimo oo lagu maamuusay Shaqaale ka tirsan ciidammaddii O.H.R.M..*

---

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGELSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 — Beddelaad Naado Dhul, *Maxamed Nuur Maxamed, Cali Maxamed Hiraabe, Maxamed Raage Cabdulle iyo Ax-Med Nuur. (60)* Bog. 379

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 — Naado Dhul *Ibrahim Munye Maxamed. (61)* » 379

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 — Naado Dhul, *Maxamud Cabdullahi Dhure. (62)* » 380

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 — Beddelaad Naado Dhul, *Xasan Aadan Cabdi. (63)* » 380

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 — Beddelaad Naado Dhul, *Maxamed Nuur iyo Maxamed Xasan Maxamed. (64)* » 381

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Abbril 1975 — Beddelaad Naado Dhul, *Maxamuud Raage Cabdulle, Axmed Maxamuud Nuur. (65)* » 381

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 19 Marso 1972 Naado Dhul, Jaallaha la yirahdo Khalif Roble Warfa. Naado Dhul, *Jaallaha la yirahdo Khalif Roble Warfa. (66)* » 382

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 8 Abbril 1975 — Buugga Lacagta L. 5416 Shs. 5.900, uu leyahay *Jaalle Cali Xeyle Wardheere. (67)* » 382

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, Tr. 20 Abbril 1975 — Jeegga Wareegto L. 3530 Shs. 500, uu leyahay *Cabdulraxmaan Moxamed Xasan. Ku celin (67)* » 383

---

# BOGGA KOWAAD

## SHARCI

**SHARCI L. 29, Tr. 12 Marso 1975.**

**Qodobka 1aad ee Xeerka tirsigiisu yahay 52 soona baxay 1dii Seteember 1970, waxaa lagu siyaadiyey, Laamaha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobollada.**

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21ka Oktoabar 1969kii;

MARKUU AKRAY Sharciga tirsigiisu yahay 3 ee 10kii Jannaayo 1970, Sharciga tirsigiisu yahay 7 ee 21kii Jannaayo 1970, Sharciga tirsigiisu yahay 52 ee soo baxay 1dii Seteember 1970kii iyo Sharciyadii iyagaas lagu toosiyey;

MARKUU TIXGELIYEY Go' aankii ay isku raaceen Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAY

Qodobka 1aad

Iyada oo loo dhaafay sida uu sheegay (fermo restando le disposizioni) qodobka koowaad ee Xeerka tirsigiisu yahay 52 soona baxay 1dii Seteember 1970kii, waxaa lagu siyaadiyey.

Laamaha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobollada waxaa Guddoomiye ka noqon kara.

Sarkaal ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida amase Garsoore ka tirsan Wasaaradda Caddaaladda oo mid kasta lagu magacaabayo Dekereetada Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 2aad

Markii uu Guddoomiye ka noqdo laan ka mid ah M.B.D. ee Gobollada Garsoore ka tirsan Wasaaradda Caddaaladda, Xubnaha kale waa in ay noqdaan Saraakiil ka tirsan Ciidamada Qalabka Sida oo uu maga-

Qodobka 3aad

Guddoomiyaha M.B.D. ee Xamar waxaa awood loo siinayaa in uu Garsoore ka tirsan Wasaaradda Caddaaladda u magacaabi karo in uu ka noqdo Lataliye laan ka mid ah Laamaha MB..D. ee Gobollada, haddii ay la noqoto lagama maarmaan.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa markii la saxiixo, waxaana lagu soo saarj doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Marso 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SAREE EE KACAANKA
*S. G. Maxamed Siyaad Barre*

---

**SHARCI L.30, Tr. 2 Abbril 1975.**

**Toosin Sharciga lambarkiisu yahay 15 soona baxay 30-1-1957, kuna saabsan qaybta ey ka qaataan Kaaliyaasha Maxkamadaha.**

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga labarkiisu yahay 15 ee baxay 30-1-1957 oo hadda ka hor ka socday Gobollada Koonfureed oo keli ah;

ISAGOO AQOONSAN In la toosiyo Sharciga L. 15 ee soo baxay 30-1-1957 si ey Kaaliyaasha ka shaqeeya Maxkamadaha Gobollada Waqooyi u heli lahaayeen xuquuqdooda ka maqan;

ISAGOO TIXGELINAHA Taladii ay wadajir u soo jeediyeen Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta iyo Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Maaliyadda;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'qnkii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Nidaamka ku qoran Sharciga lambarkiisu yahay 15 ee soo baxay 30-1-1957 kuna saabsan qaybta ganaaxa ey ka qaataan Kaaliyaasha Maxkamadaha oo hadda ka hor looga dhaqmi jiray Gobollada Koonfureed oo keli ah, waxaa laga hirgelinayaa Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soo-

Qodobka 2aad

Sharcigaan si degdeg ah buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 2 Abbril 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

---

**SHARCI L. 31, Tr. 2 Abbril 1975.**

**Sharci ku saabsan huga garsooridda (toga).**

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga Nidaamka Garsoorka tiradiisu yahay 34 ee soo baxay 22kii Oktoobar 1974;

ISAGOO AQOONSAN In lagama maarmaan ey tahay Garsoorayaasha Dawladda, Xeer Ilaaliyaasha iyo Qareennada in Maxkamadda gudaheeda ey ku qaataan hu' (toga) midabkiisu cad yahay;

ISAGOO TIXGELINAYA Ra'yigii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Kan Xoghayaaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharci hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

*Huga Garsooridda*

1. Iyadoo la tixgelinayo hiddaha iyo dhaqanka wanaagsan ee Ummadda Soomaaliyeed ey gaar u leedahay, waxaa la sameeyey hu' (toga) cusub oo midibkiisu caddaan yahay.

2. Hugaas wuxuu ka kooban yahay laba go' oo midkiiba dherirkiisu yahay lix (6) dhudhun iyo koofiyad cad.

Qodobka 2aad

*Dadka ey waajib ku tahay iney xirtaan*

1. Huga garsooridda waxey waajib ku tahay iney xirtan dadka hoos ku qoran:

a) Garsoorayaasha Dawladda;
b) Xeer Ilaaliyaasha;
t) Qareennada.

2. Hugaas waxaa la xiranayaa markii garta lagu qaadayo Maxkamadda gudaheeda inta ey dacwaddu socoto cid kale ma qaadan karto aan ka ahayn kuwa kor lagu oo sheegay.

Qodobka 3aad

*Lama oggola in magaalada loo qaato*

Garsoorayaasha Dawladda, Xeer Ilaaliyaasha iyo Qareennada looma oggola in iyagoo xiran huga (toga) garsooriddi ula baxaan magaalada gudaheeda.

Qodobka 4aad

*Dhaqan gelin*

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda marka laga bilaabo 16kii Febraayo 1975, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 3 Abbril 1975.

GUDDOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

# BOGGA LABAAD

## XEER

### XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 20 Disember 1974, L. 64.

**Koobnaanta cusub ee Guddiga Kacaanka Gobolka Bay.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 8aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52, taariikh 8 juunyo 1972, lagu qoray faafinta rasmiga ah ee Dawladda ee 21-9-1972, Suppl. n. 1 ilaa n. 9;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 8 ee 15-1-1973, lagu qoray faafinta rasmiga ah ee Dawladda ee 1dii febbraio 1973. lambar 2 oo wax looga bedelay sharciga lambarkiisu yahay 52 ee xaggan sare ku qoran;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaxweynaha G.S.K. lambar 10862, taariikh 1-10-1972 oo lagu dhisay Guddiga Kacaanka Gobolka Jubbada Sare;

ISAGOO ARKAY Qodobka 1aad Xeer Madaweynaha G.S.K., lambrakiisu yahay 102, taariikh 26-9-1973, lagu qoray faafinta rasmiga ah ee Dawladda, taariikh 11-9-1973 oo Gobolkii hore loogu aqoon jiray Jubbada Sare saddexda Gobol loogu qaybshay;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in la caddeeyo koobnaanta cusub ee Guddiga Kacaanka Gobolka Bay;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Tiiyoo dhismaha Guddiga Kacaanka Gobolka Bay uu ahaan doono sidii hore loogu dhisay Guddigii Kacaanka Gobolkii hore loogu aqoon jiray Jubbada Sare, ka bilaabanta 26 settember 1973, Xubnihii Guddiga waxaa laga reebay oo aan ka tirsanaan doonin Xubnihii isla Guddigaas ee ka iman jiray Degmooyinka lagu daray Gobollada cusub. Gedo iyo Bakool.

Qodobka 2aad

*Dhaqan gal*

Xeerkani 26 settembar 1973 ayuu dhaqan gelayaa waana in lagu qoro faafinta rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 20 Disembar 1974.

MADAWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. G. Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmiye*

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr. 20 Disember 1974, L. 65.**

**Dhismo Guddiyo Kacaanka ee Gobollada cusub: Gedo, Bakool, Sanaag iyi Galguduud.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*

*Diiwaanka lam. 1, bogga lam. 61.*
*Muqdisho, 30 Marso 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

ISAGOO ARKAY Qodobka 8aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52, taariikh 8 Juunyo 1972, lagu qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda ee 21-9-1972, Suppl. lambar 1 ilaa 9;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 8 ee 15-1-1975, lagu qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ee 1dii Febbrayo 1975, lambar 2 oo wax looga beddelay sharciga lambarkiisu yahay 52;

ISAGOO ARKAY Qodobka 1aad Xeer Madaweqnaha G.S.K. lambarkiisu yahay 102 taariikh 26-9-1973, lagu qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, taarikh 11-9-1973 ee Gobolkii hore loogu aqoon jiray Jubbada Sare saddex Gobol loogu qaybiyey ee magacyadoodu kala yihiin Bay, Gedo iyo Bakool;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaweynaha G.S.K. labarkiisu yahay 66, taarikh 23-1-1973, lagu qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda 15-7-1973, lambar 13 BIS ee lagu dhisay Gobollada Sanaag iyo Galguduud;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in Guddiyo Gobol laga dhiso Gobollada Gedo, Bakool, Sanaag iyo Galguduud;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

*Dhismaha Guddiyada Kacaanka ee Gobollada*

Guddi walba waxaa sharci ahaan wakiil ugu ah Guddoomiyahiisa.
*Gedo, Bakool, Sanaag iyo Galguduud*

Ka bilaabato 26-9-1973, waxaa la dhisay Guddiyo Kacaanka ee Gobollada Gedo, Bakool, Sanaag iyo Galguduud oo loo aqoonsaday qof ahaan sharci daan'in ah oo saldhiggooda sharci ahaaneed kala yahay Xarunta Gobollada ee Garbahaarrey, Xuddur, Cerigaabo iyo Dhuusa Mareed.

Qodobka 2aad

*Koobnaanta Guddiga Gobolka Gedo*

Guddiga Kacaanka Gobolka Gedo wuxuu ka kooban yahay hal Guddoomiye, oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, iyo Xubnaha halkan hoose ku taxan:

| | |
|---|---|
| Taliyaha Qaybta Xoogga Dalka | Xubin |
| Taliyaha Qaybta Boliska | » |
| Taliyaha Qaybta Ciidanka Nabad Suggidda Soomaaliyeed | » |
| Taliyaha Qaybta Ciidanka Asluubta | » |
| Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka | » |

Taliyaha Waxbarashada Gobolka »
Agaasimaha Caafimaadka Gobolka »
Isuduwaha Hawlaha Lacagta »
Madaxa Hawlaha Guud ee Gobolka »
Madaxa Hawlaha Shaqada iyo Ciyaaraha ee Gobolka »
Madaxa Hawlaha Caafimaadka Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa »
Madaxa Hawlaha Beeraha »
Madaxa Hawlaha Biyaha Gobolka »
Madaha Hawlaha Boostada iyo Isgaarsiinta »
Madaxa Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada G.S.K. Gobolka »
Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha »
Agaasimaha Wakaaladda Ganacsiga Ummadda »
Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Xoolaha »
Agaasimaha Wakaladda Batroolka Ummadda »
Agaasimaha Bangiga Gobolka »
Madaxda Gaadiidka Dawladda ee Gobolka »
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Garbahaarrey »
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Baardheere »
Guddomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Luuq-ganaane »
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Guulo Xaawo »
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Doolow »
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-waaq »
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Saakow »
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Garbahaarrey »
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Luuq-ganaane »
Wakiil laga soo dooetay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Baardheere »
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Buulo Xaawo »
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Doolow »
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Saakow »
Wakiil lag soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Ceel-waaq »

Qodobka 3aad

*Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka Gedo*

Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha G.S.K. uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wuxuu fulinayaa waajibaadka shaqada ku tilmaaman qodobka 9aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52 ee xaggan sare ku qoran.

Qodobka 4aad

*Koobnaanta Guddiga Kacaanka Gobolka Bakool*

Guddiga Kacaanka Gobolka Bakool wuxuu ka kooban yahay lial Guddoomiye, oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, iyo Xubnaha halkan hoose ku taxan:

| | |
|---|---|
| Taliyaha Qaybta Xoogga Dalka | Xubin |
| Taliyaha Qaybta Boliska | » |
| Taliyaha Qaybta Ciidanka Nabad Suggidda Soomaaliyeed | » |
| Taliyaha Qaybta Ciidanka Asluubta | » |
| Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka | » |
| Taliyaha Waxbarashada Gobolka | » |
| Agaasimaha Caafimaadka Gobolka | » |
| Isuduwaha Hawlaha Lacagta | » |
| Madaxa Hawlaha Guud ee Gobolka | » |
| Madaxa Hawlaha Shaqada iyo Ciyaaraha ee Gobolka | » |
| Madaxa Hawlaha Caafimaadka Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa | » |
| Madaxa Hawlaha Beeraha | » |
| Madaxa Hawlaha Biyaha Gobolka | » |
| Madaxa Hawlaha Boostada iyo Isgaarsiinta | » |
| Madaxa Xafisika Siyaasadda Madaxtooyada G.S.K. ee Gobolka | » |
| Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha | » |

Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Xoolaha »

Agaasimaha Wakaaladda Batroolka Ummada »

Agaasimaha Bangiga Gobolka »

Madaxa Gaadiidka Dawladda ee Gobolka »

Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Xuddur »

Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Waajid »

Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Yeed »

Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-berde »

Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Tiyeeglow »

Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Xuddur »

Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Waajid »

Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Yeed »

Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Ceel-berde »

Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Tiyeeglow »

Qodobka 5aad

*Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka Bakool*

Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha G.S.K. uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wuxuu fulinayaa waajibaadka shaqada ku tilmaaman qodobka 9aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52 ee xaggan sare ku qoran.

Qodobka 6aad

*Koobnaanta Guddiga Kacaanka Gobolka Sanaag*

Guddiga Kacaanka Gobolka Sanaag wuxuu ka kooban yahay hal Guddoomiye, oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaa-

| | |
|---|---|
| Taliyaha Qaybta Xoogga Dalka | Xubin |
| Taliyaha Qaybata Booliska | » |
| Taliyaha Qaybta Ciidanka Nabad Suggidda Soomaaliyeed | » |
| Taliyaha Qaybta Ciidanka Asluubta | » |
| Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka | » |
| Taliyaha Waxbarashada Gobolka | » |
| Agaasimaha Caafimaadka Gobolka | » |
| Isuduwaha Hawlaha Lacagta | » |
| Madaxa Hawlaha Guud ee Gobolka | » |
| Madaxa Hawlaha Shaqaalaha | » |
| Madaxa Hawlaha Caafimaadka Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa | » |
| Madaxa Hawlaha Beeraha | » |
| Madaxa Hawlaha Biyaha Gobolka | » |
| Madaxa Hawlaha Boostada iyo Isgaarsiinta | » |
| Madaxa Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada G.S.K. ee Gobolka | » |
| Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha | » |
| Agaasimaha Wakaaladda Ganacsiga Ummadda | » |
| Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Xoolaha | » |
| Agaasimaha Wakaaladda Batroolka Ummadda | » |
| Agaasimaha Bangiga Gobolka | » |
| Madaxa Gaadiidka Dawladda ee Gobolka | » |
| Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Ceerigaabo | » |
| Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Laas-Qoray | » |
| Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Gar-adag | » |
| Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Cerigaabo | » |
| Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Laas-Qoray | » |
| Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta | |

Qodobka 7aad

*Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka Sanaag*

Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha G.S.K. uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wuxuu fulinayaa waajibaadka shaqada ku tilmaaman qodobkt 9aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52 xaggan sare ku qoran.

Qodobka 8aad

*Koobnaanta Guddiga Kacaanka Gobolka Galguduud*

Guddiga Kacaanka Gobolka Galguduud wuxuu ka kooban yahay hal Guddoomiye, oo hore loogu magabay Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, iyo Xubnaha halkan hoose ku taxan:

| | |
|---|---|
| Taliyaha Qaybta Xoogga Dalka | Xubin |
| Taliyaha Qaybta Booliska | » |
| Taliyaha Qaybta Ciidanka Nabad Suggidda Soomaaliyeed | » |
| Taliyaha Qaybta Ciidanka Asluubta | » |
| Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanka | » |
| Taliyaha Waxbarashada Gobolka | » |
| Agaasimaha Caafimaadka Gobolka | » |
| Isuduwaha Hawlaha Lacagta | » |
| Madaxa Hawlaha Guud ee Gobolka | » |
| Madaxa Hawlaha Shaqada iyo Ciyaaraha ee Gobolka | » |
| Madaxa Hawlaha Caafimaadka Xoolaha, Dirta iyo Daaqa | » |
| Madaxa Hawlaha Beeraha | » |
| Madaxa Hawlaha Biyaha Gobolka | » |
| Madaxa Hawlaha Boostada iyo Isgaarsiinta | » |
| Madaxa Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada G.S.K. ee Gobolka | » |
| Agaasimaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha | » |
| Agaasimaha Wakaaladda Ganacsiga Ummadda | » |
| Agaasimaha Wakaladda Horumarinta Xoolaha | » |

Agaasimaha Bangiga Gobolka »
Madaxa Gaadiidka Dawladda ee Gobolka »
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Dhuusa-mareeb »
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-dheer »
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Ceel-buur »
Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Caabud-waaq »
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Dhuusa Mareeb »
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Ceel-dheer »
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Ceel-buur »
Wakiil laga soo doortay Guddiga Kacaanka Degmada Qaybta Wakiillada Beesha Caabud-waaq »

Qodobka 9aad

*Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka Galguduud*

Xoghayaha Guddiga Kacaanka Gobolka oo hore loogu magacaabay Xeer Guddoomiyaha G.S.K. uuna ku soo taliyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wuxuu fulinayaa waajibaadka shaqada ku tilmaaman qodobka 9aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52 ee xaggan sare ku qoran.

Qodobka10aad

*Dhaqal gal*

Xeerkani 26-9-1973 ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 20 Disember 1974.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmiye*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 60.*
*Muqdisho, 30 Marso 1975*
G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur
*Hantidhawraha Guud*

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 6 Marso 1975,L. 66.

Billad Maar Hawlkarnimo oo lagu maamuusay Shaqaale ka tirsan ciidammaddii O. H. R. M.

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida kowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;
MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 1 ee soo baxay 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 18ka Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY Sida geesinimada muranka lahayn iyo niyaad daacadda ah ay ku guteen xlikii ka saarraa Ololaha Horumarinta Reer Miyiga, Jaallayaal ka mid ah ciidenkii Ololaha, iyagoo fulinaya go'aannada Kacaanka 21ka Oktoobar, hirgelinayana mabaadi'ida hanti-wadaagga;

MARKUU ARKAY Lagama maarmaan inay tahay in si gaar ah loo maamuuso qof kasta oo ka geysta kaalin weyn dhismaha iyo horukaca dalkiisa;

MARKUU DHEGEYSTAY Go'aanka Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

## WUXUU GUDDOOMIYAY

Qodob Keliya

Jaallayaasha hoos ku qoran waxaa lagu maamuusay Billad maar ah ee Hawlkarnimo:

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. Cabdi Cumar Cigaal | W.G. (Wade) | Deg. | Ceerigaabo |
| 2. Jaamac Cali Xaashi | » | » | Garadag |
| 3. Dhamme Maxamad Kediye Cilmi | Booliska | » | Baydhaba |
| 4. Xid. Ciise Muuse Xujaale | » | » | Golweyn |
| 5. S. Alifle Buux Dhabar | » | » | Hargeysa |
| 6. L. Alifle Maxamud Maxamed | » | » | Hargeysa |
| 7. L. Alifle Cali Ducaale | » | » | Hargeysa |
| 8. L. Alifle Yuusuf Iidaan | » | » | Hargeysa |
| 9. K.K. Xirsi Suge | » | » | Seylac |
| 10. S. Alifle Jaamac Jibriil | » | » | Boosaaso |
| 11. L. Alifle Rooble Waaliye | » | » | Caluula |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 12. S. Alifle Axmad Aadan | » | » | Jilib |
| 13. L. Alifle Max. Gobey Cawale | » | » | Ceelberde |
| 14. S. Alifle Nuur Axmad | » | » | Baydhaba |
| 15. L. Alifle Salaad Wheliye | » | » | Buur Hakaba |
| 16. L. Alifle Dhaahir Dhoore | » | » | Buur Hakaba |
| 17. S. Alifle Maxamad Cali | » | » | Gaalkayo |
| 18. L. Alifle Xasan Ibraahim | » | » | Gaalkayo |
| 19. K. K. Maxamad Cali | » | » | Beled Weyne |
| 20. L. Alifle Yuusuf Xasan | » | » | Oodweyne |
| 21. K. L. Maxamad Cabdulle | » | » | Buur Hakaba |
| 22. Aadan Xaaji Cabdi | W. Caafim. | » | Baydhaba |
| 23. Maxamad Xasan Maxamuud | » | » | Hargeysa |
| 24. Duraan Cabdullaahi Nuur | » | » | Seylac |
| 25. Amiin Cali Boolaay | » | » | Baraawe |
| 26. Maxamad Sheekh Cabdi | » | » | Gaalkayo |
| 27. Cali Cusmaan Barrow | » | » | Gaalkayo |
| 28. Xaawa Aadan Xaashi | » | » | Boosaaso |
| 29. Cabdi Maxamad Maxamuud | » | » | Qoryooley |
| 30. Axmad Buleymaan Bilaal | » | » | Ceerigaabo |
| 31. Maxamad Xuseen Shirdoon | » | » | Seylac |
| 32. Cumar Ibraahim Rooble | » | » | Hargeysa |
| 33. Tr. Antonio Gonzales | » | » | Kismaayo |
| 34. Maxamuud Cali Maxamad | W. Waxbar. | » | Garbaharrey |
| 35. Cumar Cali Dhiblaawe | » | » | Saakow |
| 36. Mursal Ibrahim Axmad | » | » | Beled Xaawo |
| 37. Cabdi Axmad Saciid | » | » | Ceelwaaq |
| 38. Xasan Cabdalla Bin Cabdalla | » | » | Baardheere |
| 39. Xasan Maxamad Shiikh Ibraahim | » | » | Waajid |
| 40. Sheekh Cumar Xuseen Macallim | » | » | Xuddur |
| 41. Faarax Sheekh Khalif | » | » | Xuddur |
| 42. Maxamad Maxamuud Axmad | » | » | Buur Hakaba |
| 43. Daahir Muxyaddiin Hadaafow | » | » | Buur Hakaba |
| 44. Axmad Maxamad Cumar | » | » | Kismaayo |
| 45. Faaduma Maxamad Warsame | » | » | Marka |
| 46. Maxamuud Xaaji Muuse Xasan | » | » | W. Weyn |
| 47. Maxamad Saalax Axmad «Charles» | » | » | W. Weyn |
| 48. Nuur Yuusuf Maxamad | » | » | W. Weyn |
| 49. Xaliima Cabdi Caruush | » | » | Baraawe |
| 50. Maxamad Axmad Cariif | » | » | Balcad |
| 51. Cabdullaahi Xasan Saciid | » | » | Jawhar |
| 52. Axmad Xaaji Xabiibullaah | » | » | Cadale |
| 53. Sheekh Abuukar Sh. Maxamad | » | » | Beled Weyne |
| 54. Cilmi Aadan Axmad Afrax | » | » | Buulo Burti |
| 55. Aadan Faarax Cabdullaahi | » | » | Ceeldheer |
| 56. Cabdi Xaaji Shirwac | » | » | Ceelbuur |
| 57. Aadan Cumar Ibraahim | » | » | Ceelbuur |
| 58. Maxamad Faarax Bahdoon Xirsi | » | » | Gaalkayo |
| 59. Xuseen Cabdi Diiriye Samatar | » | » | Gaalkayo |
| 60. Maxamad Shire Maxamad | » | » | Laascaanood |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 61. Jaamac Xaaji Maxamad Aadan | » | » | Laascaanood |
| 62. Cali Shire Maxamuud | » | » | Qardho |
| 63. Cabdi Yuusuf Geelle | » | » | Ceerigaabo |
| 64. Cali Jaamac Boqorre | » | » | Ceerigaabo |
| 65. Saalax Axmad Faarax Maxamad | » | » | Garadag |
| 66. Saciid Xaaji Nuur Ducaale | » | » | Laasqoray |
| 67. Xasan Muuse Jaamac | » | » | Hargeysa |
| 68. Axmad Cumar Axmad | » | » | Hargeysa |
| 69. Axmad Cabdullaahi Maxamad | » | » | Hargeysa |
| 70. Cumar Aadan Cali | » | » | Gabiley |
| 71. Cabdi Yuusuf Bulxan | » | » | Gabiley |
| 72. Cali Raage Cumar | » | » | Boorama |
| 73. Xasan Maxamad Xasan | » | » | Bender Beyla |
| 74. Cabdi Cawaale Jaamac Cabdalla | » | » | Qandala |
| 75. Maxamad Xasan Maxamuud | » | » | Ceelberde |
| 76. Tr. Cusman Max. Ax. Xaraare | W. Caafim. | G. | Dhexe OHRM |
| 77. Yuufus Cali Xalane | » | G. | Dhexe OHRM |
| 78. Maxamad Cabdiraxman Xaaji | W. Xoolaha | G. | Dhexe OHRM |
| 79. Axmad Saciid Kaarshe | W. Waxbar. | G. | Dhexe OHRM |
| 80. Cabdullaahi Siciid Cilm | » | G. | Dhexe OHRM |
| 81. Maxamad Axmad Wacays | » | Deg. | Hargeysa |
| 82. Xaawo Cali Faarax | » | » | Afgooye |
| 83. Dhamme Max. Cabdi Muumin | T.Q. Bool. H. | Marka | |
| 84. Dhamme Ibr. Cumar Muuse | NSS Gob. Sh.H. | Marka | |
| 85. L.X. Max. Weli Sh. Max. | Gaad. X. Dalka | Soomaaliyeed | |

Muqdisho, 6 Marso 1975.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Nuur Maxamuud, Cali Maxamed Hiraabe, Maxamed Raage Cabdulle iyo Axmed Nuur maalintii 19-1-1966 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaso Shiid Jidka Balcad uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Regtang. addimihiisuna ahaayeen 80x30 kuna fadhiye 3.400 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorashihii Degmadaas.

Sidaas aawdeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WD-148-590-68 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Regtangulaar addimihiisu yihiin 60x20 kuna fadhiya 1.200 soohdimihiisuna yihiin sida soo soo socota:

Waqocyi waxaa ka xiga: Maxamuud Raage Cabdulle iyo Axmed Maxamuud.
Koofur waxaa ka xiga: Waddo.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Jidka Balcad.
Muqdisho, 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(60)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibrahim Munye Maxamed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 1 Maarso 1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waberi, oo leh qiyaas Sedax gees, kuna fadhiya 612,74 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Jid.
Koofur Dhul Wawladeed.
Galbeed Dhul asaga horay loo siiyay.
Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Cabdullahi Dhure, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 18 Jennayo 1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodon, oo leh qiyaas Regtangolar, kuna fadhiya 20x30 =600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Dhul lamb. 49.
Koofur Jid.
Galbeed Dhul lmab. 31.
Bari Dhul lamb. 32.

Qofkii dannaqnayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho. 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(62)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xasan Aadan Cabdi, maalintii 5-13-174, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaaq Shiid Jidka, uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Regtang. addimihiisuna ahaayeen 20x16,50 kuna fadhiye 330 mdh., sababtoo ah in uu noqday rabesio.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diyra warqadda lambarkeedu ahaa WHG-3-23-19 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa 15x32x15,2 addimihiisu yihiin Trabesio kuna fadhiya 352,50 soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo Q. C.
Koofur waxaa ka xiga: Lootada lamb. yahay 33-34.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Lootada lamb. yahay 28.
Muqdisho, 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Nuur iyo Maxamed Xasan Moxamuud maalintii 21-2-1967 loono ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaq Shiid Jidka Balcad uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Regtang. addimihiisuna ahaayeen 80x30 kuna fadhiye 2400 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii Degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD-193-589-68 ee 11-5-1968 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Regtangular addimihiisu yihiin 60x20 kuna fadhiya 1,200 soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Moxamed Salax.
Koofur waxaa ka xiga: Maxamed Raage iyo Axmed Maxamuud.
Galbeed waxaa ka xiga: Jidka.
Bari waxaa ka xiga: Jidka Balcad.

Muqdisho, 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(64)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Moxamuud Raage Cabdulle iyo Axmed Moxamuud Nuur maalintii 21-2-1967 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaq Shiid Jidka Balcad uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Regtang. addimihiisuna ahaayeen 80x30 kuna fadhiye 2,400 mdh., sababtoo ah in uu iska beddelay qorashihii Degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD-194-576-68 ee 11-5-1968 kana baxday xafiiskaan, wa-

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Regtangular addimihiisu yihiin 60x20 kuna fadhiya 1.200 soohdimihiisuna sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Moxamed Nuur Mohamed iyo Moxamed Xasan.
Koofur waxaa ka xiga: Moxamed Nuur Moxamed iyo Saxibadiisa.
Galbeed waxaa ka xiga: Jidka.
Bari waxaa ka xiga: Jidka Balcad.

Muqdisho, 5 Abbril 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(65)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### *N A A D A  D H U L*

Waxaan dad Weynaha la ogeysinayaa in uu keenay arji Xafiiska Guddomiyaha Degmada B. Weyne Jaallaha la yirahdo Khalif Roble Warfa u ku weydiisanaayo cad dhul ku jaalo Degmadatan u doonaayo in u ku dhisto guri dhagax ah, sida u sheegayo Sharciga Dhulka u degsan, waxaa si caddan ah u tilmaamaya dhulka asaga ah naqshad laga helo Xafiiska Guddomiyaha oo lagu arkikaro in ninkii doonaayo oo dani uga jirto in u arkikaro.

Nadada iyada ah waxay ku dhegenaaneysa Alwaaxa Dawladda Hoose ee Degmada B. Weyne 30 (soddon) maalmood laga billaabo 19 Maarso 1972 ilaa 18 Abbril 1972.

B. Weyne, 19 Maarso 1972.

Guddomiyaha Dawladda Hoose eeee B. W.
*Waxaa saxixay Xasan Axmed Cige*

*(66)*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

---

Waxaan arkay dacwadan:

Markaan arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta 2aad, waxaan ogaaday iney tahay shaqadeyda.

Arkay qodobka D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaancadeynayaa dhumidii buugga lacagta (ammortamento libret-

Waxaan amrayaa in loo sameeyo buugga ninka la yiraahdo Cali Xeyle Wardheere, muddo 30 beri ah, ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga, haddaan qof kale oo ku sheeganayaa usan jirin.

Waxaa kale ka codsanayaa in Buugga gacanta looga saaro Cali Xeyle, ama qof kale oo ka sita Wakaalad.

Muqdisho, 8 Abbril 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda
*Dr. Yasiin Shire Faarax*

*(67)*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

---

Waxaan arkay dacwadan:

Markan arkay waxay ku saabsan tahay Ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Soomaalidda Laanta Kismayo, ee aan ogaaday in ay tahay shaqa Xafiiskan;

Markan arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

Waxaan caddeynayaa dhumidda Jeeg. wareegto L. 3530 ku qoran lacag dhan 500 (shanboqool) Shs.

Waxaan Amraya in loo cusbooneysiiyo Cabduraxmaan Moxamed Xasan muddo 15 (shaniyotobaan) beri ah oo laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah (Bollettino), haddan la helin qof kale oo jeegaas sheegtaa.

Waxaan kaloo caddeynayaa in jeegaas gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sitaa wakaalad aan shaki ku jirin.

Kisimaayo, 20 Abbril 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka J. Hoose
*Dr. Xuseen Faarax Hilowle*

*(Ku celin 67)*

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الرسمية الجريدة

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA
نجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Muqdisho, 25 Abriil 1975 | L. 2, R. 4

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 32 ee 10 Abriil 1975 — *Heshiis ku saabsan Magdhaw.* Bog. 386 Bis

LEGGE N. 32 del 10 Aprile 1975 — *L'accordo nella forma dello cambio.* » 387 Bis

## BOGGA LABAAD

### XEER

W. M.

### BOGGA SEDDAXAD

### TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS WIXII LA MID AH

W. M.

Madbacadda Dawladda — Muqdisho

# BOGGA KOOWAAD

**SHARCI L. 32 ee 10 Abriil 1975.**
**MEEL MARIN.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO EEGAY Warqadii Koowaad iyo tii abaad ee Kacaanka;

ISAGOO DEHGEYSTAY Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

ISAOGO TIXGELINAYA Uuajeeddadii ku qoreyd Aftiyadii ay is — dhaafsa — deen taariikhdii 21kii Maarso, 1973. Danjiraha Jamhuuriyadda Talyaaniga u fadhiya Mogadiscio iyo Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaauliya.

WUXUU SOO SAARAY SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Heshiiska ku saabsan Magdhawda khasaarihii soo gaaray dadkii deganaa dauka Soomaliya waqtigii ay Ciidamada Ingriisku qabsadeen Soomaaliya, kuna qoraa Aftiyadii ay isku dhaafsadeen Magaalada Muqdisho taariikhdii 21kii Maarso 1973, wuu meel maray.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu dhaqan gelayaa waqtiga ku qoran Qodobka u dambeeya ee Aftiyada, kuwaasoo halkan ku lifaaqan ayagoo ka mid ah Sharcigan.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu yeelan doonaa astaan sharci. wuxuuna ka mid noqon doonaa sharciyada u degsan dalka isagoo lagu soo saari doono Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10 Abriiul 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

X.g.: Aftiga lagu tilmaamany qod. 2aad ee Sharciga kor ku qoran lam. 32 ee 10-4-1975 waxaa laga helayaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

**LEGGE N. 32 del 10 Aprile 1975.**
**ACCORDO DI RATIFICA.**

IL PRESIDENTE

DEL CONSIGLIO RIVOLUZIONARIO SUPREMO

VISTO la Prima e la Seconda Carta della Rivoluzione del 21 Ottobre 1969;

SENTITO il Consiglio Rivoluzionario Supremo e il Consiglio dei Segretari di Stato;

CONSIDERATO il tenore delle Note scambiati in data 21 Marzo, 1973 tra l'Ambasciatore della Repubblica Italiana a Mogadiscio ed il Segretario di Stato agli Affari Esteri della Repubblica Democratica Somala;

PROMULGA LA SEGUENTE LEGGE:

Art. 1

S i ratifica u'accordo, nella forma dello scambio di Note, tra il Governo della Repubblica Democratica Somala ed il Governo della Repubblica Italiana, relativo alla definizione degli indennizzi dei danni causati ai residenti in Somalia dell'occupazione Militare Britannica, concluso a Mogadiscio il 21 Marzo, 1973.

Art. 2

Piena ed ntera esecuzione e' data all'accordo di cui all'Articolo precedente a decorrere dalla data della sua entrata in vigore, in conformità della clausola finale delle Note stesse, allegate alla presente per farne parte integrante.

Art. 3

La presente Legge, munito del sigillo dello Stato, sarà pubblicata ed inserita nella raccolta ufficiale delle Leggi e dei Decreti della Repubblica Democratica Somala. E' fatto obbligo a chiunque spetti di osservarla e di farla osservare come legge dello Stato.

Mogadiscio, 10 Aprile 1975.

IL PRESIDENTE
del Consiglio Rivoluzionario Supremo
*Jagilo Maga Gen. Mohamed Siyad Barre*

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30 Maarso 1975, L. 70 — *Dhul Dowladeed la siiyay gacantana loo geliyay Jaalle Jamiila Cali Bin Cali.* » 405

---

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 12 Abbril 1975, — *Beddelaad Naado Dhul, Amina Sheekh Xusen. (68)* Bog. 407

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16 Abbril 1975, — *Naada Dhul, Maxamed Warsama Rooble iyo Cali Jiisow Nuur. (69)* » 407

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16 Abbril 1975, — *Naada Dhul, Uluma Xasan Maxamed. (70)* » 408

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 16 Abbril 1975, — *Beddelaad Naada Dhul, Axmed Maxamed Ibrahim. (71)* » 408

SOCIETA' PRODOTTI ALIMENTARI - SOPRAL - S.p.A. 29 Abbril 1975, — *Avviso di Convocazione di Assemblea Ordinaria. (72)* » 409

WASAARADDA KIIMIKADA SOOMAALIYEED (I.C.S. - S.p.A.) 30 Abbril 1975 — *Ogeysiis Shir. (73)* » 409

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 4 Maajio 1975, Lumidda Buugga L. 96-4 Shs. 502 uu leyahay — *Cabdullahi Ismaciil Jaamac. (74)* » 410

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 1 Maajio 1975, Buugga lacagta L. 6478-4, Shs. 3.000, uu leyahay — *Xusen Shire Jimcaale. (75)* » 410

# BOGGA KOWAAD
# SHARCI

**SHARCI L. 33, Tr. 18 Jenayo 1975.**
**Calaamadaha Ganacsiga (Trade Marks and Patents).**

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii labaad ee Kacaanka;

ISAGO AQOONSAN Inay lagama maarmaan tahay in Jamhuuriyada oo dhan lagu tixgelinyo sharci keliya oo ku saabsan calaamadaha ganacsiga;

ISAGO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayeyaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Sharciyadda lambarkoodu yihiin 1, 2 iyo 3 ee soo baxay 22-1-1955 ee ku saabsan calaamadaha ganacsiga (Trade Marks and Patents) ee hadda ka hor looga dhaqmi jirey *dhinaca Koonfur* keliya waxay ka hirgeleyaan dalka Jamhuuriyadda oo dhan.

Qodobka 2aad

Waxa la tirtiray sharciyada hoos ku qoran oo ilaa hadda looga dhaqmi jiray dhinaca waqooyi keliya:

1. Sharci lamb. 9 ee soo baxay 6-8-1938 (United Kingdom Trade Marks Ordinance)
2. Sharci lamb. 9 ee soo baxay 13-11-1924 (United Kingdom Patents Ordinance).
3. Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama khilaafsan sharciga kan.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa maalintii uu Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku saxeexo, waxaana lagu soo saari doonaan Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 18 Jenayo 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

**SHARCI L. 34, Tr. 4 Maarso 1975.**
**Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1975.**

MAXDAWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
ISAGOO Go'aankii Labada Gola ee 20 Maarso, 1975;

Qodobka 1aad

Isbeddelka lagu sameeyey Miisaaniyadda sannadka 1975ka, sida ka muuqata lifaaqa A, waa la ogolaaday.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan-galayaa 21ka Maarso 1975, wuxuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada Dawladda Soomaaliyeed; waa in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. G. Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Maal.
*Jaalle Cabdiraxmaan Nuur Xirsi*

| MADAX | Madax-xige | TILMAAN | Qiyaastii hore | Isbeddelka | Qiyaa cust |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.2.0 Wasaaradda Maaliyadda | 1.2.8 (kh) | Lacag Celin . . . . . | 1.000.000 | — 300.000 | 700 |
| | 1.2.8 (r) | Korsocdka Deynta . . . | 5.529.785 | — 500.000 | 5.029 |
| | 2.2.0 (a) | Deeqda Joogtada ah . . . | 9.200.000 | —2.750.000 | 6.450 |
| 1.3.0 Wasaaradda Arrimaha Dibedda | 1.2.2 (t) | Qalabka baaqoraalka . . . | 150.000 | — 50.000 | 100 |
| | 1.2.7 (j) | Qaadista saraayadda . . . | 100.000 | — 30.000 | 70. |
| 1.5.0 Wasaaradda Garsoorka «Maamulka» | 1.2.5 (a) | Ijaarka Guryaha . . . | 70.000 | — 30.000 | 40. |
| 1.6.1 Wasaaradda Arr. Gudha «Maamulka» | **1.2.1 (t)** | **Batroolka, naftada iyo saliidda** . | 250.000 | — 40.000 | 210 |
| | 1.2.8. (kh) | Dugsiyada Heweenka . . . | 50.000 | — 10.000 | 40. |
| 1.7.0 Wasaaradda Hawlaha Guud | 1.2.2 (kh) | Qalabka sahanka . . . . | 120.000 | — 20.000 | 100 |
| | 1.2.3 (t) | Alaabta daryeelidda Guryaha . . | 3.200.000 | — 200.000 | 3.000 |
| 1.8.0 Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha | 2.2.0 (a) | Kaalmada Wakaaladda Biyaha . | 8.698.630 | — 100.000 | 8.598 |
| **1.9.0** Wasaaradda Beeraha | 1.2.1. (a) | **Abuurka nafaqada dhulka iyo sunta dul.** . . . . . | 1.500.000 | — 200.000 | 1.300 |
| | 1.2.3 (d) | Sahmiska . . . . . | 62.000 | — 12.000 | 50. |
| | 1.2.2 (g) | Iibsiga Matoorada Biyaha . . | 100.000 | — 15.000 | 85. |
| | 1.2.5 (b) | Jjaarka cagaf-cagafyada . . . | 670.000 | — 130.000 | 540 |
| | 3.1.1 (a) | Dhismaha biyo-mereenka . . | 1.000.000 | — 200.000 | 800. |

| MADAX | Madax-xige | TILMAAN | Qiyaastii hore | Isbeddelka | Qiyaast cusub |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.10.0 Wasaaradda Xanaanada Xoolaha | 1.2.1 (b) | Daawada Xoolaha . . . . | 3.200.000 | — 200.000 | 3.000.0 |
| | 1.2.2 (kh) | Hantida yar yar . . . . | 100.000 | — 25.000 | 75.0 |
| | 1.2.8 (j) | Ballaarinta Hawlaha . . . | 120.000 | — 20.000 | 100.0 |
| | 1.2.8 (d) | Hawlaha Xanaanada Xoolaha . . | 350.000 | — 50.000 | 300.0 |
| | 2.1.0 (a) | Laanta talaalka semeysa . . | 1.200.000 | — 200.000 | 1.049.9 |
| 1.13.0 Wasaaradda Gaadiidka | 1.2.2 (r) | Iibka qalabka gegida dayuuradaha . | 1.399.940 | — 350.000 | 1.049.9 |
| | 3.1.1 (a) | Dhismaha Hoosaha ee Xamar . . | 500.000 | — 200.000 | 300.0 |
| 1.14.0 Wasaaradda Boostada iyo Isgarsiinta | 1.2.1 (t) | Batroolka, naftada iyo saliidda . | 1.000.000 | — 120.000 | 880.0 |
| | 3.1.1 (t) | Kordhinta iyo ballaar. telf. Xamar | 1.368.000 | — 368.000 | 1.000.0 |
| 1.15.0 Wasaaradda Ganacs. | 1.2.8 (j) | Tababarka Shaqaalaha . . . | 100.000 | — 50.000 | 50.0 |
| 1.16.0 Wasaaradda Dalxiiska | 1.2.2 (b) | Qalabka badda . . . . | 150.000 | — 50.000 | 100.0 |
| | 1.2.3 (b) | Daryeelidda carshaanta . . . | 150.000 | — 50.000 | 100.0 |
| | 3.1.1 (a) | Horumarinta xirmooyinka ugaarta . | 500.000 | — 100.000 | 400.0 |
| 1.17.0 Wasaaradda Waxbarashada | 1.2.1 (b) | Cuntada . . . . . | 5.600.000 | — 600.000 | 5.000.0 |
| | 1.2.1 (kh) | Waxbaridda dadka waaweyn . . | 150.000 | — 50.000 | 100.0 |
| | 1.2.2 (a) | Sariiraha iyo gogosha . . . | 150.000 | — 50.000 | 100.0 |
| | 1.2.2 (j) | Qalabka waxbarashada iyo sayniska | 300.000 | — 50.000 | 250.0 |
| | 1.2.6 (t) | Khareshka beddelaadda . . . | 250.000 | — 50.000 | 200.0 |
| 1.18.0 Wasaaradda Hiddaha iyo T. Sare | 2.2.0 (a) | Gargaarka Jaamacadda Ummadda . | 8.362.877 | — 100.000 | 8.262.8 |

| MADAX | Madax-xige | TILMAAN | Qiyaastii hore | Isbeddelka | Qiyaas cusu |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.19.0 Wasaaradda Caafima-adka | 1.2.2 (x) | Qalabka Isbitaalada . . . | 600.000 | — 220.000 | 380.( |
| 1.20.0 Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga | 1.2.8 (b) | Tababarka Shaqaalaha . . . | 150.000 | — 50.000 | 100.( |
| | 2.2.0 (a) | Lacagta Cayaaraha . . . | 250.000 | — 50.000 | 200.( |
| | 2.2.0 (t) | Kordhinta Aqoonta Farsamayaqaan. | 100.000 | — 50.000 | 50.( |
| 1.21.0 Wasaaradda Warfaafinta | 1.2.1 (a) | Dharka . . . . . | 260.000 | — 110.000 | 150.( |
| | 1.2.1 (b) | Batroolka, naftada iyo saliidda . | 1.500.000 | — 100.000 | 1.400.( |
| | 1.2.3 (a) | Qalabka Idaacadda . . . | 1.350.000 | — 50.000 | 1.300.( |
| | 1.2.8 (a) | Kharashka dabaaldegga . . | 150.000 | — 50.000 | 100.( |
| | 2.2.0 (a) | Wakaaladda Filimada . . . | 579.000 | — 50.000 | 529.( |
| | | Isugeyn | 61.590.232 | —8.000.000 | 53.590.2 |
| 1.17.0 Wasaaradda Waxbarashada | 1.2.1 (j) | Qalabka waxbarashada . . . | 5.700.000 | +1.000.000 | 6.700.( |
| | 1.2.2 (x) | Guri iyo xafiis bilid . . . | 210.000 | +2.150.000 | 2.360.( |
| Mashruuca 6aad | 3.1.1 | Dhismaha cusub . . . . | 3.000.000 | +4.850.000 | 7.850.( |
| | | Isugeyn | 8.910.000 | +8.000.000 | 16.910.( |

SHARCI L. 35, Tr. 21 Maarso 1975.
Mashruuca Horumarinta Beeraha Balcad.

# MAXDAWEYNAHA
# GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dawladda;

## WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

## Gaybta I.
## HORDHIG

### Qodobka 1aad
*Dhismaha mashuurca*

1. Mashruuca Horumarinta Beeraha Balcad imminka wixii ka dambeeya lagu magacaabi doona «Mashruuca» ayaa halkaan lagu dhisay.

2. Mashruucu wuxuu yahay mid madax banaan oo awáad iyo jirid qaanuuni ah.

### Qodobka 2aad

1. Ilaalinta Guud ee Mashruuca waxa yeelan doona, Xoghayaha Wasaaradda Beeraha oo imminka wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono Xoghayaha.

2. Xoghayahu wuxuu awood u leeyahay inuu tusaalooyin siiyo mashruuca isogoon haggaasan danaha guud ee Dawladda.

## Qaybta II.
## HABKA GUUD

### Qodobka 3aad
*Ujeeddooyinka Mashruuca*

Ujeedooyinka Mashruuca waxay yihiin:

1. Horumarinta dhulka Dawladdu siisay Mashruuca.
2. Soo saaridda iyo diyaariinta tacabka Beeraha.
3. Inuu ka ijaaro dhulka, qalabka iyo aqoonlayda beeraha, beeraleyda dhulka ay Dawladdu siisay Mashruuca.

4. Soo saaridda midhaha Beeraha iyo gadidooda.

5. Horumarinta waraabinta Beeraha Balcad iyo hawlaha la xiriira.

Qodobka 4aad

*Xarunta Mashruuca*

Xarunta Mashruuca waxay ahaan doonta Balcad oo ku yaal Gobolka Shabeelada Dhexe.

Qodobka 5aad

*Awooda*

Mashruucu wuxuu leeyahay awood uu ku fulin karo ujeedooyinka ku xusan qodobka 3aad ee Sharcigan.

Qaybta III.

DHISMAHA MASHRUUCA

Qodobka 6aad

*Xubnaha Mashruuca*

Xubnaha Mashruuca waxay ka kooban yihiin:

1. Maareeyaha Guud.
2. Waaxda Beeraha.
3. Waada Waraabinta.
4. Waada Maamulka.

Qodobka 7aad

*Magacaabidda Xubnaha Mashruuca*

Maareeyaha Guud, iyo madaxda waayada Mashruuca waxa lagu Magacaabi doonaa Xeerka Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaaya ra'aiga Xoghayaha.

Qodobka 8aad

*Xuquuqda Dhaqaalaha*

Xuquunqda dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud iyo Maareeyayaasha kale waxaa xukunmi doona, sharciga lamb. 36 ee 22kii Abrile 1972 iyo Xeerka M.G.S.K. Lam. 74 ee 22 Abrile 1972.

Qodobka 9aad

*Hawlaha Maareeyaha Guud*

Maareeyaha Guud wuxuu ahaan doonaa madaxa fulinta ee Mash-

ruuca, waxaa xilsaaray maamulka Guud iyo fulinta ujeedooyinka Mashruuca, mas'uuliyadda lacagta Mashruuca iyo inuu si habsami ah u maamulo xisaabaadka Mashruuca sida ay farayaan habka iyo qawaaniinta Dawladdu.

Qodobka 10aad

*Shaqaayaha*

1. «Mashruuca» wuxuu qoran karaa shaqaalaha uu u baadan yahay iyadoo la raacayo sharciga shaqo qoridda.

2. Shuruudda shaqada ee shaqaalaha Mashruuca waxa xukumaya sharcigan iyo qaawaaniinta faahfaahsan (regulation) ee sharcigan la xidhiidha; iyo sharciyada ku xusan qod. 8 ee sharcigan.

Qaybta IV.

QODOBBADA MAAMULKA LACAGTA

Qodobka 11aad

*Raasumaalka Mashruuca*

Raasumaalka «Mashruuca» wuxuu ka kooban yahay:

1. Qiimaha 10.000 ee Hiktar oo dhul ah kuna yaal shabeellada Dhexe oo Dawladdu siin doonto.
2. Wixii lacag ah oo ka soo gala hawsha uu «Mashruuca» qabto.
3. Hantida dhaqdhaqaaqa leh iyo taan leheen ee «Mashruuca» iyo wixii lacag ah ee ka soo baxa ijaarkooda.
4. Wixii hanti ah ee Dawladda iyo Ururrada Caalamiga ahi ugu deeqaan «Mashruuca».
5. Wixii lacag ee keyd ah «Reserve Fund» ee sannad kasta laga dhig macaashka «Mashruuca».
6. Wixii hanti ee deeq ama si kale u soo gala «Mashruuca».

Qodobka 12aad

*Misaaniyadda*

Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Settember ama inta ka horreeysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda sannadka maliyadda soo geliya isagoo faahfaahinaya kuna muujinaaya bandhigga miisaariyadda lacagta soo geli doonta iyo tah ka bixi doonta Mashruuca sannadka soo socda; waxaa hordhigi doonaa si loo oggolaado «Wasaaradda Beeraha iyo Wasaaradda Maaliyadda.

Qodobka 13aad

*Xisaabaadka sannadka*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31ka Marso ama inta ka horreysa sannadka kasta waa inuu diyaariyo, iskuna soo dubbariddaa xisaabaadka sannadka iyo bandhiggii macaashka iyo kharashka Mashruuca ee sannadkii Maaliyadda ee hore, isla markasna u gudbiyaa «Wasaaradda» iyo Wasaaradda Maaliyadda.

2. Xoghayuhu wuxuu awood u leeyahay isagoo tashanaaya Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda inuu oggolaado xisaabaadka sannadka, wuxuuna amar ku bixin doonaa in lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharjka uu bixinaayo «Mashruuca».

Qodobka 14aad

*Sannadka Maaiyadda*

Sannadka Maaliyaadda ee «Mashuuca» wuxuu bilaabmayaa 1da Jennaayo wuxuuna dhammaanayaa 31ka Dicembar ee sannad kasta.

Qodobka 15aad

*Amaahda*

«Mashruuca, isagoo haysta guddoonka Xoghayaha Wasaaradda Beeraha, wuxuu awood u leeyahay inuu amaahdo lacag xarumaha lacagta (financial institutions) ee dalka iyo dibeddaba si uu u hirgeliyo xilka la saaray ama ujeedooyinka «Mashruuca».

Qodobka 16aad

*Baadhidda Xisaabaadka*

Xisaabaadka «Mashruuca» waxaa baadhi doona Hantidhowrka Guud.

Qodobka 17aad

*Maamulka Lacagta*

Maamulka Lacagta ee «Mashruuca» waxaa xukumaya; laguna maamulayaa habka ay tilmaamayaan Sharciyada Dawladdu iyo Qawaaniinta faahfaahsan ee la xidhiidha

## Qaybta V.

## QODDOBADDA XIDHITAANKA

### Qodobka 18aad

*Guddoominta Qawaaniinta Faahfaahsan*

Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaaya talada «Xoghayaha» inuu soo saro qawaaniinta faahfaahsan si loo hirgeliyo Qodobadda Sharcigan.

### Qodobka 19aad

*Burin*

Sharci ama Xeer kasta oo ka duwan ama ka hor imaanaya sharcigan waa la baaba'shay.

### Qodobka 20aad

*Dhaqan Gelid*

1. Sharcigan hor ayuu ka dhaqan gelayaa.

2. Sharcigani wuxuu ka mid noqon doonaa sharciyada rasmiga ah iyo xeerarka Jamhuuriyadda Dimoqradiga ee Soomaaliya, waxana lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 2 Abril 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*

**LAW L. 35 Tr. 2 Abril 1975.**
**Balad Irrigation Development.**

THE PRESIDENT

OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

TAKING NOTE Of the joint approval of the Supreme Revolutionary Council and the Council of Secretaries;

HEREBY PROMULGATES

The following law:

## Chapter I.

## PRELIMINARY

### Art. 1

«Balad Irrigation Development» project, hereinafter, referred to as the «Project» is hereby established. The Project shall be autonomous body with a juridical entity.

### Art. 2

The Project shall function under the supervision of the Ministry of Agriculture, hereinafter referred to as «the Ministry».

The Secretary of State for agriculture hereinafter referred to as the «Secretary» may give the project such directives as he may consider necessary from time to time in order to ensure that it acts in accordance with the best interests of the state.

## Chapter II.

## GENERAL

### Art. 3

*Scope, Objectives and Powers*

The scope and objectives of the project shall be as follows:

1. Development of land leased to it by the government;
2. Production of agricultural crops;
3. Processing of agricultural produce;
4. Marketting agricultural produce in raw or processed f

5. Hire out agricultural land, machinery and technical know-how to lease-holders farming within land legally leased by the government to the project.

Art. 4

*Head Office*

1. The Head Office of the Project shall be in Balad in the Central Shebelle Region.

Art. 5

*Power*

The Project shall have all the powers necessary for the achievement of its objectives referred to in article 3 of this law.

Chapter III.

ORGANISATION THE ORGANS OF THE PROJECT

Art. 6

The Organs of the project shall be as follows:

1. The General Manager.
2. The Agricultural Manager.
3. The Irrigation Manager.
4. The Administration Manager.

Art. 7

*Appointment of the Organs of the Project*

The General Manager, Agricultural Manager, Irrigation Manager and Administration Manager shall be appointed by decree of the President of the Supreme Revolutionary Council on the proposal of the «Secretary».

Art. 8

*Emoluments*

The emoluments of the General Manager and Managers shall be established by decree of the President of the Supreme Revolutionary Council on the proposal of the «Secretary».

Art. 9

*The function of the General Manager*

The General Manager shall be the executive head of the Project. He shall be responsible for the general direction and fulfilment of its objectives as well as the funds of the project and the proper maintenance of its accaounts in accordance with the state financial regulations and procedure.

Art. 10

*Staff*

The project may appoint the staff required by it other than those mentioned in article 6 of this law and shall establish their emoluments.

The terms and conditions of service of the staff shall be governed by this law and regulations issued thereunder and shall also be subject to the provisions of law No. 36 of 22 April 1972. (Law on Autonomous Agencies and the regulations made thereunder).

Chapter IV.

FINANCIAL PROVISIONS

Art. 11

*Capital*

The Capital of the project shall consist of:

a) the value of 10.000 hectares of the land at Central Shebelle to granted by the government.

b) any revenue drived from its activities;

c) all movoble and immovable propertes of the projet and rentals therefrom;

d) any contribution which may be granted by the State, public bodies and International organisations.

e) reserve funds to be set aside from «the Project's» yearly profits.

f) any other receipts.

Art. 12

*Budget*

The General Manager shall not later than 30th September each year prepare a budget statement for the next financial year, showing the estimated receipts and expenditure of the project this shall be submitted

forthwith to the Ministry of Agriculture and the Ministry of finance for approval.

Art. 13

*Annual Accounts*

1. Within 31st March in each year, the General Manager shall prepare the annual accounts and profit and loss statement of the «Project» and shall submit the same to the «Ministry» and Ministry of Finance.

2. «The Secretary» shall, in consultation with the Secretary of State for Finance, be competent to approve the Annual Accounts and shall give instructions for their publication in the Official Bulettin at the expenses of «the Project».

Art. 14

*Financil Year*

The financial year of the project shall commence on the 1st Jenauary and end on 31st December every year.

Art. 15

*Authorised Loans*

The project may, for the purpose of its activity, obtain loans from financial Institutions within the Republic and abroad with the approval of the «Secretary of State for Agriculture».

Art. 16

*Audit*

The accounts of the project shall be audited by the Magistrate of Accounts.

Art. 17

*Accounts*

The accounts of the project shall be maintained in the manner prescribed by the General rules issued by the Government for that purpose and by any regulations issued thereunder.

Capter V.

FINAL PROVISIONS

Art. 18

*Regulations of the Project*

The President of the Supreme Revolutionary Council may, on the proposal of the «Secretary» by decree issue regulations for the proper implementation of this Law.

Art. 19

*Repeal*

Any law or provision contrary to or inconsistent with the provisions of this law is hereby repealed.

Art. 20

*Coming into force*

1. This law shall come into force immediately.

2. It shall be included in the Official Compilation of law and Decree of the Somali Democratic Republic and shall be published in the Official Bulettin.

Muqdisho, 2 April 1975.

THE PRESIDENT

of the Supreme Revolutionary Council

*Major Gen. Mohamed Siyad Barre*

# BOGGA LABAAD
# XEER

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 4 Maarso 1975, L. 67.**
**Dalacsiin la siiyey Xiddiglayaal.**

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ANNAGOO ARAGNAY Xaashidii Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka;

ANNAGOO ARAGNAY Sharciga lambarkiisu yaha 1 taariikh 21kii Oktoobar, 1969;

ANNAGOO ARGNAY Sharciga Xabsiyada ee lambarkiisu yahay 7, taariikh 30kii Disembar, 1971;

ANNAGOO ARAGNAY Sharciga lambarkiisu yahay 14 taariikh 3dii Juunyo 1962, qodobka 7aad ee Habka Dawladda;

ANNAGOO ARAGNAY Caddeynta Taliyaha Ciidamada Asluubta;

SOO JEEDINTA Xoghayaha Dawladda, Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Dinta;

Qodobka 1aad

Laga bilaabo 1da Abriil, 1975 Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin oo tababar Sarkaalnimna ku soo qaatay Jamhuuriyada Dimoqradiga ee Jarmalka iyo Soomaaliyaba waxa loo dalacsiiyey Xiddiglayaal ka tirsan Ciidamada Asluubta ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya:

1. Maxamud Ismaaciil Xuseen
2. Maxamed Xirsi Maxamud
3. Yuusuf Cabdi Aadan
4. Aadan Axmed Rooble
5. Cumar Siidow Rooble
6. Cali Xirsi Daahir
7. Ibraahim Cali Aadan
8. Axmed Maxamed Aadan
9. Ibraahim Cabdiraxman Cali.

Qodobka 2aad

Mushaharkooda kordhay waxaa laga bixin doonaa 1.5.1. Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Dinta — 1.5.2. - 1.1.1. Mushar — Taliska Ciidanka Asluubta.

Muqdisho, 4 Maarso 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Dinta

**XEER WASAARADDA GANACSIGA**
**Tr. 23 Maarso 1975, L. 68.**
**Qiimaha Timirta.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKII UU ARKAY Go'aankii 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKII UU ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 17ka oo soo baxay 17-6-1967, ee ku saabsanaa ilaalinta qiimaha alaabta lagama maarmaanaa ah;

MARKII UU ARKAY Xeerka sumadiisu tahay WGG-A-2B-131 ee 16-1-1975, kuna saabsana Sicirkii loo gooyay timirta;

MARKII UU TIXGELIYEY Inay tahay lagama maarmaan in Wakaaladda Ganacsiga Ummadda toos uga gado timirta Dukaanleeyda;

Ayadoo la dhaqan gelinaaya go'aankii ay gaareen Goloha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda:

WUXUU DEJINAAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Qiimaha timirta ay Wakaaladda Canacsiga Ummadda toos uga gadayso Dukaanleyda iyo qimaha ay Dukaanleyda kaga gadayaan Dadweynaha, waxay noqon doonaan sida aanu u goynay ee hoos ku qoran, laga billaabo 24 Maarso 1975:

| *Badeecadda* | *Qiimaha ay WGU (ENC) kaga gadayso Dukaanleyda kiiladii* | *Qiimaha ay Dukaanleydii kaga gadayaan Dadweynaha kiiladii* |
|---|---|---|
| Timirta | Shs. So. 2.55 | Shs. So. 3.00 |

Qodobka 2aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda; waxuuna tirayaa xeer kastoo ka soo horjeeda. Waxaa lagu amrayaa qof waliba inuu dhawro, dadka kalena dhowriyo xeerkan isaga ah.

Muqdisho, 23 Maarso 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Jaalle Axmed M. Maxamuud*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka Lamb. 1, Bogga Lalmb. 64.*
*Muqdisho, 9 Abril 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillaahi Waraame N...

**XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMALIA**

**Tr. 16 Abriil 1975, L. 69.**

**Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.**

Xeer Lambar 71 ee 16-04-1975.

## AGAASIMAHA GUUD

## EE BANKIGA DHEXE EE SOOMALIYA

MARKUU ARKAY Qodobka 13aad Xubintiisa 4aad, ee Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofembar, 1964, ee awood buuxda siinaya Agaasimaha Guud, markuu maqanyahay Guddoomiyuhu.

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihiinta Ganacsiga Dibedda, eeawood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, inuu mar walba caddeeyo qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

ASAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciiciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaadii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

ASAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 178 ee 16-04-75, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lr. 27 ee 26 Nofembar 1968 uu dhigayo.

## WUXUU GUDDOONSHAY

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga Ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 16-04-75, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faa-

| *Lacagta galaad* | | *Heerka iibsashada oo Sh. So. ah* | *Heerka gadidda oo Sh. So. ah* |
|---|---|---|---|
| US $ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK £ | 1.00 | 14.7614 | 15.0567 |
| DM. | 1.00 | 2.6189 | 2.6713 |
| LT. | 102.04 | 1.0000 | — |
| LT. | 100.00 | — | 1.0000 |
| F. FR. | 1.00 | 1.4785 | 1.5081 |
| SW. FR. | 1.00 | 2.4313 | 2.4800 |
| DJ. FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 15 Abriil 1975.

Agaasimaha Guud Guddoomiyaha K.M.G.
SACIID MAXAMED CALI

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**Tr. 30 Maarso 1975, L. 70.**

**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Jamiila Cali Bin Cali, kuna yaal Baydhabo.**

XOGHAYAHA HAWLAHA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 50 soona baxay 26 Gennaio 1964;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Ibrahim Macallin Muuse taarikhdu markay ahayd 16-5-1964 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Baydhabo;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Guddoomiyaha Baydhabo, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda L. 24 soona baxaday 12-12-1973, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda ku saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Wasaaradda Hawlaha Guud — Waaxda Farsamada dhulka taarikhdeeduna ahayd 8-11-1973 kuna saabsaneed dhismo

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 114240 ee 8-11-1973 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Ibrahim Macallim Muuse uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 330, kuna saabsan

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhila mq. 330, loona tiriyay Ibrahim Macallim Muuse sida ku cad xaashid ay qorqiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

tay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna aheyd 19-10-1974;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Baydhabo, taarikhdeeduna ahayd 26-1-1975 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay waafaqsan tahay gufiga;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Baydhabo, laguna siiyay xaashid lamb. 1062-74 ee 21-12-1974, kana soo baxday Xafiiska Caafimaadka Guud Gobolka Bay, taas oo caddeyneysa in gurga wanaagsan yahay;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo nashadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 87 Reb. taarikh. 7 12-68 lagu diiwaan geliyay Baydhabo 9-12-1968, qoraal Dowladeed oo ah Caddeynta Garsooraha Axmed Xaaji Maxamed Cismaan taas oo Ibrahim Macallim Muuse ka gatay kuna wareejiyay Jamiila Cali Bin Cali wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul kuna yaal Baydhabo;

ISAGA OO AQOONSAN in la tixgeliyay wax allaale waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddaddisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Jamiila Cali Bin Cali, dhul ku fadhiya mq. 330, kuna yaal Magaaladda Baydhabo.

Muqdisho, 30 Maarso 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaale Mutlar*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*
*Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 7.*
*Muqdisho, 12 Abriil 1975.*
*Hantidhawraha Guud*

C. Dheeq Cabdillahi Warsame Nuur

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Amina Sheekh Xusen, maalintii 21-7-1973, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada 21ka Oktoobar, Jidka 21ka Oktoobar uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rettangolar, addimihiisuna ahaayeen 20x30, kuna fadhiye 400 mdh., sababtoo ah in Qorshihii Xaafudda Iskabedelka.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa W.H.G. 3-23-930, kana baxaday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Rettangolar, addimihiisu yihiin 30x20 kuna wadhiya 600 soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. Yahay 35.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Dhul Lamb. Yahay 42.

Muqdisho, 12 Abriil 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(68)*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Warsama Rooble iyo Cali Jiisow Nuur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 27-11-1959, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna fadhiya 34x20,30 = 690,20 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Jid.
Koofur Xasan Hirawe Dhiblaawe.
Galbeed Jd.
Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Abriil 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(69)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Uluma Xasan Moxamed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 7-12-1966, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis, oo leh qiyaas Rettangolar, kuna fadhiya 204x6 = 920 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Dhul Dad leeyahay.
Koofur Looto Lamb. 7 iyo 3.
Galbeed Jdd.
Bari Wadada Balcad.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Abriil 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(70)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Axmed Maxamed Ibrahim, maalintii 12-5-1968, loona ogolaadal oo ku yiil Muqdisho degmada V Km. Jidka Muq. Afg. uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rettangolar; addimihiisuna ahaayeen 60x50, kuna fadhiye 3000 mdh., sababtoo ah Qoorshahii oo xaafadda oo isbedelay.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 431-1018 ee 14-8-1968, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Rettangolar addimihiisu yihiin 40x30 kuna fadhiya 1200, soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Dhul dawladeed.

Muqdisho, 16 Abriil 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(71)* *Maxamed Cabdi Saciid*

**SOCIETA' PRODOTTI ALIMENTARI — SOPRAL — S.p.A.**

**Sede in Mogadiscio — Capitale Shs. So. 1.000.000,00**

---

## A V V I S O

## DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Prodotti Alimentari — SOPRAL — S.p.A., con sede in Mogadiscio, sono convocati in Assemblea Ordinaria, presso la Sede Sociale, per il giorno 19 Maggio 1975 alle ore 11 in prima convocazione e, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 26 Maggio 1975 alla stessa ora enello stesso luogo per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. Presentazione Bilancio e Conto Perdite & Profitti al 31 Dicembre 1974 e deliberazioni relative;
3. Nomina del Collegio Sindacale.

Hanno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti inscritti nel Libro Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea o che entro tale termine abbiano depositato le loro azioni presso la sede Sociale o presso un Istituto Bancario n Mogadiscio.

Mogadiscio, li29 Aprile 1975.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

*(72)*

---

**WESAARDDA KIIMIKADA SOOMAALIYED — I.C.S. — S.p.A.**

---

## OGEYSIIS SHIR

Waxaa la ogeysiinayaa saamileyda Warshadda Kiimikada Soomaaliyeed (I.C.S. - S.p.A.) in uu jiro fadhi caadi ah oo lagu dhigi doono saldhigga Warshadda ee Muqdisho maalinta bishu ay tahay 15-6-1975 saacaddu markay tahay 4.30 galabnimo, hadduu shirku ku dhammaan waayana mar labaadka bisha Juunyo maalinta ay tahay 22 isku saacadda kor ku qoran.

Shirkaa assaga ah waxaa lagaga hadli doonaa arrimaha hoos ku yaalla:

1. Faaiadii Guddiga Maamulka sannadkii 1974.
2. Faaiadii Guddiga Baaridda Maamulka sannadkii 1974.
3. Dhellitirka xisaabaadkii sannadkii 1974.
4. Wixii kale ee yimaada.

Muqdisho, 30 Abriil 1975.

GUDDIGA MAAMULKA

*(73)*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Hadduu arkay dacwada hor ku qotan;
Markuu arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed, wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;
Hadduu arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda buuga (Ammortamento libretto) NDR. 96-4 ee Shs. 502 ku qoran tahay;

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo, ninka magaciisa la yiraahdo Cabdillaahi Ismaaciil Jaamac, muddo 30 beri ka dib, laga bilaabo maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, buug lacageed; haddi cid kale ayan wax ku sheegan.

WAXAA LA CODSANAYAA

Oo kale in ninka magaciisu kor ku yaal gacanta laga saaro buuggaas, ama nin wakaalad sharci ah ka sita, ayadoo la sugaayo muddada 30ka beri ah ee kor lagu soo sheegay.

Xamar, 4 Maajo 1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA
*Dr. Yasiin Shire Faarax*

*(74)*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Haddu arkay dacwada hor ku qoran;
Markuu arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiski Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed, wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;
Hadduu arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda buugga lacagta (Ammortamento libretto) NDR. 6478-4 ee Shs. 3.000, ku qoran tahay;

WAXAAN AMRAYAA

In loo sameeyo ninka la yiraahdo Xuseen Shire Jimcaale muddo 30 beri ka dib laga bilaabo maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ee Dawladda, haddii cid kale ayan wax ku soo sheegan, buug lacageed;

WAXAA LA CODSANAYAA

Oo kale in buugga lacagta laga saaro gacanta ninka magaciisu kor ku qoran yahay ama qof ka sita wakaalad sharci ah; ayadoo la sugaayo 30ka beri ee kor laga soo sheegay.

Muqdisho, 1 Maajio 1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA
*Dr. Yaasiin Shire Faarax*

*(75)*

IBB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الرسمية الجريدة

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Mogadiscio, 25 Majio 1975 | L. 1, R. 5

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### KOOBNIIN

SHARCI L. 36, Tr. 30 Abbril 1975 — *Sharci ku saabsan Afduubidda.* Bog. 413

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 30 Abbril 1975, L. 71 — *Xeerfaafin ku saabsan Sharciga Kaydka Boostada.* » 415

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 30 Abbril 1975, L. 71 — *Postal Savings Regulation.* » 430

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 8 Majio 1975, L. 72 — *Magacaabid Guddi Degmooyin.* » 443

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 11 Majio 1975, L. 73 — *Magacaabid Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Mudug.* Bog. 447

XEER WASAARADDA GANACSIGA, 19 Febbrayo 1975, L. 74 — *Wakaaladda Ganacsiga Ummadda Toos uga iibin karto Dadweqnaha.* » 450

---

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

SHARIKADDA A.M.E.C.O. S.p.A., Tr. 18-5-1973 — *Isuimaatin Guudnimo oo Caadi ah. (76)* Bog. 451

NUCLEARE SOMALA S.p.A. Tr. 22 Majio 1975 — *Oggolaashada Misaaniyadda Sannadka 1974. (77)* » 451

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, Tr. 19-5-1975 — *Jeeg woreegto ah, L. 12237, Shs. 750 uu leeyohay Cumar Cali Xaaji Saciid. (78)* » 455

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 22-5-1975 — *Lumidda Buugga Lacagta L. 1.829, Shs. 1.554, ay wakiil Sharci ka tahay Khadiijo Bile Hande. (79)* » 456

---

# BOGGA KOBNIIN
# SHARCI

SHARCI L. 36, Tr. 30 Abril 1975.
Sharci ku saabsan Afduubidda.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SAREE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY In tahay lagama maarmaan in la soo saaro Sharci ku saabsan Afduubidda;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xeghayaha Dawladda ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta,

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

*Afduubid*

1. Qof kasta oo ku afduuba Waddanka gudihiisa ama dibeddaba qof, dayuurad ama gaadiid kale isagoo doo naya in la siiyo lacag ama xoolo ama uu siyaasad haan uga faa'iideysto taaso ka soo horjeeda maslaxadda guud ee Qaranka Soomaaliyeed, nabadgelyada iyo siyaasadda Kacaanka Soomaaliyeed, waxaa lagu ciqaabyaa dil.

2. Dadka kale ee ku lug leh dembigaas abaabulkiisa ayagana waxaa lagu ciqaabayaa sida lagu sheegay qaybta 1aad ee qodobkaan.

Qodobka 2aad

*Ka reebid*

*Dhaqan gelid*

Haddii dembigaas uusan ka soo horjeedin danaba guud, xurriyadda, midnimada iyo siyaasadda guud ee Qaranka, Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayasha Dawladda ayaa go'aan ka gaadhi doona wixii laga yeeli labaa dadkii galay dembigaas.

Qodobka 3aad

*Dembi qarin*

Qof kasta oo ka war hela abaabulka dembiga lagu sheegay qodobka 1aad oo aan soo ogeysiin Ciidamada Nabadgeliyada ee ku shuqul leh, waxaa lagu ciqaabayaa xarig 20 sano ilaa 30 sano, wixii hanti ah ee u leeyahayna Dawladda la wareegeysa.

Qodobka 4aad

*Dembi dhaafid*

Qof kasta oo ka qayb gala abaabulka dembigaas haddii uu soo sheego intii uusan dambigu dhicin, wax dembi ah ee lagu qaadayo ma jiro.

Qodobka 5aad

*La wareegid*

Wax allaale wixii ey weydiisteen oo ey heleen dadka galay dembiga lagu caddeeyey qodobka 1aad wixii hanti ah oo ey ku leeyihiin Waddanka gudihiisa ama dibeddaba waxaa la wareegeya Dawladda Soomaaliyeed.

Qodobka 6aad

*Awood*

Maxkamadda Badbaadada Ummadda ayaa awood u leh inay qaado dembiga lagu caddeeyey Sharcigaan.

Qodobka 7aad

*Qaadista dacwadda*

Qofka ku xadgudba Sharciga waxaa dacwad lagu qaadi karaa isagoo maqan.

Qodobka 8aad

*Tirtir*

Waxaa la tirtiray qodobka 486 ee Xeerka Ciqaabta.

Qodobka 9aad

*Dhaqan gelid*

Sharcigaan si degdeg ah buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 30 Abril 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

# BOGGA LABAAD
# XEER

## XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

**Tr. 30 Abril 1975, L. 71.**

**Xeerfaafin ku saabsan Sharciga Kaydka Boostada.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in la sameeyo xeerfaafin oo fasir iyo faahfaahin ka bixinayo sharciga kaydka boostada;

ISAGOO ARKAY Qodobka 37 ee Sharciga lam. 17 taariikhdiisu yahay 21ka Jannaayo 1975, Sharciga Kaydka Boostada;

ISAGOO TIXGELINAYA Soo jeedinta Xoghayaha Dawladda ee Boostada iyo Isgaarsiinta;

WUXUU XEEREEYEY

Qodobka 1aad

*Oggolaanshaha Xeerfaafinta Kaydka Boostada*

Waa la oggolaaday xeerfaafinta halkan ku lifaaqan oo ahaanaya qaybka mid ah xeerkakan.

Qodobka 2aad

*Hirgelin*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa kaddib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 30 Abril 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Boostada iyo Isgarsiinta
*Dr. Aabdullaahi Cosoble Siyaad*

## XEERFAAFINTA KAYDKA BOOSTDA

### Qaybta I.

### AWAAMIR GUUD

### Qodobka 1aad

*Dhameyn (Definition)*

Xeerfaafintaan erayga «SHARCIGA» waxaa loola jeedaa sharciga Kaydka Boostada (Sharci lam. 17 ee 21-1-1975) haddaanan wax kale loola jeedin, ereyda kale oo dhan, waa isku micna sida sharciga ku qoran.

### Qodobka 2aad

*Buugagga Kaydsiga*

1. Buugagga Kaydsiga magacaaban waxaa lagu qori karaa qof kasta xataa hadduusan qaan-gaar ahayn, hey'adaha iyo shirkadaha gaar ahaaneed.

2. Buugagga kaydsiga waxay ka kooban yihiin: buugag oo lambarada isdabajoogga ah madbacadda laga soo daabacay. Buugaagtaas waxay ka sameysan yihiin, jildi adag, laba baal qoridda magaca (Midkood loo diraya xarunta dhexe ee Kaydka Boostada), baalal lagu qorayo xisaabfalyo iyo rasiido lacag lagu qaadanayo.

3. Baalasha oo dhan waa inay ku qornaadaan lambar isdabajoogga ah iyo lambarka buugga kaydsiga.

4. Nooca buugga kaydsiga iyo qaabkiisa waxaa lagu soo saarayaa Dekreeto ee Xoghayaha.

### Qodobka 3aad

*Xisaabta lagu qorayo Buugagga Kaydsiga*

1. Qoritaanka Buugagga kaysiga waxaa ku qori karayaa oo keliya qofka uu u fasaxay Madaxda Kaydka Boostada. Qoritaankaas waa in lagu caddeeyaa saxiixa karaaniga iyo shaabadda xafiiska ee taariikhda leh.

2. Xisaabta ku qoran rajistrada xafiiska soo saaridda iyo Xarunta Dhexe ee Kaydka Boostada waa inay isu waafaqaan sida ku qoran Buugga Kaydsiga.

3. Qoritaanka buugga kaydsiga lama masaxi karo, haddii aysan qalad ahayn amba beddelaadda cinwaanka qofka buugga leh loo baahan. Haddii saxidda loo baahdo waxa sameyn kara oo keliya xafiiska buugga kaydsiga soo saaray, qoritaanka la masaxayo waa inuu ahaado mid la arki karo oo uu la socdo saxiixa karaaniga ku hawl leh iyo shaabadda xafiiska.

Qodobka 4aad

*Baabi'inta warqadaha (records)*

1. Kaydka Boostada waa baabi'in karaa dokumentooyinka ku saabsan hawlaha kaydsiga markii la dhaafo muddada hoos ku qoran:
   a) Toban sano dokumentooyinka ku saabsan xisaabta la xidhay;
   b) Shan sano dokumentooyinka oo kale.

2. Muddadaas waxay ka bilaabataa, maalinta u horeysa sannadka ku xiga kaa xisaabta la xidhay amba dokumentooyinka la soo saaray.

3. Dokumentooyinka lama baabi'in karo haddii ay jirto weydiin amba dacwo sharci ah, oo weli aan la dhameyn oo arrintaas ku saabsan.

Qaybta II.

SOCODSIINTA XISAABTA KAYDSIGA

Qodobka 5aad

*Furitaanka xisaabta*

1. Furidda xisaabta kaydsiga waxaa dalban kara qofka xisaabta loo furaayo amba qof kale ayaa u dalban kara.
2. Xisaabta kaydsiga waa in lagu furaa magacaa buuxa ee qofka xisaabta furanaya.
3. Xisaabta kaydsiga oo wakaalad ku qoran, waa in lagu qoraa magaca iyo jagada qofka oo meesha sharci ahaan wakii ka ah. Haddii beddel dhaco oo ku saabsan wakiilka, waa in la ogeysiiyaa xafiiska buugga kaydsiga soo saaray.
4. Dadka hay'adaha wakiil ka ah, waa inay muujiyaan xaashi lagu aqoonsado in ay wakiil ka yihiin hey'adaas.
5. Waa reeban tahay in xisaab lagu furo magaca aan jirin.
6. Xisaabta waxaa lagu furi karaa buugga kaydsigana la soo saari kara, keliya marka la sameeyo dhigis ah ugu yaraan sida uu waafaqsan yahay Qodobka 11aad cadka 2aad ee xeerkani ku dhisan yahay.

Qodobka 6aad

*Soo saaridda buugagga kaydsiga*

1. Buugga kaydsiga marka la soo saarayo, waa in lagu qoraa baalka qoridda magaca loogu talagalay sida hoos ku tifaftiran:
   a) Xafiiska soo saaridda (shaabadda dheer);
   b) Magaca qofka xisaabta furanayo; markii ay tahay hey'ad, waxaa lagu kordhinayaa magaca iyo darajadiisa;
   c) Cinwaanka qofka xisaabta furanayo;
   d) Taariikhda iyo meeshuu ku dhashay;
   e) Saxiixa karaaniga buugga kaydsiga bixinayo;
   f) Shaabadda lambarka jajab leh (fraction) iyo shaabadda taariikhda.

2. Isla markaa loo furayaa rajistar oo lagu haynayo xafiiska buugga kaydsiga soo saaray, (qaab KB-5) rajistarkaas waxaa lagu qorayaa dhigista ugu horeysa iyo wax alla wixii xisaabfal dambe ah.

3. Nuqulka baalka koowaad ee cinwaanka iyo magaca lagu qorayo, waa in buugga kaydsiga laga jaraa loona soo diraa xafiiska dhexe ee kaydka boostada, halkaasoo looga furi doono rajistar kale (Qaab KB-21) oo isla xisaabtaas lagu qorayo.

Qodobka 7aad

*Dhigista iyo bixinta caadiga ah*

1. Dhigista iyo qaadista lacagta waxa lagu sameyn karaya xafiisyada boostada oo dhan ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya ka furan, kuwaasoo u fasaxay Xoghayaha Dawladda Boosaha iyo Isgaarsiinta in hawsha kaydka boostada ay soo maamulaan. Waase in aad buugga kaydkana tustaa wixii kale ee lagaa rabana buuxisaa.

2. Xisaabfalyada la sameeyo waa in lagu qoraa buugga kaydsiga meesha loogu talagalay iyo rajistarada la xidhiidha. In lacag la dhigtay amba dib loo qaatay, waa in lagu kordhiyaa amba laga jaraa, hadba sida ay tahay, hantidana lagu muujiyaa.

3. Qofka lacagta dhiganaya amba qaadanaya waa inuu hubiyaa in qoraalka buugga kaydsiga iyo foomamka kale ay hagaagsan yihiin. Maamulka dhexe ee kaydka boostada wuu diidi karaa dacwad mar dambe la soo qaadimo.

Qodobka 8aad

*Dhigis*

1. Dhigista oo dhan waa in lagu soo qoraa ogeysiiska dhigista (bill of deposit) qaab KB-4 oo laga helo xafiisyada boostada, kuwaasoo Blook ahaan loogu dhaqmayo. Blookyadaas oo midab kala gedisan ayaa lagu dhaqmi doonaa, dhigista lagu sameeyo xafiiska soo saaridda (midab cad), xafiisyada kale (midab cas).

2. Ogeysiiska dhigista (bill of deposit) waa in laga dhigaa saddex nuqul oo loogu isticmaalo sida soo socda:

a) Nuqulka koobaad (bill of deposit) waa in loo diraa xarunta dhexe ee kaydka boostada;
b) Nuqulka labaad (rasiid) waa in la soo siiyaa dhigtaha;
c) Nuqulka saddexaad (counterfoil) waa inuu Bolooka ku haraa.

3. Saddexda nuqul isku qoraal bay tusaaleynayaan; kaas oo ah:
a) Lambarka buugga kaydsiga;
b) Xafaaska soo saaridda;
c) Magaca qofka xisaabta leh;
d) Lacagta la dhigtey iyo hantida cusub;
e) Taariikhda dhigista;
f) Saxiixa karaaniga;
g) Shaabadda lambarka jab jab leh (fraction) iyo tan taariikhda.

Qodobka 9aad

*Bixinta*

1. Lacagta waxaa lagu qaadan karaa rasiidada buugga kaydsiga ku lifaaqan.

2. Rasiidadaas waa inay lahaadaan lambarka buugga kaydsiga. Haddana waa inay u lambarsanaadaan si isdabajoog ah, waxaanna waajib ah in loogu isticmaalo sida lambarada isu xigaan. Markii rasiid la baabi'in rabo sabab kasta ha ahaatee, waa in lagu daayo ha ku lifaaqnaado buugga kaydsiga.

3. Rasiidada waa laba nooc, kuwa midabka caddaan leh waxaa lagu dhaqmayaa marka lacagta laga qaadanayo xafiiska buugga kaydsiga soo saaray, kuwa kale oo midabka cas ku daabacan, waxaa loogu dhaqmayaa xafiisyada kale.

4. Rasiidada waa inay ku qornaadaan:
a) Xafiiska bixiyaha;
b) Lacagta dib loo qaatay iyo hantida cusub;
c) Saxiixa qaataha;
d) Saxiixa karaaniga;
e) Shaabadda lambarka jajab leh iyo tan taariikhda.

Rasiidada oo midabkooda casaan ku daabacan yahay waa inay siyaado ku qornaadaan «Xafiiska soo saaridda».

5. Lacagta waxaa qaadan kara oo keliya, qofka xisaabta iska leh, amba qofka asagu soo wakiishay, markii ay soo muujiyaan xaashida aqoonsiga. Wakiilka oo aan buugga kaydsiga ku qorneyn, waxaa looga baahan yahay (xaashida wakaaladda) (Proxy).

6. Ka hor inta aan lacagta la bixinin, xafiiska bixiyaha waa inuu baaraa; in hantida buugga kaydsiga ku qorani ay waafaqsan tahay hantida ku qoran rajistarka Qaab KB-5.

Qodobka 10

*Bixinta lacag buug la'aan*

1. Ayadoo ka baxsan qodobka 7aad cadka 1aad dhigtaha wuu weydiisan karaa lacag qaadasho, in kastoo buugga kaydsiga Maamulka kaydka boostadu ka haystoo, sabab kasta awgeed.

2. Haseyeeshee, bixinta waxaa sameyn karaya xafiska soo saaridda oo keliya ilaa laba saddexaan 2/3 ee hantida oo ka muuqda rasiidka dhigtaha la soo siiyey marka buugga kaydsiga laga qaatay.

3. Haddii arrintu sidaas ay tahay, dhigtaha waa inuu muujiyaa rasiidka Qaab KB-17 isla markaana ku qoraa weydiinta lacag qaadashada gaarka ah Qaab KB-18 oo lagu heyn doono khasnadda xafiiska buugga

4. Ka dib markii lacagta la bixiyey, xafiiska buugga soo saaray waa inuu la haraa arjiga Qaab KB-18 ilaa buugga kaydsiga la soo celiyo. Dabadeed wixii muhiin ah buugga kaydsiga ayaa lagu qori doonaa iyo rajistarka la xiriira xarunta dhexe ee kaydka waa in lagu ogeysiiyaa xaashida lacag bixinta sida caadiga ah.

Qodobka 11aad

*Xisaabfalyo lagu sameeyey xafiis aan ahayn kan buugga kaydsiga soo saaray*

1. Inta aan waxba la bixinin xafiiska bixiyaha ah, waa inuu si degdeg ah soo weydiiyaa hubaal hantida buugga kaydsiga ku qoran, xafiiska buugga soo saaray amba xarunta dhexe ee kaydka. Iyadoo ka baxsan xeerfaafintan xafiiska bixiyaha ahi wuxuu kari karaa in aanu weydiin dirin haddii lacagtu ay dhan tahay Sh. So. 200 iyo wixii ka yar.

2. Haddii lacag la dhigto amba laga qaado xafiis aan ahayn kan buugga kaydsiga soo saaray, xafiiska xisaabfalka soo sameeyey, waa inuu ku ogeysiiyaa xafiiska soo saaaray buugga kaydsiga, xaashi gaar ah oo loogu tala-galay (Qaab KB-19).

3. Ogeysiiska dhigista amba xaashida lacag bixinta oo midab cas ku daabacan, waa in loo soo diraa Xarunta dhexe ee kaydka boostada sida caadiga ah.

Qodobka 12aad

*Xiridda xisaabta*

| Capitale sociale | Sh. So. | 1.000.000,00 |
| *FONDO AMMORTAMENTO* | | |
| IMMOBILIZZAZIONI TECNICHE | | |
| Impiegati generici (mobili) | Sh. So. | 73.317,74 |
| Attrezzatura varia | » | 118.580,11 |
| Mezzi mobili per trasporto, traino e sollevament | » | 79.596,10 |
| Arredamenti macchine e dotazione per ufficio | » | 41.266,22 |
| | Shs. So. | 312.760,17 |
| FONDO INDENNITA' ANZIANITA' | | |
| Personale | Sh. So. | 7.287,49 |
| DEBITI DIVERSI | | |
| Fornitori | Sh. So. | 46.935,23 |
| Società Collegate | » | 33.142.283,90 |
| Altri debiti | » | 2.500,00 |
| | Sh. So. | 34.511.766,79 |
| CONTI D'ORDINE | | |
| Amministratori per cauzioni | Sh. So. | 16.000,00 |
| Totale | Sh. So. | 34.527.766,79 |
| *CONTO ECONOMICO* | | |
| *COSTI ED ONERI* | | |
| RIMANENZE INIZIALI | | |
| Immobilizzazioni tecniche in corso | Sh. So. | 30.162.588,43 |
| Lavoro | » | 199.069,24 |
| Acquisti | » | 216.028,84 |
| Prestazioni e costi diversi | » | 323.974,36 |
| AMMORTAMENTI | | |
| Immobilizzazzioni tecniche | Sh. So. | 34.097,73 |
| Costi ed oneri vari da ammortizzare | » | 3.459,08 |
| Oneri finanziari | » | 2.894.675,87 |
| Totale | Sh. So. | 33.833.893,55 |

*RICAVI E PROVENTI*

| | | |
|---|---|---|
| CAPITALIZZAZIONI | | |
| Ad immobilizzazioni tecniche | Sh. Sc. | 171.764,06 |
| Proventi Finanziari | » | 23.274,13 |
| Proventi diversi e straordinari | » | 5.582,19 |
| RIMANENZE FINALI | | |
| Immobilizzazioni t ecniche in corso | Sh. So | 33.633.273,17 |
| Totale | Sh. S . | 33.833.893,55 |

Il presente Bilancio corrisponde a verità.

Misaaniyadda sannadka iyo waraaqad la socda, sida oo qoraayo qodobka 2435, waxaa la dhigay Xafiiska Kaaliyaha Maxkamadda Benaadir maalinta 19-5-1975 ee lagu dhigay lambarka 1147 buugga isxejiinta lambaradda iyo lambakra 7896 buugga shirkaddaha.

Muqdisho, 20-5-1975.

GUDOOMIYAHA
*Ing. Emilio Pacchiarotti*

*(77)*

*Rag. Renzo Guidi*
*Dott. Giampiero Papetti*
*Dott. Vittorio Quaglia*

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

---

WAXAAN AKHRIYEY DACWADDA

MARKAAN ARKAY waxay ku tahay Ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Jilib; ee aan ogaaday in ay ahay shaqada Xofiiskan;

MARKAN ARKAY qodobka 69 D.L. 9-9-65 n. 2;

WAXAAN CADDEYNAYAA DHUMIDDA JEEG wareegto ah L. 12.237 Taariikh 17-4-75 ku qoran lacag dhan 750 (todobaboqooliyokonton) Shs.

WAXAAN AMRAYAA in loo cusbooneysiiyo Cumar Cali Xaaji Saciid muddo 15 (shaniyotobaan) beri ah, oo laga bilaabo markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah (Bollettino), haddan la helin qof kale oo Jeegaas sheegta.

Waxaa kaloo la caddeynayaa in Jeega gacanta laga saaro ninka kor ku qoran qof kale oo sita wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismayo, 19 Majio 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. J. Hoose
*Dr. Xuseen Faarax Hilowle*

*(78)*

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Garsooraha Maxkamadda Gobolka;
Hadduu arkay dacwada hor ku qoran;
Markuu arkay waxa ay ku saabsan tahay iyo ogeysiiski Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed, wuxuu ogaaday in ay tahay awoodiisa;
Haddu arkay Qod. 69 D. L. 9-9-69 N. 2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda Buugga lacagta (ammortamento libretto) N.D.R. 1829-4 ee ah Shs. 1.554 (Kunshanbogolkontonafar).

WUXUU AMARAYAA

In loo sameeyo Buug cusub qofta la yiraahdo Khadiijo Bile Hande oo wakiil sharci u ah dhaxalki Maxamed Samatar Sahal, ka dib marki ay ka soo wareegto 30 maalmood ku shaacinta Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waxaa la codsanayaa in buuggaas faraha laga saaro Jaalle Khadiija Bile ama qof wakaalad sharci, ah ka sito ayadoo la tixgalinayo 30 maalmood ee kor ku tilmaaman.

Xamar T. 22-5-75.

Garsoore
*(79)* *Yaasiin Shire Faarax*

## SHIRKADDA KOJU

Waxaan idinka codsaneynaa inaad ku qortaan Faafinta Rasmiga ah Ogeysiiskan hoos ku qoran;

«Xubnaha Shirkadda Koju oo dhan waxaa la Ogeysiinayaa in Shirka Guud Caadiga ee Shirkadda la qaban doono 26 Junyo 1975, saacadana tahay 7 Habeennimo isla markaasna waxaa laga codsanayaa iney ka qayb galaan Shirkaas oo lagu qaban doono Xaruunta Shirkadda ee Kisimayo.

Ajendada Shirkaas waxay ka kooban tahay:

1. — Wadahadalo ku saabsan Miisaaniyada iyo oggolaanshadeeda;
2. — Arrimahii kale oo ku saabsan Shirkadda.

Shirku haddu maalintaas suroobi waayo waxaa la qaban doonaa maalinta Bishu tahay 28 Junyo 1975, isku meeshii iyo isku Saacaddii.

Kismayo, 24 Maajio 1975.

Guddoomiyaha Shirkadda Koju
*(79 Ku-celin)* *Maxamed Cabdirashid Cali*

IBB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

**Sannadka 3aad** Muqdisho, 1 Junyo 1975 **L. 6**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** **جريده شهرية**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 37, Tr. 4 Juunyo 1975 — *Awood Siin.* Bog. 449

---

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 25-5-1975, L. 75 — *Dhisidda Guddiga Sare Maamulka Wakaaladda Degedaha.* » 450

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 15 Majio 1975, L. 76 — *Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka.* » 452

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 10 Majio 1975, L. 77 — *Dhul Dowladeed la siiyay, Gacantana loo geliyey Axmed Maxamed Aadan.* » 454

---

Madbacada Dwladda — Muqdisho

XEER WASAARADDA GANACSIGA, Tr. 2 Junyo 1975, L. 78 — *Diwaan Gelin Iskashatada Ganacsiga Alaabta Farshaxanka «Wadajir».* Bog. 456

XEER WASAARADDA GANACSIGA, Tr. 2 Junyo 1975, L. 79 — *Diwaan Gelinta Iskashatada Ganacsiga Muuska ee lagu magacaabo Banaadir.* » 456

---

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Majio 1975, Naada Dhul — *Jaalle Sheekh Cosmaan Maxamed Xaji. (80)* Bog. 458

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Majio 1975, Naada Dhul — *Jaalle Cabdullahi Axmed Maalin. ((81)* » 458

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Majio 1975, Naada Dhul — *Jaalle Buraale Faarax. (82)* » 459

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Majio 1975, Naada Dhul — *Jaalle Axmed Buraale Faarax. (83)* » 459

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Majio 1975, Naada Dhul — *Jaalle Khadiija Gaas Faarax. (84)* » 460

MORODI - SOCIETA' PER AZIONI, Tr. 30 Majio 1975 — *Avviso di Convocazione di Assemblea Ordinaria. (85)* » 460

NATIONAL BOTTLING COMPANY - S.p.A. — *Ogeysiis iusu yeerid shir Caadi ah. (86)* » 461

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE - S.I.P.A., Tr. 30 Majio 1975 — *Avviso Convocazione di Assemblea Ordinaria. (87)* » 461

NATIONAL CARBON DIOXDE S.p.A. - Tr. 30 Majio 1975 — *Ogeysiis isu yeerid shir Caad ah. (88)* » 462

LIBAN S.r.l. - Sede in Chisimaio — *Avviso di Convoazione di Assemblea Ordinaria. (89)* » 463

SOCIETA' AGRICOLA BULO MERERTA - SABUM - Tr. 30 Majio 1975 — *Avviso Convocazione di Assemblea Ordinaria. (90)* » 463

SHINEMA «HODAN» S.p.A. Tr. 23 Majio 1975 — *Ogeysiis isu imaatin Caadi ah. (91)* » 464

FIAT SOMALIA S.p.A. Tr. 2 Junyo 1975 — *Isuyeeridda Shirka Guud ee Caadiga ah. (92)* » 465

# BOGGA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 37, Tr. 4 Junyo 1975.
Awood siin.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga lamb. yahay 6 ee baxay 25-1-1968 ee lagu dhisa Wakaaladda Guryaha Ummadda;

MARKUU ARKAY Xeerka Madaxweynaha G. S. K. lamb. 24 ee soo baxay 25-12-1972;

ASAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Wakaaladda gurayha Ummadda waxay awood u leedahay iney guri ama guryo ay leedahay ku wareejiso Wakaalad kale ee Madax Banaan ama shirkad ay Dawladdu abuurtay, gurigaas ama guryahaas oo ka mid noqon doona hantida Wakaaladda ama Shirkadda.

Qodobka 2aad

Haddii ay lagamamaarmaan noqoto, labo Wakaaladood oo madax banaan ama Shirkad ama Wakaalad ay Dawladdu sameysay way kala gadan karaan guri ama guryo iyadoo shuruudda lagu xiraayaa ay tahay iney Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddi farsamadeed ay xaqiijiyaan iney kalagadashadaasi u dhacday si habboon inta aan heshiiska kala gadashada la meel marin.

Qodobka 3aad

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama ka horimaanaaya sharcigan, waa la buriyay.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka uu Saxiixo Madaxweynaha G.S.K.

Muqdisho, 4 Junyo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

# BOGGA LABAAD

# XEER

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 25 Majio 1975, L. 75.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

HADDAN ARKAY Xaashida kowaad ee Tawradda iyo Xeerka 1da ee 21kii Oktoobar 1969;

HADDAN ARKAY Sharciga Wakaaladda Dekedaha Soomaal iyeed ee L.R. kiisu yahay 1 ee soo baxay eedii Janaayo 1973 qodobkiisa 6aad.

G U D D O O N

Qodobka 1aad

Sida uu dhigayo qodobka 6aad ee sharciga Wakaaladda Dhedaha Soomaalieed ee kor ku sheegan waxaa halkan ku dhisan Guddiga Sare ee maamulka Wakaaladda Dekedha Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Guddigaasi wuxuu ka kooban yahay:,

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Guddoomiyaha Wakaladda Dekedaha Soomaaliyeed | Guddoonshaha |
| 2. | Maareeyaha Guud Wakaladda Dekedaha Soomaal. | Xbin |
| 3. | Maareeyaha Guud Shirkadda Gaadiidka Badda (National Shipping Line) | Xubin |
| 4. | Maareeyaha Guud Wakaaladda Horumarinta Xoolaha (Livestock Development Agency) | Xubin |
| 5. | Maareeyaha Guud Wakaaladda Ganacsiga Ummadda (National Agency for Foreign Trade) | Xubin |
| 6. | Maareeyaha Guud Wakaaladda Muuska Ummadda (National Banana Agency) | Xubin |
| 7. | Maareeyaha Guud Bankiga Dhexe (Central Bank of Somalia) | Xubin |

Qodobka 3aad

Hawsha Guddiga waa sida ku tilmaaman sharciga Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed L. R. 1 ee 7-1-1973 iyo wixii kale ee la soo darsa ama soo raaca.

Muqdisho, 25-5-1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda Wasaaradda
Kalluunka iyo Gaadiidka Badda
*Jaalle Cismaan Jaamac Cali*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 81.*
*Muqdisho, 1-6-11975.*
*Hantidhawrka Guud*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**
**Tr. 15 Majio 1975, L. 76.**
**Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka.**

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii.

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 72kii lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-9-1972 kuna saabsan Maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan oo lambarkiisu yahay 12125 taariikh 13-12-1972kii oo hore loogu magacaabay qaybaha Wakiiladda Beesha ee Guddiyada Kacaanka Degmmooyinka Bosaaso, Qardho, Qandala, Caluula, Iskushuban iyo Bender Beyle ee Gobolka Bari;

ISAGOO OGAADAY Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Wakiiladda Beesha ee Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Bosaaso, Qardho, Qandala, Caluula iyo Iskushuban, iyadoo la waafajinayo Qodobka 10aad Lambarkiisa 3aad, Xarafka (c) ee Sharciga kor ku tilmaaman;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Bari;

## WUXUU GOOYEY

### Qodobka 1aad

Magacawga Guddiyada Kacaanka Degmooyinka Bosaaso, Qardho, Qandala Caluula iyo Iskushumban qaybahooda iyo Wakiillada Beesha.

Ka bilaabinta 20-10-1974. Dadka magacyadoodu hoose ku taxan yihiin waxaa loo magacaabay inay noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka ay ku hoos qoran yihiin:

### DEGMADA BOSAASO

1. Jaalle Maxamed Cismaan Maxamed;
2. » Xaaji Geelle Faarax Shirwac;
3. » Xuseen Gurxan Geed (Colow);
4. » Cali Cumar Dubbe;
5. » Warsame Muuse Yuusuf;
6. » Geedi Aaden Sugulle;
7. » Abshir Cadame Idriis;
8. » Cabdi Xaaji Mire Xasan;
9. » Cabdi Cumar Shire;

11. » Sheekh Maxamuud Cabdiraxmaan Yuusuf;
12. » Culimo Awaare Carraale;
13. » Iftiin Maxamed Xuseen Afcas;
14. » Maxamed Jaamac Maxamed (Weyrax);
15. » Axmed Jaamac Faarax;
16. » Saciid Cabdilleh Xasan;
17. » Maxamed Axmed Rooble (Curri).

DEGMADA QANDALA

1. Jaalle Cabdulqaadir Moxamuud Moxamed;
2. » Sheekh Gurxan Aadan;
3. » Xareedo Idriis Cali;
4. » Saciid Cabdullahi Yuusuf;
5. » Muumin Ibraahim Xasan;
6. » Khadara Moxamed Ciise;
7. » Shariff Ibraahim Cali;
8. » Abshir Saalax Yuusuf;
9. » Cumar Ismaaciil Cabdulle;

DEGMADA CALUULA

1. Jaalle Maxamed Saalax Dacar;
2. » Shire Jaamac Moxamed;
3. » Faarax Cilmi Faarax;
4. » Maxamed Maxamuud Yuusuf;
5. » Faaduma Yaasiin Jaamac;
6. » Xaliima Saciid Dheere;
7. » Guul Maxamed Shirwac;
8. » Yuusuf Cismaan Xaaji Yuusuf;
9. » Xaaji Yuusuf Ciise Cali.

DEGMADA ISKUSHUBAN

1. Jaalle Xaaji Muuse Cartan;
2. » Aaden Cali Faarax;
3. » Hujaale Axmed Yuusuf;
4. » Ciid Cawad Maxamed;
5. » Siyaad Xaaji Maxamed;
6. » Cabdulle Yuusuf Cumar;
7. » Xaaji Saalax Cumar;
8. » Xaaji Faaduma Cismaan;
9. » Xaalima Maxamed Yuusuf.

DEGMADA QARDHO

1. Jaalle Xasan Saciid Xasan;
2. » Moxamuud Moxamed Cali;

3. » Maxamed Faarah Barre;
4. » Bulxan Axmed Yuusuf;
5. » Axmed Moxamed Saalim;
6. » Ciise Xaaji Cumar;
7. » Marwo Firin Yuusuf;
8. » Buuxa Maxamed Faarax;
9. » Saciid Maxamed Yuusuf.

Muqdisho, 15-5-1975.

Qodobka 2aad

*Dhaqan Gal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabinta 20-10-1974ka, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 15-5-1975.

Xoghayaha Dawladda
ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*
*Diiwaanka Lamb. 1, Bogga Lamb. 80.*
*Muqdisho, 22 Maajio 1975kii.*
*Hantidhawrka Guud*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**Tr. 2 Juun 1975, L. 77.**

**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) Axmed Maxamed Aaden, kuna yaal magaaladda Baydabo.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 50 soona baxay 26 Gennayo 1964;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Axmed Maxamed Aaden, taarikhdeeduna ahayd 21-4-1973, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Baydhabo;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Guddoomiyaha Baydhabo, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda L. 15 soona baxday 1-6-1973, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda ku saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Wasaaradda Hawlaha Guud, Waaxda Farsamada dhulka taarikhdeeduna ahayd 31-10-1973 kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 114218 ee 31-10-1973 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Axmed Maxamed Aaden uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 493,45. Kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 488,45, loona tiriyay Axmed Maxamed Aaden sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna aheyd 11-11-1973;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Bay, taarikhdeeduna ahayd 22-4-1975 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay waafaqsan tahay guriga;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilità) degganaashada guriga ku dhisan Baydhabo, laguna siiyay xaashid lamb. 108x14,75 ee 22-4-1975 kana soo baxaday Xafiska Caafimaadka Guud Gobolka Baydhabo, taas oo caddeyneysa in guriga wanaagsan yahay;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyax wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsan siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Axmed Maxamed Aaden, dhul ku fadhiya mq. 488,45, kuna yaal magaaladda Baydhabo.

Muqdisho, 10 Maajio 1975.

Xoghayaha Hawlaha Wasaaradda Guud
*W. S. Inj. Maxamed Xawaale Nadar*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 13.*
*Muqdisho, 15 Maajio 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur.

# BOKAA SEDDEXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Cosmaan Maxamed Xaji Buuwe, usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalinti 26-3-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl Wadaag, oo leh qiyaas 30x30, kuna fadhiya 900 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Waddo.
Koofur waxaa ka-xiga Dor. Saalax.
Galbeed waxaa ka xiga Waddada Kacaanka.
Bari waxaa ka xiga Baafo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maal mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(80)*

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullahi Axmed Maalim, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 29-1-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar 21x19, kuna fadhiya 399 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Jidka Ummadda.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Jid. 3 meytar ah.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maal mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho ,5 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

ISAGA OO ARKAY Naqshadda ku saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Wasaaradda Hawlaha Guud, Waaxda Farsamada dhulka taarikhdeeduna ahayd 31-10-1973 kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolloetada lamb. 114218 ee 31-10-1973 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Axmed Maxamed Aaden uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 493,45. Kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 488,45, loona tiriyay Axmed Maxamed Aaden sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna aheyd 11-11-1973;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Bay, taarikhdeeduna ahayd 22-4-1975 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay waafaqsan tahay guriga;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilità) degganaashada guriga ku dhisan Baydhabo, laguna siiyay xaashid lamb. 108x14,75 ee 22-4-1975 kana soo baxaday Xafiska Caafimaadka Guud Gobolka Baydhabo, taas oo caddeyneysa in guriga wanaagsan yahay;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyax wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsan siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Axmed Maxamed Aaden, dhul ku fadhiya mq. 488,45, kuna yaal magaaladda Baydhabo.

Muqdisho, 10 Maajio 1975.

Xoghayaha Hawlaha Wasaaradda Guud
*W. S. Inj. Maxamed Xawaale Nadar*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 13.*
*Muqdisho, 15 Maajio 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur.

# BOKAA SEDDEXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Cosmaan Maxamed Xaji Buuwe, usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalinti 26-3-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl Wadaag, oo leh qiyaas 30x30, kuna fadhiya 900 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Waddo.
Koofur waxaa ka-xiga Dor. Saalax.
Galbeed waxaa ka xiga Waddada Kacaanka.
Bari waxaa ka xiga Baafo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maal mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(80)*

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullahi Axmed Maalim, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 29-1-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar 21x19, kuna fadhiya 399 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Jidka Ummadda.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Jid. 3 meytar ah.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maal mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho ,5 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(81)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Buraale Faarax, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 1-1-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas rektangolaar 20x30, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 33.
Galbeed axaa ku xiga: Dhul lamb. Yahay 47.
Bari waxaa ku xiga: Dhul lamb. Yahay 46.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maal mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 27 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(82)* *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Buraale Faarax, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 23-2-75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas rektangolaar ah 20x30, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 34.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 45.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 47.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maal mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 27 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(83)* *Maxamed Cabdi Saciid*

2. — Presentazione Bilancio e conto Perdite & Profitti chiusi al 31 dicembre 1974 e deliberazioni relative;

3. — Nomina di un membro del Consiglio di Amministrazione;

4. — Nomina di un Sindaco effettivo e designazione del Presidente del Collegio Sindacale.

Avranno diritto di intervneire all'Assemblea gli Azionisti inscritti nel Libro Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea e che entro tale termine abbiano depositato le loro azioni presso la Sede Sociale o presso l'Ufficio di Recapito della Società in Italia.

Mogadiscio, li 30 Maggio 1975.

*(87)* IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

---

**NATIONAL CARBON DIOXIDE — S.p.A.**
**Saldhigga: Muqdishi — Ra'asmaal Shs. So. 240.000,00**

---

## OGEYSIIS ISU YEERID CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadda National Carbon Dioxida — S.p.A. waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono xarunta Sharikadda ku yaal Jidka Lenin, maalinta 23ka Juunyo 1975 saacada markii ey tahay 10ka subaxnimooo haddi maalintaas la isu imaan waayay, waxaa la isu imaan doonaa 30ka Juunyo 1975 isla saacada hore, sii looga hadlo go'aanaa loga gaaro arrimaha soo socda:

1. — Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Barayaasha;

2. — Hordhig Miisaaniyadda iyo Dhef-Deynta la xiray 31-12-1974;

3. — Magacaabid hal Baare rasmi ah oo beddela mid maqnaaday iyo ilmaamidda Guddoomiyaha Guddiga Barayaasha;

4. — Wax alaa waxii falankeqs uu baahdo.

Waxaa xaq uu leh in ay shirka ka soo qeyb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buuga Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

Muqdishio, 30 Maajio 1975.

*(88)* GUDDIGA MAAMULKA

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Buraale Faarax, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 1-1-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas rektangolaar 20x30, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 33.
Galbeed axaa ku xiga: Dhul lamb. Yahay 47.
Bari waxaa ku xiga: Dhul lamb. Yahay 46.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maal mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 27 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(82)* *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Buraale Faarax, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 23-2-75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas rektangolaar ah 20x30, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 34.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 45.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 47.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maal mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 27 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

2. — Presentazione Bilancio e conto Perdite & Profitti chiusi al 31 dicembre 1974 e deliberazioni relative;

3. — Nomina di un membro del Consiglio di Amministrazione;

4. — Nomina di un Sindaco effettivo e designazione del Presidente del Collegio Sindacale.

Avranno diritto di intervneire all'Assemblea gli Azionisti inscritti nel Libro Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea e che entro tale termine abbiano depositato le loro azioni presso la Sede Sociale o presso l'Ufficio di Recapito della Società in Italia.

Mogadiscio, li 30 Maggio 1975.

*(87)* IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

---

**NATIONAL CARBON DIOXIDE — S.p.A.**
**Saldhigga: Muqdishi — Ra'asumaal Shs. So. 240.000,00**

---

## OGEYSIIS ISU YEERID CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadda National Carbon Dioxida — S.p.A. waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono xarunta Sharikadda ku yaal Jidka Lenin, maalinta 23ka Juunyo 1975 saacada markii ey tahay 10ka subaxnimooo haddi maalintaas la isu imaan waayay, waxaa la isu imaan doonaa 30ka Juunyo 1975 isla saacada hore, sii looga hadlo go'aanaa loga gaaro arrimaha soo socda:

1. — Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Barayaasha;

2. — Hordhig Miisaaniyadda iyo Dhef-Deynta la xiray 31-12-1974;

3. — Magacaabid kal Baare rasmi ah oo beddela mid maqnaaday iyo ilmaamidda Guddoomiyaha Guddiga Barayaasha;

4. — Wax alaa waxii falankeqs uu baahdo.

Waxaa xaq uu leh in ay shirka ka soo qeyb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buuga Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

Muqdishio, 30 Maajio 1975.

*(88)* GUDDIGA MAAMULKA

**LIBAH — s. r. l. — Sede in Chisimaio**
**Capitale Sociale Shs. So. 210,000**

## AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

I Signori Soci della Società responsabilità limitata LIBAH, sono convocati in Assemblea Ordinaria presso la Sede Sociale per il giorno 30 Giugno 1975, alle ore 11, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 28 Luglio 1975, alla stessa ora e nello stesso luogo per discutere e deliberare sul seguente:

### ORDINE DEL GIORNO

1. — Relazione dell'Amministratore Unico e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. — Bilancio e Conto Perdite & Profitti dell'esercizio chiuso al 31 dicembre 1974 e deliberazioni relative;
3. — Nomina di un Sindaco e designazione del Presidente.

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea come sopra convocata i Soci inscritti al Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea.

Mogadiscio, li 30 Maggio 1975.

*(89)* L'AMMINISTRATORE UNICO

---

**SOCIETA' AGRICOLA BULO MERERTA — SABUM — S.p.A.**
**Sede in Scialambot — Capitale Sociale Shs. So. 12.000,00**

## AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

I Signori Azionisti della Società Agricola Bulo Mererta — SABUM — S.p.A., sono convocati in Assemblea Ordinaria presso gli uffici della Spett. S.I.P.A. in Scialambot per il giorno 27 Giugno 1975, alle ore 10, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocaziose, per il giorno 25 Luglio 1975 alla stessa ora e nello stesso luogo per discutere e deliberare sul seguente:

### ORDINE DEL GIORNO

1. — Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del

2. — Presentazione Bilancio e conto Perdite & Profitti chiuso al 31 dicembre 1974 e deliberazioni relative;

3. — Nomina del Consiglio di Amministrazione e del Collegio Sindacale.

Hanno diritto di intervenire all'Assemblea coce sopra convocata gli Azionisti inscritti al Libro Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea.

Mogadiscio, li 30 Maggio 1975.

*(90)* IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

---

**SHINEMA «HODAN» S.p.A.,**

---

OGEYSIIS ISU IMAATIN CAADI AH

Shinema «HODAN» S.p.A., Saldhiggedu yahay Muqdisho, Ra sulmaalkeedu yahay shilin Soomaali 300.000, waxay ogeeysiineysaa;

Dadka qeeybaha ku leh Shirkadda Shinema Hodan S.p.A. oo saldhiggeedu yahay Muqdisho in ay ka qayb galaan shir gudnimo oo caadi ah laguna qaban doono Saldhigga Shirkadda, maalinta 15aad ee bisha Juuniyo 1975, 10ka subaxnimo, waxaana laga hadlidoona waxyaalaha soo socda;

1. — Xogwarranka Guddiga Maamulka Guud iyo baarayaasha.

2. — Hordhigga Xaashida Miisaniadda iyo dheefta iyo khasaarada ee ku eg 31-12-1974, iyo wixii go'aan ah ee la xiriira.

3. — Magacaabidda Guddiga Maamulka Guud.

4. — Magacaabidda Guddiga Baarayaasha.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga-dadka ku qoran buugga Shirkadda, ilaa 5 beri ka hor maalinta la isu imanayo.

Muqdisho, 23-5-1975.

*(91)* GUDDIGA MAAMULKA GUUD

F. I. A. T. S O M A L I A - S. p. A.

## ISUYEERIDDA SHIRKA GUUD EE CAADIGA AH

Waxaa la ogeysiinayaa dadka shamiga ku leh Shirkedda FIAT SOMALIA S.p.A. in maaalinta 18ka juunyo ee sannadkan saacadu markay tahay 9ka oo ahaan doonta isuimaatinka 1aad iyo maalinta 19ka juunyo isla saacadaa ay ahaan doonta isuimaatinka 2aad. Shirkaaso lagu qaban doono Xaruunta Shirkadda Fiat ee Muqdisho si looga doodo lana fuliyo arrimaha hoos ku qoran:

1. — Warbixinta Guddiga Maamulka;

2. — Warbixinta Guddiga Baarista;

3. — Oggolaashada Miisaaniyadda iyo Xisaabta fa'aidada iyo khasaarada;

4. — Wax ka beddelka magacaawidda Lataliyaasha Maamulka oo magacaawna inta hawsha sannadka socotay (durante l'esercizio).

5. — Iyo wixii kale oo raaca.

Muqdisho, li 2 Juunyo 1975.

*(92)* GUDDIGA MAMULKA

Ibb Ma Galo

# FAAFIN RASMI AH
# الرسمية الجريدة

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Muqdisho, 10 Junyo 1975 **L. 1, R. 6**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** **جريدة شهرية**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku **waxaa** la **weydiistaa** Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 38, Tr. 4 Junyo 1975 — *Toosin ku saabsan Sharciga L. 52 ee Junyo 1972ka.* Bog. 478

SHARCI L. 39, Tr. 7 Junyo 1975 — *Meel-Marin Heshiis Amaaheed oo dhexmaray Soomaaliya iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika.* » 481

LAW N. 39 of 7 June 1975 — *Ratification of Agreement between the Somali Democratic Republic and African Development Bank.* » 482

SHARCI L. 40, Tr. 7 Junyo 1975 — *Meel-Marin Heshiis Dhexmaray Soomaaliyo iyo Ururka Horumarinta Addunka (I.D.A.) oo ku Saabsan Mashruuca Ballarinta Dekedda Muqdisho.* » 483

LAW N. 40 of 7 June 1975 — *Ratification of Agreement between the Government of Somalia and International Development Association (IDA).* » 484

SHARCI L. 41, Tr. 7 Junyo 1975 — *Meel-Marin Heshiis Dhexmaray Soomaaliya iyo Boqortooyada Sacuudi Carabya.* » 485

SHARCI L. 41, Tr. 7 Junyo 1975 — *Nuqul Carabya.* Bog. 486
*laha Dawladda.* » 487

---

# BOGGA LABAAD

XEER:

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 25 Majio 1975, L. 80 — *Magacaabidda Guddoomiyeyaasha Gobollada Galgaduud iyo Mudug Sh. Dhexe iyo Nugaal.* Bog. 491

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 28 Abbril 1975, L. 81 — *Magacaabid Guddiyada Kacaanka Gobolka Sh. Hoose.* » 492

XEER WASARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 24 Majiyo 1975, L. 82 — *Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee G. Bakool.* » 495

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 19 Oktoobar 1967, L. 83 — *Concessione di area di Terreno demaniale a favore dei Sigg.ri Abdullahi Mohamed e Farah Sugulle.* » 498

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Majiyo 1975, L. 84 — *Dhul Dowladeed la siiyay gacantana loo geliyay J. Sheekh Xasan Hamuud Cabdi.* » 499

---

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSII IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 4 Juunyo 1975, — *Buugga Lacagta L. 3226-4, Shs. So. 2.098 ay ledahay Xadiya Nuur Kaahiye. (93)* Bog. 500

NUCLEARE SOMALA S.p.A., Tr. 20 Majio 1975 — *Ururka Maamulka Shirkadda Nucleare Somala S.p.A. (94)* » 501

NUCLEARE SOMALA S.p.A., Tr. 20 Maajio 1975 — *Consiglio di Amministrazione della Nucleare Somala S.p.A. (94)* » 501

SOMALI AIRYINES S.p.A., Tr. 15 Junyo 1975 — *Avviso di Convocazione di Assemblea Ordinaria. (95)* » 502

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, Tr. 15 Junyo 1975 — *Jeegga warxga L. 25 qor kuna qorantohay lacag Shs. So. 11.000. Leeyohay Moxamuud Yusuf Cilmi Jaamac. (95 Ku celi)* » 503

SAXID » 504

# BOGGA KOWAAD

# SHARCI

SHARCI L. 38, Tr. 4 Junyo 1975.
Toosin ku saabsan Sharciga Lambar 52 ee Jun 1972ka.

## GUDDOONSHAHA

## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambar 52 ee soo baxay 8 Juun 1972kii;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in la toosiyo iyo wax lagu kordhiyo sharciga kor ku qoran ee ku saabsan nidaaminta Dawladda Hoose;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii ay u soo jeediyeen Xoghayeyaasha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Garsoorka iyo Diinta;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayeyaasha Dawladda;

## WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

*Kordhin qodobka cusub 19 A*

Waxaa sharciga lamb. 52 ee soo baxay 8-6-1972kii, lagu kordhinayaa qodobka cusub ee lambarkiisu noqon doono 19A. Wuxuuna ahaan doonaa sida hoos ku qoran:

### Qodobka 19 A

*Awoodda Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka*

1. Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka waxay awood u leeyihiin inay metalaan Dawladda oo dhan hay'adaha Dawladda ee kala geddisan oo jooga Gobollada iyo Degmooyinka waxay hoos ima-

2. Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka waxay massu'uul uga yihiin Wasaaradaha iyo Hay'adaha madax bannaan habeynta maamulka guud, fulinta iyo hirgelinta go'aannada Dawladda Dhexe.

3. Dallacaadda Shaqaalaha Dawladda waa inay ku xidhantaa warbixinta Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka.

Qodobka 2aad

Qodobka 30aad qaybta 1aad ee sharciga lambar, 52 ee 8-6-1972kii waxaa lagu kordhiyay xuruufta (III), iyo (IV) oo ah sida soo socota:

III. Wasaaradaha iyo Hay'adaha Madax bannaan, waxay Dawladdaha Hoose ee Gobollada iyo Degmooyinka ku wareejinayaan:

b) Mushaharooyinka Shaqaalaha Dawladda oo dhan;

t) Kharajka caadiga ah ee ku baxa Gobollada iyo Degmooyinka oo dhan oo aan ahayn midka ku saabsan mashruucyada gaarka ah, waxaa loo gudbinayaa Dawladda Hoose ee shaqada ku leh;

IV. Wasaarad ama Hay'ad waliba waa inay sannadka horaantiisa u gudbisaa Gobollada iyo Degmooyinka awood kharash (Warrant) lacagta looga baahan yahay (b) iyo (t) kor ku sheegan.

Qodobka 3aad

*Dhismaha Guddiyada*

Qodobka 21 (1) (f) ee sharciga lambar 52 ee soo baxay 8-6-1972 waa la tirtiray, waxaana lagu beddelay sida soo socota:

(f) Guddiga Hoose (Committee) ee dhexdhexaadinta hesshiisinta arrimaha Caddaaladda. Guddiga Hoose (Committee) waxay soo dhexgelayaan wixii khilaaf ah ee dhexmara xubnaha Dadweynaha, iyagoo ku dadaalaya sida u heshiisin lahaayeen dadka khilaafku dhexmaray. Guddiga Hoose (Commitee) waxay awood u leeyihiin inay talaabo asluubeed ka qaataan wixii u baahan.

Guddiga waxay kaloo fiiro gaara ah siinayaan siday caddaaladdu guud ahaan uga hirgelayso Gobolka ama Degmada ayagoo la socodsiinaya Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, hase yeeshee marna ma fara gelinkaraan Go'aannada ka soo baxa Maxkamaddaha, waxayna soo gaarsiinayaan Guddiga Sare (Council) wixii ay la tahay inay habboon tahay inay Guddiga Sare (Council) ogaadaan.

Qodobka 4aad

*Fadhiyada*

Qodobka 25aad xubinta 1 (koowaad) ee sharciga nidaaminta Dow-

1. Guddiyada Kacaanka ee Gobolladu waxay u fadhisanayaan shirkooda caadiga ah oo ay ka soo qayb galaan xubnaha jooga oo dhammi, tiradooduna ku filaato fadhiga bishiiba mar, iyo shir guud oo caadi ah oo ay ka soo qayb galaan madaxda Dawladda oo dhan iyo xubnaha ka leba seddexdii bilood mar.

Guddiga Kacaanka ee Degmadu waxay shirkooda caadiga ah fadhiisanayaan bishiiba mar.

V. Waxaa ka reeban mushaharooyinka shaqaalaha iyo kharashka kale ee Wasaaraddaha, Wakaaladaha ka dhisan Gobollada iyo Degmooinka oo aan maamulkooda Xamar laga xukumin.
oo aan maamulkooda Xamar laga xukumin.

Qodobka 5aad

*Tirtir*

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigaan waa la tirtiray.

Qodobka 6aad

*Dhaqan gelid*

Sharciga kan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, waxuuna dhaqan gelayaa maalinta uu ku soo baxo Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 4 Juunyo 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

**SHARCI L. 39, Tr. 7 Junyo 1975.**

**Meel-Marin heshiis amaaheed oo dhexmaray Soomaaliya iyo sanduuqa Horumarinta Afrika.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYA9

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmaryey Hehsiiska ka dhexeeya Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kaasoo ku saabsan qalabka dib-u-samaynta iyo daryeelidda jidadka Soomaaliya, lacagtiisuna dhantahay 3 malyuun oo dollar iyadoo dulsocodka la bixinayaa uu yahay seddex dalcool hal boqolkiiba (3/4 of 1 per cent) sannadkiiba.

Qodobka 2aad

Heshiiska kor ku tilmaamaan wuxuu yeelan doonaa astaan sharci, waxaanu ka mid noqon doonaa sharciyada lagaga dhaqmo Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4 Juunyo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

**LAW No. 39 of 7 June, 1975.**
**Ratification of Agreement between the Somali Democratic Republic and African Development Bank.**

THE PRESIDENT
OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The 1st and 2nd Cartters of the 21 Octobar 1969 Revolution.

HAVING SEEN The Decision of the Supreme Revolutionary Council.

HEREBY PROMULGATES

The following Law:

Art. 1

The Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development Bank equipment and facilities for the repair and maintenance of the road Network in Somalia is hereby Ratified. The money required for this project is 3 three million Dollars with an interest rate at 3/4 of 1% a year.

Art. 2

The above mentioned Agreement shall have the force of law in the territory of the Republic and shall form Part of the Laws of this Republic.

Art. 3

This Law shall come into force immediately. It is signed by the President of the Supreme Revolutionary Council.

Mogadishu, 7 June 1975.

THE PRESIDENT
of the Supreme Revolutionary Council

SHARCI L. 40, Tr. 7 Juunyo 1975.

**Meelmarin Heshiis Dhexmaray Soomaaliya iyo Ururka Horumarinta Addunka (I.D.A.) oo ku Saabsan Mashruuca Ballaarinta Dekedda Muqdisho.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska ka dhexeeya Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Ururka Horumarinta Addunka (I.D.A.) oo ku saabsan Mashruuca Ballaarinta Dekedda Muqdisho.

Qodobka 2aad

Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu yeelan doonaa astaan sharci, waxaanu ka mid noqon doonaa sharciyada lagaga dhaqmo Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 7 Juunyo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

**LAW No. 40 of 7 June 1975.**

**Ratification of Agreement between the Government of Somalia and International Development Association (IDA).**

THE PRESIDENT

OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The 1st and 2nd Charter of the 21 Octobar 1969 Revolution.

HAVING SEEN The decision of the Supreme Revolutionary Council.

HEREBY PROMULGATES

The following Law:

Art. 1

The Agreement Concerning the extention of the Port of Mogadishu between the Government of the Democratic Republic of Somalia and the International Development Association is retified.

Art. 2

The above mentioned Agreement will have the full force of the Law and will form Part of the Laws of the Somali Democratic Republic.

Art. 3

This Law will come into force immediately, it is signed by the President of the Supreme Revolutionary Council.

Mogadishu, 7 June 1975.

PRESIDENT
of the Supreme Revolutionary Council
*Major Gen. Maxamed Siyad Barre*

**SHARCI L. 41, Tr. 7 Juunyo 1975.**

**Meelmarin Heshiis Dhexemaray Soomaaliya iyo Boqortioyada Sacuudi Caraabya.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Go'ankii Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyey Heshiiska ka dhexeeya Jamhuuriyadda Dimooqradiga Soomaaliya iyo Boqortooyada Sacuudi Caraabya, kaasoo ay Boqortooyada Sacuudi Caarabiya ku siinayso Soomaaliya amaah dhan 28 malyuun oo doolar oo sharuudaha ku xidhani ay yihiin kuwa hoos ku qoran:

a) In aanay jirin wax dulsocod ah;

b) In muddada amaahda lagu bixinayaa ay ahay 10 sano;

t) In bixinta amaahdu ay bilaabanto 4 sano (4years grace period) kabid marka heshiisku dhaqan galo.

Qodobka 2aad

Hehsiiska kor ku tilmaaman wuxuu yeelan doonaa astaan sharci, ,ka mid noqon doonaa sharciyada lagaga dhaqmo Dalka Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa isla marka uu saxiixo Madaxwey naha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 7 Juunyo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

## تصديق على الاتفاقية المبرمة بين

## جمهورية الصـــومال الديمقراطية والمملكة العربية السعـــودية

رئيس المجـــلس الاعلى للثـــورة

بعد الاطلاع على الميثـــاق الاول والثـانى للثورة ٢١ اكتـــوبر ١٩٦٩م على القـانون رقم ١

بعد الاطلاع على الاتفـاقية المبرمـــة فى ريـاض بتاريخ ٢٠/٥/١٩٧٥م بين الجمهورية الصـــومالية الديمقراطية وحكومة المملكة العـــربية السـعوديـــة .خ

ونظـــــرا لقرار المجلس الاعلى للثورة ومجلس سكرتيرى الدولة .

### يصـــــــدر .

القـانون التـالى :

لقد تم التصديق على اتفاقية بمقتضاها تقدم حكومـــة المملكة العـــربية السـعودية الى الصومال قرضا مقداره ٢٨ مليون دولار ، وتلك الاتفاقية قد أبرمت فى ريـــاض بتاريخ ٣٩٥/٥/٩هـ الموافق ٢٠/٥/١٩٧٥م بحيث يكـــون تسديد القرض على الشروط التـالية :

١ — على أن يتسدد القرض فى حدود عشر سنوات .

٢ — على أن تبدأ تسديد القرض بعد أربعة سنوات بعد ان تصبـــح الاتفـاقية سـارية المفعول بين البلدين .

٣ — على الا يفرض أى قيود او فـائدة علـــى تسديد القرض .

تكون الاتفـاقية لها صفة شرعية فى جمهورية الصومـال الديمقراطيـــة

### مـــــــادة : ٢

يسرى مفعول سريـان هذا القـانون ابتداء من تـاريخ امضـاءه عليـــه الرئيس الاعلى لمجلس الثورة وينشر فى الجريدة الرسمية للدولة .

مقديشو فى ٧ — ٦ — ١٩٧٥م

SHARCI L. 42, Tr. 7 Juunyo 1975.
Habka Maamulka Xoolaha Dawladda.

## MADAXWEYNAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda.

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

Haddii si kale aanl oo micneyn, erayada hoos ku qoren waxaa ula-jeeddadooda noqoneysaa sida soo socda:

DAWLADDA AMA HAYADDA Waxaa loola jeeda Dawladda Dhexe, Dawladda Hoose Wakaalad, ama Mashruuc ay qeyb ku leeyihiin hayadaha tilmaaman.

HANTIDA DAWLADDA Waxaa loola jeedaa, wax alla wixii lacag ah ama waraaqo lacag u dhigmi kara iyo wixii hanta ah oo ku micneysan qodobadda 4, 5, 6, iyo 7 ee xeerka lam. 318 taarikh. 18-12-62 ee ku saabsan xannaanadda Xoolasha Dawladda.

WARAAQO LACAGEED Waxaa loola jeedaa waraaqaha ee rasmiga ah ee lacag u dhigma «jeegaga» (assegni bancari) ama lagu amro lacag bixin (ordine di pagamento) iyo wixii la mid ah.

XAAS Labada qof ee isqaba ama caruurta ka harta (ptrees families).

QOF HUFAN Waxaa loola jeeda qof nadiif ah ee aan u muuqan qof sameyn kara waxyqlaha lid ku ah bulshada Soomaaliyeed.

### Qodobka 2aad

Waraaqaha lacagta ama hantida Dawladda oo la bixinaayo ama laga saarayo qasnadda Dawladda waa ineey wadasaxiixaan ugu yaraan laba qof.

### Qodobka 3aad

1. Lacagta Dawladda loo qabto waa in maalin kasta lagu wareejiyo khasnadda Dawladda (treasury) ama Bankiga.

2. Meesha aan khasnad Dawladeed laheyn ama Banki, iyadoo la tixgelinaya tirada lacagta, waa in laga qabto gaar adag inta laga gaarsii-

Qodobka 4aad

1. Wax alla wixii alaaba ah oo Dawladda ama xubnaheeda loo soo qaadayo waa in Guddi loo xil saaraa.

2. Looma oggola in qof keligii soo qaado alaabta Dawladda ama xubnaheeda ay u baahan yihiin.

3. Marka aloobta la soo qaado ee maqaasiinka la keeno waa diiwaanka la geliyo, iyadoo lagu qoraayo taarikhda la keenay alaabtaas, tiradeeda ama cabirkeeda, qiimaheeda iyo waxii kale ee tilmaana oo looga baahanyahay.

4. Waxii ka xumaada alaabtaas waa in la sameeyaa guddi Diiwaanka ka saaraa sanadkiiba mar (annual of survey).

Qodobka 5aad

1. Qofka laga dhigaayo lacag maamule ama lacag qabte (cashiers and collector) waa inuu ahaado mid la hubsabay hawlkarnimadiisa iyo hufnaantiisa oo xaasna leh.

2. Qofka laga dhigaayo xisaabile (accountants) ama maqsiin haaye (store keeper) waa inuu shaado mid la hubsaday hawl karnimadiisa iyo hufnaantiisa.

3. Marka lagu arko lagu tuhmo maamul xumo, daaca darro, aamin darro oo aanay taasi keenin dambi caadi ah, waa in laga wareejiyaa xilkaas go'aan edbi ahna lagu qaadaa.

Qodobka 6aad

Xilka xulashada lacag maamule, xisaahiye, maqaasiin haaaye ama lacag qabta wuxuu saaranyahay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda ama Wakaaladda qofka la magacaabayo tirsanyahay isagoo tixgelinaya qodobada sharcigan u dhigaayo.

Qodobka 7aad

Xoghayha Wasaaradda, Agaasimaha Guud ee Wakaaladda, Guddoonshaha Gobolka, Guddoonshaha Degmada, Maamulaha Laamaha Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka iwm. ee ku lug leh maamul lacageed, waa inaay sameeyaan jaangooyo kormeerid, illaalin iyo qorsheyn ulajeeddadeedu tahay in la daryeelo nabadgelyada Xoolaha Dawladda.

Qodobka 8aad

Oof kasta oo loo xilsaaray maamul lacageed ama hanti dawladeed

2 ee 29-12-1961 iyo lam. 317 ee 17-12-1962 iyo xeerka xannaanada alaabta lamb. 318 ee 18-12-1962 haddii aanay ka soo horjeedin qodobadda sharcigan.

Qodobka 9aad

1. Qofka ka soo bixi waaya xilka sharcigani saaraayo, haddii aan dembi kala uga imaan, wuxuu muqteysanaysa ciqaabaha soo socda midood:

b) Shan (5) ilaa shan iyo toban (15) maalmood oo mushaharkiisa laga jaro, haddii xilgudashadiisa wax ka kala dhimanaadaan.

t) Lix iyo toban (16) maalmood ilaa hal bil mashaarkeed oo laga jaro, haddii aanuu xilkii saarnaa waxba ka gudan.

j) Hal bil wax ka badan ilaa lix bilood oo shaqada laga joojiyo, haddii ay xilkasrarridiisa ka dhibaata soo garta socodsiinta maamulka, ama dayacaadda iyo vannaana-xumada hantidii xilku ka saaray, ayadoon wasaaro kale gaarin.

x) Ciqaabta ku dhigan xarafka (j) ay la socoto darajadiisa hoos loo dhigo ama shaqada oo laga eryo xaq la'aan, haddii xilkasdarriddiisu gaarsiiso qasaaro weyn hantida Dawladda.

2. Qofkasta oo gaarsiiya qasaaro lacag ama hanti kale oo dawladda, haddii aanu caddeyn inaanu sabab ku laheyn (forza maggiore), (caso fortuito, responsabilità altrui), waxa waajib ku ah inuu dawuladda u magdhabo dhammaan qasaaraha uu gaarsiiyay.

Qodobka 10aad

1. Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda waa inuu soo saaraa xeer ama amarro idaariya oo ku saabsan nidaam xisaabeed oo isku mid ah sammeenaayana hayadaha Dawladda oo dhan isagoo tixgelinaaya hay' adaha isku hal noqon kara unfied accounting and book keepin system).

2. Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda wuxuu soo saari karaa xeer faahfaahinaya sharcigan waxii ku saabsan maamulga hantida Dawladda iyo xubnaheeda.

Qodobka 11aad

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 1208 Reb. taarikh. 21 Nofembre 1968 lagu diiwaan geliyay Xamar 12-1-1969 L. 37, qoraal Dowladeed Buugga 19 oo ah caddeynta Notaayada Cabdalla Xaaji Faarax taas oo Xaaji Cabdio Ibrau ka gaday kuna wareejiyay Xalima Maxi Yero wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 3.460, kuna yaal Muqdisho — Km. V;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 14996 Reb. taarikh. 3-12-1974 lagu diiwaan geliyay Xamar 3-12-1974 L. 349 Qoraal Dowladeed Buugga 20 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Xasan Warsame Cali taas oo Xalima Maaxi Yarou ka gadatay kuna wareejisay Saciid Xaaji Maxamed Bilcil iyo Ismaaciil Xaaji Maxamed Muusa wax allaale wixii xuquq ah oo ku saabsan dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 3.460 kuna yaal Muqdisho — Km. V;

XEER

Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Saciid Xaaji Maxamed Bilcil iyo Ismaaciil Xaaji Maxamed Muusa oo ku yaal Muqdisho — Km. V, kuna fadhiya mq. 3.460.

Muqdisho, 27 Majio 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 15.*
*Muqdisho, 9 Junyo 1975.*
G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

---

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xaaji Saciid, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 13-3-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas rektangolaar ah 40x30 kuna fadhiya 1200 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxa ka: Lootka lamb. yahay 43k. 44k.
Koofur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed maxaa ka xiga: Waddo.

Bari maxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 33k.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Bibi iyo Binti Xaaji Abuubakar Xaaji Cumar, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 19-4-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis, oo leh qiyaas labo rektangolaar 17x6+11x3=135, kuna fadhiya 135 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul jaalleyaashaas horoy loo siiyay oo ayagu leeyihi.

Koofur waxaa ka xiga: dhul jaalleyaashaas horay loo siiyay oo ayagu leeyihi.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul jaalleyaashaas horay loo siiyay oo ayagu leeyihi.

Bari waxaa ka xiga: jaalleyaashaas horay loo siiyay oo ayagu leeyihi.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(97)* *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Maxamed Guuleed Cabdi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 22-5-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waaberi, oo leh qiyaas rektangolaar 11,50x16, kuna fadhiya 184 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul dad leeyahay.

Koofur waxaa ka xiga: dhul dad leeyahay.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul dad leeyahay.

Bari waxaa waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(98)* *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Yusuf Maxamuud, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 21-4-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar 20x23, kuna 460 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxa ka xiga: Lootka lamb. yahay 2.
Koofur waxaa ka xiga: Lootka lamb. 4.
Galbeed waxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 7.
Bari waxaa ka xiga: Waddada Balcad.
kooLootkala

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(99)* *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Xaaji Maxamed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 15-7-1972, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar 15x13, kuna fadhiya 195 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Baabu-Raqiis.
Koofur waxaa ka xiga: Barxad (Piazza).
Galbeed waxaa ka xiga: Jidka Hawl-Wadaag.
Bari waxaa ka xiga: Xasan Cumar.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(100)* *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xuseen Ibraahim, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 3-6-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar ah 27x13,50, kuna fadhiya 354,50 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koofur waxaa ka xiga: Waddo.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Dhul dawladeed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(101)* *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Anagoo tixraaceyna warqadda lambarkeedu yahay WHG-3-23-239 ee taariikhdeedu ahayd 28-4-1974, laguna soo diray naado dhul ku yaal degmada Afgooye soona weydiistay jaalle Axmed Rooble Gabeyre.

Waxaan caddeyneynaa in dhulaasi u qaybsan yahay laba cad oo qaabkoodu yahay rektangolaar addimohooduna yihiin 28,20x13,60 = 383,52 iyo 5,50x10,70 = 58,85 mdh. kuna fadhiya dhamaan 442,37 = mdh ee ma aha sida khalad ahaanta loogu soo qoray naadadaas lagu soo diray warqadda aan tix raaceyno.

Muqdiscio, 4 Junyo 1975.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(102)* *Maxamed Cabdi Saciid*

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الرسـمية الجـريدة

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

**Sannadka 3aad** Mudiqsho, 2 Luuliyo 1975 **L. 7**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** **جريـده شـهرية**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 43 42 Juunyo 1975 — *Gunno oo ku saabsan L-taliyayaalka Guddiyada M.G.S.K.* *Bog* *532*

SHARICI L. 44 17 Luuliyo 1975 — *Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada ee Xamar* » *533*

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA 15 Junyo 1975, L. 95 — *Magacaabidda Guddiga Kacaanka ee Bender Beyla* » *536*

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD 16 Junyo 1975, L. 96 — *Dhul Dawladeed la siiyay Gacantanal oo geliyey Jaalle Kastaldo Raffaelo* » *537*

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31 Junyo 1975, L. 97 — *Dhul gadatay Mariam Xaaji Saalim Saalax iyo Carrurteeda* » *539*

Madbacada Dawladda — Muqdisho

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

ARREDAMENTI METALLICI SOMALA - AR.ME.S. - S.p.A

1 Luuliyo 1975, *Ogeysiis isu imaatin Guddinimo oo Caadi ah (103)* Bog 542

ARREADMENTI METALLLICI SOMALIA - AR.ME.S. - S.p.A
1 Luuliyo 1975, *AVVISO DI OCNVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA (103)* » 542

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGESYA 6 Junyo 1975, *Bugugga Lacagta L. 4469/7 So. Sh. 500/= u leeyahay Xasan Cali Xasan (104)* » 543

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE 29 Maajo 1975, *Bugga Kaydka Lacagta L. 3308, So Sh. 4.000/= (afartankun) Shs. u leeyahay Maxamed Nuur Yuusuf (105)* » 544

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE 6 Junyo 1975, *Buugga Kaydka Lacagta L. 1.316, Shs. 22.295, uu leeyahay Qaasim Maxamed Cabli (106)* » 544

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR 10 Luulyo 1975, *Buugga Lacagta L. 985/4 Shs. 8.898/= u leeyahay Isaamciil Maxamuud Nuux (107)* » 545

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR, 15 Luuliyo 1975 *Buugga Kaydka Lacagta L. 2150/4 Shs. 2.215/= u leeyahay Cabdillaahi Cilmi Sahal (107bis)* » 545

# BOGGA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 43 Tr. 2 Luuliyo 1975.
Gunno oi èu saabasan L-taliyayaalko Guddiyada M. G. S. K.

### GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 1 Taariikhdiisuna tahay 6.12.74 oo ku saabsan Nidaamka Maamulka Hawlaha Golaha Sare ee Kacaanka iyo Madaxtooyada, oo lagu dhisay Guddiyo oo xubno ka ah rag ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka iyo La-taliyayaal;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dawladda;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

Qodobka 1aad

Mar allaale oo ay dhacdo in qof La-taliye ah oo ka tirsan Guddiyada Madaxtooyada Golaha Sare ee Kcaanka oo la xiro, wuxuu xaq u yeelanayaa seddex dalool u dhig hal dalool (1/3) lacgata oo uu qaadan jiray.

Qodobka 2aad

Gunnada oo lagu tilmaamay qod. 1aad eesharcigan, waxay ku egtahay bixinteeda:-

1. Marka laga bilaabo taariikhda xukunka kama dambeyska ah oo ay Maxkamad ku dhawaaqdo iyadoo ku caddeyneyso inuu yahay dembi, ama,

2. taariikhda oo Golaha Sare ee Kacaanka go'aan ku gaaraan inay dhamaneyso bixinta lacagtaas.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo taariikhda 6.12.74.

Qod. 4aad

Sharcigani waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

GUDDOONSHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Borre*

---

**SHARCI L. 44 Tr. 17 Luuliyo 1975**
**Guddoomiyaha Maxkamada Badbaadado Dalka ee Xamar.**

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY: Shaciyada kala ah:-

Sharciga tirsigiisu yahay 3 10. 1. 1970;
Sharciga tirsigiisu yahay 7 ee 21.1.1970;
Sharciga tirsigiisu yahay 20 ee 16.1.1971;
Sharciga tirsigiisu yahay 46 ee 10.8.1971;
Sharciga tirsigiisu yahay 50 ee 10.6.1971;
iyo Sharciga tirsigiisu yahay 60 ee 20.9.1971;

MARKUU TIXGELIYEY: Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka:

WUXUU GUDDOONSHEY

Qodobka 1aad

Markii ay ku timaado Guddoonshaha Maxkamadda Badbaada Dalka ee Xamar sabab u diidda (impedimento) in uu madax ka noqdo qaadidda Dacwooyinka, waxaa dacwooynikaas Guddoonshe ka noqon kara lataliye uu isagu magacaabo.

Qodobka 2aad

Waxaa la tirtiray Sharci kasta oo aan la socon karin Sharcigan:

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa markii la saxiixo.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*(S Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

# BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

**2 Luuliyo 1975 L. 94**

**Magacaabid Guddoomiyayaal Degmo.**

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ASAGOO ARKAY Qodobka 1aad (Xarafka L) iyo kan 10aad Lambarka 3aad ee Sharciga 52 lana soo saaray 8eedii Juun 1972kii;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Guddomiyeyal Degmooyinka: Buur Hakabo, Baardheere, Doolow, Beled Weyne, Jeriban, Eyl, Qardho, Iskushauban, Caluula, Burco, Ceel - Dheer, Lughaye, Waajid, Baraawe, Berbera, Buhodle iyo Cabuud Waaq.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Saraakiisha hoos ku qoran, waxaa loo maqacaabay iney noqdan Guddomyieyaal Degmooyinka kor lagu sheegay, iyadoo Sarkaal walba hortiisa lagu dhinac qoray Degmada uu ka noqonaayo Guddoomiye iyo taariikhda la magacaabay:

1) Gaashaanle Xersi Faahiye — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Buur Hakaba, marka laga bilaabo 30.12.1974.

2) Jaalle Sheekh Yarow Cabdiyow — Guddomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Beled Weyne, marka laga bilaabo 30.12.74

3) L/Xiddigle Cali Faarax — Guddomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Dooloow, marka laga bilaabo 30.12.1974;

4) Xiddigle Cali Jumcaale — Guddomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada Waajid, marka laga bilaabo 27.7.1974ka.

5) Dhamme Maxamed Xaaj iShire — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Baraawe, marka laga bilaabo 23.10.74ka.

6) Gaashnaale Maxamed Cartan — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Beled Weyne, marka laga bilaabo 30.12.7

7) Jaalle Muuse Yuusuf Shirwac — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka eeDegmada Jeriiban, marka laga bilaabo 18.1.1975ka.

8) Jaalle Jaamac Gaas — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Eyl, marka laga bilaabo **30.12.1974ka.**

9) Gaashaanle Cabdullaahi Xaaji Axmed — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Ceel-Dheer, markalagabilaabo 5.10.74;

10) Xiddigle Xaashi Maxamed Guuleed — **Guddoomiyaha** Guddiga kacaanka ee degmada Qardho, marka laga bilaabo 6.10.74

11) L/Xiddigle Maxamed Xaaji Axmed Yuusuf — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Iskushuban, marka laga bilaabo 30.12.1974.

12) Dhamme Cabdullaahi Maxamed Maxamuud — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Caluula, marka laga bilaabo 30.12.1974;

13) Dhamme Yaasiin Xaaji Barre — Guddoomyiha Guddiga Kacaanka ee Degmada Burco, marka laga bilaabo 30.12.19774ka;

14) Xiddigle Jaamac Kahaayre — Guddoomiyaha Guddiga Kcaaanka ee Degmada Buuhoodle, marka laga bilaaba 22.7.1974:

15) Dhamme Cabdullaahi Madar — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Berbera, marka laga bilaabo 4.9.1974ka.

16) Xiddigle Ibraahim Xaaji Cusmaan — Guddoomyiha Guddiga Kacaanka ee Degmada Lughaye, marka laga bilaabo 22.7.1974.

17) Jaalle Maxamed Aadan Mayle — Guddoomyiha Guddiga Kacaanka ee Degmada Cabuud-Waaq, marka laga bilaabo 20.7.74

Qodobka 2aad

*Dhaqan Gal*

Xeerkaani, wuxuu dhaqan galayaa ka bilaabanta taariikhda magacaabidda Saraakiisha, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

Muqdisho, 14 Juun 1975.

XOGHAYAHA WASSARADDA ARRIMAHA GUDAHA

*(Jaalle S/Gaas Jaamac Moxamed Qaalib.)*

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

**2 Luuliyo 1975 L. 95**

**Magacaabiddo Guddiga Kacaonèa ee Degmada Bender Beyle.**

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 72ka lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21/1972ka kuna saabsan Maamul ka Dawladda Hoose;

ISGAOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan oo lambarkiisu yahay 12125taariikh 13/12/1972kii oo hore loogu magacaabay qaybaha Wakiiladda Beesha ee Guddiga Kacaanka Degmada Bender Beyle ee Gobolka Bari;

ISAGOO OGAADAY Inay lagama maarmaan tahay in la Magacaabo Wakiiladda Beesha ee Guddiga Kacaanka ee Degmada Bender Beyle, iyadoo la waafajinaayo qodobka 10aad Lambarkiisa 3aad, xarafka (c) ee Sharciga kor ku tilmaaman;

ISAGOO TEXGELINAYO Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Bari.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Magacowga Guddiga Kacaanka ee Degmada Bender Beyle qaybtiisa Wakiiladda Beesha.

Ka bilaabinta 20/10/1974ka, dadka magacyadoodu hoose ku taxan yihiin, waxaaloo magacaabay iney noqdaan xunbo Guddiga Kacaanka ee Degmada Bender Beyle oo ka tirsan Gobolka Bari:

1) Jaalle Sheekh Xasan Aw Cilimi Muuse;
2) » Ayaanle Axmed Canbar;
3) » Maryan Muuse Cali;
4) » Maxamed Dacar Guuleed;
5) » Xasan Cusmaan Nuur;
6) » Jaamac Nuur Ibraahim;
7) » Xaaji Cabdulqaadir Maxamed;
8) » Abshir Xaaji Nuux Cali;
9) » Cali Faarax Cadde.

Qodobka 2aad

*Dhaqan Gal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabinta 20.10.74 waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 15 Juun 1975.

XOGHAYAHA DAWALDDA
EE WASAARADDA ARRIMA GUDAHA
*(S/Gaas Jaamac Maxmaed Qaalib)*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**2 Luuilyo 1975 L. 96**

**Dhul Dowladeed la siiyey, gocantana loo geliyey (Libera Disponibilità) Jaalle KASTALDO RAFFAEE èu yaal Muqdisho — Km. 6 (Agagoarka Cisbitaalèa Digfer) kuna fadhiya mq. 1.820.**

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 115 soona baxay 13 Settembre 1956;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 99 soona baxay 13 Settembre 1956;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed 221 ee R e B taariikhda markay ahayd 9 Giugno 1964 laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S L. 3/11 ee 21 Novembre 1967, taas oo lagu siiyay Jaalle SHARIIF CUMAR HAASHIM cad dhul ah ujeeddadiisu tahya dhis ku fadhiya mq. 3.640 kunyaal Muqdisho — Km. 6 (Agagaarka Cisbitaalka Digfer) «Xafadda Hodan»;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 4141 taas oo beddeshay middii lambarkeedu ahaa 15.225 laguna aqoonsaday fadhigaa 27°aad ee Guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikhdu markay ahayd 14 Abriil 1975 kuna saabsaneed dhismo Guri — kuna fadhiya mq. 1.820.

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamaha ka tirsan Waxaad Dhismaha iyo Dhulka, taariikhdeeduna ahayd 9.6.1975 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggoladeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar Lamb. 4141 ee 6.10.1974 laguna xaqiijiyey sidd ay naqshaddu Guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggoaaanta (Nulla Osta dagganaashada Guriag ku dhisan Xamar Xaafadda Hodan laguna siiyay xaashida Lamb. 127 ee 28.5.1975 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) Lamb. 6366 Reb. taariikh. 1 Maarso 1965 lagu diiwaan geliyey Xamar 5.5.1965 1.328 Atti Pubblici Vol. 16 oo ah caddeynta Notaayadda Michael J. Mariano taas oo SHARIIF CUMAR HAASHIM ka gaday kuna wareejiyay XAAJI YUUSUF CIGAAL oo u ah wakiil Shirkadda Somalia Farmaceutica, (SOMAFARM) «SpA», wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha ku yaal cadka dhulka ah oo ku fdahiya mq. 1.820.

ISAGA OO ARKAY Qoral (Atto) Lamb. 12.477 Reb. taariikh. 25 Febbrayo 1971 lagu diiwaan geliyey Xamar 8 Maarso 1971 al n. 226 Atti I vol. 20 oo ah caddeynta Notaayada Dott. MAXAMED FAARAX

SIYAAD taas oo Cabdullaahi Sheekh Maxamed Saadi, oo u ah wakiil Shirkadda Somalia Farmaceutica, (SOMALFARM) «SpA» wuxuu ka gaday kuna wareejiyay Sebastiano Insirello iyo Mohsin Ibrahim Cali Okera, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha ku yaal cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.820.

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) Lamb. 13.133 Reb. taariikh. 12 Giugno 1972, lagu diiwaan geliyey Xamar 12.6.1972 al n. 403 Atti Pubblici Vol. 20 oo ah caddeynta Notaayada Dott. Maxamed Faarax Siyaad taas oo SEBASTINO INSERELLO iyo MOHSIN IBRAHIM CALI OKERA ka gadeen kuna wareejiyeen KASTALDO RAFFAELE wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha ku yaal cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.820.

ISAGA OO ARKAY In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhismahaas ku yaal cadka dhulkaas Dowladda (Libera Disposibilita') oo ay ujeeddadiisu ahayed dhis, wuxuu soo saaraya.

## X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey loona aqoonsaday (Libera Disponibilita') KASTALDO RAFFAELE dhul ku fadhiya mq. 1.820 kuna yaal Muqdisho — Km. 6 (Agagaarka Cisbitaalka Digfer). Muqdisho, 16 Giugno 1975.

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
*w.s. Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**2 Luulyio 1975 L. 97**

**Dhul gadotay Mariam Xaaji Saalim Saalx iyo carruurteedo mq. 300.**
**Dhul gateen Faduma Saalim Maxomed, Saalim Muhsin Bin Mansuur iyo carruurtooda mq. 310,50.**

**Dhul gatay Axmed Shire Addawe mq. 300.**
**Dhul gatay Maxomed Axmed Sef mq. 310,50**

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 41 siona baxay 1 Novembre 1973

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 115 soona baxay 13kii Settembre 1956kii;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxay 23kii Maajo 1961kii;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed lamb. 131 ee Reb taariikhda markay 11 Novembre 1974 laguna qoray Faafint aRasmiga ah ee J.D.S L. 12 ee 1.21.1974, taas oo lagu siiyey Jaalle AXMED CABUUD BAXASHWAAN cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mq. 1.416 kun ayaal Muqdisho — Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda 1.4145 taas oo beddeshay middii hore lambarkeedu ahaa 1703 laguna aqoonsaday fadhigii 22°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikh. markay ahayd 26.10.1974 kuna fadhiya mq 300.

ISAGA OO ARKAY Naqshadda 1.4142 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 1703 laguna aqoonsaday fadhgii 22°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikh. markay ahayd 26.10.1974, kuna saabsaneed dhismo guri, kuna fadhiya mq. 310,50.

ISAGA OO ARKAY Naqashadda 1.4144 taas oo beddeshay midii taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 1703 laguna aqoonsaday fadhigii 22°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikhda markay ahayd 26.10.1974 kuna saabsaneed dhismo guri, kuna fadhiya mq. 300.

ISAGA OO ARKAY Naqshada 1.4143 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 1703 laguna aqoonsaday fadhigii 22°aad ee guddiga dhismaha Dowaldda Hoose, taariikhda markay ahayd 26.10.1974 kuna saabsaneed dihsmo guri, kuna fadhiya mq. 310,50.

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii farsamaha ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud, Waaxda Dhismaha Dhulka, taariikhduna ahayed 22.3.75

kuwaas oo caddeynayaan in naqshaddaha dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lambarkeeduna yihiin 4145, 4142 4144 iyo 4143 taariikhdooduna 6.10.1974 laguna xaqiijiyay sida ay naqshaduhu guriyaha waafaqsanyihiin;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan yihiin Xamar Xaafadda Shibis laguna siiyey xaashadaha lambarkoodu 9757 ee 13 Set. 1962 iyo 311 ee 26 Gen. 1963 oo ay oggolaadxn Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) 1.354 Reb. taariikh. 3.7.1961 lagu diiwaan geliyey Xamar 6.7.1961 L. 325/I. Qoraal Dowladeed, Buuga 11 oo ah caddeynta Notaayada Dott. Maxamed Warsame Cali «Daneet», taas oo AXMED CABUUD BAAXASHWAAN ka gatay kuna wareejiyay Mariam Xaaji Saalim ilo Carruurteeda wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 300, kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) 1410 Reb. taariikh. 14.1.1962, lagu Diiwaan geliyey Xamar 17.1.1962 L. 31 qoraal Dowladeed, buugga 12 oo ah caddeynta Notaayada Dott. Maxamed Warsame Cali Danet, taas oo Axmed Abuud Baaxashwaan ka gaday kuna wareejiyey Mxamed Axmed Sef iyo Saalim Muxsin wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhul ah oo kufadhiya mq. 405, kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA O OARKAY Qoraal (Atto 1.7471 Reb. taariikh. 21.1.65, lagu diiwaan geliyey Xamar 1 Feb. 1965 L. 112, qoraal Dowladeed Buugga 16 oo ah caddeynta Notaayada Dott. Maxmed Warsam eCali Danet taas oo AXMED ABUUD BAXASHWAAN ka gadya kuna wareejiyey Saalim Moxsin Bin Mansuur iyo Maxamed Axmed Sef wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 216, kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) 1.7900 Reb. taariikh. 8.6.1965 lagu diiwaan geliyey Xamar 21.7.1965 L. 629 Qoraal Dowladeed, Buugga 17 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Maxamed Warsame Cali Daneet, taas oo caddeyneyso in Maxamed Axmed Seef uu leeyahay dhul ku fadhiya mq. 310,50; Saalim Muhsin Bin Munsuur uu leeyahay dhul ku fadhiya mq. 310,50, kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 2878 Reb. taariikh. 30 Ago. 1962, lagu diiwaan geliyey Xamar 1.9.1962 L. 545, qoraal Dowladeed Buugga 12 oo ah caddent aNotaayada Dr. Maxamed Warsame Cali Daneet, taas oo Saalim Muxsin Bin Mansuur ka gaday kuna wareejiyey Faduma Saalim Maxamed iyo Carruurteedii wax allaale wixii xuquuq ah oo saabsan cad dhul ah oo ku fadhiqa mq. 203, kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 14.535 Reb. taariikh. 14 Luuliyo 1960 lagu diiwaan geliyey Xamar 16.7.1960 L. 38 qoraal Dowladeed Buugga XI° oo ah caddeynta Notaayada Mario Ciotola taas oo Axmed Abuud Baxashwaan ka gaday kuna wareejiyey Cabdalla Islam Cabdalla Bin Asuum wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabasn cad dhul ah

oo ku fadhiya mq. 200 kuna yaal Degmada Shibis.

ISAGAOOARKAY Qoraal rayadka ah (Scrittura Privata laguna bixiyey xeer iyo xisiba, taariikhdeeduna aheyd 25.2.1961 laguna diiwaan geliyey Xamar 2 Apr. 1961 L. 1827 qoraal rayad, Buugga 33, taas oo Axmed Abuud Baxashwaan ka garday kuna wareejiyey Cabdalla Islam Cabdalla wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 100 kuna yaal Degmada Shibis;

ASAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 7527 Reb. taariikh. 9.3.66, lagu diiwaan geliyey Xamar 12 Maarso 1966 L. 161 qoraal Dowladeed, Buugga 17 oo ah caddeynta Notaayada Mayched Mariano taas oo Cabdalla Islam Cabdalla Bin Asuum ka gaday kuna wareejiyey Axmed Shire Addawe wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 300 kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Libera Disponibilita') oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis;

WUXUU SOO SAARAY

X E E R

1) Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, loona aqoonsaday Mariam Saalim Saalax iyo carruurteeda, dhul ku fadhiya mq. 300 kuna yaal Xamar Degmada Shibis;

2) Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, loona aqoonsaday Faduma Saalim Maxamed Saalim Muhsin Bin Mansuur iyo carruuteeda, dhul ku fadhiya mq. 310,50 kuna yaal Xamar Degmada Shibis;

3) Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, loona aqoonsaday Axmed Shire Addawe dhul ku fadhiya mq. 300, kuna yaal Xamar Degmada Shibis;

4) Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, loona aqoonsaday Maxamed Axmed Sef dhul ku fadhika mq. 310,50, kuna yaal Xamar Degmada Shibis.

Muqdisho, 31 Maajo 1975

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*w.s. Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

**Arredamenti Metallici Somalia — AR.ME.S. S.pA. 1.7.75**

### OGEYSIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikadda «Arredamenti Metallici Somali — AR.ME.S, oo Saldhigeedu yahay Muqisho, waxaa la weeydinaaya inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qaban doono magaalada Rovato dalka Italia Xafiiska Notaril eDott. Francesco Durante in iVa Rossi, n° 29 maalnta 22ka Luuliyo 1975 saacadu 11ka subaxnimo, haddii shirkaaso suura geli waayo maalinta 22ka Luuliyo waxaa mar labaad laysu imaan doonaa 29ka Luuliyo 1975 saacadu 11ka subaxnimo.

Waxyaabaha shirka lagaga wada hadli doonaa waxa weeye:

1) Xoog warrankii Maamulaha Guud iyo Baarayaasha Shirkada;
2) Hor dhig xaashida miisaaniyadda Ganacsiga iyo dheef iyo daynta ee ku eg 31.12.1974 ee wax alah wixii kale ee falanqays u baahan.
3) Magacaabid Maamule Idman.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga dadka kuqoran buugga Sharikada illa shan beri ka hor maalinta laysu imaanayo, ama se, kuwa dhigay qaybahoodii Bangi ku yaal Muqdisho, ama Xarunta Shirkadda 1.7.1975.

*(103)*

## AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLE ORDINARIA

Arredamenti Metallici Somali — AR.ME.S-- S.p.A

Sede in Mogadiscio

Gli Azionisti della Società per Azioni «Arredamenti Metallici Somali — AR.ME.S», con sede in Mogadiscio sono convocati Notarile Dott. Francesco Durante in Via Rossi, n° 29 per il giorno 22 Luglio 1975 alle ore 11 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 29 Luglio 1975 alla stessa ora e nello stesso luogo per deliberare sul seguente:

### ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione dell'Amministratore Unico e Rapporto del Collegio Sindacale;
2) Bilancio e Conto Perdita &Profitti dell'esercizio chiuso al 31 Dicembre 1974 e deliberazioni relative;
3) Nomina dell'Amministratore Unico.

Avranno diritto di participare all'Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almena cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea o che entro tale termine abbiano depositato le loro azioni presso la Sede Sociale, o presso un Istituto Bancario. 1.7..1975.

*(103)*

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

**Arjile Lamb. 3/75 Xasan Cali Xasan iyo Bankiga Ganacsiga Ummadda Hargeyso**

A M A R (Decreto) N. 17/75

Labada magac ee kor ku qoran waxay keeneen Maxkamadda sida hoos ku qoran:

1) Xasan Cali Xasan wuxuu Maxkamadda hor keenay Arji u ku dalbanayo in Buugga Kaydka kuna qoran magaciisa L. 4469/7 ka lumay, Bananka iyo Saldhigyada Booliskana ogeysiiyey, wuxuu codsaday in lagu qoro, Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

2) Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Hargeysa, isaguna Maxkamadda wuxuu keenay warqad taariikhdeedu ahayd 3.6.1975 Lamb. yahay 003746 taas oo u ku sheegayo in u lumay buugga Lamb. yahay 4469/7 kuna qoran lacga dhan 500/= buuggaas oo ku qornaa Xasan Cali Xasan lagana samayey bankiga Ganacsiga Ummadda.

Sidaas darteed markii aan eegnay wayaabaha kor ku qoran iyo markii aan arkay qod. 37,27 Xeerka Lamb. yahay 2 soona baxay 9.9.1965, waxaa la amrayaa:

1) In uu socon karin Buugga Kaydka Lamb. kor ku qoran yahay laga bilaabo maanta.

2) In lagu qoro amarkaas Faafinta Rasmiga ah,

3) In lacagtaas ah So Sh. 500/= Bankiga siiyo Arjiilaha magaciisu kor ku qoran yahay muddo ku siman 15 casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda. 6.6.1975

Guddoomiyaha M. Gobolka Hargeysa
*(Xasan Xaaji Yuusuf)*

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE

WAXAAN ARKAY DACWADDAN

MARKAN ARKAY waxay ku saabsan tahay Oogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Laanta Kismaayo;

OO AAN OGAADAY inay tahay shaqada Xafiiskan,
MARKAN ARKAY qodobka 69 D.L. 9.9.65 n.2;

Waxaan caddeynayaa dhumidda Buugga Kaydka L. 3308 Shs. 4.000/= (Afarkun) Shs.

WAXAAN AMRAYAA in loo cusbooneysiyo MAXAMED NUUR YUUSUF muddo 15 (shaniyotobaan) beri ah, oo laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah (Bollettino) haddan la helin qof kale oo Buugga shegta.

WAXAA KALOO la caddeynayaa in buugga gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita Wakaalad aan shaki ku jirin.

*(105)*

Kismaayo, 29 Maajo 1975.

GUDDOOMIYAHA
MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE
*Dr Xuseen Faarax Hilowle*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE

Waxaan arkhriyey dacwaddan;

MARKAN ARKAY waxay ku saabsan tahay Ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Laanta Kismaayo.

EE AAN OGAADAY inay tahay shaqada Xafiiska;
MARKAAN ARKAY Qod. 69 D.L. 9.65 N. 2;

Waxaan caddeynayaa dhummidda buugga Kaydka Nominativo L.1.316 ku qoran lacag dhan 22.295/= (Laba iyo labaatan kun lababoqol sagaashan iyo shan) Shs.

WAXAAN AMRAYAA in loo cusbooneeysiyo QAASIM MAXAMED CABDI muddo 15 (Shaniyotoban) beri ah, oo laga bilaabo markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah (Bollettino), haddan la helin qof kale oo Buuggaas sheegta, waxaa kaloo la caddeynayaa in buuggaas gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo sita Wakaald aan shaki ku jirin.

Kismaayo 6 Juunyo 1975 .

*(106)*

GUDDOOMIYAHA
MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE
Dr. Xuseen F...

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Hadduu arkay dacwada kor ku qoran;

MARKUU ARKAY waxay ku saabsan tahay iyo Ogeysiikii Bankiga Ganacsiga Ummada (Ex Roma) uuna ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

HADDUU ARKAY qod. 69 D.L. 9.9.65 n. 2;

WUXUU CADDEYNAYAA

Lumidda Buugga Kaydka (Ammortamento libretto) Lamb. 985/4 oo ay ku qornayd Shs. 8.898/= (Sideed kun sideed boqol iyo sagaashan iyo sideed) noociisuna haa al portatore;

WUXUU AMRAY

In loo sameeyo buug cusub ninka la yiraahdo Ismaaciil Maxamuud Nuux, oo iska lahaa buugga kor ku tilmaaman ee la caddeyey lumidiisa sida ku cad warqadda Bankiga lamb. 1032, ka dib 30 maalmood markii amarka lagushaaciyo Faafinta Rasmiga ee Dawladda, haddii intaas ciduna soo caban.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buugg la sameyndoono faraha laga saaro Jaalle Ismaaciil Maxamuud Nuux ama cid wakaalad shaci ah ka sidata asaga ayadoo la sugayo 30ka maalmood ee kor lagu soo sheegay. 10.7.1975.

*(107)*

GARSOORAHA MAXKAMADDA
Dr. Yaasiin Shire Faarax

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

Hadduu arkay dacwada horay ku qoran;

MARKUU ARAKAY waxay ku saabsan tahay, iyo ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Ummada (eeg warq. lamb. 1086); Laanta Seddexaad wuxuu ogaaday in ay shaqadiisa tahay;

HADDUU ARKAY qod. 69 D.L. 9.9.65;

WUXUU CADDEYNAYAA

Lumidda buugga keydka lamb. 2150/4 oo ay ku qornayd lacag dhan Shs. 2.215/= (labakun lababoqoltobanshan) iskana lahaa ninka la yiraadho Cabdullaahi Cilmi Sahal, sida ku cad warqadda Bankiga kor ku maalmood ee kor ku tilmaaman. 15.7.1975.

WUXUUNA AMRAYAA

In loo sameeyo Jaalle Cabdullaahi Cilmi Sahal buug keyd oo cusub, ka dib markii 30 maalmood ka soo wareekato markii amarkan lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ee Dawladda;

WAXAA LA CODSANAYAA

In buugga la sameyn doono gacanta laga saaro Cabdullaahi Cilmi Sahal ama qof Wakaalad sharci ah asaga ka sita ayadoo la sugaayo 30ka maalmood ee kor ku tilmaaman.

GARSOORAHA MAXKA. GOBOLKA
Dr. Yaasiin Shire Faarax

*(107bis)*

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الرسـمية الجـريدة

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

**Sannadka 3aad** 12 Luuliyo 1975 **L. 1 R. 7**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** **جريـده شـهرية**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

## SHARCI

## W. M.

## BOGGA LABAAD

## XEER

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 29 Dishembre 1974, L. 98 — *Qaadid dhul dan awgeed* *Bog* 548

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30 Maarso, 1975, L. 99, — *dhul Doladeed la siiyey gacantana loo geliyey Shariif Maxamed Saalax Bayti* » 549

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 27 Maajo 1975, L. 100, — *Qaadid dhul dan guud awgeed* » 550

XERR WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22 Juunyo 1975, L. 101, — *Guri lamb. L.H. 2/5 iyo L.H. 2/6 ee waqti hore ay laheeyd Sahra Saalax Axmed* » 551

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25 Juunyo 1975, L. 102, — *Dhul Dowladeed la siiyey gacntana loo geliyey Jaalle Makay Muudey Cabdi* » 553

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA, 28.2.1975 L. 103 — *Tariifada Dalalka ku jira Jaamacadda Carabta* Bog. 554

XEER WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA, 5.7.1975, L. 104, — *Tigidh ioog ah* » 556

---

## BOOGA SADDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 5.7.1975, *Naada Dhul Jaalle Luul Cumar Nuur (108* » 557

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 5.7.1975, *Naada Dhul Jaalle Maxamed Guuleed Axmed (109)* » 557

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 5.7.1975, *Naada Ddhul Jaalle Maryan Ciise Cabdi (110)* » 558

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA 30 Juun 1975, *Jeegga lamb. 091.955, So Sh. 10.000 = u leeyahay Cabdillahi Xasna Shirwac (111)* » 559

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA30 Juun 1975, *Jeegga lamb. 13.115, So Sh. 10.011/40 u leeyahay Maxamed Yuusuf Walalac (112)* » 559

*Saxid Qalad (Corregendum)*

# BOGGA LABAAD

## X E E R

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**27 Maajo 1975, L. 98**

**Qaadid dhul dan guud awgeed ee waqti hore la siiyey Jaalle MACALLIN CABDULLE HADAFOW oo ay la wareegtay WAKAALADDA GANACSIGA UMMADDA — ku yaal Muqdisho — Xaafadda Kaaraan.**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Koowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Settembre 1973;

ISAGA OO ARKAY Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.590 loona tiriyay MACALLIN CABDULLE HADAFOW sida ka muuqata xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegno) taariikhdeeduna ahayd 4 Agosto 1974;

ISAGA OO ARKAY Warqadda lamb. yahay 0582/H/B taariikhduna ahayd 19.8.1973 ee ay noo soo qortay Wakaaladda Ganacsiga Ummadda iyadoo ku weydiisaneysa in la siiyo dhul;

ISAGA OO ARKAY Warqadda qiimaynta derbiga ee uu 18.12.74 soo sameeyey Jeometer ka tirsan Waaxda Qorshaynta iyo Hindisaha, taas oo ayka muuqato qiimaha oo dhan Sh. So. 9.466.45/=;

X E E R

Waxaa la caddeynnyaa in loo qaaday dan guud awgeed darbi uu leeyahay Jaalle MACALLIM CABDULLE HADAFOW, iyadoo loo celinayo magdhaw gaaraya Sh. So. 9.466.45/= sida muujinayso warqadda qiimayntu. Isla markaas waxaa la caddeynayaa in qiimahaas uusan ku jirin kan dhulka. Lacagta maqdhowga waxaa bixinaaya Wakaaladda Ganacsiga Ummadda (E.N.C.).

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka Lamb. 1 bogga lamb 56
Muqdisho, 30 Dic. 1975.
Hantidhawraha Guud
G/Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

30 Maarso 1975, L. 99

Dhul Dowladeed lo siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) SHARIIF MAXAMED SAALAX BAYTI — kuna yaal Kismaayo.

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 50 soono baxya 26 Gennaio 64;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday SHARIIF MAXAMED SAALAX BAYTI, taariikhdeeduna ahaqd 20.4.1974 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Kismaayo;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaan loogu dhajiyay looxa Guddoomiyaha Kismayo, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda L. 9 soona baxay 1 Sett. 1974, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda ku saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Wasaaradda Hawlaha Guud — Waaxda Farsamada dhulk taariikhdeeduna ahayd 28.10.1974 kuna saabsaneed dhismo Guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 178248 ee 3.11.1974 kana soo baxday Xafiiska Canshruurta Dadban, taas oo caddeyneysa in SHARIIF MAXAMED SAALAX BAYTI uu bixiyay lacag dhan Sh. So.367,50/ kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq.245/ loona tiriyay SHARIIF MAXAMED SAALAX BAYTI sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (vebale di consegna) taariikhdeeduna aheyd 16 DIC. 1974;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqashada tilmaamayso isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guug Gobalka Kismaayo, taariikhdeeduna aheyd 20/1/75 taas oo caddaynaysa in naqashada dhismaha oo ay waafaqsan tahay guriga;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilita) degganaashada guriga ku dhisan Kismaayo, laguna siiyay Xaashida lamb. 338/XHC/74 ee 2/12/1974 kana soo baxday Xafiiska Caafimaadka Guud Gobalka Kismaayo, taas oo caddaynaysa in guriga wanaagsan yahay,

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismada iyo gacan u gelinta dhulka dowladda

(conessione e coneguente libera disponibilita) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loona aqoonsaday SHARIIF MAXAMED SAALAX BAYTI, dhul ku fadhiya mq.245/ kuna yaal magaaladda Kisimaayo.

MUQDISHO, 30 MAR. 1975.

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
*W.S. INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diinwaanka Lamb. 1 bogga lamb.6
Muqdisho, 12 APR. 1975.
Hantidhawraha Guud
*W.S. G Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur.*

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**27 Maajo 1975, L. 100**
**Qaadid dhul dan guud awgeed ee hore ay lahayd «ISKAASHATADA RUGTAYDA» lana siiyey MAXAMED IBRAAHIM CABDI — dhul lamb. 10 kuna yaal Muqdisho, Km. 5 Waddada Afgooye.**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ISAGA OO ARKAY Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee kacanka iyo Qaynuunkii koowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Sett. 1973;

ISAGA OO ARKAY Warqaddii lamb. yahay WHDS/3/1/74/255 taariikhdeeduna ahayd 26.9.1974, ee ay noo soo qortay Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed, iyadoo ku weydiisaneysa in loo qiimeyo darbiga wareegisu oo leeyahay Jaalaha kor kuqoran;

ISAGA OO ARKAY Warqaddii qiimaynta darbiga taariikhdeedu-na tahay 10.10.1974 soo sameeyeen Inj. ka tirsan Wakaaladda Hawlaha Guud, taas oo ay ka muuqato qiimaha oo dhan Sh. So. 21.930,50/= (Labatanyiokoowkun iyo naqaal boqolsoddon ee 50/000);
qiimaytii isla markaas waxa lo caddeynayaa in qiimahaas uusan ku jirin kan dhulka.

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday dan guud awgeed darbiga oo leeyahay JAALLE MAXAMED IBRAAHIM CABDI, iyadoo loo celinayo maqdhaow gaaraya Sh. So. 21.930,50/= sida muujinayso warqaadda qiimahaas uusan ku jirin kan dhulka.

Lacagtaas kor ku sheegan waxaa maqdhowayaa Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed oo ka mas'uul ah Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud.

Muq. 27/5/1975

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
*w.s.* Inj. *Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 17
Muqdisho, 9 Giugno 1975.
Hantidhawraha Guud
*G/Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur*

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**22 Giugno 1975, L. 101**
**Guri lamb. L.H. 2/5 iyo L.H. 2/6 oo waqti hore ay laheeyd SAHRA SAALAX AXMED oo la wareegtay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta — kuna yaa Magaaladda MARKA.**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ANNAGOO ARGNAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARGNAY Qoraal (Atto) L. 931 Prot. taariikh. 18 Feb. 1973, lagu diiwaan geliyey Marka 16.6.1973 al n. 602 Atti 13 vol. 2/1 oo ah caddeynta Guddomiyaha Degmada MARKA Dhamme Maxamed Jaamac Cali taas oo Fracesco Gallotti oo loo yaqaan (FRANCO) kaga gaday kuna wareejiyey SAHRA SAALAX AXMED wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan gurigaas, kuna yaal magaaladda MARKA;

ANNAGOO ARGNAY Wakaaladda Caamka ah L. 15199 — B.N. — 3609 — 11700 taariikh. tahay 23.12.1974, oo lagu qoray Xafiiska Notaayada Dr. XASAN WARSAME CALI oo Jaalle SAHRA SAALAX AXMED mulkiyada guriga kor ku tilmaman leeyahay uu wakiilatay Jaalle Cumar Cali Saalax inuuku dhaqaaqikaro wax allaale wixii gurigaas ka saabsan oo la jira gadid gurigeeda;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda lamb. yahay WHM/30/224/75 taarikhdeeduna aheyd 18/1/1975 ee ay soo qortay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta oo ay ku weydiisaneyso in loo qiimoyo guriga ay leedahay Jaallaha kor ku magacaaban;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda lamb. yahay WHM/40/200/75 taarikhdeeduna aheyd 10/5/1975 ee ay soo qortay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta oo ay ku weydiisaneyso in amar xeer loc sameeyo;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda qiimaynta Guriga taarikh. 15/2/1975, soo sameeyeen Injiyeer ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taas oo ay ka muuqato qiimaha oo dhan Sh.So.112.176,14/

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda qiimeynta Guriga taarikhdeeduna aheyd 6 Abrile 1975 soo sameeyeen Guddigii loc xilsaaray inay dhex dhaxaadiyaan beeca Guriga ay gadanayso Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta Laanta Marka, kana gadanayso Jaalle SAHRA SAALAX AHMED kana wakiil ah Jaalle Cumar Cali Saalim, taas oo ay ka muuqato qiima oo dhan Sh.So.85.000/ (Sideetaniyoshankun);

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday Dan Guud guriga ay laheeyd SAHRA SAALAX AXMED, iyadoo loo celinayo maydhow gaaraya Sh.So.85.000/ (Sideetaniyoshankun) Shillin, - sida ay muujinayso go,aanka ay gaareen Cuddiga qiimayntu.

Soohinta: Orax Bax waxaa ka jiro Guri uu leyahay Feerri, Orax Dhac waxaa ka jiro guri uu leyahay Gallotti, Koofur waxaa ka jiro Makiinada Nalka Daarta, Qhiblada waxaa ka jiro maqaasin ay leedahay Wasaaradda Hawlaha Guud.

Lacagta maqdhowga waxaa bixinayaa Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta Laanta MARKA.
Muqdisho, 22 Giugno 1975.

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
*W.S. INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR*

XOG.WAS. KALLUUNKA IYO GADIIDKA
BADDA
W.S. CISMAAN JAAMAC CALI
WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb.23
Muqdisho, 24 GIU. 1975.
Hantidhawraha Guud

*W.S. G Dhexe Cabdillaahi Warsamo Nuur.*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

25 Giugno 1975, L. 102

**Dhul Dowladeed la siiyey gocantana loo geliyey (Decreto di concessione e conseguente libera Disponibilità) JAALLE MAKAY MUDDEY CABDI — ku yaal Muqdisho — Degmada SHINGAANI — kuna fadhiya mq. 679,70.**

## WASARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Ooktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 115 soonabaxay 13.10.1956;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 99 soona baxay 13 Sett. 1956;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensatay MAKAY MUUDEY CABDI taariikhdu markay ahyed 7 Feb. 1958, kuna weydiisaaty dhismo cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Shingaani — ex via Talmone, kuna dhacaaya qaybta I°;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaan loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 7 ee 1.7.1959, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 13.700, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 248°aad taariikhduna ahayd 16 Dic. 59;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 8898 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 13.700 laguna aqoonsaday fadhigii 259°aad ee Guddiga Dhismaha Dowladda Hoose, taariikhdu markay ahayed 19 Sett. 1960, kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 10591 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 8898 laguna aqoonsaday fadhigii 354° aad ee Guddiga Dhismaha Dowladda Hoose, taariikhdu markay ahyad 20 Luglio 1965, kuna saabsaneed dhismo Guri kuna fadhiya mq. 679,70;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada L. 1853 ee 12.4.1960 iyo Bolleetada L. 3289 ee 20.6.1960, kana soo baxday Xaafiiska Canshuuraha Dadban, lambarkeeduna ahayd 1025812 taariikhdeeduna ahayd 21.6.1960 taas oo caddeynaysa in MAKAY MUDDEY CABDI bixisay lacag dhan Sh. So 8.156,40/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO ARKAY Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 679,70 loona tiriyay MAKAY MUDDEY CABDI sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 19 Gen. 1961;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijinta Farsamada ka tirsan Waaxda

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta abitabilita') daggana-Dhismaha iyo Dhulka,taariikhdeeduna aheyd 22.6.1975 taas oo caddeyneysa in Naqshadda Dhismaha oo y oggolaadeen Guddiga Dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lamb. 10591 ee 7.7.1965 laguna xaqiijiyay sida ay naqshadd Guriga waafaqsan tahay;

naashada Guriga ku dhisan Xamar Degmada Shingaani — Via Talmoone laguna siiyay xaashida lamb. 12738 ee 15 Nov. 1965 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib a-haa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhismahaas ku yaal dhulkaas, Dowladda (Concessione conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dihs, wuxuu soo saaraya.

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonday MAKAY MUDDEY CADBI dhul ku fadhiya mq. 679,70 kuna yaal Muqdisho — Degmada Shingaani — Via Talmooe.

Muq. 25/6/1975.

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWAHA GUUD
*w. s Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARKAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 24
Muqdisho, 5 Luuliyo 1975.
Hantidhawraha Guud
*D/Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur*

---

Xeer WASAARADDA BOOSTADA iyo ISGAARSIINTA
**28 Febraayo 1975 L.103**
**Taraafada Dalalka ku jira Jaamacadda Carabta.**

## WASAARADDA BOOSTADA iyo ISGAARSIINTA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISGOO ARKAY Qodobka 21aad ee Sharciga Boostada L,R. 662-soo baxay 22/9/1971;

ISAGOO ARKAY Degreetada Wasaradda L.R. 287 ee 12/12/71-oo Tariifada Boostadu ay ku soo baxday;

ISAGOO ARKAY Sharciga Convention Ururka Boostada ee-Jamacadda Carabta;

ISAGOO TIXGELINAYA Inay lagama maarmaan tahay in loo

sameeyo Tariifo Booseed oo u gaar ah Dalalka ku jira Jaamacadda Carabta;

ISAGOO LA TASHANAYA Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Maalinyadda;

WUXUU XEERAYAA

Qodob 1aad

*Tariifada Boostada Caadiga ah*

Tariifada Boostada caadiga ah (surface mail) ee dalalka ku jira Jaamacadda Carabta waxa lagu hirgelinaya ama lagu dabaqaya tariifada dalka gudihiisa u degsan.

Qodob 2aad

*Tariifada Boostada Tubta Cirka*

Tariifada Boostada ee tubta cirka waxay ka koobantaa tariifada ku xusan Qodobka 1 aad iyo qiimaha dheeraadka ah (air surcharge) ee hoos ku qoran.

a) Warqadaha (L.C.) 10kii grammeba Sh.So. 0,25;
b) Alaabt kale (O.A) 30kii grammeba Sh. So. 0,30

Qodob 3aad

*Tariifada Guntimaha*

Tariifada Guntimaha Boostada waxay noqoneysa sida uu jideynayo Sharciga (Convention) ee u degsan Ururka Boostada Jaamacadda Carabta.

Qodob 4aad
Dhaqan Gelin

Xerkani wuxuu dhaqan gelaya 1da Maarso 1975.

Qodob 5aad
Burin

Tariifa kasta oo Xeerkan khilaafsan waa la buriyey.

*(Dott. Cabdullahi Cosoble Siyaad)*
XOGHAYAHA DAWLADDA
WASAARADDA BOOSTADA iyo ISGAARSIINTA

*(Dott. Cabdiraxmaan Nuur Xersi)*
XOGHAYAHA DAWLADDA
WASAARADDA MAALIYADDA

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 98
Muqdisho, 5 Luuliyo 1975
Hantidhawrka Guud
G/Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

**Xeer WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA**

**Muqdisho 5 LUG 1975 L. 104**
**TIGIDH JOOGTA AH.**

## WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA

ISAGOO ARKAY Xashida 1aad iyo tan 2aad Kacaanka.

ISAGOO ARKAY Qodobka 22aad iyo 23aad ee Sharciga Boostada Lr. 62 Soona Baxay 22.9.1971.

ISAGOO DHEGEYSTAY Talada Guddiga Filateliga.

ISAGOO TIXGELINAY Baahid loo qabo in la soo saaro Tigidho 6qiime ah oo kuwo Joogto ah laguna magacabay Huga Dhaqanka (Traditional Costume)

## WUXUU GUDDOOMINAYA

### Qodob. 1aad

In la soo saaro tigidh Joogtta ah laguna magacabay Huga Dhaqanka qiimahooduna iyo tirada la soo dabacayna yihiin:-

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Sh. So. | 0,10 | Tirada la dabacay | 1.000.000 (Hal Million) | |
| Sh. So. | 0,40 | » | » | » |
| Sh. So. | 0,50 | » | » | » |
| Sh. So. | 1,00 | » | » | » |
| Sh. So. | 5.00 | » | » | » |
| Sh .So. | 10,00 | » | » | » |

Tigidhadaas waxaa lagu dabacay ISTITUTO POLIGRAFICO DELLA STATO ROMA, Waxaana lagu sameeyey xaashiyo aan ahayn Filigranata, qiyaastooduna ama cabirkooduna waxaa weeye 26 × 31.

### Qodob. 2aad

Tigidhadaas oo joogta ah waxaay soo bixi doonan 5.7.1975.

*Jaalle Cadbillahi Cosoble Siyaad*
XOGHAYAHA DAWLADDA.

## WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 97
Muqdisho 5 Luuliyo 1975
Hantidhawrka Guud

# BOOGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle luul cumar Nuur, u u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu A. 17/6/75 uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl - Wadaag, oo leh qiyaas afar gees siman 27 × 27 kuna fadhiya 729/mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koofur waxaa ka xiga: Waddo.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Luuliyo 1975.

*Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka*
*Maxamed Cabdi Saciid*

---

### NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Maxamed Guuleed Axmed, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka taariikhdu markay ahayd 9/6/75 uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas regtangolaar 27 × 13,50 kuna fadhiya 364,50/ mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed iyo Suuq.
Koofur waxaa ka xiga: Waddada Ummadda.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30(soddon maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Luuliyo 1975

*Maamuulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka*
*Maxamed Cabdi Saciid*

## NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle MARYAN CIISE CABDI, usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 9.9.74 uu ku weydiisanayey dhul dowladeed kuna yaad Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas raktangolar ah 30 × 20 kuna fadhiya 600 mdh.

Sohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lamb. 51.
Koofur waxaa ka xigga : Jid.
Galbeed waxaa ka xigga : Dhul lamb. 43.
Bari waxaa ka xigga : Dhul lamb. 44.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiisan uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood ee laga bilaabo maantii lugu naadshey kuuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Luuliyo 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Ciise*

*(110)*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

**DEKRETO LAMB. 19 75, CABDULLAHI XASAN SHIRWAC ARJILEH iyo BANKIGA GANACSIGA SOOMAALIYEED.**

### DEKRETO AMAR

Labada Magac oo kor ku qoran waxay hor keenen Maxkamadda sida hoos ku qoran;

1. Cabdillahi Xasan Shirwac wuxuu Maxkamadda hor keenay arji u ku dalbanayo in Jeegga wareega ah Lamb. yahay 091.955 T/ahayd 1dii Disember 1974 kuna taalo lacag dhan So.Sh.10.000/00 (toban kun oo shillin.

2. Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta, Hargeysa isaguna Maxkamadda wuxuu keenay Taar. markay ahayd 18/6/75 warqadda Lamb. yahay 003.983 taas oo u ku cadeeyey in lumay Jeegga Lamb. yahay kan kor ku qoran anay joojiyey bixinta lacagta ku tiiley Jeegga. Sidaas darteed Markii aan Arkay waxyaalaha kor ku qoran iyo Markii aan Arkay Qod.27 Xeerka Lamb. yahay 2 soona baxay 9/9/65 iyo Qod. Lamb. yahay 69 oo isla Xeerkaas.

1. Waxa la Amray in uusan socon karin Jeegga Lamb. yahay kan kor ku qoran laga bilaabo maanta.

2. In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

3. In lacagta ah So. Sh. 10.000/00 (Toban kun oo shillin) Bankigu siiyo Arjilaha Magaciisu kor ku qoran yahay shan iyo Toban Casho (15) ka dib marka lagu qoro Faafinta Ras. ah. 30kii Juun 1975.

GUDDOOMIYAHA
MAKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA
*(111)* *(XASAN XAAJI YUUSUF)*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

**DEKRETO L. 18 75 Maxamed Yuusuf Walalac Arjileh iyo Bankiga Ganacsiga Ummadda Hargeysa Dood Geliye**

### DEKRETO AMAR

Labada Magac ee kor ku qoran woxay hor keenen Maxkamadda sida hoos ku qoran; Maxamed Yuusuf Walalac wuxuu Maxkammadda hor keenay Arji u ku dalbanayo in Jeegga Wareegga Lamb. yahay 13.115 lacagtiisu tahay 10.011/40 (toban kun iyo kow iyo toban shillin iyo afartan Santi) Taar. ahayd 11.5.75 ku lumay. Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta, Hargeysa isaguna Maxkamadda wuxuu keenay warqad Lamb. 4085 Taar. 23/6/75 u ku caddeynayo in u lumay Jeegga Lamb. yahay kan kor ku qoran, anay joojiyeen bixinta lacagta ku tiilay Jeegga. Sidaa markii aan arkay waxyaalaha kor ku qoran iyo markii aan arkay Qod.27 Xeerka Lamb. yahay 2soona baxay 9/9/65 iyo Qod. Lamb. yahay 69 oo isla Xeerka waxa la Amray;

1. In uusan socon karin Jeegga lamb. yahay kan kor ku qoran.
2. In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.
3. In lacagtaas ah So. Sh. 10.011/40 (toban kun shillin iyo toban shallin iyo afartan santi) aBnkiga siiyo Arjilaha magaciicu kor ku qoran yahay shan iyo toban casho (15) casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 30 Juun 1975.

GUDDOOMIYAHA
MAKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA
*(112)* *(Xasan Xaaji Yuusuf)*

## SAXID QALAD

1. Faafinta Rasmiga ah ee Labmarkeedu yahay 1 R 2 ee soo baxday 10 Febbrayo 1975, waxaa taariikhda u soo baxay loo akhriyi doona 13 Febbrayo 1975 meesha ahayd 10 Febbrayo 1975.

2. Sharciga lamb. 14 ee 13 Febbrayo oo ay ujeeddadiisu ahayd SHARCI CASHUUR KA DHAAFID laguna qoray Faafinta Rasmiga ah L. 1 R. 2 ee soo baxay 13 Febbrayo 1975 waxaa lambar ahaan loo akhriyi doonaa 13/bis.

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الجـــريدة الرســـمية

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهـورية الصـومال الديمقراطيـة

**Sannadka 3aad** Mogadiscio 1 Agosto 1975 **L.8**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** **جريـدة شـهرية**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku **waxaa** la **weydiistaa** Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 45, Tr. 10 Junyo 1975, — *Toosin ku saabsan Sharciga Rugta Ganacsiga* *Bog.* *564*

SHARCI L. 46, Tr. 19 Junyo 1975, — *Axdigii ku saabsanaa ACP-EEC* » *567*

SHARCI L. 46 Tr. 19 Junyo 1975, — *Instrument of Retification* » *568*

SHARCI L. 47, Tr. 29 Junyo 1975, — *Ogoolaansho Heshiis Amaah ah oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Libiya* » *569*

SHARCI L. 47, Tr. 29 Junyo 1975, — *Nuqul Carabi ah.* » *570*

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 17 Juny o1975, L. 105 — *Dallacaad* *Bog.* *571*

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 28 Junyo 1975, L. 106 — *Dallacaan* » 572

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 16 Lulyo 1975, L. 107 — *Magacaabid Kuxigeen Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka* » 573

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA Tr. 24 Junyo 1975, L. 108 — *Magacaabid Guddoomiyayaal Degmo.* » 574

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD Tr. 27 Maajo 1975, L. 109 — *Dhul Dowladeed la siiyey gacatana loo geliyey Jaalle Xasan Nuur Cilmi* » 575

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAASIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA Tr. 26 Luuliyo 1975, — *Jeegga Wareega L. 26579, So. Sh. 9.000,00 ee lumay ee u leeyahay Cabdillaahi Geedi Rooble (113)* 577

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA Tr. 15 Luuliyo 1975 — *Lumid Jeegga Wareegga ee lamb. 5429 Shs. 1.000/= ay leedahy Xalwo Cabdi Qabille (113) Bis* » 578

# BOGGA KOWAAD

## SHARCI

**SHARCI L. 45 Tr. 10 Luuliyo 1975,**
**Toosin ku saabsan Sharciga Rugta Ganacsiga.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka;
ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 38 ee soo baxay 30.7.1970 ee ku saabsan Rugta Ganacsiga.
ISAGOO AQOONSAN Iney tahey lagama maarmaan in wax lagu kordhiyo Sharciga lambarkiisu yahay 38 ee soo baxay 30.7.1970.
ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Toosin Sharciga Rugta Ganacsiga

Waxaa la toosinayaa sharciga lambarkiisu yahay 38 ee soo baxay 30.7.70 ee ku saabsan Rugta Ganacsiga, waxaana lagu kordhinayaa qodobada soo socda:

Qodobka 2aad

LA Wareegidda Wakiilnimada Ganasciga Dibedda

1. Marka laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo sharcigan, Dawladda Soomaaliyeed ayaa la wareegeysa maamulka shaqada wakiilnimada ganacsiga dibedda (Commercial Agencies).
2. Hawshaas waxaalaga xilsaarayaa wax ka mid ah Rugta Ganacsiga (Chamber of Commerce).
3. Dadkii horey u haystay shatiyada (licences) ku saabsan Wakiilnimada ganacsiga dibedda waa laga qaadayaa.

Qodobka 3aad

Shaqada Waaxda

Guud ahaan Shaqada Waaxda waxay tahay inay maamusho iyo iney iskudubariddo hawsha ku saabsan wakiilnimada ganacsiga lala yeesho dibedda, gaar ahaan waxaa loo xilsaaray:

1. Inay qabato hawshii ey qaban jireen wakiiliinta ganacsiga dibedda (Commercial Agencies).
2. Iney xiriix la yeelato sharikadaha dibedda si ey ula socoto sicirka suuqyada Adduunka.

3. Iney Wasaaradaha iyo Wakaaladaha madax - bannaan iyo Hey'adaha Dawladda oo dhan la socodsiiso sicirka Adduunka, una keento, markii loo baahdo, waxyaabaha la doonayo in laga heli karin Waddanka gudihiisa.

4. Iney ilaaliso in wax allaale wixii ay soo gadanayaan Wasaaradaha, Wakaaladaha iyo Hay'adaha kor ku tilmaaman, inuu noqdo sicirka ugu wanaagsan ee adduunka laga heli karo.

5. Iney xiriir la yeelato Wakiilada Ganacsiga ee Safaaradaha Soomaaliyeed.

6. Hawl kasta oo xiriir la leh kuwa kor lagu tilmaamay.

Qodobka 4aad

Dhismaha Waaxda

1. Waaxda waxaa madax u noqonaya Agaasime, waxaana magacaabi doona Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Ganacsiga.

2. Waaxda waxay ka koobnaaneysaa madax xubin (Head of Service) iyo madaxda laamaha (Heads of Sections) iyo Shaqaale kale.

3. Waaxda waxay ku yeelan kartaa wakiilo Waddanka gudihiisa iyo dibedddaba si ey u fuliso hawleheeda.

Qodobka 5aad

Awoodda Waaxda

1. Waaxda waxay lahaaneysaa awood ay ku fuliso hawleheeda iyadoo mar kasta dhawreysa kuna dhaqmeysa sharcigan iyo sharciga lambar 38 ee soo baxay 30.7.70.

2. Waaxda waxaa awood loo siineyaa inay ka qaadato Khidmad lacageed (Commission fee) hawlaha wakiiinimada ganacsiga dibedda ee ay qabato.

Qodobka 6aad

*Xeer gaar ah (Tnternal Regulations)*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Ganacsiga wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaya talada Agaasimaha Guud ee Rugta Ganacsiga inuu guddomiyo Xeer gaar ah (internal Regulations) oo ku saabsan khidmada iyo wixii kharaj ah ee kale oo la xiriira hawlaha ay waaxdu qabato (Commission fee ect).

Qodobka 7aad

Tirtir

Sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 8aad

Dhaqan gelin

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 10, Luliyo, 1975.

GUDDONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAAANKA
*( Juulle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre )*

---

**SHARCI L. 46 Tr. 19.6.75**

**Axdigii ku saabsanaa ACP - EEC.**

MARKUU ARKAY Xaashiida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar, 1969; iyo sharciga No.1;

MARKUU ARKAY ACP - EEC Axdigii Lome oo la saxiixay 28kii Febraayo, 1975;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda;

Qodobka 1aad

Axdigii ku saabsanaa ACP - EEC oo ay Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya saxiixday 28kii Febraayo, 1975 waa la oggolaaday.

Qodobka 2aad

Axdigaasi wuxuu yeelanayaa astaan sharci wuxuuna ka mid noqonayaa sharciga Dalka yaalla sida ku qoran qodobkiisa 87aad, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 - 6 - 75

*( Juulle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre )*
Madaxweynaha Golaha Sare ee kacaanka
Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka

SHARCI L.46 Tr. 19.6.75

**Instrument of Ratification**

## SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC
## THE PRESIDENT
## OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The First and Second Charters of the Revolution of 21st October 1969 ond Law No.1;

HAVING SEEN ACP - EEC Convention of Lome signed on 28th February 1975;

TAKING NOTE Of the approval of the Supremt Revolutionary Council and of the Secretaries of State.

Hereby promulgates the following law:-

### ARTICLE I

The ACP - ECC Convention of Lome signed by the Government of the Somali Democratic Republic on 28th February, 1975 at Lome, is here by Ratified:-

### ARTICLE II

This Convention shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic from the date of its entring into force in accordance with Article 87 of the Convention:-

This law shall come into force immediately and published in the Official Bulletin:-

Muqdisho. 19.6.75.

(Jaalle Major General Maxamed Siad Barre)
President of the Supreme Rivolutionary

**SHARCI L. 47 Tr. 17 Luuliyo 1975.**

**Oggolaansho Heshiis amaah ah oo dhexmaray Jamhuuriyadda Demoqradiga ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Libiya**

MARKUU ARKAY Xaashidii 1aad tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaalia iyo Libiya la saxiixay 26 Juniyo 1974.

ISAGOO AQOONSADAY Iney tahay danta labada dawladood ee walaalaha ah inuu dhexmaro heshiis dhaqaale iyo iskaashiba,

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda taariikhdu markey aheyd 19.6.75.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday meel - marinta Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Libiya oo ay kala saxiixdeen labada Dawladood, taariikhdu markey aheyd 26.6.1974, kuna saabsaneyd dhameystirka gegida Dayuuradaha Gaalamiga ah ee Kismaayo;

Heshiisku wuxuu yeelanayaa astaan sharci ah, wuxuuna ka mid noqonayaa sharciyada u yaalla Jamhuuriyadda Dimoqradiga ee Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha GSK, waxaanu lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho. 17.7.75.

*Jaalle S.G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

وثيقـــة تصديـــق

رئيس المجلس الاعلى للثورة

بعد الاطـــلاع على ميثاق الاول والثانى للثورة ٢١ اكتوبر ١٩٦٩

بعد الاطـــلاع على الاتفاقية بين الجمهورية الصومالية الديمقراطيـــة والجمهورية العربية الليبية المبرمة فى ٢٦ يونيو ١٩٧٤ الخاصة باقراض الحكومة العربية الليبية ٢ مليون دينار ليبى الى جمهورية الصومل الديمقراطية وذلك لاتمام بناء مطار كسمايو الدولى .

واخذا بعين الاعتبار رغبة الدولتين الشقيقتين التعاون فى الميـــدان الاقتصادى .

وطبقـــا لقرار مجلس قيادة الثورة والسكرتيرين بتاريخ ١٩ يونيو ١٩٧٥م .

يصدر القانون التالى

المـــادة الاولى

لقد تم التصديق على الاتفاقية المبرمة بتاريخ ٢٦ يونيو ١٩٧٤ بـــين جمهورية الصومال الديمقراطية والجمهورية العربية الليبية الخاصة بتقديم قرض ليبى للصومال قدره ٢ مليون دينار ليبى وذلك لاتمام بنـاء مطـــار كسمـايو الدولى .

وتكون للاتفاقية المذكورة قوةالقـانون فى جمهرية الصومال الديمقراطية وتعد من القوانين النافذة فى الصومال .

المـــادة الثانية

يسرى مفعول هذا القانون حال مـــا يمضى عليـــه رئيس المجلس الاعلى للثورة ونشر فى الجريدة الرسمية للدولة .

مقديشو ٧٥ — ٧ ٧١م

**رئيس مجلس الاعلى للثورة جـاللى محمد سيـاد برى**

# BOGGA LABAAD

## XEER

### XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA

**Tr.17 Juunyo 1975. L. 105.**
**Dallacaad.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5aad (lambarka 4aad ee sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska laha soo saaray 23kii Disembar 1972, kuna lambarsan 2;

ASAGOO TIXGELIYEY Shaqadiisa wanaagsan, kuna darsaday hawlkarnimo iyo daacadnimo intaba (merito eccezionale);

ASAGOO ARKAY Warqaddii lambarkeedu ahayd XGM/GSK 13 - 472 taariikhdeeduna ahayd 15 Juunyo 1975 ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka kuna saabsaneyd in la dallacsiiyey Xiddigle Xaashi Maxamed Guuleed lana gaarsiiyey darajada Laba - Xiddigle;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Xiddigle Xaashi Maxamed Guuleed ee ka tirsan Ciidanka Boliiska la dallacsiiyey lana gaarsiiyey darajada ah Laba - Xiddigle, marka laga bilaabo 15 Juunyo 1975, kuna hirgeleysa xagga sharciga iyo dhaqaalahaba.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17.6.75.

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*(S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*(S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib)*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Maaliyadda
*(Dott. Cabdiraxmaan Nuur Xirsi)*

Waan aragnay ee diiwaangelinnay
diiwaanka lam L.3 Boggaa lam.246
*G Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur.*

**XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr. 17 LUG. 1975. L. 106**
**Dallacaad.**

GUDDONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5naad (lambarka 4aad ee sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska lama soo saaray 23kii disember 1972, kuna lambarsan 2;

ASAGOO TIXGELIYEY Shaqadiisa wanaagsan iyo muteysi awgeed (merito eccezionale);

ASAGOO ARKAY Warqadii taariikhdeedu ahayd 15 Juunyo 1975 kuna lambarsaneyd SEC/A/8/1. ee Taliyaha Ciidanka Boliiska ugaga soo xogwarramay Dhamme AXMED CABDULLE SHUCAYB ee ka mid ah Ciidanka Boliiska, asagoo soo jeediyey in loo dallacsiiyo darajada Gaashaanle;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, kuna qornayd warqadda lambarkeedu yahay A/C/1/4 - 423 ee 24 Juunyo 1975.

WUXUU XEERAY
Qodobka 1aad

In Dhamme AXMED CABDULLE SHUCAYB ee ka tirsan Ciidanka Boliiska
la dallacsiiyo lana gaarsiiyey darajada ah Gaashaanle, marka laga billaabo 1/7/1975, kuna hir geleysa xagga sharciga iyo dhaqaalaha.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 28/GIU. 1975

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*Sx. S.Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Maaliyadda
*Sx. Dott. Cabdiraxmaan Nuur Xirsi*

Waan aragnay ee diiwaangelinnay
diiwaanka lam. 3 bogga lam. 247
Muqdisho, 17 Lug. 1975
Hantidhawraha Guud
*Sx. Cabdullaahi Warsame Nuur G Dhexe*

**XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr 21 LUG. 1975 L.107**

**Magacaabid Kuxigeen Xeer Ilaaliyaha Guud Maxkamadda Badbaadada Dalka.**

# XEER

MARKUU ARKAY Warqadda koowaad iyo tan labaad ee Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii;

MARKUU ARKAY Xeerka tirsigiisu yahay 3soon$_a$ baxay 10kii Jannaayo 1970kii;

MARKUU TALADA KU DARAY Iney tahay lagama maarmaan in la kordhiyo tirada kuxigeennada Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka, Muqdisho, si'hawsha loo socodsiiyo;

MARKUU TIXGELIYEY Ra'yiga Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka;

WUXUU GUDDOONSHEY

Mark$_a$ laga bilaabo taariikhda Dekereetadaan, waxaa loo magacaabay, inuu noqdo «Kuxigeen» Xafiiska Xeer Ilaaliyah$_a$ Guud ee Markamadda Badbaadada Dalka, Muqdisho, Jaalle Gaashaanle YUUSUF CALI TAHAR oo ka tirsan Ciidanka Boliiska.

Dekereetadaanu waxay dhaqan geleysaa marka laga bilaabo taariikhda u qoran:-

Muqdisho, 16/7/1975

F/to: *(Jaalle S Gaas Maxamad Siyaad Barre)*
*MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE*
KACAANKA

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

**Tr. 24 GIU. 1975 L. 108**
**Magacaabid Guddoomiyeyaal Degmo:-**

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ASAGOO ARKAY Qodobka 1aad (Xarafka L) iyo kan 10aad Lambarka 3aad ee Sharciga 52 lana soo saaray 8eedii Juun 1972kii;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Guddoomiyeyal Degmooyinka: Kismaayo, Gaalkacyo, Qandala, Caluula, Marka, Garoowe, Ceel - Buur, iyo Waajid.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Saraakiisha hoos ku qoran, waxaa loo magacaabay iney noqdan Guddoomiyeyaal Degmooyinka kor lagu sheegay, iyadoo Sarkaal walba hortiisa lagu dhinac qoray Degmada uu ka noqonaayo Guddoomiye iyo taariikhda la magacaabay;

1. Jaalle Cabdi Weli SHeekh Aaden — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Kisimaayo, marka laga bilaabo 8/3/1975;

2. L/Xidigle Daahir Sheekh Maxamad — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Gaalkacyo, marka laga bilaabo 18/3/1975

3. Jaalle Cabdullaahi Xaaji Xasan — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Qandala, marka laga bilaabo 18/3/1975;

4. Jaalle Xuseen Xaashi — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Caluula, marka laga bilaabo 18/3/1975;

5. L/Xidigle Axmed Yuusuf Cumar — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Marka, marka laga bilaabo 18/3/1975ka;

6. Jaalle Daawuud Cali Yaxya — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Garoowe, marka laga bilaabo 18/3/1975;

7. L/Xidigle Axmed Jaamac Cali — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Ceel - Buur, marka laga bilaabo 18/3/1975;

8. Jaalle Axmed Xaaji Xaashi — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Waajid, marka laga bilaabo 18/3/1975;

Qodobka 2aad

Dhaqan Gal

Xeerkan, wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta taariikhda magaabidda Saraakiisha, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

*(Jaalle S Gaas Jaamac Maxamad Qaalib)*
XOGHAYAHA
WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**Tr. 27 MAG. 1975 L. 109.**

**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle XASAN NUUR CILMI - ku yaal Muqdisho - Xaafadda Hodan, kuna fadhiya mq.1.271.**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxday 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxday 23kii Maajo 1961kii;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday AXMED ISMACIIL CISMAAN taariikhdu markay aheyd 13 Giugno 1960 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho - Xaafadda Hodan kuna dhacaaya qaybta VII;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 11 soona baxday 1da Novembre 1961, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 16508, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, Fadhigoodii 284aad taariikhduna aheyd 18/4/1962;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 3072 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 16508 laguna aqoonsaday fadhigii 17°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay aheyd 30 majo 1974, kuna saabsaneed dhismo Guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 6189 ee 8 LUG. 1962, kuna soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in AXMED ISMACIIL CISMAAN uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 635,50/ kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.271/ loona tiriyay AXMED ISMACIIL CISMAAN sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna aheyd 14 LUG. 1962;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda

in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lamb. 3072 ee 6/4/1971 laguna haqiijiyay sida ay nayshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar Xaafadda Hodan laguna siiyay xaashada lamb. 754/ ee 23 Maarso 1975 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 1401 Reb. taarikh. 1° Oktoobar 1962, lagu diiwaan geliyay geliyay Xamar 2/10/1962 al n. 625 Atti Pubblici Vol.12, oo ah caddeynta Notayada M. Mariano taas oo AXMED ISMACIIL CISMAAN ka gaday kuna wareejiyay HAAJI YUUSUF CIGAAL wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha ku yaal cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.271;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 155 Reb. taarikh 1964, lagu diiwaan geliyay Xamar 3/5/1964 1.313 Atti Pubblici Vol. 14 oo ah caddeynta Notaayada Cabdalla Xaaji Faarax taas oo XAAJI YUUSUF CIGAAL ka gaday kuna wareejiyay XASAN NUUR CILMI wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1271;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhismaha, ku yaal ah cadka dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilita') oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

**X E E R**

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday XASAN NUUR CILMI, dhul ku fadhiya mq. 1.271/ kuna yaal Muqdisho - Xaafadda Hodan;

Muqdisho, 27 MAG. 1975;

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 19
Muqdisho, 9 GIU. 1975.
*G Dhtxe Cabdillahi Warsame Nuur;*

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
W.S. INJ. *Maxamad Xaaji Xawaadle*

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

**XEER MAXKAMADDA GOBLKA HARGEYSA**

**Tr. 22. MAG. 1975. L.113.**

**Abshir Diiriye Cismaan iyo Bankiga Ganacsiga Ummadda.**

### A M A R

Labada magac ee kor qoran waxay hor keenen Maxkamadda sida hoos ku qoran, Abshir Diiriye Cismaan wuxuu Maxkamadda hor keenay arji u ka dalbanayo in Jeeg wareega ee lamb. yahay 26579 uu ku qoray magac Cabdillahi Geedi Rooble kuna tiilay lacag dhan So. Sh. 9.000/00 (Sagaalkun oo shillin) uu ka lumay, Markii Cabdillahi Geedi Rooble oo jeegga siya Baabuur u ku joogay Amxaaradu Rasaas ku furtay isla goobtiina u ku Geeriyooday Cabdillahi Geedi Rooble sidaas oo ay ka hor caddeeyeen Maxkamadda Degmadda ee Hargeysa. Abshir Diiriye iyo Cabdiraxman Sh. Cabdillahi Aadan, taarikhdu markay ahayd 12.7.1975. Maxkamadduna ka rumaysatay. Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta, Hargeysa isaguna Maxkamadda wuxuu keenay warqad L.4804 Taar. ahayd 21kii Juulay 1975 u ku cadeynayo in u lumay jeegga lamb. yahay 26579 kuna qoran Jaalle Cabdillahi Geedi Rooble lacagtiisuna tahay 9.000/00 (sagaal kun oo shillin), Ogeysiiyeena Laamahooda oo dhan si aan loo bixin lacagta Jeegaasi ku qoran.

Sidaas darteed Markii aan Arkay waxyaalaha kor ku qoran iyo Markii aan Arkay qod. 27 Xeerka lamb. yahay 2 soona baxay 9.9.65 iyo qod. lamb. yahay 69 ee isla Xeerkaas waxaa la Amraya;

1. In uusan socon karin jeegga lamb. kiisu yahay kan kor ku qoran.
2. In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.
3. In lacagtaas ah So. Sh. 9.000 (sagaal kun) Bankigu siiyo Caruurta iyo dadka dhaxalka marxuumkii Cadbillahi Geeddi Iska leh 30 Casho ka dib markii lagu qoro Fafinta Rasmiga ah.

26kii Juulay 1975.

*(Xasan Xaaji Yuusuf)*

GUDDOOMIYAHA

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

## DEKRETO LAMB. 20/75

Xalwo Cabdi Qabille iyo Bankiga Gnacsiga Ummadda AMAR. Labada Magac ee kor ku qoran waxay hor keenen Maxkamadda sida hoos ku qoran, Xalwo Cabdi Qabille waxay Maxkamadda hor keentay Arji ay ku dalbaneyso in Jeegga wareegga ee Lamb. yahay 5.429 kuna taalo lacag dhan 1.000/= ka lumay, Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta, Hargeysa Isaguna Maxkamadda wuxuu keenay warqad Lamb. 4423 taar. 8/7/75 u ku cadaynayo in u luamay Jeegga Lamb. yahay kaas kor ku qoran, anay jojiyeen bixinta lacagta ku taalay jeegga. Sidaa darteed markii aan arkay waxyaalaha kor ku qoran iyo markii aan arkay qod.27 Xeerka Lamb. 2 soona baxay 9/6/75 iyo qod. Lamb. 69 oo isla Xeerk awaxa la Amrayaa.

1. In uusan socon karin Jeegga Lamb. yahay kan kor ku qoran.
2. In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.
3. In lacagtaas ah Sh. So. 1.000/= (kun) Bankigu siiyo Arjilaha magaciisu kor ku qoran yahay 30 Casho ka dib marka lagu qoro Faafin Rasmiga ah.

Luuliyo 15. 7 75.

**(Xasan Xaaji Yuusuf)**
Guddoomiyaha Maxkamadda
Gobolka Hargeysa

(113/Bis)

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Mogadiscio, 11 Agoosto 1975 **L. 1 R. 8**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريده شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

## SHARCI

## W. M.

## BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA 13 Luuliyo 1975, L. 110 — *Laba Xiddigle Takhtar Axmed Maxamed Jaamac* *Bog.* *580*

XEER WASAARADA ARRIMAHA GUDAHA 19 Luuliyo 1975, L. 111 — *Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Galgaduud Qaybahooda Wakiiladda Beesha* » *581*

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA 21 Luuliyo 1975 L. 112 — *Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Bay Qaybahooda Wakiiladda Beesha* » *584*

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA 26 Luuliyo 1975, L.113 — *Magacaaw Xoghayeyaal Guddiyo Degmooyin* » *586*

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER WASAARADA HAWLAHA GUUD 16 Luuliyo 1975, L.114 — *Cad dhul Dowladeed la siiyay Jaalleyaasha Turabali Jaafar Raashid Muraji, Asharafali Azadali, Xayderali iyo Tahera - kuna yaal Muqdisho Degmada Bondheere-kuna fadhiya mq. 798* Bog. 589

XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA 11.Luuliyo 1975 L. 115 — *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad* » 590

XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA 11 Luuliyo 1975 L. 116 — *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad* » 592

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 20 Luuliyo 1975, *L. 114 — Naada Dhul Jaalle Xasan Xuseen Xasan* » 593

WASAARADA HAWLAHA GUUD 20 Luuliyo 1975, L.115 — *Beddelaad Naada Dhul Jaalle Isaaq Maxamuud Maxamed* » 593

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 4/8/1975 L.116 — *Buugga Keydka L.2165/4, SHS. 400/= uu leeyahay Xasan Maxamed Maxamuud* » 594

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA 9.6.1975 L.117 — *Lumid Buugga L.1750/7 SO. SH. 897/98 ay ledahay «Xaaji Haweeye Cabdi Mooge* » 595

*Saxid Qalad* » 596

# BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 13 LUG. 1975. L.110
Laba Xiddigle Takhtar Axmed Maxmaed Jaamac.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5naad (lambarka 4aad) ee sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska lana soo saaray 23kii dicembre 1972 lambarka 2;

ASAGOO TIXGELIYEY Baahida loo qabo cilmiga uu soo bartay ee ah takhtarnimada indhaha Jaalle Axmed Maxamed Jaamac iyo iyadoo laftiisu soo weydistay inuu ka mid noqdo Ciidanka Boliiska;

ASAGOO ARKAY Warqadda lambarkeedu yahay GSK/S/2/A - 826 ee 13. 7. 1975 ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka, kuna saabsaneyd in takhtar Axmed Maxamed Jaamac lagu qaato Laba - Xiddigle ka mid ah Ciidanka Boliiska;

ASAGOO ARKAY Soo jeedintii Taliyaha Ciidanka Boliiska kuna qorneyd warqadda lambarkeedu yahay CIID/TIR./Q/43 - 122 ee 17 Maajo 1975;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha kuna qorneyd warqadda lambarkeedu yahay A/C/1/3 - 417 ee 22 maajo 1975.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In takhatr Axmed Maxamed Jaamac lagu qaato darajada Laba-Xiddigle ka tirsan Ciidanka Boliska marka laga bilaabo 10 Maajo 1975 ku-

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 LUG. 1975

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*Sx. S. (Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
**Sx. S.Gaas Jaamac Maxamed Qaalib**

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Maaliyadda
**Sx. Cabdiraxmaan Nuur Xirsi**

Waa aragnay ee diiwaangelinnay
diiwaanka lambar 4 bogga lamb. 35
Muqdisho, 27 LUG. 1975
HANTIDHOWRAHA GUUD
*Sx. G. Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur*

---

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

**Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Gaiguduud qaybahooda Wakiilada beesha.**

Tr. 19 LUG. 1975. L.111

Jamhuuriyadda Dimoqradiga Somalia
Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 1972, lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21/9/72, ku saabsan Maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka lambarkiisu yahay 12120 ee 13.2.72, ku saabsan Magacaabidda Guddiyada Kacaanka Mudug oo ay ka tirsanaan jireen Degmooyinka Dh/ Mareeb, Ceel - Buur iyo Ceel - Dheer;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka Lambar 66, taariikh 23/1/1973kii, lagu qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ee 15/7/1973kii lambar 13 Bis ee lagu dhisay Gobollada Sanaag iyo Galgaduud oo ay Magaala - Madaxdu kala yihiin Cerigaabo iyo

ISAGOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan oo lambarkiisu yahay ADM/6/5 - 1677 ee 7/4/1974ka oo hore loogu magacaabay Guddiga Kacaanka Caabud - Waaq qaybtiisa Wakiillada beesha;

ISAGOO OGAADAY Iney lagama maarmaan tahay in la cusbooneysiiyo Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Dhuusa Mareeb, Ceel - Buur, Ceeldheer iyo Caabud - waaq, iyadoo la waafajinaayo qaanuunka ku qoran qodobka 10aad lambarkiisa 3aad, xarafka (c) ee sharciga kor ku tilmaaman;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Galguduud.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Magacawga Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Dhuusa Mareeb, Ceel - Buur, Ceel - dheer iyo Caabud - waaq qaybahooda Wakiillada Beesha.

Ka bilaabanta 20. 10. 1974kii, dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxan yihiin, waxaa loo magacaabay inay noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka ay ku hoos qoran yihiin:

DEGMADA DH/MAREEB

1. Jaalle Xaashi Gutaale Cismaan;
2. » Xasan Oog Maxamed;
3. » Cabdi Xasan Cigaal;
4. » Kaahiye Dhannaas Faarax;
6. » Shukri Xaaji Xuseen;
5. » Nuur Caalas Faarax Shuuriye;
7. » Ibraahim Caydiid Yaasiin;
8. » Xaliima Xuseen Sadiiq;
9. » Canab Jaamac Faarax;
10. » Xasan Cali Siyaad;
11. » Cadceed Sheekh Doon;
12. » Qubato Warsame Cali;
13. » Xaliim aWarsame Gukeyre;
14. » Faaduma Axmed Baayir;
15. » Macallin Maxamuud Cali;
16. » Macallin Maxamed Cumar;
17. » Cabdulle Macallin Axmed;

DEGMADA CEEL - BUUR

1. Jaalle Xasan Cali Cismaan;
2. » Macallin Cabdi Guure;

4. » Axmed Yabaroow Caaleey;
5. » Xaaji Cali Cabdi Guure;
6. » Qaasim Fiidoow Rooble;
7. » Daahir Xaashi Geedi;
8. » Cali Afrax Cusuble;
9. » Ashkiro Cilmi Faarax;

DEGMADA CEEL - DHEERE

1. Jaalle Moxamuud Sheekh Axmed Jimcaale;
2. » Daahir Socdaal Afrax;
3. » Yuusuf Jaamac Cabdulle;
4. » Abuukar Axmed Sabriye;
5. » Cali Abiikar Shadoor;
6. » Moxamuud Cali Yuusuf;
7. » Xaliima Cabdulle Xirsi;
8. » Madiina Maxamed Cosoble;
9. » Xaaji Maxamuud Sheekh Maxamed;

DEGMADA CAABUD - WAAQ

1. Jaalle Cismaan Warsame Xasan;
2. » Maxamed Samantar Axmed;
3. » Ismaaciil Xaaji Faarax Xirsi;
4. » Nuur Cumar Cabsiye;
5. » Maxamed Yuusuf Nuur;
6. » Axmed Warsame Diiriye;
7. » Maxamed Muuse Waladi;
8. » Cabdi Xuseen Cali;
9. » Jaamac Ciise Isaaq.

Qodobka 2aad

Dhaqan gal

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20/10/1974ka, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka:-

XOGHAYAHA WASAARADDA
ARRIMAHA GUDAHA

*Sx. Jaalle S Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

Muqdisho, 19 LUG. 1975.

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**
Tr. 21.7.1975 L. 112
**Mogacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Bay qaybtooda Wakiilladda Beesha.**

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Somaliya
Wasaaradda Arrimaha Gudaha
Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8/6/1972 lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21/9/1972kii ku saabsan Maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan oo lambarkiisu yahay 12123 taariikh 13 Disember 1972kii, ku saabsan Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Gobolkii hore loo yiqiin Jubadda Sare qaybtiisa Wakiilladda Beesha;

ISAGOO ARKAY Qodobka 1aad Xeer Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lambarkiisu yahay 102, taariikh 26/9/73 lagu qoray Faafinta Rasmiga ee Dawladda, taariikh 11/9/1973kii oo Gobolkii hore loogu aqoon jiray Jubbada Sare seddexda Gobol loogu qaybshay;

ISAGOO OGAADAY Iney lagama maarmaan tahay in la cusbooneysiiyo Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Baydhabo, Diinsoor, Buur - hakaba iyo khansaxdheere iyadoo la waafajinaayo qaanuunka ku qoran qodobka 10aad lambarkiisu 3aad, xarafka (c) ee sharciga kor ku tilmaamani;

ISAGOO TIXGELINAYO Talada uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Bay.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Magacowga Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Baydhabo, Diinsoor Buur Hakaba iyo Khansaxdheere qaybahooda Wakiillada Beesha.

Ka bilaabanta 20/10/1974kii, dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxan yihiin, waxaa loo magacaabay inay noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka ku hoos qoran yihiin;

DEGMADA BAYDHABO

1. Jaalle Sheekh Shucayb Sheekh Cabdullaahi;
2. » Khaliif Cabdi Xasan;
3. » Maxamed Qani Siigaale;
4. » Cali Xuseen Gerle;

5. » Cabduraxmaan Sheekh Maxamed;
6. » Sheekh Xamiid Mursal;
7. » Aaden Cali Maxamed;
8. » Maxamed Kalar Maxamuud;
9. » Maxamed Barre Maxamed;
10. » Axmed Sheekh Xasan;
11. » Xaliima Sheekh Xuseen;
12. » Aadan Nuurow Isaaq;
13. » Yaaquula Cabdullaahi Cilmi;
14. » Cabdisalaam Xaaji Ismaaciil;
15. » Maxamed Yerow Cabdiyow;
16. » Ibraahim Xuseen Axmed;
17. » Cabdi Maax Cali.

DEGMADA DIINSOOR

1. Jaalle Raashiid Xaaji Maxamed Caynte;
2. » Khadiija Xaaji Maxamed Nuur;
3. » Xaaji Cabdiraxmaan Maxamed Saciid;
4. » Cabdullaahi Xaashi Maxamed;
5. » Sheekh Maxamed Dhure Sheekh Xuseen;
6. » Cabdullaahi Maxamuud Xuseen;
7. » Isaaq Maxamed Sheekh Maxamed;
8. » Nuurow Yuusuf Abtiyow;
9. » Sangaaba Macallin Maxamed;
10. » Xaawa Aadan Barre;
11. » Cabdullaahi Xaaji Ibraw;
12. » Axmed Raage Barrow;
13. » Xaaji Maxamed Xaaji Maye.

DEMGADA BUUR HAKABA

1. Jaalle Sheekh Barre Aadan Cabdulle;
2. » Xuseen Axmed Maxamed;
3. » Nuurta Maxamed Cali;
4. » Nuurow Maxamuud Cali;
5. » Mayow Isaaq Balqaash;
6. » Cabdulqaadir Caliyow Cabdi;
7. » Ibraahim Xasano Maxamed;
8. » Sheekh Cabdullaahi Cabdiyow;
9. » Jaalle Xaaji Aadan Amiin;
10. » Isaaq Caliyow Ibraahim;
11. » Siidow Ibraahim Aadan;
12. » Axmed Isaaq Dacar;
13. » Xaaji Cabduraxmaan Xuseen.

DEGMADA QANSAXDHEERE

1. Jaalle Aabow Xaaji Sheekh Cali Suubow;
2. » Mocallim Caliyow Maxamed;

3. » Ibraahim Caanay Xuseen;
4. » Faaduma Imaan Caliyow;
5. » Xaaji Cali Aadan Isaaq;
6. » Suley»maan Cali Dhure;
7. » Sheekh Maxamed Nuur Aadan;
8. » Caasha Muuse Faarax;
9. » Cabdullaahi Cali Axmed.

Qodobka 2aad

Dhaqan gal

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20/10/1974ka, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 21 LUG. 1975

XOGHAYAHA DAWLADDA EE WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA
*S Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

Waanu aragnay ee diiwaangelinnay
diiwaanka lambar. 4 bogga lam. 120
Muqdisho, 26 LUG. 1975
Hantidhawraha Guud
*Sx. G Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur*

---

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

**Tr. 26 LUG. 1975. L. 113**
**Magacaaw Xoghayeyaal Guddiyo Degmooyin.**

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 13 ee Xeerka lambarkiisu yahay 52 lana soo saaray 8dii bisha Juun 1972;

ASAGOO OGAADAL Baahida loo qabo in loo magacaabo Xoghayeyaal Guddiyada Kacaanka hoos ku qoran:

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1aad

In Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka hoos ku dhigan ay Xoghayeyaal ka noqdaan Shaqaalaha ku dhinac qoran:

1. **GOBOLKA J. - HOOSE:**

Degmada Kismaayo — Cusmaan Diiriye Xaashi
» Jamaama — Axmed Moxamed Axmed
» Jilib — Moxamed Dheer Yacquub
» Afmadow — Cusmaan Xaaji Axmed

2. **GOBOLKA BAY:**

Degmada Baydhaba — Cusmaan Nuux Saciid
» Diinsoor — Gaabow Nucmaan
» Q - Dhere — Cusmaan Aaden Axmed

3. **GOBOLKA BAKOOL:**

Degmada Xuddur — Maxamed Jaamac Guuleed
» Waajid — Faarax Moxamed Warsame
» Yeed — Iikar Moxamed Cali
» Celberde — Bulle Xasan Macallin
» Tiyeglow — Abuukar Cumar Ibraahim

4. **GOBOLKA GEDO:**

Degmada Garbaharey — Aadan Caliyow Moxamed
» L - Ganaane — Cabdullaahi Ceelaabe
» Dooloow — Cabdi Faarax Qaarey
» B - Xaawo — Nuunow Moxamed
» Bardheere — Cali Cabdi Xaji Aaden
» Saakow — Raage Cumar Moxamed

5. **GOBOLKA SH - HOOSE:**

Degmada Braawa — Abu Sheekh Cali Mudey
» Qoryoley — Moxamuud Sheekh Xuseen
» Afgooye — Axmed Mooge Aaden
» W/Weyn — Cabdullaahi Abookar

6. **GOBOLKA SH - DREXE:**

Degmada Jowhar — Yuusuf Boos Axmed
» Balcad — Cabdiraxmaan X.Dhoore
» A/Yabaal — Shariif Moxamed Nuur
» Cadale — Cali Axmed Barre

7. **GOBOLKA MUDUG:**

Degmada Galkacyo — Ibraahim X. Caliyow
» Hobbyo — Xuseen Cabdullaahi Xoday

**8. GOBOLKA NUGAAL:**

Degmada Garowe — Cawil Faarax Aaden
» EYL — Moxamed Kulow Xuseen
» L/Canood — Ibraahim Nuur Moxamed
» Taleex — Cali Cabdi Oog

**9. GOBOLKA BARI:**

Degmada Boosaaso — Axmed Aaden Cali Codir
» Qardho — Faarax Siciid Aaden
» B/Beyla — Saalax Cali Cabdalla
» Isku/ban — Cali Moxamed Geedi
» Caluula — Cusmaan Moxamed Warsame

**10. GOBOLKA SANAAG:**

Degmada Cerigaabo — Cabdulqaadir Yuusuf
» Ceel/Afweyn — Siciid Xaaji Cabdalla Farax
» Badhan — Moxamed Cali Ibraahim

**11. GOBOLKA T - DREER:**

Degmada Burco — Cabdi Faarax Aaden
» Sheekh — Axmed X. Moxamed (Dhaadhere)
» Odweyne — Moxamed Calas Qaarey
» Buhodle — Ibraahim Xuseen Daahir

**12. GOBOLKA W GALBEED:**

Degmada Hargeysa — Cumar Xaaji Cabdalla Muusa
» Saylac — Moxamed Caddow Warsame
» Borama — Moxamed Saciid Ismaaciil
» Gabiley — Cali Moxamuud Xaliye
» Lug - Haye — Xuseen Aaden

**13. GOBOLKA HIIRAAN:**

Degmada B - Weyne — Xasan Axmed Cige
» B - Burti — Shuuriye Moxamed
» Jalalaqsi — Axmed Diriye Guleed

**14. GOBOLKA G - GUDUUD:**

Degmada Dh - Mareeb — Moxamed Cabdiraxmaan

» C - Buur — Salaad Weyrax Faarax
» Cab - Waaq — Cabdullaahi Xareed

Qodobka 2aad

Go'aankanu wuxuu u dhaqan gelaya si degdeg ah waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda:

Muqdisho 26 LUG. 1975

XOGHAYAHA WASAARADDA GUDAHA
*S Gaas Jaamac Moxamed Qaalib*

VISTO E REGISTRATO
Reb. N. 1 foglio N. 124
Mogadisho 3 agosto 1975
IL SOSTETUTUITO MAGISTRATO AI CONTI
*Saxiixay Moxamed Cali Faarax*

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**Tr. 16. LUG. 1975. L.114.**
**Cad dhul Dowladeed, la siiyay Jaalleyaosha Turabali Jaafer Raashid Muraji, Asharafali, Azadali, Xaydorali iyo Tahera - kuna yaal Muqdisho Degmada Bondheere - kuna fadhiya mq. 798**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

ISAGA OO ARKAY Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jennayo 1967;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 41 soona baxay 1 Novembre 1973;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensadeen Turabali Jaafer Raashid Muraji, Asharafali, Azadali, Xayderali iyo Tahera taarikhdu markay aheyd 17/12/1974 kuna weydiisteen dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho, Degmada Bondheere kuna dhacaaya qaybta III°;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb L.2 R.1 soona baxday 28 Jenayo 1975 iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 5564, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 22aad taarikh. duna aheyd 8 Oktoo-

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 0597907 ee 27/4/1975 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Turabali Jaafer Raashid Muraji uu bixiyay lacag dhan shs. So. 7.980/=kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loosiiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 798/=loona tiriyay Turabali Jaafer Raashid Muraji, Asharafali, Asadali, Xayderali iyo Tahera sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (Verbalo di consegna) taarikhdeeduna aheyd 2/5/1975;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Turabali Jaafer Raashid Muraji, Asharafali, Asadali, Xayderali iyo Tahera oo ku yaal Muqdisho - Degmada Bondheere - kuna fadhiya mq.798/=;

Muqdisho, 10 Lulyo 1975.

XOGHAYAHA
Wasaaradda Hawlaha Guud
*W.S. Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARAGNA EE DIIWAANGELINAY
Diiwaanka Lamb. 1 Bogga lamb. 25
Muqdisho 21 Luglio 1795
Hantidhawrka Guud
*G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur*

---

**XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA**

**Tr. 11.7.1975. L. 115.**
**Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.**

GUDDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD EE KMG AH EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Sebtembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna;

AYAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaadii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamad ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya;

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna;

AYAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 182 ee 11.7.1975, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaliya, Lr.2 ee 26.11.1968 uu dhigayo;

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 11.7.1975, waxaa go'aankaan lagu soo caddeyn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya:

LACAGAHA QALAAD HEERKA IIBSASHADA HEERKA GADIDDA

| | | OO AH SH. SO. | OO AH SH. SO. |
|---|---|---|---|
| US$ | 1 | Sh. So. 6.2327 | Sh. So. 6.3573 |
| UK£ | 1 | » » 13.7429 | » » 14.0178 |
| DM. | 1 | » » 2.6312 | » » 2.6838 |
| LIT. | 102,00 | » » 1.0000 | » » ——— |
| LIT. | 100,00 | » » ——— | » » 1.0000 |
| F.FR. | 1 | » » 1.5280 | » » 1.5586 |
| SW.FR. | 1 | » » 2.4787 | » » 2.5283 |
| DJ.FR. | 1 | » » 0.03525 | » » 0.03596 |

Muqdisho, 11.7.1975

Agaasimaha Guud
ee KMG
*SHARIIF ABUUBAKAR MAXAMAD*

Guddoomiyaha
*CUMAR AXMED CUMAR*

## XEER BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

**Tr. 20.7.1975. L. 116**
**Xeerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.**

### GUDDOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD EE KMG AH EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN Qodobka 10aad, Xeerka Lr.12 ee 26kii Sebtembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna;

AYAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaadii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya;

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna;

AYAGOO OGSOON In horay loo qaatay go aan deg deg ah Lr. 183 ee 20.7.1975, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lr. 27 ee 26.11.1968 uu dhigayo;

### WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu haatan ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 21.7.1975, Waxaa go'aankaan lagu soo caddeyn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya:

### LACAGAHA QALAAD HEERKA IIBSASHADA HEERKA GADIDDA

| | | OO AH SH. SO. | OO AH SH. SO. |
|---|---|---|---|
| US$ | 1 | Sh. So. 6.2327 | Sh. So. 6.3573 |
| UK£ | 1 | » » 13.6742 | » » 13.9477 |
| DM. | 1 | » » 2.5128 | » » 2.5631 |
| LIT. | 103,53 | » » 1.0000 | » » ——— |
| LIT. | 101,46 | » » ——— | » » 1.0000 |
| F.FR. | 1 | » » 1.4822 | » » 1.5118 |
| SW.FR. | 1 | » » 2.3919 | » » 2.4397 |
| DJ.FR. | 1 | » » 0.03525 | » » 0.03596 |

Muqdisho, 20.7.1975

Agaasimaha Guud
ee KMG
*SHARIIF ABUUBAWAR MAXAMAD*

*CUMAR AXMAD CUMAR*
*Guddoomiyaha*

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle XASAN XUSEEN XASAN, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 4/6/74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda wadajir, oo leh qiyaas rektangolaar 40,50,13,50 kuna fadhi-546,75/mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Jid:-
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 554; 552; iyo 550:-
Galbeed waxaa ka xiga: Jid:-
Bari waxaa ka xiga: Dhul Gal lamb. 918/66:-

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhsimaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maamood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 LUG. 1975

(114)

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*N A A D A  D H U L*

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Isaaq Maxamuud Maxamed, maalintii 31/12/68 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodon 5°km. qaabkiisuna ahaa rektangolaar addi mihiisuna ahaayeen 60 × 56 kuna fadhiye 3360/mdh., looga qaaday dan-

ta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Wardhiigle Jidka 21 Oktoobar sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD/1679°2624/68 ee 17/11/68 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:-

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Wardhigley Jidka 21 Oktoobar qaabkiisuna waa raktangolaar addimihiisu yihiin 40 × 60 kuna fadhiya 2400/mdh; soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:-

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Jid:-
Koofur waxaa ka xiga: Jid:-
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 221 iyo 224:-
Bari waxaa ka xiga: Jid:-

Muqdisho, 20 LUG. 1975

(115)

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MAXKAMADDA

Hadduu arkay weydiinta horay ku qoran;

Markuu arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiski Bankiga Ganacsiga Umadda Laanta Sedexaad (eeg Warq. Lam. 1198), wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa; Hadduu arkay qod. 69 DL 9.9.65 n. 2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda buugga Keydka lam. 2165°4 noociisu ahaa AL PORTATORE kuna qornayd Shs. 400/= (afarboqol/=);

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo buug Keyd cusub ninka la yiraahdo XASAN MAMAXED MAXAMUUD, oo ah ninki iska lahaa buug Keydka lumidiisa horay loo cadeeyey, ka dib marki 30 maalmood ka soo wareegto maalinta dekreetadan lagu shaaciyo Faafinta Dawladda ee Rasmiga ah:-

WAXAA LA CODSANAYAA

In buug Keydka la sameyndoono gacanta laga galiyo Jaalle XASAN MAXAMED MAXAMUUD ama qof kale ee asaga ka sita wakaalad Sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30ka maalmood ah ee kor lagu soo sheegay:-

Muqdisho 4/8/75.
(116)

Garsooraha Maxkamadda
*Dr. Yaasiin Shire Faarax*

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

Arji Lamb. 4/75, Xaaji Haweeya Cabdi Mooge - Arjiile. Iyo Bankiga Gnacsiga Ummadda Laanta Hargeysa,

### AMAR (DEKRETO) N. 16/75

Labada Magac ee kor ku qoran waxay hor keeneen Maxkamadda sida hoos ku qoran;

1. Xaaji Haweeye Cabdi Mooge Maxkamadda hor keentay Arji ay cadeyneyso in Buugga Kaydka Lamb. 1750/7 ka lumay. Bankiga iyo Saldhigyadda Booliskana Ogeysiisay, waxayna codsatay in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

2. Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Hargeysa, Isaguna Maxkamadda wuxu keenay warqad Lamb. 2132 T/ahayd 1/4/75 oo u ku sheegayo in u lumay Buugga Lamb. 1750/7 kuna qorna lacag dhan So. Sh. 897/98 Buuggaas oo ku qorna Xaaji Haweeya Cabdi Mooge lagana sameeyey Xaaji Haweeya Cabdi Mooge.

Sidaa darteed Markii aan eegay waxyaabaha kor ku qoran iyo Markii aan arkayQod. 37 iyo 27 Xeerka Lamb. yahay 2 soona baxay 9/9/65; Waxaa la Amrayaa:-

1. In uu socon karin Buugga Kaydka Lamb. kor ku qoran yahay laga bilaabo Maanta.
2. In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
3. In lacagtaas ah So. Sh. 897/98 Bankigu siiyo Arjilaha muddo ku siman 15 Casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Hargeysa. 9/6/75.

(117)

Guddoomiyaha Maxkamadda
Gobolka Hargeysa
*Xusan Xaaji Yusuf*

## SAXID QALAD

Xeerka Lamb. yahay 82 Taarikhdisuna tahay 10/6/75 ee ku soo baxay Faafinta Rasmiga ah 1r 6 ee 24/5/75, qaybtiisa Degmada Waaji waxaa loo akhri doonaa sida soo socota xarafka 6 (lix°) Sheekh Isaaq Maxamed Mursal, xarafka 8 (sideedaad) waxa loo akhridoonaa Aadan Cali Maxamed.

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Mogadiscio 25 Agoosto 1975 *L. 2 R. 8*

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**EAAFIN BIL SOO BAXA** جريده شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

**W. M.**

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 3 Agoosto 1975 L. 117 — *In laga furo Safaarad Mozambic.* *Bog* *620*

XEER WASAARADDA GANACSIGA 4 Agoosto 1975 *L.118 — Sicirka dhuxusha geedaha* » *620*

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 20 Luuliyo 1975, —*Naada Dhul Maxamed Axmed Culusow* *(118)* » *622*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 6 Agoosto 1975 — *Naada Dhul Cumar Xuseen Cabdi* *(119)* » *622*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 6 Agoosto 1975 — *Naada Dhul Shooble Ibraahim Cali* *(120)* » 623

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 6 Agoosto 1975 — *Naada Dhul Maxamed Cali Badhaah* *(121)* » 623

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 6 Agoosto 1975 — *Naada Dhul Xaaji Xuseen Gacal; Cali Sheekh; Maxamuud Farax iyo Xuseen Maxamed Xasan* *(122)* » 624

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 6 Agoosto 1975, — *Naada Dhul Muriddiin Cabduqaadir Max. Dahira Cumar iyo Cabducasiis Nuur Muuddee* *(123)* » 625

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 6 Agoosto 1975, — *Naada Dhul Cabdullaahi Cusmaan Aadan* *(124)* » 626

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Okapi & Device»* *(125)* » 626

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Tictac (Wordmark)»* *(126)* » 627

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Clearsil»* *(127)* » 628

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Girling»* *(129)* » 630

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Ocusert»* *(130)* » 631

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Biolecit»* *(131)* » 632

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Moncler»* *(132)* » 633

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Moncler»* *(132)*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Chesterfield»* *(133)* » 634

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Bobbie Broaks»* *(134)* » 635

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Creme 21 and Device»* *(135)* » 636

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, — *Sumad Ganacsi «Creme 21 and Device (in Box)»* *(136)* » 637

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Fa and Device»* *(137)* » *638*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Nitrophos»* *(138)* » *639*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Glibix»* *(139)* » *640*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «W.M.A.»* *(140)* » *641*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «E.A.D.»* *(141)* » *642*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «S.V.I.L.A.»* *(142)* » *643*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Farancadde Commerciale Agency»*
*Sumad Ganacsi «S.N.»* *(143)* » *644*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*(144)* » *645*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Lasactone»* *(145)* » *646*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi Biofungin* *(146)* » *647*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Marvels»* *(147)* » *648*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Kohler»* *(148)* » *649*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Balmox»* *(149)* » *650*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganasci «Primagram»* *(150)* » *651*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Preforan»* *(151)* » *652*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Nuvacrom»* *(152)* » *653*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Akar»* *(153)* » *654*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Cotban»* *(154)* » *655*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Gesagard»* *(155)* » *656*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Dimecrom»* *(156)* » *657*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Gesaprim»* *(157)* *Big* *658*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975, —
*Sumad Ganacsi «Nogos»* *(158)* » *659*

WASAARADDA WARSHADAHA 12 Agoosto 1975 —
*Sumad Ganacsi «Fcb Device &»* *(159)* » *660*

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR 12.8.75 L.161
*Sumad Ganacsi «FIAT - ALLIS»* *(160)* » *661*

*u leeyahay Yuusuf Cabdillahi Nuur* » *662*

# BOGGA LABAAD

**XERR MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 3 Agosto, 1975, L.117**

MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA

IYADOO LA ARKAY Xaashida 1aad ee Golaha Sare ee Kacaanka oo u wareejineysey Maamulka Sharciga Dawladda iyo Qawaaniinta Dalka

IYADOO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed oo la socda ruuxa Kacaanka;

IYADOO LA ARAKY Sharciga Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda, lambar. 9 oo 8dii Sebtembar 1971, iyo Sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 26kii Abriile 1973 (Foreign Service Low);

IYADOO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Dawladda, Sharci lambar 14 oo 3dii Juunyo 1962;

IYADOO LA TIXGELINAYO Talooyinka ay soo Jeedisey Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

AMARXEER

Qodobka 1aad

Waxaa la guddoomiyey in la furo Safaarad Soomaaliyeed, Saldhiggeeduna ahaandoona Jamhuuriyadda Mozambic.

Muqdisho 2 **Agosto 1975**

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle Sarreeye Gaas Moxamed Siyaad Barre*

---

**XEER WASAARADDA GANACSIGA**
**Tr. 4 Agosto, 1975, L.118**
**Qiimaha Dhuxusha:-**

XOGHAYAHA WASAARADDA GANACSIGA

MARKII UU ARAKY Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar **1969;**

MARKII UU ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 17ka oo soo baxay 17ka Juun 1967 ee ku saabsanaa ilaalinta qiimaha alaabta lagama maarmaanka **ah;**

MARKII UU ARKAY Xeerka Lambarkiisu yahay 128 ee soo baxay 14 Nofembre 1974, kuna saabsanaa sicirka dhuxusha Geedaha;

AYADOO LA MAQLAY Guddiga lagala tashanaayey ilaalista sicirka alaabta lagama **maarmaanka ah;**

## WUXUU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDA

### Qodobka 1aad

Sicirka Dhuxusha Geedaha wuxuu noqodoona sida aanu u gooy: ee hoos ku qiran.

Sicirkaanu Muqdisho buu ku kooban yahay:

| Badeecadda | Sicir Jumladeed Kiintaalki | Sicir Kiiladi | Tafaarigeed Kiintaalki |
|---|---|---|---|
| Dhuxul-Geed | 100 Kg. ah Sh. so. 14,50 | Sh. so. 0,18 | 100 Kg.ah Sh. so. 18 |

### Qodobka 2aad

Qof kasta ee u hogaamsami waaya Qodobka 1aad (Koowaad) ee Xeeran ku yaala wuxuu mudan doonaa Ciqaabta lagu caddeeyey Qodobka 7aad (Xubinta a) kuna qoran Sharciga lambarkiisu yahay 17 ee 17kii Juun 1967.

### Qodobka 3aad

Xeerkaan wuxuu dhaqan galayaa durbaba wuxuu tirayaa xeer kastoo ka soo horjeeda. Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda:-

Muqdisho 3 Agosto 1975

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Sax. (Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud)*

## BOGGA SEDDEXAAD

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

### N A A D A  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Axmed Culusow, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 7/7/75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl - Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar ah 25 × 21 kuna fadhiya 525/= mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed:-
Koofur waxaa ka xiga: Cali Jiisow Nuur
Galbeed waxaa ka xiga: Maxamed Xagaley:-
Bari waxaa ka xiga: Jid - Waddo:-

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho 20 LUG. 1975

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(118)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

### N A A D A  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cumar Xuseen Cabdi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka T.markay ahayd 20/11/74kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-shiid, oo leh qiyaas rektangolaar ah 30 × 60 kuna fadhiya 1800/= mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo:-
Koofur waxaa ka xiga: Maxamed Cali Badha:-
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo:-
Bari waxaa ka xiga: Waddada Balcad:-

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha

Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshye buugga xeerka dawlad da.

Muqdisho, 6 Agosto, 1975

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(119) *Jnj. C. C. Keenadiid*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

**N A A D A D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shooble Ibraahim Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka markay taariikhdu ahayd 3/11/62 uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wadajir, oo leh qiyaas rektangolaar ah 50 × 40 kuna fadhiya 2000/= mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: dhul dad leeyahay:-
Koofur waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed:-
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo:-
Bari waxaa ka xiga: dhul dad weydiistay:-

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Agosto, 1975

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(120) *Jnj. C. C. Keenadiid*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

**N A A D A D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cali Badhaah, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 20/11/74 uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal xafadda Yaaq-

Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar ah 30 × 60 kuna fadhiya 1800/= mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Cumar Xuseen Cabdi:-
Koofur waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed:-
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo:-
Bari waxaa ka xiga: Waddada Balcad:-

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho. 6 Agosto, 1975

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(121)* *INJ. C. C. Keenadiid*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaji Xuseen Gacal; Cali Sheekh; Maxamuud Faarax iyo Xuseen Maxamed Xasan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 28/6/75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas rektangolaar ah 27 × 20 kuna fadhiya 540/= mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Maxamed aw Cali iyo Yuusuf:-
Koofur waxaa ka xiga: Waddo:-
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo:-
Bari waxaa ka xiga: Waddada Jubada Sare:-

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Agosto, 1975

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(122)* *INJ. C. C. Keenadiid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD
### Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

## N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muriddiin Cbdulqaadir Maxamed: Dahir Cumar iyo Cabdulcasiis Nuur Muudde, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 10/6/68, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan jidka Afgooye oo leh qiyaas trabesiyo iyo rektangolar A - Trabeesiyo addimihiisu yihiin: $30+20\times47/2=1178{,}50/=$ MDH. B. rektangolaar addimihiisu yihiin $47\times25=1175$, 00 isugeyntooda guudna tahay 2353,50/= mdh.

Soohinmohooduna kala yihiin sida hoos ku tilmaaman A iyo B.

(A)

Waqooyi waxaa ka xiga: Maye Xaji:-

Koofur waxaa ka xiga: Waddo:-

Galbeed waxaa ka xiga: X. Hogaanka. K.

Bari waxaa ka xiga: Waddo:-

(B)

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo:-

Koofur waxaa ka xiga: Waddo:-

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul D.

Bari waxaa ka xiga: Waddo:-

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga diidi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho. 6 Agosto, 1975

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(123)* *INJ. C. C. Keenadiid*

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

## N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Cusmaan Aadan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 24/7/75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar ah 27 × 13,50 kuna fadhiya 364,50/= mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo:-
Koofur waxaa ka xiga: Masajid:-
Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Kacaanka:-
Bari waxaa ka xiga: Waddo:-

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadd dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga diidi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Agosto, 1975

Maamulaha Qaybta Dhismaha ivo Dhulka
*(124)* *INJ. C. C. Keenadiid*

---

**WASAARADDA WARSHADAHA**
Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii jinaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood ahna wakiilka SHIRKADDA ERNST JOACHIM markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, in isla SHIRKADDAAS loo olaaliyo sumad Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:
«OKAPI & DEVICE»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyay; XMEDaaaaH g Booqrkysgooggg-

Wuxuu shahaaddo sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA ERNST JOACHIM GERLING saldhiggeedu yahay of 27, BROSSHAUSER STRASSE SOLINGEN OHLIGS FEDERAL REPUBLIC GERMANY, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi

sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taafiikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«OKAPI & DEVICE»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAAS 20 & 49.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici kara a xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi karta naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(125)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

---

**WASAARADDA WARSHADAHA**

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3soona baxay jinaayo 1955 kuna saabsan sumadaha ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka SHIRKADDA: P. FERRERO e C.S.P.A, AN ITALIAN CORPARATION, markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, kaa oo rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:
«TICTAC (Wordmark).»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiil nimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey:

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA: P. FERRERO e C.S.P.A, AN ITALIAN CORPORATION saldhiggeedu yahay: PIAZZA PIETRO FERRERO, ALBA PROVINCE OF CUNEO REPUBLIC OF ITALY, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, si loogu ilaaliyo Dal Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«TIC TAC (Wordmark).»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAASKA 37.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku haddoon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(126)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

---

**WASAARADDA WARSHADAHA**

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr.3 soona baxay 22kii jinaayo 1955, kuna saabsan sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraha Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka SHIRKADDA: RICHARDON MERRELL Inc. markay taariikhdu ahayd 17.5.75, saacaduna ahayd 12,10, kaa oo rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman;

«CLEARASIL»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cahsuurta Dawladda lagu bixiyay;

Wuxuu shahaaddo sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA RICHARDSON MERRELL Inc. saldhiggeedu yahay WILTON CONNECTICUT 06897, (U.S.A.), taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ah oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Farasaacaduna ahayd 12,10, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda ca Sumdaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 27.5.75 hoos ku tilmaaman:

«CLEARASIL»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumaddeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAAS 31 & 48.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha Gqnqcsiga, saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku haddoon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda
*(127)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan.*

---

**WASAARADDA WARSHADAHA**
Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii jinaayo 1955 kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka SHIRKADDA: GIRLING LIMITED KINGS ROAD, markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10 kaa oo rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaalliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaanman:

«G AND HAND DEVICE.»

ISAGOO ARKAY Xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyay xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta;

Wuxuu Shahaado Sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA: GIRLING LIMITED KINGS ROAD saldhiggeedu yahay TYSELEY, BIRMINGHAM 11, (ENGLAND).
taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaasyahiisii sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku; tilmaaman:

«G AND HAND DEVICE.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta waxaana lagu sumaddeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAASKA 12.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(128)* *(Dr. Cabdiqaasin Salaad Xasan*

---

**WASAARADDA WARSHADAHA**
Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii jinaayo 19 kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood ahna wakiilka SHIRKADDA: GIRLING LIMITED KING ROAD, markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, kaa oo rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«GIRLING»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyeye:

Wuxuu Shahaaddo Sumadd Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA: GIRLING LIMITED KING ROAD, saldhiggeedu yahay TYSELEY, BIRMINGHAM 11, (ENGLAND), taa oo si hagaagsan u keensa arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraa markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«GIRLING.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta waxaana lagu sumaddeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAASKA 12.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon kara hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(129)* *(Dr. Cabdiqaasin Salaad Xasan*

WASAARADDA WARSHADAHA
Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii jinaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka SHIRKADDA: ALZA CORPORATION, markay taaariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, kaa oo rabo in isla Shirkaaddaas loo iaaliyo sumadda ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«OCUSERT»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey;

Wuxuu shahaaddo sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA A LZA CORPORATION saldhiggeedu yahay PALO ALZA CALIFORNIA 94304, UNITED STATES OF AMERICA, taa oo si hagaagsan ukeensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman.

«OCUSERT.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAAS 48.»

Sumadda iyada ah waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

*(130)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*
Xoghayaha Dawladda

## WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Summadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jinaayo 1955, kuna saabsan Summadda Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Wershadaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle: Axmed Sheekh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda; Dr. SCHEIFFER ARZNEIMITTEL - GESELLSCHAFT MIT BESCHARANKTED MAFTUNG. markay taariikhdu ahayd 27.5.1975 saacaduna ahayd 12,10 kaa oo rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«BIOLECIT»

ISAGOO ARKAY Xaashida timaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, Xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Shahaado sumad Ganacsi siinayaa Shirkadda Dr. SCHEIFFER ARZNEIMITTEL - GESTELISCHAFT MIT Saldhiggeedu Yahay of 5 KOLN 1, PIPINSTRASSE 16 (HEUMARKT), FED. REP. OF CERMANY. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 27.5.1975. saacaduna ahayd 12,10, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda summadda hoos ku tilmaaman:

«BIOLECIT»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran: 48.

Sumadda iyada waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(131)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jinaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda: F.HOFFMANN - LA ROCHE & CO. LIMITED COMPANY, markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«MONCLER.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, iyo xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyaya:

Wuxuu shahaaddo sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA: F.HOFFMANN - LA ROCHE & CO. LIMITED COMPANY, saldhiggeedu yahay: of 124 CRENZACHERSTRASSE, BASLE SWITZERLAND, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumdaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca, markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«MONCLER.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta; waxaana lagu sumaddenkaraa alaabada ama miraha tacabka ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

«KALAASKA 31.»

Sumadda iyada ah waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababka (imballaggi), resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(132)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jinaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda: LIGGETTI e MYERS INCORPORATED, markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12,10, kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Gnacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«CHESTERFIELD.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyay:

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa Shirkadda: LIGGETTI e MYERS INCORPORATED oo saldhiggeedu yahay: of 4100 ROXBORO ROAD, DURHAM, STATE OF NORTH CAROLINA (U.S.A.), taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca, markay taariikhdu ahayd 27.5.75, saacaduna ahyd 12,10, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuryiadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«CHESTERFIELD.»
Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

«KALAASKA 32.»
Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababka (imballaggi), resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

*(133)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jinaayo 1955 kuna saabasan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood, ahna Wakiilka Shirkadda: BOBBIE BROOKS, INCORPORATED, markay taariikhdu 27.5.75, saacaduna ahayd 12,10, kaa oo rabi in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo Sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«BOBBIE BROOKS.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakaalnima iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyay:

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa: SHIRKADDA: BOBBIE BROOKS saldhiggeedu yahay: 3830, KELLY AVENNUE, CLEVELAND, OHIO 4411 (U.S.A.), taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca, markay taariikhdu ahayd 27.5.75, saacaduna ahayd 12,10, si loogu ilaaliyo dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«BOBBIE BROOKS.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta w xaana lagu sumadeeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

«KALAASKA 26.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababka (imballaggi), resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyado sawir ah lehna nooc iyo qyiaas kasta ama sidii kaloo ku habboon;

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(134)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Otkoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jinaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Farca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood, ahna Wakiilka Shirkadda HENKEL & CIE GMBH markay taariikhdu ahayd 2.4.75 saacaduna ahayd 13ka iyo 20 galabnimo kaa oo rabi in isla Shirkadaas loo ilaaliyo sumadda ganacsiga ah oo hoos ku tilaaman:

«CREME 21» AND DEVICE»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyay;

Wuxuu Shahaaddo Suamd Ganacsi Siinayaa Shirkadda HENKEL & CIE GMBH saldhiggeedu yahay HENKELSTRASSE 67,4000 DUSSELDROF HOLTHAUSEN WEST GERMANY, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 2.4.75 saacaduna ahayd 13ka iyo 20 si loogu ilaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:
«CREME 21» AND DEVICE (IN BOTTLE) »

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa noo iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAAS 31»

Sumadda iyada ah waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa niidada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

## WASAARADDA WARSHADAHA

### Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jinaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood, ahna Wakiilka SHIRKADDA HENKEL & CIE GMBH markay taariikhdu ahayd 2.4.75 saacaduna ahayd 13ka iyo 20 kaa oo rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«CREME 21» AND DEVICE (IN BOX)

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyay:

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA HENKEL & CIE GMBH saldhiggeedu yahay HENKELSTRASSE 67, 4000 DUSSELDROF HOLTHAUSEN WEST GERMANY, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi Sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 2.4.75, saacaduna ahayd 13ka iyo 20 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman:

«CREME 21» AND DEVICE (IN BOX)

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAAS 31.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa lagu daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

(D. *Cabdiqasim Salaad Xasan*)

**WASAARADDA WARSHADAHA**

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969; Sharciga sumadaha ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jinaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood, ahna Wakiilka HENKEL & CIE GMBH markay taariikhdu ahayd 2.4.75 saacaduna ahayd 13,20 duhurnimo kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumad ganacsiha oo hoos ku tilmaan:

«FA» AND DEVICE»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyay;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA HENKEL & CIE GMBH saldhiggeedu yahay HENKELSTRASSE 67,4000 DUSSELDROF HOLTHASSEN WEST GERMANY, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi Sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 2.4.75, saacaduna ahayd 13,20, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman;

«FA» AND DEVICE

Sumadda iyadaha ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAAS 31.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, saababka (imballaggi), resiidyada bakhs hadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(137)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

## WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jinaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood, ahna Wakiilka SHIRKADDA: BASF AKTIENGESELLSCHA FT markay taariikhdu ahayd 17.3.75, saacaduna ahayd 12,45, kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«NITROPHOS.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta lagu bixiyay:

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa Shirkadda: BAST AKTIENGESELLSCHAFT, saldhiggeedu yahay 6700 LUDWISHAFEN WEST GERMANY, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi Sharciga ah oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 17.3.75, saacaduna ahayd 12,45, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«NITROPHOS.»

Sumadada iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabaka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

«KALAASKA 7.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababaka (imballaggi), resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(138)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

**WASAARADDA WARSHADAHA**

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Summadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jinaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Wershadaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood, ahna Wakiilka Shirkadda F. HOFFMANN - YA ROCHE & CO. LIMITED COMPANY. markay taariikhdu ahayd 2.4.1975, saacaduna ahayd 13,20, kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman;

«GLIBIX.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA F. HOFFMANN LA ROCHE LIMITED COMPANY. Saldhiggeedu yahay of 124 CRENZACHERSTRA SSE, BASLE, SWITZERLAND taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi Sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 2.4.1975, saacaduna ahayd 13,20, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«GLIBIX.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

48. Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi), resaadyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(139)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

## WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jinaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Maxamed Faarax Saciid, ahna Agaasimaha Shirkadda: Wadajir Mercantile Agencies markay taariikhdu ahayd 20.4.75, saacaduna ahayd 9,30, kaa oo u rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«W.M.A.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa Shirkadda: Wadajir Mercantile Agencies saldhiggeedu yahay Muqdisho, P.O.BOX 690, Tel. 2826. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi Sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariihdu ahayd 20.4.75, saacaduna ahayd 9,30. si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman:

«W.M.A.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAASYADA: 17, 11, 46, 48, 49.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi), resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(140)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**
Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Cismaan Jaamac Yusuf ahna, Guddoomiyaha Shirkadda, ahna Canacsade iskiisa isu Maamula, markay taariikhdu ahayd 4.5.1975, saacaduna ahayd 10.00 kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo Sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«E.A.D.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA EAST AFRICAN DISTRIBUTORS (PTE) COMPANY. Saldhiggeedu yahay MUQDISHO P.O.BOX (914). taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihoosi Sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 4.5.1975. saacaduna ahayd 10.00, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman:

«E.A.D.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAASYADA: 45,48,31.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi), resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(141)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

## WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGGO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Cali Shiikh Maxamed ahna Guddomiyaha Shirkadda markay taariikhdu ahayd 5.5.1975 saacaduna 10.30, kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo Sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«S.V.I.L.A.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa SHIRKADDA SVILA S.P.A. Saldhiggeedu yahay MOQDISHO, S.B. 464. Tel. 3421. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi Sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca marakay taariikhdu ahayd 5.5.1975, saacaduna ahayd 10.30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman:

«S.V.I.L.A.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waraana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAASYADA: 17.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi), resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(142)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca, Jaalle, Bashiir Nuur Cali oo ah Maamulaha Shirkadda «AL NASAR COOPERATIVES» markay taariikhdu ahayd 24.4.75, saacaduna ahayd 13,00 kaa oo uu rabo in loo ilaaliyo Sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«S.N.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda caddeynta ilaalinta, iyo tan cashuurta Dawladda lagu baxshay;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi Siinayaa Shirkadda AL NASAR COOPERATIVES saldhiggeedu yahay Muqdisho, P.O.BOX 821, kaa oo si hagaagsan u keensaday arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi Sharciga ahaa oo dhan,Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 24.4.75, saacaduna ahayd 13,00 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hocs ku tilmaaman:

«S.N.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta waxaan lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaasyada hoos ku qoran:

«KALAASYADA 2,3,24,42,20,49.»

Sumadda iyada ah waxaa kaloo la socon kara hantida (regione sociale) ama siglaha weydiistaha. Waxaa kaloo daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi), resiidyada, bakhshadaha. Waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agosto, 1975

Xoghayaha Dawladda

*(143)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

## WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Jaalle, Yuusuf Ugaas Faracadde, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga, markay taariikhdu ahayd 17.4.75, saacaduna ahayd 11,15, kaa oo uu ku rabo in loo ilaaliyo Sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«FARACADDE COMMERCIAL AGENCY.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, iyo kuwa cashuurta Dawladda lagu baxshay;

| » | 09 | Saponi altri compresi quelli medicinali | D. F. | 60% | D. D. | 10% |
| ) La voce | 90.04 | Occhiali, ecc. e cosi modificata : | | | | |
| Voce | 90.04 | Occhiali, occhialetti, occhialini ed oggetti simili | D. F. | 13% | D. | = |
| Sottovoce | 01 | Occhiali per sole | D. F. | 10% | D. D. | = |
| » | 09 | Atlri occhiali | | | | |
| Note: | | | | | | |
| ) Item | 34.01 | Soaps etc. is amended as follow: | | | | |
| Item | 34.01 | Soaps | | | | |
| Submitem | 01 | Profumed and toilet soaps | D. F. | 63% | D. D. | 10% |
| » | 09 | Other soaps included medicinal | D. F. | 60% | D. D. | 10% |
| ) Item | 94.04 | Spetales, is amended as follow: | | | | |
| Item | 94.04 | Spectacles, price, nez, lorgnettes, goggles, and he like, corrective, protective or other | | | | |
| Subitem | 01 | Sectacles sun protective | D. F. | 13% | D. D. | = |
| » | 09 | Others | D. F. | 10% | D. D. | = |

## NAADO DHUL

Waxaa la ogeysiinayaa dhamaan dadweynaha degan degmada Kisimaayo in Jaalle Xaaji Saciid Goodir Caamir taariikhdu markay ahayd 12.1.75 uu noo keenay arji uu ku weydiisanayo gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Kisimaayo Xaafadda Calanley Waaxda Hawl - Wadaag ugana dhisan yahay haatan guri dhagax ah oo uu asagu leeyahay; dhklua asaga ah qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 14×12,50 kuna fadhiya 175/=mdh.

Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:-
Waqooyi waxaa ka xiga: Shariif Maxamed Beyti.
Koofur waxaa ka xiga: Cawad Saalim.
Galbeed waxaa ka xiga: Cali Dimnaan.
Bari waxaa ka xiga: Jidka Dukaamada.

Sidaas awgeed qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naadada iyo naqshadda dhulka oo ku dhegan looxa ogeysiisyada ee Dawladda Hoose ee degmada Kisimaayo laga bilaabo 25.1.75 illaa 25.2.75 waxaana laga doodi karaa muddadaas 30 (sodonka) maalmood ah oo u taariikhda aan hor ku soo sheegnay wixii ka dambeeyana lama qaban doono.

Kisimaayo, 25.1.75.

Madaha Xafiiska Dhismaha iyo Dhulka
*W.S. Jeom. Cali Xaaji Cabdulle*

Guddoomiyaha Golaha Kacaanka Deg.
*W.S. Yuusuf Ibraahim Cali (Abuuras)*

---

## OGEYSIIS

Waxaa la ogeysiinayaa dhamaan dadweynaha degan degmada Belet - Weyne in Jaalle Maxamed Calawi Maxamed taariikhdu markay ahayd 16.5.75 uu noo keenay arji uu ku weydiisanayo gabal dhul dawaldeed ah oo ku yaal degmada Belet - Weyne Xaafadda Haawa Taako Laanta Liibaan fallarka Fay - Yarey - dhulkaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 17×11 kuna fadhiya 187/=mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:-

Waqooyi waxaa ka xiga: Macallim Xuseen Xaaji Barre.
Koofur waxaa ka xiga: Saalax Calawi (Tiiti)
Galbeed waxaa ka xiga: Maxamed Cabdulle Labani.
Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Sidaas awgeed qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshada dhulka ee ku dhegan ama taal XafiiskaDawladda Hoose ee degmada Belet - Weyne iyo looxeeda ogeysiisyada oo uu ku dheganaan

doono muddo 30 (sodon)maalmood ah laga bilaabo 24.5.75 illaa 22 Juun 75 waxaa laga doodi karaa mudadaas u dhexeysa taariikhda aan kor ku soo sheegnay wixii ka dambeeyana lama qaban doono.

B/Weyne 24.7.1975.

Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Degmada B/Weyne

*Waxaa Saxiixay G Le Maxamad Cartan Ismaciil*

---

**WASAARADDA WARSHADAHA**

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxhood, ahna Wakiilka SHIRKADDA: SHIRASUNA DENKI KABUSHIKI KAISHA markay taariikhdu ahayd 5.6.75 saacaduna ahayd 11.30. kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda ganacsiga; oo hoos ku tilmaaman: «SILVER (Special form).»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta xaahsida Wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyaya: Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa Shirkadda: SHIRASUNA DENKI KABUSHIKI KAISHA saldhiggeedu yahay: of JABAN, of 1,7-Chome, okute-Cho, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisii sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 5.6.75 saacaduna ahayd 11,30 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«SILVER (Special form).»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta waxaana lagu sumaddeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaasyada hoos ku qoran:

KALAASYADA, 10, 45.
Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lgu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababka (imballaggi), resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir leh nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho 12 Agoosto, 1975.

Xoghayaha Dawladda

**WASAARADDA WARSHADAHA**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka SHIRKADDA BASF AKTIENGESELLSCHAFT, markay taariikhdu ahayd 5/6/75 saacaduna ahayd 11,30, kaa oo rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«BASF WITH SPIRAL COLOURED.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta iyo ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta lagu bixiyey:

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa SHIRKADDA: BASF AKTIENGESELLSCHAFT, saldhiggeedu yahay: 6700 LUDWIGSHAFEN, FEDERAL REPUBLIC OF GERMANY, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisii sharciga ah oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 5/6/75, saacaduna ahayd 11,30, siloogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«BASF WITH SPIRAL COLOURED.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumaddeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

«KALAASKA 10.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo kuu soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon;

Muqdisho 12 Agoosto, 1975.

Xoghayaha Dawladda

(165) *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

## WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955 kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka SHIRKADDA: BASF AKTIENGESELLSCHAFT, markay taariikhdu ahayd 5/6/75, saacaduna ahayd 11,30, kaa oo rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo Sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«BASF.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta iyo ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey:

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa SHIRKADDA: BASF AKTIENGESELLSCHAFT, saldhiggeedu yahay 6700 LUDWIGSHAFEN, FEDERAL REPUBLIC OF GERMANY, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisii sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 5/6/75 saacaduna ahayd 11,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«BASF.»

Sumadda iyad aah waxay ku soo bixi kartc nooc iyo qiyaas kasta waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaasyada hoos ku qoran:

KALAASYADA: 5,7,10,17,48.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho 12 Agoosto, 1975.

*(166)*

Xoghayaha Dawladda
*(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955 kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka SHIRKADDA: TRIO KABUSHIKI KAISHA, mar: kay taariikhdu ahayd 5/6/75 saacaduna ahayd 11,30, kaa oo in, isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«KENWOOD.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyay:

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa SHIRKADDA: TRIO KABUSHIKI KAISHA, saldhiggeedu yahay OF 6-17,3- CHOME, Aabadai, Meguri-ku, TOKIYO-YO, JABAN, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiis sharcgia ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 5/6/75, saacaduna ahayd 11,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«KENWOOD.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumaddeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaasyada hoos ku qoron:

KALAASYADA, 9,10,45.

Sumdda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho 12 Agoosto, 1975.

Xoghayaha Dawladda

*(167)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

## WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna sabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle, Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda: COMPAGNIE DES MONTRES LONGINES FRANCILLON S.A, markay taariikhdu ahayd 5/6/75, saacaduna ahayd 11,30, kaa oo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyi sumadda ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«WING DEVICE.»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta lagu bixiyay;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa SHIRKADDA: COMPAGNIE DES MONTRES LONGINES FRANCILLON, saldhiggeedu yahay: OF SWITZERLAND, of SAINT - IMIER, SWITZERLAND, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisii sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 5/6/75, saacaduna ahayd 11,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«WING DEVICE.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumaddeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaasyada hoos ku qoran:

KALAASYADA, 45,30,8.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho 12 Agoosto, 1975.

*(168)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*
Xoghayaha Dawladda

WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22 kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Shiikh Maxmood ahna wakiilka Ganacsadaha ERNST - Joachim Gerling, markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahayd 12ka iyo 10ka duhurnimo kaa oo rabi in isla Ganacsadahaas loo ilaaliyosumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«OKAPI CUTLERY LABEL»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyay;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa Ganacsadaha ERNT JOACHIM GERLING, saldhiggeedu yahay 27, BROSSHAUSER STRASSE, SOLINGEN OHLIGS, FEDERAL REPUBLIC OF GERMANY taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga markay taariikhdu ahayd 27.5.75 saacaduna ahyd 12ka iyo 10ka si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«OKAPI CUTLERY LABEL»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

KALAAS 20 iyo 49.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bxii kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*(Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

## WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca sumdaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda FISONS LIMITED, A BRITISH COMPANY, markay taariikhdu ahayd 23.6.1975, saacaduna ahayd 12,30 kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«FISONS»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa SHIRKADDA FISONS LIMITED, A BRITISH COMPANY saldhiggeedu yahay FISONS HOUSE, 9 GROSVENOR STREET, LONDON, ENGLAND taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 23.6.1975, saacaduna ahayd 12.30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Suomadlda hoos ku tilmaaman:

«FISONS»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

KALAAS 7 iyo 48.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) rediidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa maadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho 12 Agoosto, 1975.

Xoghayaha Dawladda

## WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda WILKISON SWORD LIMITED COMPANY INCORPERTED IN THE U.K. markay taariikhdu ahayd 23.6.75 saacaduna ahayd 12,30, kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«ARROW»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa SHIRKADDA SWORD LIMITED COMPANY INCORPORATED IN THE U.K. saldhiggeedu yahay SWORD HOUSE, TETTERIDGE ROAD, HIGH WYCOMBE, BUCKINCHAMSHIRE, ENGLAND. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 23.6.1975 saacaduna ahady 12.30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«ARROW»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana laga sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

20.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon kadaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho 12 Agoosto, 1975.

Xoghayaha Dawladda

## WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda WILKINSON SWORD LIMITED A BRITISH COMPANY markay taariikhdu ahayd 23.6.1975 saacaduna ahayd 12.30, kaa oo rabo in isla Shirkaddaasi loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«APOLLO»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo:

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa SHIRKADDA WILKISON SWORD LIMITED A BRITHISH COMPANY. saldhiggeedu yahay BUCKINCHAMSHAIRE, ENGLAND. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 23.6.1975 saacaduna ahayd 12.30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«APOLLO»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeynkaraa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

**20.**

Suumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agoosto 1975.

Xoghayaha Dawladda

WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda BEREC INTERNATIONAL LIMITED markay taariikhdu ahayd 23.6.1975 saacaduna ahayd 12.30, kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«BEREC & DIVICE»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa SHIRKADDA BEREC INTERNATIONAL LIMITED saldhiggeedu yahay 1255, HIGH ROAD, WHETSTANE, LONDON N.200ES, ENGLAND. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 23.6.1975 saacaduna ahayd 12,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«BEREC & DEVICE IYO LACAAMAD.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

10,13,20, iyo 49.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama sigłaha weydiistaha, waxaa kaloo aga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agoosto 1975.

Xoghayaha Dawladda

## WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsgia;

ISAGOO AKRAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Xassan Cabdi Eybakar ahna Ganacsade Iskiisa u leh markay taariikhdu ahayd 25.6.1975, saacaduna ahayd 12,25, kaa oo rabo in isla loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«B.D.B. IYO SAWIR»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa Ganacsiga Iskiisa u leh Beerta Diggaaga Benadir saldhiggeedu yahay Mogadisho, P.O.BOX 584, Tel: 8719 taa oo hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 25.6.1975 saacaduna ahayd 12.25, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«B.D.B. IYO CALAAMAD»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

3.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agoosto 1975.

*(174)*

Xoghayaha Dawladda
*(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGGO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Xaaji Raaghe Wehliye ahna Guddoomiyaha Iskaashatada markay taariikhdu ahayd 15.6.1975, saacaduna ahayd 8.35, kaa oo rabo in isla Shikaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«I.G.F.W. IYO SAWIR»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan ćashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa ISKAASHATADA GANACSIGA FARSHAXANKA WADAJIR saldhiggeedu yahay XAMAR GOBOLKA SHANGAANI P.O.BOX 638. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 15.6.1975 saacaduna ahayd 8.35, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«I.G.F.W. IYO CALAAMAD»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

49.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agoosto 1975.

Xoghayaha Dawladda

*(175)* *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan)*

## WASAARADDA WARSHADAHA

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969; Sharciga Sumadaha Ganacsiga rl. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Shiikh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda; ALLAMANNA SVENSKA ELEKTRISKA. markay taariikhdu ahayd 9.6.1975, saacaduna ahayd 12.15, kaa oo rabo in isla Shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«ASEA»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

Siinayaa SHIRKADDA ALLAMANNA SVENSKA ELEKTRISKA saldhiggeedu yahay AKTIEBOLOGET OF VASTERAS SWEDEN N. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 9.6.1975, saacaduna ahayd 12.15, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda sumadda hoos ku tilmaaman:

«ASEA.»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi karaa nooc iyo qiyaas kasta waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

10,12,20,45.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada iidhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Muqdisho, 12 Agoosto 1975.

Xoghayaha Dawladda

(176) *(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xaggar)*

## GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

Hadduu arkay weydiinta horay ku qoran,
Hadduu arkay Qod. D.L.1969 N. 2;

## WUXUU CADDEYNAYAA

Lumidda Jeegaga Keydka Lam. 482 Shs. 10.560/= ee 3/7/1975 iyo Lam.1486 Shs. 836.25 ee 3/7/1975.

Iskana lahaa Degmada Shiingaani sida ku cad warqadda Lam. DRO 23353 T. 2/8/75. ee Bankiga Ganacsiga Ummadda L. 2aad.

## WUXUU AMRAYAA

In Degmada k roku Magacaaban loo sameeyo Jeegag cusub ka dib ay ka soo wareegaro 15 maalmood markii Dekretadaan ku soo baxdo Buugga Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

## WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegaggaas la sameyndoono gacanta laga Galiyo Degmada Shiingaani ama qof Wakaalad sharci ah ka sita asaga, ayadoo la hubinayo muddada 15ta malmood ah ee kor lagu soo sheegay. In cidna cabasho keensan.

Xamar Tr. 13/8/1975.

Garsooraha Maxkamadda
*Dr. Khaliif Muuse Samantar.*

*(177)*

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Mogadisho 1 September 1975 | L.9

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

## SHARCI

## W. M.

## BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA G. SARE EE KACAANKA, 3 Agoosto 1975, L.123 — *Qiimaha Taararka Dalka Gudihiisa* — Bog 691

XEER MADAXWEYNAHA G. SARE EE KACAANKA 23 Agoosto 1975, L. 124 — *Dhisid Waaxda Uruurinta Dokumentooyinka iyo baaridda ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka* — » 692

XEER WASAARADDA MAALIYADDA 16 Agoosto 1975, L.125 — *Taariikhda ay ka bilaabmeeyso dhaqan galka lacagta Xaashida oo 100,20,10 iyo 5 Shilin Soomaali ee cusub.* — » 693

XEER WASAARADDA GANACSIGA 18.8.75 L.126 — *Diiwaan Gelinta Iskaashatada Xijiga «Raas Caseer» ee Degmada Caluula.* — » 694

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 27 Agoosto 1974 L..127 — *Dhul gatay Jaalle Dr. Maxamed Sheekh Cali Munasar. ku jadhiya mq. 2.150/=kuna yaal Muqdisho Km.5* » 695

---

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Naada Dhul 20 *Luulyo 1975 — Loreetta Maxamed Caagane (178)* » 696

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Naada Dhul 31 A-*goosto 1975 — Jaalle Farow Cali Axmed (179)* » 696

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Naada Dhul 31 A-*goosto 1975 —, Jaalle Cabdulcasiis Iimaan Nuur (180)* » 697

WASAARADDA HAWLAHA GUUD Naada Dhul 31 A-*goosto 1975 —, Jaalle Cali Axmed Maxamuud (181)* » 698

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis 19 Luulyo *1962, — Jaalle Xuseen Maxamed Cabdurasuul (182)* » 699

**XEER MADAXWEYNAKA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 3 Agoosto 1975. L.123**
**Qiimaha Taararka Dalka Gudihiisa**

GUDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka.

ISAGOO ARKAY Dekreetada lambarkeedu yahay 76 ee 21 Aprile 1955.

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii xoghayaha Dawladda ee Boostada & Isgaarsiinta.

ISAGOO ARKAY Baahida loo qabo in la kordhiyo qiimaha Taararka Dalka gudihiisa la isaga dirsado.

ISAGOO ARKAY Sicirka Adduunka oo sii kordhay.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1

Qiimaha Taararka dalka gudihiisa la isaga dirsado wuxuu noqon doonaa Taarka Caadiga ah Maalmaha Shaqada 0,30 senti Kalmadiiba. Jimcooyinka iyo maalmaha fasaxa ah 0,60 senti Kalmadiiba.

Taararka Degdegga ah Maalmaha Shaqada 0,60 senti Kalmadiiba. Jimcooyinka iyo maalmaha fasaxa ah 1,20 senti Kalmadiiba.

Qod. 2

Dekreetada lambarkeedu yahay 76 ee 21 Apriile 1955. Waxaa lagu tirtira Xeerkan.

Qod. 3

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa 1da Agoosto 1975, waxaana lagu faafin doonaa Buugga Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*(Jaalle S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Boostada & Isgaarsiinta
*(Jaalle Dr. Cabdullaahi Cosoble Siyaad)*

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Maaliyadda
*(Jaalle Dr. Cabduraxman Nuur Xirsi)*

Visto E Registrato Reb. N. 1 Foglio N. 123 Mogadiscio 3 Agoosto 1975 Il Sostituito Magistrato Ai Conti
*Jaalle Maxamed Cali Faarax*

## XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

**Tr. 23 Agoosto 1975. L. 124**
**Dhisid Waaxda Uruurinta Dokumentooyinka iyo Baariidda ee ka tirsan Madaxtooyada Sare ee Kacaanka.**

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 14 taariikh. 3 Juniyo 1962 iyo beddelladdi ka dambeeyay oo ku saabsanaa Nidaamka Dowladda;

ISAGOO ARKAY Xeerka Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka oo ku saabsanaa Nidaamka Dhisiidda iyo Qaabka Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagamamaarmaan in la kordhiyo howlaha la xiriira uruurinta dokumentooyinka iyi baaridda cilmiga ku dhisan.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1
(Dhisid Waax)

Waxaa laga dhisayaa Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka waax cusub oo loo aqoonsandoono *WAAXDA URUURINTA DOKUMENTOOYINKA IYO BAARIDA* (Documentation and Research Department).

Qod. 2

(Dhisid Waaxdu)

1. Howlaha waaxda ee lagu dhisay Xeerkan, waxay ahaan doonta, sida soo socota:
— Uruurinta Dokumentooyinka oo dan u ah Dowladda xiriirna la leh howlaha kala geddisan ee Dowladda;
— Inay ku dhaqaaqdo howlaha la xiriira baaridda nooc kasta ahaadeenee oo cilmi ku dhisan;
— Inay ku dhaqaaqdo baaridda la xiriira hiddaha iyo cilmiga.

2. Waaxda Uruurinta Dokumentooyinka iyo Baaridda waxay awood u leedahay inaay qaado tillaabooyinka habbon si ay u fuliso howlaha loo xilsaaray.

Qod. 3

(Misaaniyadda)

Lacagta ku bixi doonto Waaxda, waxaa laga bixin doonaa Misaaniyadda Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

Xeerkan isla markiiba ayoo dhaqan galayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda;

Muqdishu 23 Agoosto 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S.Gaas Moxamed Siyaad Barre*

**XEER WASAARADDA MAALIYADDA**

**Tr. 16 Agoosto 1975 L.125**

**Taariikhda ay ka bilaabmeeyso dhaqan galka lacagto Xaashida oo 100,20,10, iyo 5 Shilin Soomaali ee cusub.**

## XOGHAYAHA WASAARADDA MAALIYADDA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 iyo Sharciga Lr. 1 ee 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Qodobka 4 ee Xeerka 6da Maarso 1961 oo loo beddeley Sharciga 23ka Maarso 1961 Lr. 13 kuna saabsan Nidaamka Lacagha Soomaaliya;

MARKUU ARKAY Qodobka 4 ee Sharciga 5ta Juunyo 1962 Lr. 2 kuna saabsan nidaamka sameeynta, soosaaridda iyo wareeg - gelinta lacagta xaashida iyo tan cadadiga ee Shilin Soomaaliga ah;

MARKUU ARKAY Xeerka Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka Lr. 134 ee 11ka Disembar 1974;

ASAGOO TIXGELINAYA In gundhiggii lacagtii hore ee 100,20, 10 iyo 5 Shilin Soomaali uu haatan dhammaaday;

ASAGOO GARTAY baahida loo qabo in la gooyo taariikhda ay dhaqan galayso lacagtaasi;

AYADA UU SOO JEEDIYEY Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

## WUXUU SOO SAARAYAA

### Qod. 1

Lacagta xaashida cusub ee 100, 20, 10 iyo 5 Shilin Soomaali oo tilmaamaheeda iyo sunmadaha farsamadeeda lagu carrifay Xeerka Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka Lr. 135 ee 11kii Disembar 1974, tiradeedana lagu sheegay Xeerka Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka Lr. 134 ee 11kii Disembar 1974, waxay dhaqan galaysaa, kana soconaysa dhulka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya oo dhan, laga bilaabo 15ka Seteembar 1975.

Haddaba, waxaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya loo oggolaanyaa inuu lacagtaas wareeg - geliyo laga bilaabo taariikhda 15 ka Seteembar 1975.

Muqdisho, 16 Agoosto, 1975

Xoghayaha Dawladda ee Maaliyadda
*Jaalle Cabdiraxmaan Nuur Xirsi*

**XEER WASAARADDA GANACSIGA**

**Tr. 18.8.1975 L.126**
**Diiwaan Gelinta Iskaashatada Xijiga «Raas Caseer» ee Dègmada Cāluula;**

## WASAARADDA GANACSIGA

ISAGOO ARKAY Gō'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kācaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4.10.1973;

ISAGOO ARKEY Xeer - Guddoomiyaha G.S.K. ee Lambarkiisu yahay 8, oo soo baxay 23.12.1974, kuna saabsanaa Habka Diiwaan Gelinta Iskaashatooyinka.

ISAGOO ARKAY Arjigii uu soo qoray Guddomiyaha Iskaashatada Xijiga «Raas Caseer» ee degmada Caluula, kana weydiisanaayey in Iskaashatadaasi la diiwaan geliyo;

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladii Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada Cāluula iyo kan Gōbolka Bāri - Qardhō.

### AMAR XEER

### Qod. 1

Iskaashatada Xijiga ee lagu magacaabo «Raas Caseer», saldhigeedu yahay Magaala Madaxda Degmada Caluula, shaqadeeduna tahay guritaanka Xijiga ku yaallo Degmada Cāluula, waxaa laga diiwaan geliyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taas oo waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga Lambarkaasu yahay 40ka, oo dhaqan galay 4.10.1973;

### Qod. 2

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Iskaashatada Xijiga «Raas Caseer» waxay yeelanaysaa aqoonsi gaar ah oo sharci ku dhisan. Xeer - gaarkeeduna. wuu dhaqan galayaa.

*Muqdisho, 18.8.1975.*

XOGHAYAHA DAWLADDA
*(Jaalle Axmed M. Maxamuud)*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD,**
**Tr. 27 Agooto 1974, L.127**
**Dhul gatay Jaalle Dr. Maxamed Sheekh Cali Munasar ku fadhiya mq. 2. 150 kuna yaal Muqdisho Km. 5o**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

ANNAGOO ARAGNA Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Dktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar xeer Lr. 11 taariikhdeeduna ahayd 1 Novembar. 1973;

ANNAGOO ARAGNAY Amar xeer L.6 taariikhduna ahayd 9 Jennayo 1967;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Jaalle Xuseen Cusmaan Siyaad, taariikhdeeduna ahayd 18 LUG. 1961, uu ku weydiisanayay dhul dhismo Dawladeed kuna yaal Muqdisho Km. 5;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka ee lagu dhejiyey Xafiiska ku shaqa lahaa, laguna dhaabacay xaashida rasmiga ah ee Dowladda;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii Gudiga Farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 6002 bishii 19 SET. 1968, soona Gudubtay fadhigii 25 aad ee sh Novembre 1968;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu tahay L. 94748 taariikhdeeduna ahayd 12.7.1973, in Jaalle Xuseen Cusmaan Siyaad uu dhiibay Xafiiska Canshuurta Dodban lacag tiradeedu tahay Sh.So. 3.225/= oo ah qiimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay WHG/ 3.23.785 taariikhdeeduna ahayd 9 AGO. 1973 in ninka kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fadhiya mq. 2.150/= kuna yaal Muqdisho — Km. 5

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameysi dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L.11.254 Rep, taariikhduna ahayd 19.8.73, oo lagu qoray buuga Canshuurta Dadban L.2770 Vol.20, oo lagu dhigay Notayaha Rd. Xasan Warsame Cali oo ku saabsan kalagadasho dhul uu iibsaday Xuseen Cusmaan Siyaad oo ka gatay Jaalle Dr. Maxamed Sheekh Cali Munasar — dhulka la mid ah mq.2.150/= kuna yaal Muqdisho — Km. 5;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Dr. Maxamed Sheekh Cali Munasar la siiyay uuna gatay dhul Dowladeed ee ku fadhiya mq.2.150/= kuna yaal Muqdisho, Km. 5;

Muqdisho, 27 Agoosto 1974.

VISTO E REGISTRATO Reg. N.1 Foglio N.36 Muqdisho, li 5 SET. 1974
IL MAGESTRATO AI CONTI
*F to Ton. Col. Abdullahi Warsame Nuur.*

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD

# BOGGA SEDDEXAAD

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## BEDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Loretta Maxamed Caagane maalintii 18.5.1967 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan 5 Km Jidka Afgooye uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektangolar addimihiisuna ahaayeen 40×65 kuna fadhiye 2600/= mdh, sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii meeshaas

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa HWD 66.637.68 ee kuna baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin - karo jaallahaas qaabkiisu waa Trabeosiyo addimihiisu yihiin 59,8+57,00×42,00,2—2.407,84 kuna fadhiya soohdimihiisuna iyhiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koofur waxaa ka xiga: Cabdullahi Cilmi
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Muqdisho. 20 Luulyo 1975

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA
IYO DHULKA

*(178)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

## N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Farow Cali Axmed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 5.8.1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolaar ah 20×30 kuna fadhiya 600/= mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: lootka lamb. yahay. 45;
Koofur waxaa ka xiga: WADDO;
Galbeed waxaa ka xiga: lootka lamb. yahay 32;
Bari waxaa ka xiga: lootka lamb. yahay 34.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashada dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 31 Agoosto 1975

MAAMULAHA QAYBTA DHISMAHA
IYO DHULKA
*(179)* *INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulcaasiis Iimaan Nuur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 27.1.75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hidan, oo leh qiyaas rektangolaar 16,60 × 18,40 kuna fadhiya 305,44/= mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Ibraahim Sheekh;
Koofur waxaa ka xiga: JID;
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dawladeed;
Bari waxaa ka xiga: Jid 3 meytar ah.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 31 Agoosto 1975

MAAMULAHA QAYBTA DHISMAHA
IYO DHULKA
*(180)* *INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

### N A A D A  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Axmed Maxamuud, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahyd 20.4.75, uu ku weydliisanayey dhul dhsimo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas afar gees siman ah 30×30 kuna fadhiya 900/= mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO;
Koofur waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay;
Galbeed waxaa ka xiga; Sheekh Cusmaan;
Bari waxaa ka xiga: **WADDO.**

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyi Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladd.

Muqdisho, 31 Agoosto 1975

MAAMULAHA QAYBTA DHISMAHA
IYO DHULKA
*(181)* *INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

---

## DOWLADDA HOOSE EE DEGMADA MARKA

### O G E Y S I I S

Waxaa la ogeysiinayaa dhammaan dladweynaha degan degmada Marka in Jaalle Xuseen Maxamed Cabdurasuul taariikhdu markay ahayd 11.4.62 uu noo keenay arji uu ku weydiisanayo gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Marka oo ay ka dul dhisanyihiin guryo uu leeyahay Jaallaha soo weydiistay dhulkaas oo qaabkiisu yahay shangeesle aan caadi ahayn addimihiisuna 32,50,36,50,28 kuna fadhiga 1104,13/× mdh. soohdimihisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Circolo Italiano;
Koofur waxaa ka xiga: Hotelka Moos dahab (B. d'Oro)

Galbeed waxaa ka xiga: WADDO;
Bari waxaa ka xiga: Barxad (Piazzo)

Sidaas awgeed qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Ogeysiiska iyo Naqshadda dhulka ee ku lifaaqan oo taalla Xifiiska Guddoomiyaha degmada iyo Dwladda Hoose ee Marka oo ku dhegan looxa Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose, kuna dheganaandoona muddo 30 maalmood ah laga bilaabo 10.6.62 ilaa 10.7.62, waxaana laga doodi kara muddadas u dhexeysa taariikhda aan kor ku soo sheegnay wixii ka dambeeyana lama qaban doono.

Marka, 19 Luulyo 1962.

GUDDOOMIYAHA DEGMADA
*(182)* *Waxaa Saxiixay Cali Maxamed Cosoble*

# FAAFIN RASMI AH
# الرسمية الجريدة

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Moqdisho, 13 Seb. 1975. **L. 1 R. 9**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** **جريدة شهرية**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


# KOOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI


SAHRCI L. 51 ee 30 Agoosto 1975, — *Sharci la Xiriira Dacwadaha ay dhinac ka tahay Dowladda iyo Laameheeda.* Bog. 604

SHARCI L. 52 ee 23 Agoosto 1975, — *Isbeddelkii 2aad ee Miisaaniyadda.* » 606


## BOGGA LABAAD

### XEER


XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 2 Luuliyo 1975, L. 128 — *Dallacaad* » 609

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 17 Luuliyo 1975, L. 129 — *Shaqo ka nasasho Xiddigle Ibraahim Cabdi Bile* » 610

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 20 Agoosto 1975, L. 130 — *Billad Dahab ah ee hawlkarnimo ee lagu maamuusay Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.* » 611

*2. Wasaaradda Gaanshaandhigga ee Midowga Soofiyeeti*

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 20 Agoosto 1975, L. 131 — *BilladQalin ah ee Hawlkarnimi ee lagu maamuusay Borisov Grigor,i Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Wasaaradda Hawlaha Guud, Gobolka Togdheer, Gobolka Galguduud* » 612

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA 20 Agoosto 1975, L. 132 — *Billado Maar ah oo lagu maamuusay 22 Hay'adood.* » 613

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 6 Luuliyo 1975, L. 133 — *Shaqo ka saarid Xiddigle Cismaan Nuur Xuseen.* » 614

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 6. 9.75, L. 183 *Lumid Jeeg Lamb. 9613 — Shs. 8.000 u leyahay Jaalle Muunye Mayaani Muunye.* » 615

**SHARCI L.51 30 Agoosto 1975.**

**Sharci la xiriira dacwadaha ay dhinac ka tahay Dowlqdda iyo laamaheeda.**

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969.

ASAGOO ARKAY Sharciga lam. 14 taariikhda 4 Febaraayo 1975 oo ku saabsanaa Dacwadaha Dowladdu dhinac ka tahay oo loo wareejiyay Maxkamadda Badbaadada Dalka.

ASAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dowladda.

WUXUU SOO SAARAY

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1

Maxkamadaha Badbaadada Dalka iyo laameheeda ee Gobollada waxaa laga dhisay «QAYB MADANI AH» oo awoodeedu tahay inay gasho Dacwadaha madani (cause civile) ee dhinac ka tahay Dowladda, Wakaaladaha Dowladda ee madax bannaan, Bangiyada, Dowladaha Hoose, Mashruucyada iyo Shirkadaha ay Dowladdu ama Wakaaladeheedu qayb ku leeyihiin.

Qod. 2

Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Muqdisho waxaa laga dhisay «QAYB IDAARI AH» (sezione Amministrativo)ee awoodeedu tahay inay gasho Dacwadaha Idaariga ah (Cause Amministrative).

Qod. 3

Qaadidda dacwadahaas waxaa lagu habaynayaa Sharciyada khuseeya arrinta ay ku saabsan tahay dacwaddu iyadoo mar waliba la dhowri doono nidaamka hoos ku qoran:

h. Dacwadaha cusub am akuwa hadda ka hor laga furay Maxkamadaha darajada Koowaad ee caadiga ah ee aan weli Xukun laga gaarin marka la qaadaayo waxaa la raaci doonaa habka ay Maxkamadaha darajada Koowaad u qaadaan dacwadaha Madaniga ah ama ay u qaaddo Maxkamadda Sare Dacwadaha Idaariga ah.

t. Dacwadaha Madaniga ah ee hor yaalley Maxkamadaha Rafcaanka ama Maxkamadda Sare marka la qaadayo waxaa la raaci doonaa habka u dhigan.

Qod. 4

Dacwadaha cusub ee laga hor oogo Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Laameheeda waxaa dul saaran Ajuuro la mid ah tan laga bixiyo Maxkamadaha Caadiga ah ee darajada Koowaad haddii dacwaddu ay tahay mid Madani ah ama Ajuurada ay qaaddo Maxkamadda Sare haddii dacwaddu tahay mid Idaari ah.

Qod. 5

Xukunnada ah Idaariga iyo Madaniga ee Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Laameheedu soo saaraan waxay yihiin kuwo dhammaad ah (definitivo) oo aan Racfaan laga qaadan karin, haddii laga reebo cabashada lagu xusay Sharciga tirsigiisu yahay 38 taariikhdiisuna tahay 5 Abrile 1972.

Qod. 6

Tirada Garsoorayaasha qaadi doona dacwadaha Sharcigan ku tilmaaman, waxay la mid tahay tan qaybta Ciqaabta (Sezione Penale).

Qod. 7

1. Muddada u dhaxeeya 4ta Febaraayo 1975 ilaa maalinta Sharcigan lagu soo saari doono FAAFINTA RASMIGA AH EE DOWLADDA, wixii ku saabsan waqtiga dacwadaha Sharcigani tilmaamaayo la ictibaarinmayo oo waa la joojiyey (sospensione ed interruzione normativa).

2. Go'aannada ay soo saareen Maxkamadaha Caadiga ah muddada u dhexeysa waqtiga lagu tilmaamay xubinta 1aad ee qodobkan, ee ku saabsan dacwadaha Sharcigani sheegayo waa la baabi'iyey.

3. Mudda ku saabsan dacwad qaadista ee ku xusan Qod. 121 X.H.M. lagu dhaqmimaayo oo waxaa loo beddelay inay noqoto 10 Maalmood.

Qod. 8

Wax allaale wixii heshiis ah ee horya uga dhexeeyey Hay - adaha Sharcigan lagu tilmaamay iyo Qareennada iskood u shaqeysta, laguma dhaqmi karo oo waa la baabi'iyey.

Qod. 9

Sharci kasta oo aan la socon karin ama ka hor imaanaaya Sharcigan waa la baabi'iyey.

Qod. 10

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro FAAFINTA RASMIGA AH.

Muqdisho, 30/8/1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S Gaas Maxamed Siyaad Barre*

**SHARCI L.52 Tr. 23 Agoosto 1975.**

**Isbeddelkii 2aad ee Miisaaniyadda 1975.**

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Go'aankii labada gole ee 21/8/1975.

Qod 1aad

Isbeddelka lagu sameeyey Miisaaniyadda 1975, sida ka muuqata lifaaqa A, waa la ogolaaday.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxu dhaqan - galayaa 23da Ogoost, 1975, wuuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada Dawladda Soomaaliyeed; waa in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*(S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda.
*(Jaalle Cabdiraxmaan Nuur Xirsi)*

ISBEDDELKA 2AAD EE MIISAANIYADDA 1975. Lifaaq «A»

| MADAX | | MADAX | TILMAAN | QIYAASTII HORE | ISBEDDEL | QIYAASTA CUSUB |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | 1.2.3. (t) | Guryaha | 150.000 | + 250.000 | 400.000 |
| | | 1.2.6. (x) | Sahayda safarka dibedda | 1.400.000 | + 800.000 | 2.200.000 |
| 1.0. | Madaxtooyada G.S.K. | 1.27. (b) | Nalka iyo biyaha | 203.000 | + 100.000 | 303.000 |
| | | 1.2.8. (d) | Kharashka martigelinta | 800.000 | + 200.000 | 1.000.000 |
| 2.0 | Wasaaradda Maaliyadda | 1.2.8. (d) | Kaalmada Keydka ah | 9.067.167 | + 1.520.000 | 10.587.167 |
| | | | Nalka iyo biyaha | | | |
| 5 1. | Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta (Maamulka) | 1.2.7. (b) | Cuntada | 50.000 | + 200.000 | 250.000 |
| 5.2. | Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta (Ciidanka Asiimbta) | 1.2.1. (kh | Kharashka Xarumaha Dhallinta | 3.200.000 | — 4.000.000 | 3.600.000 |
| | | | Abaalgudyada | | | |
| 6.1. | Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Maamulka) | 1.2.8. (a) | Taargada baabuurta la iibsado | 2.500.000 | + 1.000.000 | 3.500.000 |
| 6,2 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Ciidanka Booliiska) | 1.1.3. | Mush. Shaq. aan joogtada ahayn | 11.385.613 | — 200.000 | 11.585.613 |
| 13.0 | Wasaaradda Gaadiidka | 1.2.1. (x) | Daabacadda & alaabta xafiiska | 400.000 | + 100.000 | 1.400.000 |
| 17.0 | Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta | 1.1.2. | Qalabka Isbitaalada | 4.987.187 | + 1.500.000 | 6.487.187 |
| | | 1.2.1. (kh | Boosha, dhamb. & telefoonada | 200.000 | + 1.000.000 | 300.000 |
| 19.0. | Wasaaradda Caafimaadka | 1.2.2. (x) | Nalka iyo biyaha | 600.000 | + 1.000.000 | 1.600.000 |
| | | 1.2.7. (a) | | 40.000 | + 30.000 | 70.000 |
| | | 1.2.7. (b) | | 350.000 | + 350.000 | 700.000 |
| | | | Isugeyn | 35.332.967 | + 8.650.000 | 43.982.967 |

| MADAX | | TILMAAN | QIYAASTII HORE | ISBEDDELKA (—) | QIYAASTA CUSUB |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.10.0. Wasaaradda Xoolaha, dhirta iyo daaqa. Mashruuca 10aad | 2.2.0. (a) | Deeqda Wakaaladda Horumarinta Xoolaha | 10.000.000 | — 4.000.000 | 6.000.000 |
| 1.11.0. Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka badda. | 3.1.1. (t) | Dhismaha Secondo Liido | 200.000 | — 200.000 | |
| | 3.1.1. (j) | » Dugsiga Kalluunka | 250.000 | — 250.000 | |
| 1.12.0 Wasaaradda Warshadaha | 3.1.1. (a) | Warshadda Sibirka | 9.200.000 | — 2.000.000 | 7.200.000 |
| Wasaaradda Warshadaha | 3.1.1. (x) | Mashruuca safaynta saliidda | 3.000.000 | — 2.000.000 | 1.000.000 |
| 1.14.0. Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta. | 2.2.0. (b) | Bankiga Boostada | 200.000 | + 200.000 | |
| | | Isugeyn | 22.850.000 | — 8.650.000 | 14.200.000 |

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 20 Agoosto 1975, L.130.

**Billado Dahab ah ee Hawlakarnimo ee lagu maamuusay:**
**1. Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed**
**2. Wasaaradda Gaashaandhigga ee Midowga Soofiyeeti**

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle AXMED SHEEKH MAXMOOD hana WAKIILKA SHIRKADDA: JOHNSON & JOHNSON markay taariikhdu ahayd 5.7.75 saacaduna ahayd 13.10 kaa oo u rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumada Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«ETHICON»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

siinayaa SHIRKADDA: JOHNSON & JOHNSON saldhiggeedu yahay of 501 GEORGE STREET, NEW BRUNSWICK NEW JERSEY 08903 (U.S.A) taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha Faraca Sumaddaha Ganacsiga iyo ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 5.7.75 saacaduna ahayd 13.10 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Summadda hoos ku tilmaaman:

«ETHICON»

Summadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa noociyo qiyaas kasta, wa xaan lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaasyada hoos ku qoran: 46 iyo 48.- summadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**
**Tr. 22 Seb. 1975, L.190**
**Sumadda Ganacsiga «ETHICON»**

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga sumadaha Ganacsiga Lr. 3 soona baxay 22kii Jannaayo 1955, kuna saabsan Summaddaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Gancsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheekh Maxmood ahna WAKIILKA SHIRKADDA: STAR STABILIMENTO S.P.A. markay taariikhdu ahayd 24/7/75 saacaduna ahayd 8.30 kaa oo u rabo in isla SHIRKADDAAS ioo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«RIVER»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilinmada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi
siinayaa SHIRKADDA: STAR STABILIMENTO ALIMENTARE S.P.A.

saldhiggeedu yahay VIA MATTEOTTI 62.20041 AGRATE BRIANZA (ITALIA) taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 24/7/75 saacaduna ahayd 8.30 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Summadda hoos ku tilmaaman:

«RIVER»

Summadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

34.35.36.

Summadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydaastaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*((Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan))*

**WASAARADDA WARSHADAHA**
**Tr. 22 Seb. 1975, L.191**
**Sumadda Ganacsiga «LAROMOCIN»**

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga sumadaha Ganacsiga Lr. 3 soona baxay 22kii Jannaayo 1955, kuna saabsan Summaddaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca: Jaalle Axmed Sheekh Maxmood ahna WAKIILKA SHIRKADDA: F. HOFFMAN - LA ROCHE & Co. markay taariikhdu ahayd 19 - 7 - 75 saacaduna ahayd 12.30 kaa oo u rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«LAROMOCIN»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

siinayaa SHIRKADDA: F. HOFFMAN - LA ROCHE & CO.LTD saldhiggeedu yahay 124 GRENZACHESTRASSE, BASLE SWITZER - LAND taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 19/7/75 saacaduna ahayd 12.30 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriya Summadda hoos ku tilmaaman:

«LAROMOCIN»

Summadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

Summadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*((Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**
Tr. 22 Sbe. 1975, L. 192
Sumadda Ganacsiga «JOHNSON & JOHNSON

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga sumadaha Ganacsiga Lr. 3 soona baxay 22kii Jannaayo 1955, kuna saabsan Summaddaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheekh Maxmood ahna WAKIILKA SHIRKADDA: JCHNSON & JOHNSON markay taariikhdu ahayd 19/7/75 saacaduna ahayd 12.30 kaa oo u rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«JOHNSON& JOHNSON (special script)»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey Wuxuu Sahaaddo Sumad Ganacsi

siinayaa SHIRKADDA: JOHNSCN & JOHNSON a company saldhigSEY; 08903 (U.S.A.) taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan geedu yahay Rf 501 GEORGE STREET, NEW BRUNSWICK NEW JEoyihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 19/7/75 saacaduna ahayd 12.30 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman:

«JOHNSON & JOHNSON (special script)»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaasyada hoos ku qoran:

31 48.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababaka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*((Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**
Tr. 22 Seb. 1975, L.793
**Sumadda Ganacsiga «VICEROY SHIELD»**

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

Isagoo arkay Xaashidii Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

Isagoo arkay Sharciga Sumadaha Ganacsiga Lr. 3 soona baxay 22kii Janaayo 1955, kuna saabsan Sumaiidaha Gancsiga;

Isagoo arkay Arji uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmad Shiikh Maxamuud ahna WAKIILKA SHIRKADDA BROWN & WILLAIAMSON TOBACCO CORPORATION markay taariikhdu ahayd 19/7/75 saacaduna ahayd 12.30 kaa oo u rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«VICEROY SHIELD»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

siinayaa BROWN & WILLIAMSON TOBACCO CORPORATION saldhiggeedu yahay WESTMINISTER HOUSE 7, MILLBANK, LONDON S.W. ENGLAND. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 19/7/75 saacaduna ahayd 12.30 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Summadda hoos ku tilmaaman:

«viceroy shield»

Summadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

32.-

Summadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weey diistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) rseiid - yada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhehda iyadoo sawyir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku haboon.

Xoghayaha Dawladda
*((Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**
**Tr. 22 Seb. 1975 L.194**
**Sumadda Ganacsiga «MORGICIN»**

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Ganacsiga Lr. 3 soo baxay 22kii Jannaayo 1955' kuna saabsan Summaddaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaarddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheekh Maxmood ahna WAKIILKA SHIRKADDA: F. HOFFMAN - LA ROCHE & CO.LTD. markay taaaariikhdu ahayd 19/7/1975 saacaduna ahayd 12.30 kaa oo u rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumada Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«MORGICIN»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta- xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey

Wuxuu shahaaddo sumad Ganacsi

siinayaa SHIRKADDA: F. HOFFMAN - LA ROCHE & CO. LTD. saldhiggeedu yahay 124 GREENZACHERSTRASSE, BASLE SWITZERLAND. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 19/7/75 saacaduna ahayd 12.30 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Summadda hoos ku timaaman:

«MORGICIN»

Summadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

48

Summadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) hesiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan)*

WASAARADDA WARSHADAHA
Tr. 22 Seb. 1975, L.195
Sumadda Ganacsiga «OLD PARR (WORDS)»

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga sumadaha Ganacsiga Lr. 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955,kuna saabsan Summaddaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheekh Maxmood ahna WAKIILKA SHIRKADDA: MACDONALD GREENLEES LTD. markay taariikhdu ahayd 19/7/1975 saacaduna ahayd 12.30 kaa oo u rabo in isla SHIRKADAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«OLD PARR (WORDS)

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi
siinayaa shirkaddas: MACDONALO GREENLEES LTD. saldhiggeedu yahay 5 MARITIME STREET, LEITH, EDINBORCH, EH 6, SCOTLAND. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 19 - 7 - 1975 saacaduna ahayd 12.30 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Summadda hoos ku tilmaaman:

«OLD PARR (WORDS)»

Summadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

39

Summadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda

**WASAARADDA WARSHADAHA**
**Tr. 22 Seb. 1975, L. 196**
**Sumadda Ganacsiga «GRANT'S (ERAY)»**

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Summadaha Ganacsiga Lr. 3 soona baxay 22kii Jannaayo 1955, kuna saabsan Summaddaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle: Axmed Sheekh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda: William Grant & Sons Limited markay taariikhdu ahayd 23/6/75 Saacaduna ahayd 12.30 kaa oo rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«GRANT'S»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, Xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyo;

Wuxuu Sahaado Sumad Ganacsi
siinayaa SHIRKADDA: WILLIAM GRANT & SONS LIMITED saldhiggeedu yahay of 82, GOSDON STREET GLASGOW, and GLENFIDDICH DISTILLERY DUFFTOWN, SCOTLAND. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 23/6/75 saacaduna ahayd, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda summadda hoos ku tilmaaman:

«GRANT'S»

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

«KALAASKA 39.»

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**
**Tr. 22. Seb. 1975, L. 197**
**Sumadda Ganacsiga «TOISON d'OR AND BOHEMIAWORKS DEVICE»**

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga sumadaha Ganacsiga Lr. 3 soona baxay 22kii Jannaayo 1955, kuna saabsan Suammaddaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheekh Maxmood ahna WAKIILKA SHIRKADDA: BOHEMIA WORKS NATIONAL CORPO. markay taariikhdu ahayd 5/7/75 saacaduna ahayd 13.10 kaa oo u rabo in isla SHIRKADDAS loo ilaaliyo suamadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«TOISON D'OR AND BOHEMIA WORKS DEVICE»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

siinayaa SHIRKADDA: BOHEMIA WORKS NATIONAL CORPORATION saldhiggeedu yahay CZECHOSLOVAKIA taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 5/7/75 saacaduna ahayd 13.10 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Summadda hoos ku tilmaaman:

«TOISON D'OR AND BOHEBIA WORKS DEVICE»

Summadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaasyada hoos ku qoran:

41 iyo 42

Summadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan)*

**WASAARADA WARSHADAHA**
**Tr. 22 Seb. 1975, L.198**
**Sumadda Ganacsiga «DELDEN»**

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga sumadaha Ganacsiga Lr. 3 soona baxay 22kii Jannaayo 1955, kuna saabsan Summaddaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheekh Maxmood ahna WAKIILKA SHIRKADDA: GERRIT VAN DELDEN & CO. harkay taariikhdu ahayd 5.7.75 saacaduna ahayd 13.10 kaa oo u in ısla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsisiga oo hoo ku tilmaaman:

«DELDEN»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaa linta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey

Wuxuu shahaaddo sumad Ganacsi siinayaa SHIRKADDA: GERRIR VAN DELDEN & CO. saldhiggeedu yahay D - 4432 GRONAU FABRIKSTRASSE - 1 GERMANY FEDERAL REP. taa oo si hagaagsan u Keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 5.7.75 saacaduna ahayd 13.10 Dalka Jamhuuriyadda Summadda hoos ku tilmaaman:

«DELDEN»

Summadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaasyada hoos ku qoran:

23.24 iyo 26:-

Summadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**
**Tr. 22 Seb. 1975, L.199**
**Sumadda Ganacsiga «BAND - AID**

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga sumadaha Ganacsiga Lr. 3 soona baxay 22kii Jannaayo 1955, kuna saabsan Summaddaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheekh Maxmood ahna WAKIILKA SHIRKADDA: JOHNSON & JOHNSON markay taariikhdu ahayd 5/7/75 saacaduna ahayd 13.10 kaa oo u rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«BAND - AID»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey

Wuxuu Shahaaddo Sumad Ganacsi

siinayaa SHIRKADDA: JOHNSON & JOHNSON saldhiggeedu yahay OF 501 GEORGE STREER NEW BRUNSWILK NEW JERSEY (U.S.A.) taa oo si hagaagsan u keensatay arij ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 5/7/75 saacaduna ahayd 13.10 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Summadda hoos ku tilmaaman:

«ABND - AID»

Summadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran:

48

Summadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan)*

**WASAARADDA WARSHADAHA**

Tr. 22 Seb. 1975, L.200
Sumadda Ganacsiga «GUUTALE'S EATC» «LTD»

Wasaaradda Warshadaha

Xoghayaha Dawladda

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga sumadaha Ganacsiga Lr. 3 soona baxay 22kii Jannaayo 1955, kuna saabsan Summaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Maxamed Nuur Guutale ahna GANACSADAHA LEH: EAST AFRICAN INDUSTRIAL CONSULTANTS LTD. markay taariikhdu ahayd 29/6/75 saacaduna ahayd 8.00 kaa oo u rabo in isla SHIRKADDAAS loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«GUUTALE'S EATC «LTD»

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida Wakiilnimada iyo tan cashuurta Dawladda lagu bixiyey

Wuxuu Sahaaddo Sumad Ganacsi

siinayaa GANACSADAHA Maxamed Nuur Guutale saldhiggeedu yahay MUQDISHO taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshaddaha - Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 29/6/1975 saacaduna ahayd 8.00 si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Summadda hoos ku tilmaaman:

«GUUTALE'S EATC »«LTD»

Summadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama kalaasyada hoos ku qoran:

11

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo laga daabici karaa xaashiyaha Ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii - dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sida kaloo ku habboon.

Xoghayaha Dawladda
*(Dr. Cabdiqaasim Salaad Xassan)*

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
N A A D O  D H U L
DEGMADA WANLE - WEYN

Waxaa la ogeysiinayaa dhamaan dadweynaha deggan degmada Wanle - Weyn in Jaalle Cusmaan Cali Maxamed taariikhdu markay ahayd 12/5/1975 uu noo keenay arji uu ku weydiisanayo gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Wanle - Weyn ugana dhul dhisan yihiin haatan Baar iyo guryo uu asagu leeyahay dhulkaasoo qaabkiisu yahay trabeesiyo addimihiisu yihiin 44+50×36: 2 kuna fadhiya 1692/= mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Wanle Weyn.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddada is - ku xirta Xamar iyo Baydhabo.
Bari waxaa ka xiga: WADDO.

Sidaas awgeed dhulkaas qofkii daneynaaya wuxuu si fiican uga arki karaa Xafiiska degmada iyo looxa ogeysiisyada Dawladda Hoose oo Ogeynaan doonaan muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo 20/7/75 Ilaa 21/7/1975 waxaana laga doodi karaa muddadaas sodonka maalmood ah ee ogeysiis ku dhegan - yahay wixii ka dambeeyana lama qaban doono.

Wanle Weyn 30/7/75

Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka D.W. Weyn
*(201)* *Waxaa Saxiixay Jaalle Cabdinuur Maxamuud M.*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cali Maxamed Ibraahim maalintii 12/5/68 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan Jidka Afgooye uu isku beddelya cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rektangolaar addimihiisuna ahaayeen 60×50 kuna fadhiye 3000/= mdh, sababtoo in uu is - beddelay qorshihii degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD/429/10 - 19 - 68 ee 20 - 6 - 68 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman.

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin - karo jaallahaas qaabkiisu waa Rektangolaar addimihiisu yihiin 30×20 kuna fadhiya 600/= mdh. soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:-

Waqooyi waxaa ka xiga: Shirkadda Soomaali - Liibiya.
Koofur waxaa ka xiga: WADDO.
Galbeed waxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 34.
Bari waxaa ka xiga:Shirkadda Soomaali - Liibiya.

Muqdisho, 13 Set, 1975

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(202)* *INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maye Xaaji Xuseen maalintii 22/8/59 loona ogolaaday oo ku yaal Muqdisho degmada Hodan 5km. Jidka Afgooye uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa trabeesiyo addimihiisuna ahaayeen 43,20,64,56 kuna fadhiye 2592/=mdh, sababtoo ah in uu is-beddelay qorshihii degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 438738 ee 12-6-63 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahiis qaabkiisu waa trabeesiyo addimihiisu yihiin 62+54×37:2 kuna fadhiya 2146/=mdh. soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:-

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.
Galbeed waxaa ka xiga: WADDO.
Bari waxaa ka xiga: WADDO.

Muqdisho, 21 Set, 1975.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
(203) *INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**N A A D O  D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdirisaaq Cali Salaad, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 23/8/75 uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas afar gees siman 20×20 kuna fadhiya 400/=mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Xasan Maxamed Cali.
Koofur waxaa ka xiga: Waddada Ummadda.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Jen. Daauud.
Bari waxaa ka xiga: Xaaji Xuseen.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho. 21 Set, 1975

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(204) INJ. Caydaruus C. Keenadiid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibraahim Muuse Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii taariikhdu ahayd 1/6/75 uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Degmada Hodan 6km. oo leh qiyaas Rektangolaar ah 30×20 kuna fadhiya 600/=mdh.

Soohdin:

Waqooyi kaxaa ka xiga: WADDO.
Koofur waxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 26.
Galbeed waxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 37.
Bari waxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 39.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 21 Set, 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(205) *INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

---

N A A D O  D H U L
WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waxaa la cddeynayaa in Jaalle Maxamed Ibrahim Culusow, u usoo qortay arji qaybta Dhimaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu hayad 10-10-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km. X. Afgoye oo leh qiyaas rektangolaar ah 71,60x33 kuna fadhiya 2.362,80 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Maxamed Cismaan Cawad.
Koofur waxaa ka xiga: WADDO.
Galbeed waxaa ka xiga: WADDO.
Bari waxaa ka xiga: Gal lamb. 287/60.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi kaaar muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 21 Set, 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(206) INJ. Caydaruus C. Keenadiid

## N A A D O  D H U L
### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sidow Cumar Cusmaan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 28.8.75, uu ku weydliisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl - Wawaad, oo leh qiyaas sedex gees 10×10:2, kuna fadhiya 200/= mdh.

Soohdin:

Waqooy iwaxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.
Koofur waxaa ka xiga: Waddada Maka al Mukaraama.
Galbeed waxaa ka xiga: Gal lamb. 1034/57.
Bari waxaa ka xiga: Waddada Hawl - Wadaag.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 21 Set, 1975

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(207) *INJ Caydaruus C. Keenadiid*

---

## N A A D O  D H U L
### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Sheekh Cabdi Maxamuud Caamir maalintii 7/6/67 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Idegmada Yaaq - Shiid Jidka Ummadda uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rektangalaar addimihiisuna ahaayeen 50×40 kuna fadhiye 2000/= mdh, sababtoo ah in uu is - beddelay qorshihii degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 768/1150/68 ee 27 - 6 - 68 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaanman:-

Rasmi ahaan dhulkaa haatan la siin - karo jaallahaas qaabkiisu waa trabeesiyo addimihiisu yihiin 56;52;5;20;6;27; kuna fadhiya 1219/= mdh. soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:-

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Ummadda.
Koofur waxaa ka xiga: WADDO.
Galbeed waxaa ka xiga: WADDO.
Bari waxaa ka xiga: WADDO.

Muqdisho, 21 Set, 1975

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(208) *INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الرسمية الجريدة

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Mugdisho 14 Oktoobar 1975 **L. 1 R. 10**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريده شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

SHARCI L. 54 ee 1 Jenayo 1975 — *Habeynta Sharciyada u degsan Furdiiyinka, Ganacsiga iyo lacagta iyo ku wareejinta dacwado ama dembiyo Maxkamadda Bad. Dalka.* Bog. 747

SHARCI L. 55 ee 4 Oktoobar 1975 — *Sharci ku saabsan Guddi gaar ah oo dhameeynaya Dacwadaha dhaxalka.* » 752

SHARCI L. 56 ee 5 Oktoobar 1975 — *Nidaaminta Maaliyadda Wakaaladaha Dawladda.* » 754

## BOGGA LABAAD

### XEER

W. M.

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 18 Oktoobar 1975 — *Lumid Buugga lacagta L. 6783, Sh. So. 14.000 u leyahay Jaalle Maxamed Caddow Raage. (209)* Bog. 756

Madbaçadda Dawladda — Muqdisho

# BOGGA KOWAAD

SHARCI L. 54 ee 1 Jenayo 1975.

Hobeynta sharciayda u degsan Furdooyinka Ganacsiga, Dhaqaalaha iyo Lacagta, iyo ku woreejin dacwado ama dembiyo Maxkamadda Bad. Dalka.

---

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda 1aa iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciyada iyo Xeerarka lagu disay Maxkamadda Badbaadad Dalka iyo Maxkamadda Gobollada ee Caadiga ah;

MARKUU ARKAY Sharciyada lam. kala yihiin 1 ee 31-3-196 Furdooyinka, Sharci lam. 12 ee 26-9-1964 ee Ganacsiga Dibedda, Dhaqalaha iyo Lacagta adag iyo Xeerarka la xiriira, sharci lam. 12 ee1-8-1966 Ilaalinta Canshuuraha, Sharci lam. 54 ee 10-9-1970 ee Dhawritaanka Badbaadada Ummadda;

MARKEY U MUUQATAY Baahida weyn ee loo qabo in toos loo habeeyo Sharciyada iyo Xeerarka loogu danaynayo daryeelka dhaqaalaha Dalka;

MARKUU AIXGELIYEY Inay tahay lagama maarmaan in la kala xadeeyo awoodda Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo kuwa caadiga ah ee Gobollada, xagga dembiyada laga galo maaliyadda iyo dhaqaalaha;

MARKUU TIXGELIYEY Iney habboontahay in lagu soo wareejiyo awoodda Maxkamadda Badbaadada Dalka dembiyada hoos laga soo sheegi doono ee Xeerka Ciqaabta;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Haddii qodoba ka mid ah Sharcigaan uusan gaar ahaan u sheegin, dembiyada qodobbada sharcigan ku tilmaaman waxaa awood u leh in ay gartiisa qaaddo go'aanna ka gaadho, Maxkamadda Badbaadada Dalka.

Qodobka 2aad

2. Qof kasta oo Konterabaan ka dhoofiya ama soo geliya Waddanka amaba isku daya inuu dhoofiyo ama soo geliyo badeeco nooc kasta oo furdo ha noqotee (merce doganale) ama xoolo iyo wixii ka soo baxa, isagoo ujeeddadiisu tahay inuu canshuurta dawladda kala dhuunto, haddii qiimaha badeecadduu gaarayso Sh. So. 10.000 (toban kun) oo shilin iyo wixii ka badan wuxuu gelayaa dembi ciqaabtiisuna waa tan hoos ku koran:

B) — Sh. So. 10.000 ilaa 50.000 (toban kun ilaa konton kun) oo shilin:
— 5 ilaa 10 sano oo xarig ah iyo;
— ciqaab lacageed oo ah 3 ilaa 10 jeer canshuurtii baxsatay.

T) — Sh. So. 51.000 (konton iyo kow kun) ilaa Sh. So. 100.000 (boqol kun):

— 10 ilaa 20 sano oo xarig ah iyo
— ciqaab lacageed oo ah 5 ilaa 15 jeer canshuurtii baxsatay.

J) — Sh. So. 100.000 (boqol kun) wixii ka sarreya.
1. — Xarig ka bilawda 15 sano ilaa 30 sano iyo
— ciqaab lacageed oo ah 10 ilaa 20 jeer canshuurtii baxsatay.

2. — Xabsi daa'in haddii: ay jireen waxyaalaha dambiga cusleeya (circostanze aggravanti)
— ciqaab lacageed oo ah 10 ilaa 25 jeer canshuurtii baxsatay.

3. — Dil haddii ay meesha soo gashe ujeeddo wax lagu yeelayo oo la isku hortaagaayo kobcinta dhaqaalaha Dalka.

Qodobka 3aad

1. Qof kasta oo Kontrobaan ka dhoofiya ama soo geliya Waddanka amaba isku daya inuu ka dhoofiyo ama ku soo geliyo lacag Soomaali ah ama shisheeyey (adag), Dahab, ama dhagax qiima leh, haddii qimahoodu gaaro ama u dhigmo Sh. So. 5.000 (shan kun) oo shilin iyo wixii ka badan, wuxuu gelayaa dembi ciqaabtiisu tahay:

B) — Sh. So. 5.000 — ilaa 50.000 (dhan kun) — (konton kun) oo shilin:

— 5 ilaa 10 sano oo xarig ah iyo
— Ciqaab lacageed oo ah 3 ilaa 10 jeer qiimaha ama tirada lacagta.

T) — Sh. So. 51.000 (konton iyo koow kun) oo shilin ama qiimaha u dhigma iyo wixii ka badan oo aan gaareyn Sh. So. 100.000 (Boqol kun) oo shilin:

— 10 ilaa 20 sano oo xarig ah iyo
— Ciqaab lacageed oo ah 5 ilaa 15 jeer qiimaha ama tirada lacagta..

J) — Sh. So. 100.000 — (boqol kun) oo shilin wixii ka sareeya:
1. — Xarig ka bilawda 15 sano ilaa 30 sano oo xarig ah iyo:
— Ciqaab lacageed oo ah 10 ilaa 20 jeer qiimaha ama tirada lacagta;

2. — Xabsi daa'in haddii ay jiraan waxyaabaha dembiga cusleeya iyo

— Ciqaab lacageed oo ah 10 ilaa 25 jee qiimaha ama tirada lacagta;

3. — Dil haddii ay meesha soo gasho ujeeddo wax lagu yeelaayo oo la isku hortaagaayo kobcinta dhaqaalaha Dalka.

Qodobka 4aad

1. Gaadiidka lagu qabto isagoo sida Koontrabaan keli ah, ama laga helo lacag, dhagax qiima leh iyo dahab oo qiimahoodu u dhigmo tan Gaadiidka, haddii uu caddeyn kari waayo qofka Gaadiidka lehi in uusan xogogaal u ahayn Koontrabaanka, Gaadiidka waa laga dhacayaa.

Qodobka 5aad

1. Qof kasta oo Soomaali ah, shisheeye Waddanka deggan oo la yeesha xiriir kanacsi isagoo u dhoofinaaya ama ka keenaaya toos ama dadab, badeeco, waddan u ah Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed cadaw, ama dagaal cad kula jira, wuxuu galayaa dembi ciqaabtiisu tahay 5 sano oo xarig ah ilaa Dil.

2. Markasta oo go,aan laga gaaraayo ciqaabaha qodobkan ku tilmaaman, waxaa la raaci doonaa habka ay qoraayaan qod. 2aad iyo kan 3aad ee sharcigaan.

Qodobka 6aad

1. Qof kasta oo si khiyaano cad ama qarsoon ah uruursaday lacag adag (valuta pregiata) oo Waddanka soo gashay isagoo ujeeddadiisu inuu ka faa'iidaysto si toos ah ama dadban, wuxuu galayaa dembi ciqaabtiisu tahay 5 ilaa 15 sano oo xarig ah iyo ciqaab lacageed oo ah Sh. So. 10.000 ilaa 50.000 (toban kun konton kun) oo shilin.

2. Waxaa isla ciqaabtaas mutaysanaya qof kasta oo toos ama dadab lug ugu yeesha, caawiya, ama suurageliya dembiga xubinta kor lagu xusay.

3. Haddii dembigaas lagu galo tabaabulsho habeysan (in maniera organizzata), iyadoo ujeeddadu tahay in faa'iido gaar ahaaneed laga gaaro, isla markaana ay ka dhalan karto waxyeelo curyaamin kara dhaqaalaha guud ee Waddanka, ciqaabtu waxay noqonaysaa, xarig adag oo 20 sano ah ilaa xabsi daa'in iyo ciqaab lacageed oo ah Sh. So. 50.000 ilaa 100.000 (konton kun - boqol kun) oo shilin.

Qodobka 7aad

1. Sarkaalka loo xilsaaray uruurinta iyo ilaalinta canshuuraha furdooyinka ama berriga, oo laaluush, eex iyo gobolleysi awgeed fududeya ama suuragal ka dhiga in ay baaqato Dakhli canshuur Dawladeed wuxuu galayaa dembi ciqaabtiisu tahay:

— xarig gaaraya 5 ilaa 15 sano, iyo;
— ciqaab alcageed oo ah Sh. So. 5.000 ilaa 10.000 (shan kun ilaa toban kun) oo shilin;

— iyo canshuurtii baaqatay oo uu soo celiyo.

2. Haddii dembiga lagu xusay xubinta 1aad ee qodobka, lagu galo si taxadir la'aan ah (negligenza), ciqaabtu waxay noqoneysa:

— xarig adag oo gaaraya 1 (hal) ilaa 3 sano; ama

— ciqaab lacageed oo ah Sh. So. 1.000 ilaa 5.000; iyo

— canshuurtii baaqatay oo uu soo celiyo.

Qodobka 8aad

1. Eedeysanaha loo heysto badeeco Kontrabaan ah oo qiimahoodu uusan gaareyn Sh. So. 10.000 (toban kun) ama Dahab, dhagax qiima leh iyo lacag Soomaali ama shisheeye oo qiimahoodu ama tiradoodu ay ka yar tahay Sh. So. 5.000 (shan kun) wuaxuu galayaa Kontrabaan fudud oo ay awood u leedahay Maxkamadda caadiga ah oo Gobollada, ciqaabtiisuna waa:

b) ilaa 2 sano oo xarig ah, iyo ciqaab lacageed oo ah 3 ilaa 10 jeer oo ah canshuurtii baxsatay, qiimaha dahabka, dhagaxa qiimaha leh, ama tirada lacagta.

Qodobka 9aad

1. Sida uu qabo qodobka 19aad ee sharciga lam. 12 ee 1-8-1966, qofka loo haysto dembiga lagu xusay qodobka 8aad ee sharcigan, waxuu awood u leeyahay inuu dacwadiisa ku dhameysto heshiis maamul lacageed ah muddada 15ka casho ah ee sharcigu caymay, Haddu-usan hadda ka hor dembiga noocaasa ah gelin (recidivo).

Qodobka 10aad

1. Badeecadda, lacagta, dahabka dhagaxa, qiimaha leh iyo qalabka dembiga lagu galay (corpo di reato) markasta waa laga dhacayaa eedeysanaha, khasnadda Dawladda ayaana lagu xereynayaa faa'iidada ka soo baxda.

Qodobka 11aad

1. Qof kasta oo ciqaab xarig ah loogu xukumay Kontrabaan awgiis, dembiga Kontrabaankuna yahay kii ugu horeeyay, hadduusan xarigu ku badneyn 20 sano, wuxuu awood u leeyahay inuu muddada xabsiga ah lacag ku beddesho, sida u qabo sharcigu.

Qodobka 12aad

Waxaa loo wareejiyey awoodda Maxkamadada Badbaadada Dalka qaadista dacwadaha ku xusan qodobbada laga bilaabo 348 ilaa 354, laga bilaabo 360 ilaa 371 ee Xeerka Ciqaata.

Qodobka 13aad

Dembiyada Sharciganu ka hadlaayo, haddii aan go'aan kama dambeys ah weli laga gaarin, waxaa loo wareejinayaa Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobolka ay ka socoto dacwaddu.

Qodobka 14aad

1. Waa la baabi'yey sharci kasta oo sharcigan ka soo horjeeda ama aan la socon karin.

Qodobka 15aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Muqdisho, 1 Jenayo 1975.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

SHARCI L. 55 ee 4 Oktoobar, 1975.

Sharci ku saabsan Guddi gaar ah oo dhammeynaya dacwodaha dhaxalka.

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka.

ISAGOO AQOONSAN In ey lagama maarman tahay in la dhiso Guddi gaar ah oo la siiyey awood Maxamadeed, hawshiisuna ey tahay inuu si degdeg ah u dhammeeyo dacwadaha dhaxalka oo ku daahay Maxkamadaha hortooda si loo gaaro caddaalad ijtimaaci ah.

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan oXghayayaasha Dawladda.

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

### Qodobka 1aad

1. Waxaa la dhisayaa Guddi gaar ah oo la siiyey awood Maxkamadeed oo ey hawshiisu tahay inuu si degdeg ah u dhammeeyo dacwadaha ku saabsan dhaxalka oo hor yaalla Maxkamadaha caadiga ah daraja kasta ha ahaadeene ama Guddiga Cadaaladda iyo Sharciga ee G.S.K. kana soconayey ugu yaraan 2 sano iyo wixii ka badan.

2. Guddigaasu wuxuu ka kooban yahay 7 qof oo kala ah sida hoos ku qoran:

a) 3 Garsoore oo u midkood ka noqonayo Guddoomiyaha Guddiga.
b) 3 Garsoore Dadweyne oo uu magacaabo Xafiiska Siyaasadda ee M.G.S.K.

t) 1 Injiineer oo ey magacaawdo Wasaaradda Hawlaha Guud.

3. Magacyada xubnaha Guddiga waxaa lagu soo saarayaa Dekreeto u saxiixo Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka.

### Qodobka 2aad

### *Awood*

1. Guddigu wuxuu leeyahay awoodda ey leedahay Maxkamad madani ah. Wuxuuna u yeeri karaa qof kasta oo u baahdo, baarina karaa qoraal kasta oo lug ku leh dacwadaha uu qaadayo. Go'aannada Guddiga waxey la mid yihiin kuwa ey soo saaraan Maxkamadaha.

2. Xubnaha uGddiga intay hawshooda wadayaan waxay leeyihiin awoodda shaqada iyo sharafta uu leeyahay Garsooraha Dawladda.

Qodobka 3aad

*Habka dacwad qaadista*

Guddigu markuu dacwad qaadayo wuxuu raacayaa Xeerarka madaniga ah.

Qodobka 4aad

*Muddada uu shaqeynayo Guddiga*

1. Guddigu hawshiisa wuxuu bilaabayaa 1-11-1975.

2. Awoodda iyo jiritaanka Guddiga waxey ku ektahay hal sano oo laga bilaabo taariikhda kor lagu sheegay. Guddiga waa inuu hawsha loo xislaaray ku dhammeeyaa sannadkaas.

3. Muddadaas xubnaha Guddiga hawl kale looma diri karo.

Qodobka 5aad

*Go'aannada iyo fulintooda*

1. Guddiga oo dhan ayaa go'aan ka gaaraya dacwadaha loo xilsaaray.

2. Go'aannada u gaaro Guddigu waa kama dambeys.

3. Guddiga waxaa loo xilsaaray inuu fuliyo go'aannadiisa muddada lagu tilmaamay qoobka 4aad ee sharcigan.

Qodobka 6aad

*Ajuurada*

Haddii ajuurada dacwadda lagu bixiyey Maxkamadaha caadiga ah wax juura ah ee dhinacyada laga qaadayo ma jiraan.

Qodobka 7aad

*Xarunta Guddiga*

Guddiga wuxuu dacwadaha ku qaadayaa Xamar, hase yeeshe haddii loo baahdo wuxuu aadi karaa Gobollada iyo Degmooyinka oo u ku soo qaadi karaa dacwooyinka loo xilsaaray.

Qodobka 8aad

*Tirtirid*

Waxaa la tirtirayaa sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharciga kan.

Qodobka 9aad

*Dhaqan gelid*

Sharciga kan wuxuu dhaqan galayaa si degdeg ah, waxaana lagu soo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4 Oktoobar, 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Jagalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

**SHARCI L. 56 ee 5 Oktoobar, 1975.**
**Nidaamjnta Maaliyadda Wokaaladaha Dawladda.**

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Warqadda kowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINAYA Hantiwadaageynta dhismaha dhaqaalaha ee Dalka;

ISAGOO TIXGELINAYA Waaya-aragnimada laga helay sanooyinkii hore ee Kacaanka iyo dhibaatooyinkii ka soo baxay wada shaqeyntii. Wakaaladaha iyo Bankiya markii la tixgeliyo waajibaadka Kacaanka inuu toosiyo had walbaba maamulkii aan la socon karin mabaadida siyaasadda, dhaqaalaha iyo dhismaha bulshada;

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aankii Golaha Sar eee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharcigaan:

Qodobka 1aad

1. In Bankiyadu bixiyaan wixii deyn ah ee Wakaaladuhu kala qabaan dhexdooda;

2. In Bankiyadu bixiyaan wixii deyn ah ee Wakaaladuhu ka qabaan xubnaha kale ee Dawladda.

Qodobka 2aad

1. In Dawladdu bixiso wixii deyn ah ee Wakaaladuhu ku leeyhiin Wasaaradaha;

2. Markii Dawladdu goosato in badeeco ama alaab lagu gado sicir ka yar isku bixin lahayd, mas'uuliyadda sicirkabka waxaa qaadaya Dawladda ayadoo qorsheyneysa isla markaas habka loo gudayo;

3. In Dawladdu bixiso wixii sicirkab ah oo ka yimid go'aanno hor uga soo baxay labada Gole.

Qodobka 3aad

1. Bankiga Dhexe ee Soomaaliya wuxuu kala wareegayaa Bankiga Ganacsiga Ummadda wixii deyn iyo dulsaar ah oo Wakaaladuhu ka qabaan Bankigaas oo la xiriira maalgelin (investment).

2. Lacagtaas maalgelinta ah ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya uu kala soo wareegey Bankiga Ganacsiga Ummadda waxay ahaanaysaa deyn Wakaaladuhu ku gudaan muddo toban sano ah, dulsaarkiisuna yahay 2,50% sannadkii, una noqonaya Raasumaal Wakaalad kasta.

Qodobka 4aad

Baahida dambe oo timaada oo ku soobsan shaqada agnacsiga Wakaaladaha waxaa xad lama dhaafaan ah u samayn doona, si xeer ah, wadajir, Wasaaradda Maaliyadda iyo Bankiyada, ayagoo tixgelinaaya talada Guddiga Dhaqaalaha, Wasaaradda Ganacsiga iyo Madaxda Wakaaladaha.

Qodobka 5aad

1. Wasaaradda Maaliyadda iyo Bankiyada waxaa waajib ku ah ah inay mudda lix bilood ah, marka laga bilaabo dhaqangalka sharcigaan, ku sameeyaan Xeer Xisaabeed iyo diiwaangelin guud.

2. Bankiyadu waxay xaq u leeyihiin inay baaraan dhaqaalaha iyo xisaabaadka Wakaaladaha deynka ka qaba, si ay u hubsadaan in maamulkkii Wakaaladuhu u socdo si waafaqsan sharcigaan iyo amaahda ay bixiyeen inay ku fadhido sal dhaqaale.

Qodobka 6aad

1. Wasaaradaha iyo Wakaaladuhu waa inay wax ku kala iibsadaan warqad qiima is dhaafsi.

2. Haddii lagama maarmaan noqoto, Wasaaradaha iyo Wakaaladaha Dawladdu inay wax kala deynsadaan, deynkaasi waa inuusan dhaafin heerka miisaaniyadda ku qarriran, bixintiisuna aysan ka badnaan 45 beri.

Qodobka 7aad

Sharci kasta qodobbada sharcigaan soo horjeeda ama aan la socon karin waa la baabi'iyey.

Qodobka 8aad

Sharcigaani wuxuu dhaqan gelayaa isla markiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Oktoobar 10 1975.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

## TALOOYIN ISGASRIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

---

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Garsooraha Maxkamadda Gobolka;

Haddu arkay dacwada hor ku qoran;

Markuu arkay wax ay ku saabsan tahay iyo digniinti Bankiga keydka iyo amahda (eeg Lam. 3284 warq.), wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

Hadduu arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda buugga, keydka ee Lamb. 6783, kuna qorneyd lacag dhan Shs. 14.000 (afartobankun) iskana lahaa Jaalle Maxamed Caddow Raage, sida ku cad isla warqadda Bankiga ee kor ku tilmaaman;

WUXUUNA AMRAYAA

In loo sameeyo buug keyd cusub bedelki kii ka lumay ninka magaciisa aan horay ku soo sheegnay, 30 beri ka dib markii dekreetadan lagu shaaciyo faafinta raasmiga Dawladda;

WAXAANA LA CODSANAYAA

In buugga la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Maxamed Caddow Raage ama qof isla asaga ka sita wakaalad Sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30ka maalmood ah ee kor lagu soo Sheegay.

Xamar Tr. 18 Oktoobar 1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

*Cabdullaahi Daahir Barre*

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# الجمهورية الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Muqdisho, 20 Oktoobar 1975 | L. 2 R. 10

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadkii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku P. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

SHARCI L. 57 ee 20 Oktoobar 1975 — *Cafis Guud iyo Cafis gaareed lagu maamusay sanad guurada 6aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969.* Bog. 758

## BOGGA LABAAD

XEER

W. M.

## BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN IYO ISGAARSIIN IYO WIXII LA MID AH

W. M.

Madbacadda Dawladda — Muqdisho

SHARCI L. 57 ee 20 Oktoobar 1975.

Cafis Guud iyo Cafis gaar-ahaneed lagu maamusay sanad guurada 6aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969.

---

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqaddii Koowaad iyo Tii labaad ee Kacaanka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharcigii soo baxay 21kii Oktoobar 1969 kii;

ISAGOO GARTAY In la bixiyo Cafis Guud iyo Cafis gaar-ahaneed oo loogu maamuusayo sanad-guradii 6aad ee Kacaankii barakeysanaa ee 21kii Oktoobar 1969kii;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii ay isku raaceen Golaha Sare Kacaanka iya kan Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU XEERAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la bixiyay Cafis Guud (amnistia) iyo Cafis gaared (indulto), iyadoo lagu maamuusayo xuska sanad-guurada 6aad ee Kacaankii barakeysanaa ee 21kii Oktoobar 1969.

Qodobka 2aad

Cafiska Guud iyo Cafiska gaareed oo lagu xusay godobka hore waxay ku saabsan yihiin dembiyada la galay iyo ciqaabta sugnaatay intii ka horeysay 20kii Oktoobar 1975too, saacaddu markay ahayd 12kii maalinimo.

Qodobka 3aad

Waxaa Cafiska Guud galay dembiyadi la galay 21kii Oktoobar 1969 wixii ka horeeyay, oo laga reebay Dembiyada lidka ku ah qofnmiada iyo jiridda Qaranka ee lagu xusay qodobada 184 ilaa 218 ee Xeerka Ciqaabta.

Qodobka 4aad

Dembiyada la galay 21kii Oktoobar 1969 wixii ka dambeeyay waa la cafiyay, ayadoo laga reebay:

a) — Dembiyada lid ku ah midnimada iyo nabadgalyada Qaranka — Dilka la galay 21kii Oktoobar 1969 intii ka dambeysay — Booli Qaran — Jaajuus — Dembiyada la xiriira dhagaalaha — ku xad gudub awood xaafiis — waajib gudasho la'aan — Laaluush — Been qoraal — Dadka waalan — Khamriya cabid — ka agid shago — Eex iyo dadka u xiran dembiyada Ciidamada ee aan galin cafiska gaar ah;

b) — Dembiyada kor lagu soo sheegey oo aan cafiska gelin qodobadoodu waa kuwa hoos si cad ugu qoran:

I — Laga bilaabo Qodobka 184 ilaa 218 ee Xeerka Ciqaabta;

II — Laga bilaabo Qodobka 241 ilaa 255 ee Xeerka Ciqaabta;

III — Qodobka 259 ee Xeerka Ciqaabta;

IV — Laga bilaabo Qodobka 348 ilaa 382 Xeerka Ciqaabta;

V — Qodobka 454 X. C. oo la xiriira Qodobka 11 ee Xeerka Lamb. yahay 67, Dilkii ka dembeeyay 21kii Oktoobar 1969, 9kii saac oo habeenimo;

VI — Dembi kasta oo dhaqaalaha iyo lacagta laga galay, sharci kasta ha ku jiree;

VII — Khamriyacab, waxaa loola jeedaa qofka khamradu dilatay una xiran;

VIII — Qodobka 10 ee Xeerka Lamb. yahay 67, ee 1 Nofembre 1970.

2. Qodobka Xeerka Lamb. yahay 54 soona baxay 10-9-1970 oo dhan laga bilaabo 1 ilaa 22 oo laga reebo Qodobka 21 (afminshaarismo).

Qodobka 5aad

Waxaa la bixiyay Cafis Gaareed (indulto) oo ku saabsan dembiyadii la galay 21kii Oktoobar 1969 wixii ka dambeeyay:

1. — In xabsi daa'imlagu beddelo ciqaaba Dilka ah;

2. — In 30 (sodon) sano oo xarig ah lagu beddelo ciqaabta xabsi daa'imka ah;

3. — In 7 (todoba) sano laga dhimo ciqaabta xariga ee 30 sano ah.

Qodobka 6aad

Dadka xiran oo ayan ku jirin kuwa galay Dembiyada xeerkani ka reebay Cafiska, waa la sii deynayaa.

Qodobka 7aad

Shareigan wuxuu dhaqan galayaa 20ka Oktoobar 1975ta saacaddu markay tahay 12ka maalinimo, waxaana lagu faafin doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Dimoqradiga Soomaaliyeed.

Muqdisho, 19 Oktobar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*



IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Muqdisho, 28 Oktoobar 1975 **L. 3 R. 10**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريده شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

SHARCI L. 58 ee 10 Oktoobar 1975 — *Sharciga Khamro-Diidka.* Bog. 765

SHARCI L. 59 ee 10 Oktoobar 1975 — *Awoodda Sameynta soo dejinta iyo ganacsiga Khamrada.* » 767

SHARCI L. 60 ee 11 Oktoobar 1975 — *Dismaha Wakaaladda Cagafyada iyo Hawlaha Beeraha.* » 769

## BOGGA LABAAD

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaaliŋta, xaashida wakiilnimada iyi tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa Shirkadda: Pye Limited a British Company, saldhiggeedu yahay St. Andrews Road, Cambridge England, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku difaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 27-8-1975, saacaduna ahayd 12,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «CATHODEON».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: **10.**

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## WASAARADDA WARSHADAHA

### XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee **Kacaanka** 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: Fives - cail Babcock, markay taariikhdu ahayd 6-9-1975, saacaduna ahayd 12,00, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyi sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «FIVES-CAIL BABCOCK».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi saanayaa Shirkadda: Fives-Cail Babcock, saldhiggeedu yahay 7 Rue Montalivet Paris France, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 6-9-1975, sqcaduna ahayd 12,00, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: FIVES CAIL BABCOCK».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas gasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusasn kalaaska hoos ku qoran: 8, 9, 10, 11, 44, 45.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka Shirkadda: Kabushiki Kaisha Komatsu, markay taariikhdu ahayd 6-9-1975, sqcaduna ahayd 12,00, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«DEVICE».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyi tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa Shirkadda: Kabushiki Kaisha Komatsu, saldhiggeedu yahay 3-6, 2-Chome Akasaka Minato-Ku, Tokyo Japan, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 6-9-1975, saacaduna ahayd 12,00, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «DEVICE».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: 8, 13.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama ssidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA
*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Yuusuf ahna Maareeyaha Guud KMG ee Warshadda Birta Shubta, markay taariikhdu ahayd 30-9-1975, saacaduna ahayd 9,15, kaa oo uu raba in isla shirkaaddas loo ilaaliyi sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «W.B.SH.».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa Warshadda: Birta Shubta, saldhiggeedu yahay Muqdisho, Waddada 21 Oktoobar, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaqshiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 30-8-1975, saacaduna ahayd 9.15, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda hoos ku tilmaaman: «W.B.SH.».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: 17, 20.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA
*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

*(272)*

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaasida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadda Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: Hinda in Arabic Giken Kocyo Kabushiki Kaisha, markay taariikhdu ahay 6-9-1975, saacaduna ahayd 12,00, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «HONDA IN ARABIC CHARASTERS».

ISAGOO ARKAY Xaasida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiiinimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa Shircadda: Honda Giken Kocyo Kabushiki Kaisha, saldhiggeedu yahay of No. 27 - 8,6 Chome, Jingumae Shibuya-Ku Tokyo Japan, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay aariikhdu ahayd 6-9-1975, saacaduna ahayd 12,00, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda ku ilmaaman: «HONDA IN ARABIC CHARACTERS».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qiran: 8, 11, 13, 20, 49.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofember 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA
*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## WASAARADDA WARSHADAHA

### XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Xiirey Qaasim Wehliye ahna Maamulaha Shirkadda: Industrie Chimiche Somale, markay taariikhdu ahayd 3-9-1975, saacaduna ahayd 10,00, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «NEOTOX».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaana sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsiga siinayaa Shircadda: Industrie Chimiche Somale, saldhiggeedu yahay Muqdisho, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyi Ikhtiraaca markay taariikhdu hayd 10,00, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «NEOTOX».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: 7.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA
*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaasida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: Pye Limited, markay taariikhdu hayd 6-9-1975, saacaduna ahayd 12,00, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «PYE DEVICE».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadda: Pye Limited, Arbritish Company, saldhiggeedu yahay St. Andrews Road, Cambridge England, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahay 6-9-1975, saacaduna ahayd 12,00, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman:

«PYE DEVICE».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: 8, 9, 10, 11, 20, 45.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, gakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna siibsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Xiirey Qaasim Wehliye ahna Maamulaha Shirkadda: Industrie Chimiche Somale, markay taariikhdu ahayd 3-9-1975, saacaduna ahayd 10.00, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

«TOILET SHAMPO».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo an cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa Shirkadda: Industrie Chimiche Somale saldhiggeedu yahay Muqdisho, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 3-9-1975, saacaduna ahayd 10,00, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «TOILET SHAMPO».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha acabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: 31.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA
*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna Wakiilka Shirkadda: Johnson & Johnson a Corporation Company, markay taariikhdu ahayd 27-8-1975, saacaduna ahayd 12,30, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «MODESS».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa Shirkadda: Johnson & Johnson a Corporation Company, saldhiggeedu yahay 501 Gearge Street, New Brunswick New Jersey (U.S.A.), taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 27-8-1975, saacaduna ahayd 12,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «MODESS».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: 48.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975,

XOGHAYAHA DAWULADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOOARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna Wakiilka Shircadda: Johnson & Johnson a Corporation Company, markay taariikhdu ahayd 27-8-1975, saacaduna ahayd 12,30, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «SERENA».

ISAGOO ARKAY Xaashida ilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa Shirkadda: Johnson & Johnson a Corporation Company, saldhiggeedu yahay 501 George Street, New Brunswick, New Jersey(U.S.A.), taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaahiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 27-8-1975, saacaduna ahayd 12,30, Si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «SERENA».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: 48.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## WASAARADDA WARSHADAHA

### XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labd ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: Johnson & Johnson a Corporation Company, markay aariikhdu ahayd 27-8-1975, saacaduna ahayd 12,300, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «MERSILK».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaado sumad ganacsi siinayaa shirkadda: Johnsin & Johnson a Corporation Company, saldhiggeedu yahay 501 George Street, New Brunswick, New Jersey (U.S.A.), taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 27-8-1975, saacaduna ahayd 12,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jomhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «MERSILK».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: kalaas 46.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyi tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmooud ahna wakiilka shirkadda: Sir Robert Burnet & Co., markay taariikhdu ahayd 6-9-1975, saacaduna ahayd 12, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumada Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «BURNET'S».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada yo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadda: Sir Robert Burnett & Co., saldhiggeedu yahay at Dacree Street, London, England, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay aariikhdu ahayd 6-9-1975, saacaduna ahayd 12, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman:

«BURNETT'S».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: kalaas 39.

Sumadda iyada waxaa kaloo la sicon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imbaḷlaggi) hesiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWULADDA
*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr. 3 soona baxay 22kii Jenaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhitraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka Corsland Filters Limited, markay taariikhdu ahayd 8-9-1975,, saacaduna ahayd 13, kaa oo uu raba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:« CROSLAND FILTERS».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa Crosland Filters Limited, saldhiggeedu yahay Glaisdale Drive, Bilborough, Nottingham, England, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyi Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 8-9-1975, saacaduna ahayd 13, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman:

«CROSLAND FILTERS».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska hoos ku qoran: kalaas 32.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

Muqdisho, 3 Nofembre 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Dadweynaha Degmada B. Weyne, waxaa leydin Ogeysiinayaa in Jaalle Maxamed Faarax Xasan uu Xafiiskaan Keenay Arji uu ku Weydiisanayo Ruqsada milki ah in loogu ogoliido cad dhul ah ee uu degganyahay kuna yaal B. Weyne Xaafadda Xaawa Taago, Laanta Iftiin, dhulkaas oo la xuduud ah jaalleyaalka soo sicda: Waqooyi Maxkamada degmada, Bari Sheekh Maxamed Saciid, Koonfur Xasan Cabdullahi, Galbeed Raxmo Cusmaan.

Ruux kasta ee dhulkaa dacwo ka qabahi waa inuu soo qadimo dacwad ka horjeeda dhulkaa inta aysan dhamaan 30ka maalmood ee ogeysiiska kani uu ku dhegsanyahay Xafiiska kan (Albo Municipale) B. Weyn. Waqtigaa oo kabillabata maanta 30-7-1975, kuna dhamaa doonta 28-8-1975. Muddadaa aan soo sheegay iyo wixii ka dambeeya ruux allale ruuxi dacwad keena lagama makhli dono ee waa inta 30ka maalmood aysan dhamaan waa inuu soo qadimo dacwada ka horjeeda dhulka aan soo sheegay.

B. Weyne, 30-7-1975.

Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka Deg. B. W.

*(282)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Cali Cawaale, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dulka 4-8-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo diwladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardiigley, oo leh qiyaas Rettangolare 10x30 kuna fadhiya 300 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xigga Jid.

Koofur Waxaa ka xigga Xaaji Cabdullahi Axmed.

Galbeed Waxaa ka xigga Jaamac Kheyre.

Bari Waxaa ka xigga Waddo

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga boodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerkadawladda.

Muqdisho, 30 Oktoobar 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydaruus C. Keenadid*

*(283)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Abuukar Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 17-5-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo diwladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas Rettangolaar, kuna fadhiya 20x30 = 600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo.

Koofur Waxaa ka xiga: Lootka Lamb. yahay 28.

Galbeed Waxaa ka xiga: Lootka Lamb. yahay 39.

Bari Waxa ka xiga: Lootka Lamb. yahay 41.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga boodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerkadawladda.

Muqdisho, 30 Oktoobar 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydaruus C. Keenadid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Warsama Xasan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 17-8-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Cabdulcasis, oo leh qiyaas Rettangolaar mt. 37,60x4 kuna fadhiya 150,40 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddada Balcad.
Koofur Waxaa ka xiga: Jaalle Cali Cismaan (Kawalaawe).
Galbeed Waxaa ka xiga: Gurgiisi hore.
Bari Waxaa ka xiga: Waddada Nugaal.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga boodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerkadawladda.

Muqdisho, 2 Nofembre 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim C. M.*

*(285)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shariif Cumar Hindi, u uso qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 15-7-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismi dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Deg Hodan, oo leh qiyaas Rettangoolar mt. 28x25 kuna fadhiya 700 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waddo.
Koofur Waddo.
Galbeed G. L. Yahay 186-75.
Bari G. L. Yahay 68-74.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga boodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerkadawladda.

Muqdisho, 2 Nofembre 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim C. M.*

*(286)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Sheekh Cumar, u uso qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 16-10-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Deg. Hodan, oo leh qiyaas Rettangolar mt. 30x8 kuna fadhiya 240 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxa ka xiga guri u leeyahay Yuusuf Maxamed (Farata).

Koofur Waxaa ka xiga Waddo.

Galbeed Waxa ka xiga Waddi Yar.

Bari Waxa ka xiga Isla gurigiisa.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga boodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerkadawladda.

Muqdisho, 2 Nofembre 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim C. M.*

*(287)*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDUU arkay wey diinta horay ku qoran;

MARKUU arkay waxaa ay saabsan tahay iyo ogeysiiskii Bankiga Keydka iyo Amaahda (eeg warq. lamb. 33986) wuxuu ogaaday in tahay shaqadiisa;

HADDUU arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

WUXUU CADEYUAYAA

Lumida buuga keydka lamb. 622, kuna qoray Shs. 2.578 (labakunshanboqoltodabaatansideed) uu iska lahaa Maxamuud Caddawe Maxamuud oo hastan dhintay eeg. cadeynta dhimashada lamb. 282 Reg Cert..

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo buug keyd cusub Islaanta la yiraahdo Faadumo Caddawe Maxmuud, oo ah qofka kaliya ee leh Dhaxalka Marxuumka Maxamuud Caddawe Maxamuud, sida ku cad warqadda Maxkamadda Dagmada; ka dib markii Dekreetadan lagu shaaciyi faafinta rasmiga ah Dawladda.

WAXAALA CODSANAYAA

In buug keydka cusub ee la sameyn doono gacanta saaro Jaalle Faadumo Caddawe Maxamuud, ama isla ayadaas ka sita wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayo muddada 30ka beri ah ee kor lagu soo sheegay.

Xamar, Tr. 6-11-1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA

*Cabullahi Daahir Barre*

*(288)*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDUU arkay dacwada horay ku qoran;

MARKUU arkay waxaa ay ku saabsan tahay iyo ogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Ummadda (eeg. warq. 12138), wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

HADDUU arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumiddajeegga wareega ee lamb. 012579 oo ay ku qorneyd lacag dhan Shs 19.000 (tobansagaalkun) iskana lahaa Cali Xasan Nuur:

WUXUU AMRAYAA

In Cali Xasan Nuur loo sameeyo jeeg wareega ee cusub 15 maalmood ka dib markii Dekreetadan lagu shaaciyi Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda;

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegga wareega ee cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku xusan yahay ama qof isla asagaas ka sita wakaalad sharci ah.

Xamar, Tr.23-11-1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA

*Cabullahi Daahir Barre*

*(288 Bis)*

---

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

---

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDUU arkay dacwada horay ku qoran;
MARKUU ar key waxaa ay ku saabsan iyo cgeysiiskii Bankiga (eeg. warq. Bankiga 1741) Ganacsiga Ummadda laanta seddexaad, wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;
HADDU arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

WUXUU CADEYNAYAA

Jeegga wareega ee lamb. 9980 oo ayku qoran tahay Shs. 10.000 (tobankun) iskana lahaa Cali Xasan Nuur;

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo jeeg wareega ee cusub ninka kor ku magacaaban, 15 maalmood ka dib markii amarkan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda;

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga wareega ee la sameyn dooni gacanta laga saaro Cali Xasan Nuur ama qof isla asa ga ka wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayo 15ka maalmood ee kor lagu soo xusay.

Xamar, Tr. 23-11-1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA

*Cabullahi Daahir Barre*

*(288 Bis)*

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الرسمية الجريدة

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA
نجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Muqdisho, 25 Nofember 1975 | L. 3. R. 11

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## S H A R C I

SHARCI L. 74 ee 21 Oktoobar 1975 — *Keenidda iyo Qeybinta Alaabta Dhismaha.* Bog. 919

SHARCI L. 75 ee 21 Oktoobar 1975 — *Keenidda iyo Qeybinta Cinjirka Ceyrin (Crude Ruber).* » 920

SHARCI L. 76 ee 11 Nofember 1975 — *Agoonsasho Hashiiska lagu asaasay sanduuqa Horumarinta Afrika (African Development Fund).* » 921

SAHRCI L. 77 ee 11 Nofembre 1975 — *Meel Marin Heshiis Farsamadeed iyo Iskaashiga Cilmiga oo Dhexmaray Soomaaliya iyo Roomaaniya.* » 922

SHARCI L. 78 ee 11 Nofembre 1975 — *Toosin Sharci Tiradiisu Tahay 40 ee soo baxay 4tii Oktoobar 1973.* » 923

Madbacadda Dawladda — Muqdisho

## BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA L. 157 ee 10 Nifembre 1975 — *Xeer Nidaamiyaha Guddiga Qiimenta Hoosooyinka la Toleeyay iyo waxyaabaha ay Dawladda la wareegtay.* Bog. 924

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA L. 158 ee 10 Nofembre 1975 — *Magacaabid Guddiga GSR ee Qiimenta Magdhowga Hoosooyinka la toleeyay iyo waxyaabaha lala wareegay.* » 926

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGARSIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8 Nofembre 1975 — *Naada Dhuul Jaalle Ibrahim Xaaji Xaashi. (289)* Bog. 927

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8 Nofembre 1975 — *Naada Dhuul Jaalle Dahaba Cabdi Cismaan. (290)* » 928

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16 Nofembre 1975 — *Dhumid Jeeg wareega L. 34608 oo ku qoran Jaalle Aadan Ibrahim Moxamed. (291)* » 928

# BOGGA KOWAAD

**SHARCI L. 74 ee 21 Oktoobar 1975.**

**Keenidda iyo Qaybinta Alaabta Dhismaha.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqaddii 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga lam. yahay 32 ee 18-3-72 Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha;

ISAGOO TIXGELIYEY In loo baahan yahay in Dawladdu keli ahaan u keento una qaybiso alaabta dhismaha;

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii Gilaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawuladda;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Alaabta dhismaha oo ah: Qoriga (alwaaxa) iyo waxa laga sameeyo, Biraha iyo Qalabka Dhismaha (tools), Makiinadaha dhismaha i.w.m., waxaa keli ahaan waddanka keeni karaa qaybina kara Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha.

Qodobka 2aad

Wasaaradda Ganacsiga iyo Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha ayaa loo xilsaaray iney hirgeliyaan sharcigaan.

Qodobka 3aad

1. Sharcigaan wuxuu dhaqan galayaa 21kii Oktoobar 1975, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

2. Qif kasta waxaa ku khasab ah inuu fuliyo sharcigaan dadkana ku khasbo.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Gaas Maxamed Siyaad Barre*

SHARCI L. 75 ee 21 Oktoobar 1975.
Keenidda iyo Qaybinta Cinjirka Ceyrin (Crude Ruber).

GOLAHA SARE EE KACAANKA

GUDDOONSHAHA

MARKUU ARKAY Warqaddii 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga lam. yahay 29 ee 10-3-73 Wakaaladda Batroolka Ummadda;

ISAGOO AQOONSADAY In loo baahan yahay in Dawladda keli ahaan u keento una qaybiso cinjirka ceyrin;

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayasha Dawuladda;

WUXUU SOO SAARAYA

Shariga soo socda:

Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo taariikhda uu dhaqan gala sharcigaan waxay Dawladdu la wareegtey dhammaan ganacsiga dibad ka keenka iyo qaybinta Cinjirka Ceyrin (crude ruber).

Alaabta lagu xusay xubinta kore ee sharcigaan waxaa keli ahaan keeni kara qaybina kara dalkoo idil Wakaaladda Bartoolka Ummadda.

Qodobka 2aad

Wasaaradda Ganacsiga iyo Wakaaladda Batroolka Ummadda ayaa loo xilsaaray iney fuliyaan sharcigaan.

Qidobka 3aad

1. Sharcigaan wux uudhaqan galayaa 21kii Oktoobar 1975, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rarsmiga ah ee Dawladda.

2. Qof kasta waxaa ku khasab ah inuu fuliyo sharcigaan dadkana ku khasbo.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Gaas Maxamed Siyaad Barre*

**SHARCI L. 76 ee 11 Nofembre 1975.**

**Aqoonsasho Hashiisk lagu asaasay sanduuqa Horumarinta Afrika (African Development Fund).**

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 1969;
ISAGOO ARKAY Go'aankii G.S.K. iyo kan Xoghayayaasha ee soo baxay 2dii Oktoobar 1975;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodibka 1aad

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay aqoonsatay heshiiskii lagu Asaasay Sanduuqa Horumarinta Afrika (African Development Fund).

### Qodobka 2aad

Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu yeelan doonaa astaan Sharci, waxaana ka mid noqon doonaa Sharciyada Dalka Soomaaliyeed.

### Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxeexo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 11 Nofembre 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Gaas Maxamed Siyaad Barre*

SHARCI L. 77 ee 11 Nofembre 1975.

**Meel marin heshiis Farsamadeed iyo Iskaashiga Cilmiga oo Dhexmaray Soomaaliya iyo Roomaaniya.**

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 1969;
ISAGOO ARKAY Heshiiskii Dhexmaray J.D.S. iyo Romaaniya 20 Abriile 7967;

ISAGOO ARKAY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyay heshiiska ka dhaxeeya Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Hantiwadaaga ah ee Roomaaniya oo lagu kala saxiixday 20kii Abriile 1967 Magaalada Bukharest.

### Qodobka 2aad

Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu yeelan doonaa astaan Sharci, wuxuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada lagaga dhaqmo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya.

### Qodobka 3aad

Heshiiskan wuxuu dhaqan geli doonaa maalinta la isweydaarsado waraaqaha ku saabsan oggolaanshaha, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 11 Nofembre 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Gaas Maxamed Siyaad Barre*

SAHRCI L. 78 ee 11 Nofembre 1975.

Toosin Sharci tiradiisu tahay 40 ee soo baxay 4tii Oktoobar 1973.

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yaha 40 oo Horumarinta Iskaashatooyinka, soona baxay 4 Oktoobar 1973;

ISAGOO AQOONSAN Iney tahay lagama maarmaan in la toosiyo Qodobka 3aad ee Lifaaqa Sharciga Lamb. 40 ee 4-10-1973;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Ganacsiga;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA HOOS KU QORAN

### Qodobka 1aad

Waxaa la toosinayaa qodobka 3aad ee Lifaqa Sharciga tiradiisu tahay 40 oo soo baxay 4tii Oktoobar 1973; waxaana laga dhigayaa sida soo socota:

«Tirada xubnaha dhisi kara Iskaashatada Ganacsiga (Consumer Cooperative) waxaa laga dhigaya ugu yaraantii 20 xubnood».

### Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu hirgelayaa si deg deg ah; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 11 Nofembre 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*G. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

# BOGGA LABAAD

**XEER L. 157 ee 10 Nofembre 1975.**

**Xeer nidaamiyaha Guddiga qimeynta Hoosooyinka la toleeyey iyo waxaabaha ay Dawladda la wareegtay.**

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshada 1aad iyi tan 2aad ee Kacaanka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga soo baxay 21kii Oktoobar 1975 oo lagu toleeyey Sharikadaha Hoosooyinka iyo la wareegidda ganacsiga dibad ka keenka iyo qeybinta alaabada qaarkood;

ISAGOO AQOONSADAY Inay Tahay lagama maarmaan in la dejiyo Xeer-Nidaamiye Dawladeed ee habeenaaya habka qiimeynta iyo magdhowga ay dawladdu siineyso dadkii xoolaha lagala wareegay;

## WUXUU SOO SAARAYAA

### Qodobka 1aad

1. Waxaa la dhisay Guddi loo xilsaaray inuu qiimeeyo magdhowga arjiga lagu warsanyo makdhowga wuxuu la qaadan doonaa shirar dadkii satada dibad ka keenka dharka, maacuunka, qalabka dayactirka, kabidda, xaafiisyada, makiinadaha, Hoosooyinka, iwm. ee lagu xusay sharciyada soo baxay 21kii Oktoobar 1975.

2. Guddigu wuxuu leeyahay awood buuxda uu ku qiimeeyo, bixiyo, heeshisna la galo cidda magdhowga xaq u yeelan karta sharci ahaan.

### Qodobka 2aad

1. Guddiga lagu xusay qodobka 1aad ee xeerkan, markii u helo arjiga lagu warsanayi magdhowga wuxuu la qaadan doonaa shirar dadkii xoolaha lagala wareegay oo doonaya magdhowga si uu ugala xaajoodo heshiisna looga gaaro caddada magdhowga la soo warsaday.

2. Shirarka ay yeelan doonaan Guddiga waxaa ka soo qeyb geli kara qofka magdhowga doonaya ama qof ka wakiil ah oo sita wakaalad sharciyeed.

### Qodobka 3aad

1. Guddiga wuxuu awood u leeyahay inuu weydiiyo qofka xaqa u doonaya inuu la yimaado wax allaale wixii caddeyn ah oo saldhig u noqon kara doodiisa, wuxuuna siin karaa muddo ku filan si uu u caddeystso xaqa uu doonayo.

2. Qofka u doodaya magdhowga wuxuu xaq yeelanayaa muddada loo qabtey dhexdeeda inuu soo hordhigo Guddiga wixii caddeyn ah oo muujinaya sifaalaha uu ku muteystay magdhowga.

Qodobka 4aad

1. Guddigu markii u helo caddeyn, waraaqo marag kac ah iyo warbixin la xiriira codsashada magdhowga, waa inuu dhameystiraa wixii waraaqo ah ee ka maqnaan kara si lagu gaaro qiimeyn saxa.

2. Markii guddigu u dhameeyo uruurinta iyo daraasada dikumentooyinka kor ku tilmaaman waxuu go'aan ka gaaraayaa codsashada magdhowga isagoo sabaab caddaan ah ka soo saari doonaa kana jawaabi doona wax allaale wixii dooda ama murana.

Qodobka 5aad

Go'aanka kor lagu tilmaamay, isaga oo qoran, ayaa loo gudbin doonaa dadka xaqa u leh magdhowga iyadoo loogu diri doono «Boostada Rakomandaato» meesha ay sheegteen in laga heli karo.

Qodobka 6aad

1. Siddon cisho gudaheed marka laga bilaabo maalinta gacanta laga saaro go'aanka guddigu gaaray, dadka u doodaya makdhowga, waxay awood u leeyihiin inay ka soo jeediyaan dood iyo wax ka dhihid go'aanka Guddiga iyagoo raacinaaya wax alaale wixii warbixin ah ee la xiriira dooddoda.

2. Qofka magdhowga u doodaya ee soo jeediya dood ka hortag ah go'aanka Guddiga ee lagu xusay qodobka 4aad ee xeer-nidaamiyahan, wuxuu warsan karaa Guddiga Qaymeynta iyo Magdhowga ineey shir isugu yimaadaan si looga gun gaaro doodaas, go'aan kama dambeys ahna looga gaaro.

3. Haddii doodi ka hortagga iyo wixii la xiriiray ee guddiga la hirkeeney u ku ganco, Guddigu wuxuu awood u leeyahay go'aankii-si wax ka beddelo isagoo raacsiin doona asbaab hor leh.

4. Haddii dood ka hortagga ah ee lid ku ah go'aanka Guddiga aan la keenin muddada kor lagu soo sheegay, go'aanka Guddiga qiimeynta iyo Magdhowga wuxuu noqonayaa mid kama dambeeys ah.

Qodobka 7aad

Wixii aan lagu soo sheegin xeer nidaamiyahan ee habeynaaya habka qiimeynta magdhiwga, waxaa la raaci doonaa sharciyada la xiriira sarkaalka loo magacaabo «Khaarijiye» (Liquidatore).

Qodobka 8aad

Hawsha Guddiga waxay bilaabmi doontaa 21 Oktoobar 1975, waxayna dhammaan doontaa, 21 Oktoobar 1975.

Qodobka 9aad

Guddiga wuxuu yeelan doonaa Xoghayn Uruurisa «dokumentooyinka» kana caawiya wixii loo baahdo.

Qodibka 10aad

Guddiga Qiimeynta iyo Magdhowga wuxuu awood u leeyahay inuu magacaabo guddi Tekniko ah oo ka caawiya hawsha loo xilsaaray.

Qodobka 11aad

Xeer nidaamiyahan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 21ka Oktoobar 1975, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10 Nofembre 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*G. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

---

**XEER L. 158 ee 10 Nofember 1975.**

**Magacaabid Guddiga GSK ee Qimeynta Magdhowga Hoosooyinka la toleeyey iyo waxyaabaha lala wareegay.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga soo baxay 21kii Oktoobar 1975 oo lagu toleeyay Sharikado, Hoosooyin iyi ganacsiga dibad ka keenka iyo qeybinta alaabada qaarkood.

ISAGOO Xeer-Nidaamiyaha Dawladeed ee ku saabsanaa Guddiga Qiimeynta iyo Magdhowga xoolaha lala wareegay.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Guddiga Qiimeynta iyo Magdhowga ee lagu dhisay qodobka 1aad ee Xeerka lambarkiisu yahay , taariikh wuxuu ka koobnaan doonaan:

1. Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud — Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga ahna xubin Guddiga G.S.K. u qaabilsan Dhaqaalaha Guddomiye
2. Jaalle Maxamed Yuusuf Wyrax — La-Taliyaha Guddiga Dhaqaalaha G.S.K. Xubin

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 21 Oktoobar 1975, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdishi, 10 Nofembre 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*G. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

---

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGARSIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibrahim Xaaji Xaashi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 15-9-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas Afar Gees. mt. 100x100 kuna fadhiya mt. 10.000 mdh.

Soohdin:
Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo.
Koofur Waxaa ka xiga: Waddo.
Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.
Bari Waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Nifembre 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim C. M.*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Dahaba Cabdi Cismaan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 22-9-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas mt. 28x25, kuna fadhiya 700 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo.

Koofur Waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed Waxaa ka xiga: G. L. Yahay 193-74.

Bari Waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Nifembre 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(290)* *Inj. Ibrahim C. M.*

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MAXKAMADDA

HADDUU arkay daćwada horay ku qoran;

MARKUU arkay waxay ku saabsan tahay iyo digniintix Bankiga Ganaosiga Ummadda Agaasika Guud wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

HADDUU arkay qodb. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

### WUXUU CADEYNAYAA

Lumida buugga keydka lamb. 8109 kuna qorneyd lacag tiradeedu yahay Shs. 7.390, iskana lahaa Aadan Ibrahim Maxmed (eeg. wark. lam. 34608).

### WUXUU AMRAYAA

In Aadan Ibraahim Maxmed buug keyd cusub loo sameyo 30 maalmood ka did markii amarkaan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In buug keydka cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Aadan Ibraahim Maxamed ama qof isla Asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo 30ka beri ee kor xusan.

Xamar, Tr. 16 Nofembre 1975.

GARSOORRAHA MAXKAMADDA G. B.

*(291)* ***Axmad Sheekh Cali Axmad***

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الرسمية الجريدة

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Muqdisho, 30 Nofembre 1975 **L. 4, R. 11**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** **جريدة شهرية**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## S H A R C I

SHARCI L. 79 ee 12 Abrile 1975 — *Beddelaad Sharci lam. 15 Tr. 25 Jennaayo 1969 iyo 34 Tr. 1da Maarso 1971.* Bog. 931

LEGGE N. 79 del 12 Aprile 1975 — *Emendamento alle Leggi n. 15 del 25 Gennaio 1969 e 34 del 1 Marzo 1971.* » 933

SHARCI L. 80 ee 6 Nofembre 1975 — *Isbeddelkii 3aad ee Miisaaniyadda 1975.* » 935

SHARCI L. 81 ee 9 Nifembre 1975 — *Wax ku kordhin Xeerka Habka Jinaaiga ah.* » 939

Madbacadda Dawladda — Muqdisho

## BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 6 Nofember 1975, L. 159 — *Abuurt Safaaradda Cusub ee laga Furidoono Hafaana.* Bog. 941

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 6 Nofembre 1975, L. 160 — *Magacaabid Danjire Cusub Jaalle G. Sare Yuusuf Xasan.* » 942

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 6 Nofembre 1975, L. 161 — *Magacaabid Danjire Cusub Jaalle Baasi Maxamed Suufi.* » 943

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGARSIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

FIAT SOMALIA 30-11-1975 — *Ogeysiis Shir. 292 Bis)* Bog. 944

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3-12-1975 — *Lumid buugga kaydka kaydka L. 1426-4 So. Shs. 1.015 u leyahay Maxamed Ibraahim Cabdulle. (292 Bis)* » 944

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER EE BURCO, 25-11-1975 — *Lumid Jeeg L. 7351 So. Sh. 2.000, ay ledahay Faadumo Cali Maxamed. (292 Bis)* » 945

# BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 79 ee 12 Abril 1975.

Beddelaad Sharci Lamb. 15 taarikh. 25 Jennaayo 1969 iyo 34 taariikh 1da Maarso 1971.

## GUDDOONSHAHA

## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lamb. 15 aariikh. 25-1-69 iyo beddelaadii ka dambeyey — Sharci Lamb. 65 taariikh. 13 Oktoobar 1971 oo ku saabsanaa Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa.

ISAGOO ARKAY Sharciga Lamb. 34 taarii.kh. 1da Marso 1971 iyo beddelaadii ka dambeeyay oo lagu dhisay Wakaaladda Xirmooyinka ugaarta iyo Dugaaga.

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama marmaan in sharciga oo ku saabsan xannanada Xoolaha, aan cidna laheyn xilka maamulkooda lagu wareejiyo Wakaaladda la tilmaamay iyadoo magaca loo aqoonsanjirayna wax laga beddelo.

ISAGOO TIXRAACAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha Dawladda;

## WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

Wakaaladda Xerada Dugaaga Dalka oo lagu dhisay sharciga lamb. yahay 34 taariikh. 1da Marso 1971, hadda ka did waxaa loo aqoonsan doonaa «WAKAALADDA XERYAHA IYO XANNAANADA DUGAAGA IYO UGAARTA» ee Dalka.

### Qodobka 2aad

Sharciga ku saabsan XannaanadaDugaaga iyo ugaarta oo ay ku qoranyihiin Sharciga lamb. 15 taariikh. 25-1-69 iyo beddelaaddii ka dambeeyay, waxaa xilka maamulkiisa lagu wareejiyay Wakaaladda sharcigan u tilmaamayo, hirgelinta sharciga wuxuu ka mid noqon doonaa hilmilooyinka Wakaaladda.

Wakaaladdu waxay leedahay awood iyo xilka maamulka ama Xannaanadda Dugaaga iyo Ugaarta oo xilkooda hayn jirtay Wasaaradda Xannaanada Goolaha Dhirta iyo Daaqa, isla markaas Wakaaladdu waxay noqoneysaa Maamulka Sare ee Xannaadada Dugaaga iyo Ugaadha.

### Qodobka 3aad

Wakaaladdu waxay hoos imaaneysaa Madaxtooyada Golaha ee Kacaanka waxaana ay yeelan doontaa qof oo kormeer ah oo ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka waxaana lagu magacaabi doonaa Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Amarada ee Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka oo uu siin karo Wakaaladda ama kormeeraha oo la magacaabay wuxuu noqon karaa fartiin ma amaro oo marka loo baahdo la bixiyo wuxuuna ujeedada amarkaas yahay inaay Wakaaladdu dhawreyso Sharciyada Dalka iyadoo ku shaqeyneyso danaha Wadanka.

Qodobka 4aad

Haddii loo aqoonsado inaay tahay lagama maarmaan, waxaa la dhisi doonaa Xiryo Xannaadada Dugaaga iyo Ugaarta Gobolada, iyo taasna waxaa lagu soo dhisi doonaa Xeer Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaaya talada kormeeraha iyo Agaasimaha Guud ee Wakaaladda.

Qodobka 5aad

Wakaaladdu waxay yeelan doontaa koox oo ilaaliyayaal ah oo asluubta ay ku dhaqmaan u dhigan tahay kuwa Ciidamada oo ku hawl leh ilaalinta Dugaaga meelaha looga baahdo iyo Xirmooyinka.

Qodobka 6aad

Agaasimaha Guud ee Wakaaladda wuxuu xaq u leeyahay ka qeyb qaato Guddiyada iyadoo laga reebay Guddiga dhaqaalaha ee G.S.K. oo Guddigaas ku hawl lahaan doono Xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta, isagoo awood loo siiyey inoo wixii talo ka ahna ka bixiyo, markaasta oo Guddida arrimahaas wax ku saabsan go'aan u ku gaari doono.

Agaasimaha Guud ee Wakaaladda waxaa loo xilsaaray inuu heshiis kasta la gali karo Wakaaladda Caalimiga ah, Macaahidka cilmiyada ah, dadka aqoonta leh (studiosi) oo ku shaqo leh Xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta isagoo markasta dhawraaya Sharciga Xirooyinka Dugaaga iyo Urgaarta iyo kuwa ku saabsan Xannaanadaoda.

Qodobka 7aad

Wakaaladdu Xirooyinka iyo Xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta waxaa la siin doono lacag oo dhan Shs. 1.000.000 ,hal malyuun shilin) si ay u hirgeliso hawlaha loo xilsaaray ee uu qoraayo Sharciga.

Qodobka 8aad

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 9aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Abrile 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

LEGGE N. 79 del 12 Aprile 1975.

Emendamento alle Leggi n. 15 del 25 Gennaio 1969 e 34 del 1 Febbraio 1971.

IL PERSIDENTE

DEL CONSIGLIO RIVOLUZIONARIO SUPREMO

VISTE la prima e la seconda carta della Rivoluzione del 21 Ottobre 1969;

VISTE La legge n. 15 del 25-1-1969 e succesivo emendamento — legge n. 65 del 13 Ottobre 1971 — sulla fauna e per la conservazione delobbiettivi.

VISTA La legge n. 34 del 1-3-1971 e successive modifiche relativa alla Istituzione dell'Ente per i Parchi Nazionali;

RITENUTO Necessario a che le norme in atti per la conservazione della fauna selvaggia sia devoluta al sopra menzionato Ente e di conseguenza modificare la sua denominazione;

PRESO ATTO Dell'approvazione del Consiglio Rivoluzionario Supremo e del Consiglio dei Segretari di Stato;

PROMULGA

la seguente legge:

Art. 1

L'Ente per i Parchi Nazionali istituito con legge 1-3-1971 n. 34 avrà ora d'nnanzi la denomizione di «ENTE PER I PARCHI NAZIONALI E PER LA CONSERVAZIONE DELLA FAUNA».

Art. 2

Tutte le norme in atte per la conservazione e per la salvaguardia della fauna selvaggia previste dalla legge 25-1-1969 e successivi emendamenti saranno devoluti all'Ente di cui alla presente legge e saranno fra i suoi obiettivi.

A tale fine l'Ente eserciterà tutti i poteri e le attività relative alla conservazione alla salvaguardia della fauna selvaggia già di competenza del Ministero Zootecnia e Foreste, classificandosi come autorità competente.

Art. 3

L'Ente posto sotto la vigilanza della Prseidenza del Consiglio Rivoluzionario Supremo ed avrà un Supervisore che sarà nominato fra i membri del Consiglio Rivoluzionario Supremo e con Decreto del Presidente del Consiglio Rivoluzionario Supremo.

Oltre alle direttive che il Presidente del Consiglio Rivoluzionario Supremo può dare all'Ente, il Supervisore nominato può dare ogni istruzione necessario e vigilanza a che esso Ente operi in conformità alla legge e nell'interesse della Nazione.

Art. 4

Se e' ritenuto necessario od indispensabile possono essere istituiti Parchi Nazionali o riserve in qualsiasi regione su proposta del Supervisore e del Direttore Generale e con Decreto del Presidente del Consiglio Rivoluzionario Supremo.

Art. 5

L'Ente disporrà di un corpo adeguato di guardie faunistiche militarmente ordinate per il controllo della fauna nei luoghi ritenuti necessari nonche' per le zone protette.

Art. 6

Il Direttore Generale dell'Ente per diritto farà parte di tutte le commissioni — salvo quelle Commissione Economica del Consiglio Rivoluzionario Supremo — che vengono istituite riferentesi alla conservazione dell'ambiente e dalla fauna con facoltà di esporre il suo parere ogni qual volta che si prenderanno decisioni che riguardino la fauna e la sua preservazione.

Il Direttore Generale dell'Ente inoltre avrà il compito di trattative, contatti con qualsiasi agenzia internazionale, istituti scienifici, Università, studiosi ecc. che si interessano sul problema della fauna, sempre uniformandosi alle norme in atto per i Parchi e per la conservazione faunistica.

Art. 7

L'Ente per i Parchi Nazionali e per la conservazione della fauna avrà una dotazione che ammonti a Shs. 1.000.000 (un milione di shellini) per l'inizio dell'attività attribuitale per norma.

Art. 8

E' abrogato ogni norma contraria od incompatibile con la presente legge.

Art. 9

La presente Legge entra in vigore dalla data sulla pubblicazione sul Bollettino Ufficiale.

Mogadiscio, 12 Aprile 1975.

IL PRESIDENTE

del Consiglio Rivoluzionario Supremo

*Jaalle Gen. Div. Maxamed Siyad Barre*

SHARCI L. 80 ee 6 Nofembre 1975.

**Isbeddelkii 3aad ee Miisaaniyadda 1975.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Go'aankii Labada Gole ee 6 Nofembre 1975.

Qodobka 1aad

Isbeddelka lagu sameeyey Miisaaniyadda 1975, sida ka muuqata lifaaqa A iyo B waa la ogolaaday.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxu dhaqan-gelayaa 6da Nofember, 1975 wuxuuna ka mid noqon doonaa sharciyada Dawladda Soomaaliyeed; waa in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah oo Dawladda.

Muqdisho, 6 Nofembre 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda
*JJaalle Cabdiraxmaan Nuur Xirsi*

LIFAAQA «A»

ISBEDDELKII 3aad EE MIISAANIYADDA 1975

| Madax | Madaxige | TILMAAN | Qiyaastii Hore | Isbeddelka | Qiyaasta Cusub |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.1.0. Cashuurta wax soo saaridda iyo kharashka | 1.1.2. | Cashuurta diridda Alaabta . . . | 10.000.000 | + 3.000.000 | 13.000.000 |
| | 1.1.5. | Cashuurta buuriga iyo taraqa . | 54.000.000 | + 6.000.000 | 60.000.000 |
| | 1.1.7. | Cashuurta Moorka . . . | 35.000.000 | + 7.000.000 | 42.000.000 |
| | 1.1.8. | Cashuurta Socodka Baabuurta . . | — | + 1.000.000 | 1.000.000 |
| 10.1.0. Amaahda | 10.1.1. | Amaahda Gudaha . . . . | — | +16.000.000 | 16.000.000 |
| | | Isugeyn | | +33.000.000 | |

## ISBEDDELKII 3aad EE MIISAANIYADDA 1975

| Madax | Madaxige | TILMAAN | Qiyaastii Hore | | Isbeddelka | Qiyaasta Cusub |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1.1.0. Madaxtooyada GSK | 1.1.1. | Musharaarka shaqaalaha joogtada ah | 3.238.341 | + | 261.000 | 3.499.341 |
| | 3.1.1. | Dhismaha Xafiisyada . . . . . | — | + | 2.600.000 | 2.600.000 |
| 1.2.0. Wasaaradda Maaliyadda | 1.2.8. j) | Bixinta Kharashka Sannadihii hore . | — | + | 10.000.000 | 10.000.000 |
| | 1.2.8. d) | Kaalmada kaydka ah . . . . . | 10.50.7167 | + | 3.000.000 | 13.507.167 |
| | 1.2.8. r) | Kirsocodka qaynta . . . . . | 5.029.785 | + | 1.700.000 | 6.729.785 |
| | 6.1.0. | Bixinta daynta gudaha . . . . . | 11.686.774 | + | 3.000.000 | 14.686.774 |
| | 6.2.0. | Bixinta daynta Dibedda . . . . | 5.093.901 | + | 500.000 | 5.593.901 |
| 1.5.2. Ciidanka Asluubta | 1.2.1. j) | Darka iyo wixii raaca . . . . . | 600.000 | + | 300.000 | 900.000 |
| | 1.2.1. x) | Batroolka iyo naaftada iyo saliida . . | 220.000 | + | 260.000 | 480.000 |
| | 1.2.1. kh) | Cuntada . . . . . | 3.600.000 | + | 3.000.000 | 6.600.000 |
| | 1.2.1. r) | Daabacaada iyo alaabta xafiisyada . | 100.000 | + | 100.000 | 200.000 |
| | 1.2.2. x) | Maacuunka . . . . . | 100.000 | + | 85.000 | 185.000 |
| | 1.2.3. t) | Alaabta deryeelidda baabuurta . . | 150.000 | + | 130.000 | 280.000 |
| | 1.2.3. x) | Alaabta dhismaha . . . . . | 100.000 | + | 200.000 | 300.000 |
| | 3.1.1. a) | Dhismaha Xabsiyada . . . . . | 500.000 | + | 350.000 | 850.000 |

| Madax | Madaxige | TILMAAN | Qiyaastii Hore | | Isbeddelka | Qiyaasta Cusub |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1.6.2. Caadanka Booliiska | 1.2.7. b) | Nalka iyo biyaha . . . . . | 290.000 | + | 260.000 | 550.000 |
| 1.7.0. Wasaaradda H. Guud | 3.1.1. | Dhismaha Jidka-Jowhar-Bulo Burte . | 350.000 | + | 820.000 | 1.170.000 |
| | 1.2.7. b) | Nalka iyo Biyaha . . . . . | 170.000 | + | 100.000 | 270.000 |
| 1.9.0. Wasaaradda Beeraha | 3.1.1. a) | Mashruuca Faanoole . . . . . | 10.000.000 | + | 3.000.000 | 13.000.000 |
| 1.12.0. Wasaaradda Warsh. | 3.1.1. a) | Warshadda Sibirka . . . . . | 5.500.000 | + | 1.000.000 | 6.500.000 |
| | 3.1.1. t) | Mashruuca Warshadaha Hargaha . . | 6.220.000 | + | 700.000 | 6.920.000 |
| | 3.1.1. j) | Warshada cusub ee sonkorta . . . | 2.450.300 | + | 1.000.000 | 3.450.000 |
| | 3.1.1. kh) | Warshadaha yar yar . . . . . | 1.159.700 | + | 100.000 | 1.259.700 |
| 1.18.0. Wasaaradda Shaqada iyo Tacliinta Sare | 1.1.1. | Mushaharka shaqaalaha joogtada ah . | 851.780 | + | 54.000 | 905.780 |
| 1.20.0. Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga | 3.1.1. | Dhismaha Cusub . . . . . | — | + | 250.000 | 250.000 |
| 1.21.0. Wasaaradda Warfaaf. | 3.1.1. | Dhismaha Raadiyaha Muqdisho . . | 300.000 | + | 230.000 | 530.000 |
| | | Isugeyn | | | +33.000.000 | |

**SHARCI L. 81 ee 9 Nofembre 1975.**
**Wax ku kordhin Xeerka Habka Jinaaiga ah.**

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshida 1aad iyo tan 2aad Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobk 74 ee Xeerka Habka Jinaaiga ah oo ku saabsan oggollasho ka koreysa shaqaale qarkood la qabanaayo;

ISAGOO AQOONSADAY In loo baahan yahay in wax lagu bordhiyo qodobka 74 ee Xeerka Habka Jinaaiga, ah, baaro dembiyadda sii loo daryeelo caddaaladda iyo danta Qaranka;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xighayayaasha Dawladda.

## WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

*Micneyn*

Haddii si kale aan loo micneyn ereyada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa sida soo sicota:

«Maamul Sare»: Waxaa loola jeedaa qof jago Sare ka haya maamulka dawladda sida Agaasime Guud ama Mareeye Guud, Danjire, Agaasime Waxaed iyo jagooyinka kale ee la siman;

«Laamaha Baarista»: Waxaa loola jeeda Laanta Baarista Dembiyadą, Laanta Nabadsugidda Ummadda iyo Xafiiśka Hantidhowrka.

### Qodobka 2aad

*Wax ka beddel Xeerka Habka Jinaaiga ah*

Xubinta 1aad ee qodobka 74 ee Xeerka habka jinaaiga ah, waxaa lagu kordhiyay xarafka (c), waxaan loo akhriyi doonaa sida soo socota:

(c) — Haddii eedaysanuhu yahay Maamule Sare waxaa shardi ah in la helo oggolaashada Madaxweynaha G.S.K. ka hor intaan la qabanin ama aan la xirin. Shuruudda xibintan (c) waxaa ka baxsan maamulaha Sare ee eedda loo haaysto oo lagu helo isagoo dembiga faraha kula jira (flagranza).

Qodobka 3aad

*Habka Baarista*

Iyadoo tixgelinaayo mabd'a caddaaladda, danta Maamulka Guud ee Dawladda iyo Xeerka habka jinaaiga ah waxaa qasab ku ah Laanta Baarista iyo Maxkamadaha marka eedeysanuhu uu yahay Maamule Sare insay raacaan habka soo socda:

i — Waa in Laamaha Baarista ka gun gaaraan waxyaabaha Maamulaha Sare loo haysto si wax runta ku dhowaankara loo gaaro oo dembi noqon kara xagga sharciga;

ii — Waa in Maxkamadaha, Xafiisyada Xeer Ilaaliyaha, Nabadsugidda, Boolilska iyo Hantidhawrka ka digtoonaadaan inaysan Baarista dembiyaalka lagu tuhmry Maamule Sare u dhicin si foolxumo ah, oo dhibaata ku reebi karta qofka Maamulka haya iyo shaqaalaha;

iii — Waa in haddii loo baahdo in la su'aalo ninka mas'uulka ah ee la tuhmay hawshaa (baadhista) loo qabtaa intii la kari karo si qarsoodi ah (xafiiskiisa oo loogu tago, amba xafiiska wax baadhaya oo si qarsoodi ah ugu yeedha, su'aalihii loo baahnaana kaga bogta si kashif la'aan ah);

iv — Madaxda Laanta Baarista ku shaqada leh waa in lala socodsiiyo tallaabooyinka laga qaadaayo Maamule Sare isla markaasna Madaxdaasu waa inay hubiyaan in baaridda dembigu si habsami ah u socoto;

v — Marka ay u caddaato Laanta Baarista ama xeer ilaaliyaha inuu eedeysanuhu yahay qof dambile ah waa in isla markiiba si rasmi ah oo qoran u weydistaa Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka oggolaanshaha qabashada ee deysanaha iyogoo u sheegaaya sababaha go'aankooda;

vi — Haddii uu Guddoomiyo Madaxweynuhu go'aanka Laanta Baarista ku shaqada leh, waa in si dhaqso ah loo ogeysiiya Madaxda eedeysanaha la shaqeeyo;

vii — Waa in xirid kaddib dadka caynikaas ah dacwadooda si deg deg ah Ciidanka amba Hay'adda ku shaqa luhu Maxkamadda ugu gudbisaa, iyaduna ay si deg deg ah dacwaddii ku oognayd eedeesanaha u qaaddaa.

Qodobka 4aad

Maxkamadda ku howl leh qaadista dembiga lagu tuhmay Maamule Sare waa in si dhaqso ah ama muddo aan dhaafsancyn qaadista dacwadaha ee u qoraayo Xeerka Habka Jinaaiga ah dacwadiisa ku ay qaadaa, si haddii dembile u yahayna looga oofiyaa xaqa dadweynaha, hadii kalena dhaqso loogu soo celiyo, xornimaddiisa iyo hawsha oo u haayay Maamulka Guud.

Qodobka 5aad

Qof all:le oo ku xadgudba sharciga waxaa loo ictibaaraaya inuu galay, denbi, waxaana logu qaadaaya qodobka 250 ee sharciga Jinaaiga ha.

Qodobka 6aad

*Burin Sharci*

Wax allaale wixii sharci ah ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la baaba shay.

Qodobka 7aad

*Dhaqan Gelid*

Ssharcigan wuxuu dhaqaa gelayaa 29ka Disheembar 1974, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 9 Nofembre 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

---

# BOGGA LABAAD

XEER L. 159 ee 6 Nofembre 1975.
Abuurit Safaaradda Cusub ee Laga Furidoono Hafaona.

MAXDAWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

IYADDO La ARKAY Warqadda 1aad ee Golaha Sare ee Kacaanka oo u wareejineysey Maamulka Sharciga Dawladda iyo Qawaaniinta Dalka;

IYADOO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed oo la socda ruuxa Kacaanka;

IYADOO LA ARKAY Sharciga Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda, lam. 9 ee 8dii Sebtember 1971, iyo Sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 26kii Abriile 1973 (Foreign Service Law);

IYADOO LA ARKAY Sharciga ay ku Dhissantahay Dawladda, Sharci lambar 14 ee 3dii Juunyo 1962;

IYADOO LA TIXGELINAYO Talooyinka ay soo jeedisay Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

AMARXEER

Qodobka 1aad

Waxaa la guddoomiyey in la furo Safaarad Soomaaliyeed, Saldhiggeeduna ahaandoona Jamhuuriyadda Kuuba.

Muqdisho, 6 November 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 5, bogga lamb. 176.*
*Muqdisho, 19 Nofembre 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

---

**XEER L. 160 ee 6 Nofembre 1975.**
**Magacaabid Danjire Cusub Jaalle G. Sare Yuusuf Xasan.**

MAXDAWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

IYADOO LA ARKAY Xaashida 1aad ee Golaha Sare ee Kacaanka oo u wareejineysey Mamulka Sharciga, Dawladda iyo Qawaaniinta Dalka;

IYADOO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed oo la socda ruuxa Kacaanka;

IYADOO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Dawladda Sharci lamb. 14 ee 3dii Juunyo 1962;

IYADOO LA ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 26kii Abriile 1973, (Foreign Service Law);

AMARXEER

Qodobka 1aad

Jaalle G. Sare Yuusuf Xasan Ibrahim, waxaa lagu magacaabay Danjire Soomaaliyeed; saldhiggisuna noqon doona Magaalada Hafaana ee Jamhuuriyadda Kuuba.

Muqdisho, 6 Nofembre 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda
ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda
***Cumar Carte***

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Muqdisho, 19 Nofembre 1975.*
*Diiwaanka lamb. 5, bogga lamb. 175.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

XEER L. 161 ee 6 Nofembre 1975.

**Mogacaabid Danjire Jaalle Baasi Maxamed Suufi.**

MAXDAWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

IYADOO LA ARKAY Warqadda 1aad ee Golaha Sare ee Kacaanka oo u wareejineysey Maamulka Sharciga Dawladda iyo Qawaaniinta Dalka;

IYADOO LA AKRAY Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo la socda ruuxa Kacaanka;

IYADOO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Dawladda, Sharci Lambar 14 ee 3dii Juunyo 1962;

IYADOO LA ARKAY Sharciga lambarkiisu yaha 36 ee 26kii Abriile 1973, (Fireign Service Law);

AMARXEER

Qodobka 1aad

Jaalle Baasi Maxamed Suufi F. N. 2474, Darajadiisuna tahay A-3 P. N. 4-2001; horeyna u ahaa La-Taliyaha Safaaradda J.S.D. ee Lusaaka, waxa lagu magacaabay Danjire Soomaaliyeed oo saldhigiisuna ashandoona Magaalada Triiboli.

Qidobka 2aad

Xilka loo magacaabay, waxuu ku haydoonaa isla Darajadiisu (A-3); sida uu qorayo Qodobka 25aad ee Sharciga lamb. yahay 36 ee 26kii Abriile 1973.

Muqdisho, 6 Nofembre 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda

ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda

**C***umar Carte*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*

*Diiwaanka lamb. 5, bogga lamb. 174.*
*Muqdisho, 19 Nofembre 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN ISGARSIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

**FIAT SOMALIA — S. p. A.**
**Hantida Shirkadda Sh. So.1.700.000,00**
**Xarunta Xamar**

---

### OGEYSIIS SHIR

Waxaa la ogeysiinayaa in Shirka aan Caadiga ahayn ee dadka ku jira Shirkadda FIAT Somalia S.p.A. lagu qaban doono FIAT S.p.A. Corso Marconi, 10-20 Torino, markay taariikhdu tahay 22-12-1975 saacaduna tahay 9ka, isu imaatinka hore iyo markay taarikhdu tahay 23-12-1975 isla sagaalka (9ka), isu imaatinka 2aad, si looga doodo ajendada soo socota:

— Dheereynta muddada shirkadda ilaa 31-12-1999 iyo beddelaada Qod. 3aad ee Xeerka (Statuto).

Muqdisho, 30 Nofembre 1975.

HAL MAAMULE
*Dott. Ezio Schierano*

*(292 Bis)*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

---

### GARSOORAHA MAXKAMADDA

HADDUU arkay dacwada hor ku qoran;

HADDUU arkay waxa ay ku saabsan tahay iyo ogeysiiski Bankiga (Eeg warq. lam. 1841) Ganacsiga Ummadda Laanta sedexaad, wuxuu ogaaday in ay tahay Shaqadiisa;

HADDUU arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

### WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda buugga keydka lam. 1426-4 oo ay ku qoran tahay lacag dhan Shs. 1.015 (kuntobanshan) iskana lahaa Jaalle Maxamed Ibraahim Cabdulle;

### WUXUU AMRAYAA

In buug keyd cusub loo sameeyo Jaallaha kor ku magacaaban, 30 maalmood ka dib marki Amarkan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

## WAXAA LA CODSANAYAA

In buug keydka cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Maxamed Ibraahim Cabdulle, ama qof isla asagaas wakiil kaga noqon kara si Sharci ah, ayadoo la sugaayo 30ka maalmood ee kor ku tilmaaman.

Xamar Tr. 3 Dishembre 1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA

*Cabduraxmaan Sheekh Maxamed*

*(292 Bis)*

---

### MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER EE BURCO

---

## XUKUN DEECRE

MARKII AAN ARKAY Arjiga Dacwootada Faaduma Cali Maxamed oo sheegatay in laga xaday jeeg wareega Lamb. 7351 kuna qornayd 2.000 (laba kun shilin) oo Bankiga Burco ka soo baxaday 26-6-75, codsana tayna in loo celiyo lacagtaas.

MARKII AAN ARKAY warqadda Summaddeedu 03099 oo ka timid Bankiga Ganacsiga Laanta Burco oo ay hubiyeen in Jeegaasu jiro.

MARKII AAN HUBIYEY in dacwootada ay doodeedii runtahay, isla markaas aan arkay qod. 27 ee Xeerka Lamb. 2 sona baxay 9-9-1965. Ayaan guddoonshay in Jeega summaddiisu 7351 la baabiiyo Bankiga Ganacsiga u celiyo Faadumo Cali Maxamed lacagta ku qornayd Jeegaas. 30 casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiba ah, kharajkana Dacwootadu iska bixiso.

Maanta oo taarikhdu tahay 25-11-1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer

*Dr. Cabdiraxmaan X. Maxamuud*

*(292 Bis)*

# FAAFIN RASMI AH
# الرسمية الجريدة

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA
تجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 3aad** Muqdisho, 1 Disembar 1975 **L. 12**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** **جريدة شهرية**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


# KOOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## S H A R C I


SHARCI L. 82 ee 18 Nofembar 1975 — *Hesishiis Ganacsi iyo dhaqaale ee dhexmaray J.D.S. iyo Dowladda Qadar.* Bog. 949

SHARCI L. 82 ee 18 Nofembar 1975 — *Nuqul Carabi ah.* » 950

SHARCI L. 83 ee 18 Nofembar 1975 — *Hishiis ku saabsan dhismaha Xoogga Korontada.* » 951

SHARCI L. 83 ee 18 Nofembar 1975 — *Nuqul Carabi ah.* » 952

LAW No. 83 of the 18 November 1975 — *Instrument of Ratification.* » 953

SHARCI L. 84 ee 20 Nofembar 1975 — *Wax-ka beddelka Taariifada furdadaha lagu ogolaada Dekreetada Sharciga ah ee 1 r. 5 ee 11-12-1968.* » 954


Madbacadda Dawladda — Muqdisho

# BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 31 Aqoosto 1975, L. 163 — *Dalacaad Saraakiil.* Bog. 955

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 31 Aqoosto 1975, L. 164 — *Dalacsiin Sarkaal.* » 957

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 31 Aqoosto 1975, L. 165 — *Dallacaad.* » 958

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 27 Sebtembar 1975, L. 166 — *Dallacaad.* » 959

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 26 Oktoobar 1975, L. 167 — *Magacaabid Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Gedo qaybtooda Wakiilada Beesha.* » 960

XEER WASAARADDA GANACSICA, 14 Oktoobar 1975, L. 168 — *Habka Gadashada Faleenka wadanka Gudihiisa.* » 963

XEER WASAARADDA GANACSIGA, 15 Disembar 1975, L. 169 — *Diiwaan Gelinta Iskaashatada Ganacsiga Muuska Biseel ee Shalamboot.* » 964

XEER WASAARADDA GANACSIGA, 15 Disembar 1975, L. 170 — *Diiwaan Gelinta Iskaashatada Xijiga «Hodon» ee Qardho.* » 965

XEER WASAARADDA GANACSIGA, 15 Disembar 1975, L. 171 — *Diiwaan Gelinta Iskaashatada Rootiga «Muruqmaal» ee Magaaladda Jilib.* » 966

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN ISGARSIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13 Nofembar 1975 — Lumid Buugga kaydka L. 748-4 So. Sh. 1.075 u leyahay *Xasan Maxamed Sheegow. (293)* Bog. 967

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 6 Nofembar 1975 — Lumid jeeg wareega L. 15563 So. Shs. 1.200 u leyhay *Cali Xasan Xirsi. (294)* » 968

# BOGGA KOOWAAD

**SHARCI L. 82 ee 18 Nofembar 1975.**
**Heshiis ganacsi iyo dhaqaale ee dhexmaray J.D.S. iyo Dowladda Qadar.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad iyo Sharciga 1aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar, 1969.

MARKUU ARKAY Heshiiskii dhexamay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya iyo Dawladda Qadar oo lagu kala saxiixday gaalada Dooxa 27kii Maajo 1975.

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha:

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Heshiiskii Ganacsiga iyo Dhaqaalaha oo dhxmaray Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya iyo Dawladda Qadar oo lagu saxiixday Magaalada Dooxa 27kii Maajo, 1975, waa la oggolaaday.

Qodobka 2aad

Hesiiskaasi wuxuu yeelanayaa astaan sharci, wuxuuna ka mid noqonayaa sharciga dalka u yaal sida ku qoran qodobkiisa 9aad, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 18 Nofembar 1975.

GUDDOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

## وثيقـــة تصديق

## جمهورية الصومال الديمقراطية

بعد الاطـــــلاع : على الميثاق الاول والثانى للثورة ٢١ اكتوبر ١٩٦٩
وبعد الاطـــــلاع : على بروتوكول الاتفـاق التجـارى والاقتصـــادى

المبرم بين جمهورية الصومـال الديمقراطية ودولة قطر فى الدوحة فى ١٩٧٥/٥/٢٧م واخذا بعين الاعتبـار قرار المجلس الاعلى للثورة ومجلس اعضـاء الدولة بشأن التصديق على الاتفـاقية فى ٢٨ اغسطس ١٩٧٥م

## يصـــدر المرســـوم التـالى :

### المادة الاولى

يصـــدق على الاتفـاقية التجـارية والاقتصـادية المبرمة بين جمهورية الصومال الديمقراطية ودولة قطر والموقع عليها فى الدوحة فى ٢٧ مايو ١٩٧٥

### المادة الثـانية

تكون للاتفـاقية قوة القـانون ، وتصح من قوانين الدولة طبقـا للمـادة التـاسعة منهـا ، وتنشر فى النشرة الرسمية .

اللواء محمد سيـاد برى
رئيس المجلس الاعلى للثـــورة

١٨/١١/٧٥

SHARCI L. 83 ee 18 Nofembar 1975.
Meel marin heshiis.

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashidii 1aad, tan 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad ee soo baxay 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiskii deynka ahaa ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya iyo sanduuqa Kuweyt ee Horumarinta dhaqaalaha Carabta oo la saxiixay 7dii Luuliyo, 1975;

MARKUU ARKAY Oggolaanshihii heshiiska ee Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha;

## WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyay heshiiskii deynka ahaa ee ku saabsanaa dhismaha mashruuca Xoogga Korontada labaad ee Muqdisho iyo wixii la xiriirka (accessories) oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaalia iyo Sanduuqa Horumarinta Dhaqaalaha Carbeed oo la saxiixay 7dii Luuliyo 1975.

### Qodobka 2aad

Heshiiskan wuxuu lahaan doonaa astaan Sharci Dalka gudahiisa ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya ka billaabata maalinta uu waqan galo sida uu qabo qodobka 9aad ee heshiiska.

Muqdisho, 18 Nofembar 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

وثيقـــة تصديق

## جمهورية الصومال الديمقراطية

رئيس
المجلس الاعلى للثـــورة

بعد الاطـــــــلاع : على الميثاق الاول والثانى للثورة ٢١ اكتوبر ١٩٦٩ والقـانون رقم ١ .

وبعد الاطـــــــلاع : علـــى اتفاقيـــة القرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق الكويت للانمـاء الاقتصادى العربى الموقع عليهـا فى ٧ يوليو ١٩٧٥م .

واخذا بعين الاعتبـار : على موافقـــة المجلس الاعلـــى للثورة ومجلس اعضاء الدولة .

## يصـــدر المرســـوم التـالى :

المـادة الاولى

يصدق على اتفـاقية القرض الخاصة بمشروع المحطة الكهربائية الثانية لمقدشوه المبرمة بين حكومة جمهـــورية الصومـال الديمقراطيـــة وصندوق الكويت للانمـاء الاقتصـادى العربى الموقع عليهـا فى ٧ يوليو ١٩٧٥ .

المـادة الثـانية

تكون للاتفـاقية قوة القـانون فى الجمهورية من يوم سريان مفعولهـا طبقا للمادة التـاسعة للاتفاقية .

رئيس المجلس الاعلى للثـــورة
اللواء محمد سيـاد برى

١٨/١١/٧٥

LAW No. 83 of 18 Novmber 1975.
Istrument of Ratification.

THE PRESIDENT

OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The First and Second Charters of the Revolution of 21st October, 1969 and Law No. 1;

HAVING SEEN The Loan Agreement between the Somali Democratic Republic and the Kuwait Fund Arab Economic Development signed on July 7, 1975;

TAKING NOTE Of approval of the Supreme Revolutionary Council and of the Secretaries of State;

Article 1

The Loan Agreement for Mogadishu Second power station and its accessories project between the Government of the Somali Democratic Republic and the Kuwaith Fund for Arab Economic Development signed on July 7, 1975, is hereby ratified.

Article 2

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Republic from the date of its enteering into force in accordance with article 9 of the said Agreement.

Mogadishu, 18 November 1975.

THE PRESIDENT
of the Supreme Revolutionary Council
*Moxamed Siyad Barre*

SHARCI L. 84 ee 20 Nofembar 1975.

Wax-ka-baddelka Taariifada Furdadaha ee lagu ogolaaday Dekreetad Sharciga ah ee lr. 5 ee 11-12-1968.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAYA Ogolaasha Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

MARKUU SOO JEEDIYEY Xoghayaha Wasaaradda Maaliyaddu;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Cashuurta dhoofinta hargaha*

Marka laga bilaabo 1da Diisambar, 1973, cashuurta dhoofinta hargaha ee ku dhigan Qodobka 41.01, qodob-xigayaasha 01, 03, 04 iyo 05 lifaaqa ku saabsan cashuurta dhoofinta kuna xiran Taariifada Furdadaha waxay noqonaysa sida soo socota:

Qodob 41.01 — Saamaha iyo hargaha:

| | | |
|---|---|---|
| Qodob-xige 01 — Lo'da | Sh. So. 0,45 | Kiiladiiba |
| » » 03 — Idaha | » » 0,45 | Haragiida |
| » » 04 — Riyaha | » » 0,45 | Haragiida |
| » » 05 — Geela | » » 0,15 | Kiiladiiba |

Qodobka 2aad

*Cashuurta dhoofinta xoolaha nool*

Marka laga bilaabo 24 Juun 1974, Cashuurta dhoofinta xoolaha nool ee ku dhigan qodobada 01, 02, 01.04 iyo 01.06 qodob-xigaha 01 ee lifaaqa ku saabsan cashuurta dhoofinta kuna xiran Taariifada Furdaduhu waxay noqonaysaa sida soo socoto:

Qodob 01.02 — Lo'da oo aanay ku jirin kuwa dibadgalaha ihi: Sh. So. 37 neefkiiba.

Qodob 01.4 — Idaha iyo riyaha oo aanay ku jirin kuwa dibadgalaha ihi.

Qodob-xige 01 — Idaha: Sh. So. 7 neefkiiba.

Qodob-xige 09 — Riyaha: Sh. So. 7 neefkiiba.

Qodob 01.06 — Xoolaha kale ee nool oo aanay ku jirin kuwa dibadgalaha ihi.

Qodob-xige 01 — Geela: Sh. So. 75 neefkiiba.

Qodobka 3aad

*Baabi'in cahuur ka Dhaafid*

Laga bilaabo 1da Febraayo, 1975 qodobka 30aad ee Taariifada Furdadaha ee lagu soo saaray Dekreetada Sharciga ah lr, 5 ee 11-12-1968 waa la baabi'iyey.

Qodobka 4aad

*Hirgelinta sharcigan*

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, qof kastana waxa laga rabaa inuu dhawro.

Muqdisho, 20 Nofembar 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

---

## BOGGA LABAAD

**XEER L. 163 ee 31 Aqoosto 1975.**
**Dallacaad.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO AKRAY Qodobka 5aa (lambarka 44aad) ee sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska lanaso saaray 23kii disembar 1972, kuna lambarsan 2;

ISAGOO KU AMRAY Wareegtadii lambarkeedu ahayd XGM-GSK 4-4594, taariikhdeeduna ahayd 15 Abriile 1974 ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka ugana soo xogwarramay Saraakiil ka mid ah Ciidanka Boliiska, isagoo soo amray in la dallacsiiyo;

ISAGOO TIXGELIYEY Dallacaadii ay u garteen Wafdigii uu hoggaaminayey Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka ee booqashada ku tegay Gobollada Bay, Bakool iyo Degmooyinkooda, taariikhdu markay ahayd 15kii Abriile 1974, taasoo ay ku gaareen Saraakiishaasi hawlkarnimo awgeed iyo iyagoo si mabaadi' da Kacaanka waafaqsan kula dhaqmeen dadka ay mas'uulka u yihiin;

ISAGOO dhegeystay Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Saraakiisha magacyadoodu hoos ku qoran kana tirsan Ciidanka Boliiska la dallacsiiyey, lana gaarsiiyey darajada ku qoran Sarkaal walba hortiisa, marka laga bilaabo 15ka abriile 1974, kuna hirgeleysa xagga sharciga iyo dhaqaalaha uu muteystay awgiis (merito eccezionale).

1. Laba Xiddigle Axmed Maxamed Muuse «Mijir» waxaa loo dallacsiiyey darapada *Dhamme;*

2. Laba Xiddigle Maxamed Kediye Cilmi waxaa loo dallacsiiyey darajada *Dhamme.*

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 27 Sebtembar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

---

Xoghayaha Dawladda
ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha

*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 5 bogga lamb. 63.*
*Muqdisho, 13 Oktoobar 1975.*
*Hantidhowrka Guud*
G. Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

**XEER L. 164 ee 31 Aqfisto 1975.**
**Dallacaad Saraakiil.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5aad xubinta 4aad ee sharciga 2 ee 23 Disembar 1972 kuna saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska;

ASAGOO KU ARKAY Warqaddii GSK-S-27-A-1-79 ee 5-8-1974 ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka kana xogwarrameysay labada Sarkaal oo ka tirsan Ciidanka Boliiska ahna Xeer Ilaaliye ku-xigeennada Maxkamadda Badbaadada Dalka, isagoo soo jeediyey hal-hal darajo in la dallacsiiyo;

ASAGOO AQOONSADAY Ra'yigii Taliyaha Ciidanka Bolîıska ee ku saabsanaa labada Sarkaal ee hore (1 iyo 2);

ASAGOO TIXGELIYEY Wanaaga iyo habsamida ay kaga soo warrameen Taliyaha Ciidanka Boliiska iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii Xoghayaha Dawladda eeWasaaradda Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Dhammeyaasha hoos ku magacaaban la dallacsiiyay lana gaarsiiyey Darajo Gaashaanle, marka laga billaabo 5-8-1974 muteysi awgeed.

1. Dhamme Maxamed Jelle Cawaale;
2. Dhamme Axmed Maxamed Halac;
3. Dhamme Maxamed Dhaqane Iidle;
4. Dhamme Cabdillahi Warsame Maxamed.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 31 Aqoosto 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda
ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmiye*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diwaanka Lamb. 5 bogga Lamb. 64.*
*Muqdisho, 13 Oktoobar 1975.*
*Hantidhowrka Guud*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

**XEER L. 165 ee 31 Aqoosto 1975.**
**Dallacaad.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Kfiwaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo Qaynuunka Koowaad ee 21kii Oktoobar, 1969;

ISAGOO ARKAY Qaynuunka Lamb. 2 ee 23kii Disamber, 1972kii iyo Sharcigii Hoose ee la xiriirsanaa hannaanka iyo dhismaha Ciidanka Boliiska;

ISAGOO ARKAY Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Baliiska kuna soo sheegay sida ku qoran xaashidiisii lamb. SEC-A-8-1 ee 27 Aqoosto 1974;

ISAGOO AQOONSADAY In Layliga Sarkaal ee hoos ku magacaaban la dallacsiiyo iyadoo la tigelinayo sida habsamida ah ee uu ku dhammeystay tababarkii Akadeemiyada Moodena;

ISAGOO HUBIYEY Inay jagooyin ka bannaan yihiin Tirada Talagalka ah ee Saraakiisha Boliiska;

ISAGOO DHEGEESTAY Ra'yigii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAYA

Qodobka 1aad

In Layli Sarkaal Xasan Ducalle Kaahiye oo ka tirsan Ciidanka Bo-Boliiska loo dallacsiiyey lana siiyey darajada ah Xiddigle marka laga bilaabo 1dii bishii Setembar, 1973kii. Xagga dhaqaalaha (Mushaharka) xeerkani wuxuu ka hirgelaya 1da Janaayo, 1974ka.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doona Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 31 Aqoosto 1975.

MAXDAWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 5 bogga lamb. 65.*
*Muqdisho, 13 Oktoobar 1975.*
*Hantidhawraha*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

**XEER L. 166 ee 27 Sebtembar 1975.**
**Dallacaad.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5aad lambarka 4aad ee sharciga 2 ee 23-12-1972 ee Dhismaha Ciidanka Boliiska;

ASAGOO AQOONSADAY Ra'yigii Taliyaha Ciidanka Booliska kuna soo shegay warqadda SEC. A-8-1 ee 27-8-1974;

ASAGOO DHEGAYSTAY Taladii Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In 3da Kormeere seddexaad ee hoos ku magacaaban kana tirsan Ciidanka Boliiska loo dallacsiiyo Xiddiglayaal marka laga bilaabo 1-9-1974 Kacaannimo, hawlkarnimo iyo daacadnimo awgeed:

1. K. S. 289 Ciise Muuse
2. K. S. 4227 Xasan Shire
3. K. S. 295 Cali Xuseen.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 31 Aqoosto 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Xuseen Kulmiye*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 5 bogga lamb. 66.*

*Muqdisho, 13 Oktoobar 1975.*

*Hantidhowraha*
G. Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

**XEER L. 167 ee 26 Oktoobar 1975.**

**Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Gedo qaybtooda Wakiillada Beesha.**

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo aan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8-6-1972kii lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-9-1972kii ku saabsan Maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Qodobka 1aad Xeer Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lambarkiisu yahay 102, taariikh 26-9-1973 lagu qoray Faafinta Rasmiga ee Dawladda, taariikh 11-9-1973kii ku saabsan dhismaha Gobollada: Bay, Gedo iyo Bakool;

ISAGOO OGAADAY Iney lagama maarmaan tahay in la cusbooneysiiyo Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka: Garbaharay — Luuq — Ceel Waaq — Doolow — Baardheere — Saakow;

ISAGOO TIXGELINAYO Talada uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Gedo;

## WUXUU XEERAY

### Qodobka 1aad

Magacowga Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka: Garbaharay, Luuq, Ceel Waaq, Doolow, Baardheere iyo Saakow qaybahooda Wakiillada Beesha.

Ka bilaabanta 20-10-1974kii, dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxan yihiin, waxaa loo magacaabay inay noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka ku hoos qoran yihiin:

## DEGMADA GARBAHARAY

1. — Maxamed Aadan Cabdi
2. — Sheekh Busuri Sheekh
3. — Xasan Gargaar Cusmaan
4. — Sheekh Aadan Mataan
5. — Cusmaan Cigaal Cali
6. — Xasan Xirsi Faarax
7. — Macallim Cabdi Moxamuud
8. — Sheekh Cali Xasan
9. — Xabiiba Xaashi Geelle
10. — Bulle Shaaciye Cali
11. — Sheekh Cabdi Yuusuf Cali
12. — Cabdullahi Carten Nuur
13. — Moxamed Ciise Samatar
14. — Sheekh Moxamuud Sahal
15. — Moxamed Cabdulle Moxamed
16. — Sheekh Cabdi Moxamed
17. — Sheekh Cusmaan Moxamed Cilmi

DEGMADA LUUQ

1. — Sheekh Aadan Moxamed Suudl
2. — Xaji Cali Cabdi
3. — Cabdi Xirsi Guuleed
4. — Sheekh Cabdiraxmaan Yusuf
5. — Yusuf Moxamed Cilmi
6. — Cawrala Cusmaan Moxamed
7. — Axmed Moxamuud Yusuf
8. — Sheekh Moxamed Jaamac
9. — Sheekh Abshir Cabdiraxmaan
10. — Yusuf Jaamac Liibaan
11. — Ibraahim Nuuro Axmed
12. — Muslimo Xaashi
13. — Moxamed Xirsi Jaamac

DEGMADA CEEL-WAAQ

1. — Cismaan Moxamuud Moxamed
2. — Xulbada Macallim Moxamed Ibraahim
3. — Moxamed Yaasin Cige
4. — Sh. Xasan Iftiin Axmed
5. — Yusuf Moxamed Cabdi
6. — Sh. Axmed Sheekh Cabduraxmaan
7. — Moxamed Axmed Cilmi
8. — Moxamed Yuusuf Cali
9. — Cismaan Warsame Camalou

DEGMADA DOLLOW

1. — Maxamed Xaaji Muuse Saciid
2. — Axmed Xuseen Mala
3. — Maxamuud Xaaji Maxamed
4. — Cabdullahi Diiriye Guuleed
5. — Cali Xasan Jaamac
6. — Sh. Cumar Macallim Yuusuf
7. — Cabdi Ducaale Nuux
8. — Xaliima Faarax Dhowre
9. — Cliyow Caddow Aadan

DEGMADA BAARDHEERE

1. — Cabdikarim Isaaq Ibrahim
2. — Timiro Maxamed Yusuf
3. — Moxamed Yusuf Macallim
4. — Moogay Khalif Xusen
5. — Sid Bakar Cusmaan

6. — Khadiija Cabdikarim Nuur
7. — Axmed Dool Dhudi
8. — Xaawo Cabdinasir Macalin
9. — Xasan Cilmi Cali
10. — Moxamed Qorane Yusuf
11. — Xusen Diriye Xasan
12. — Sheekh Xuseen Sheekh Cabdirisaaq
13. — Cabdl Malik Bin Cabdaalla Bin Cabdaalla

DEGMADA SAAKOOW

1. — Nuune Cali Aadan
2. — Xaaji Cali Caliyow
3. — Musdhaf Mayow Macalin
4. — Mocalin Moxamed Cabdi
5. — Abuukar Nuur Moxamed
6. — Sheekh Xusen Colow
7. — Cabdi Duubay Madoobe
8. — Iisha Cabdi Roobow
9. — Faaduma Maxamed Cabdi

Qodobka 2aad

*Dhan Gal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20-10-1974ka, waana in lagu qoro Faafinta Rarsmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 26 Oktoobar 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

XEER L. 168 ee 14 Oktoobar 1975.
**Habka Gadashada Faleenka Wadanka Gudihiisa.**

## XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga Lamb. 17 — Qodobka 4aad (Xubintiisa 2aad — Xarafka «e»), oo soo baxay 17-6-1967, kuna saabsan Ganacsiga Alaabta Lagama Marmaanka ah.

MARKUU ARKAY Sharciga Lamb. 58 ee 14-9-1970, kuna saabsanaa ciqaabta mudanaya qofkii u hogaansami waaya Xeerka soo saarta Wasaaradda Ganacsiga.

MARKUU ARKAY Sharciga Lamb. 17 ee soo baxay 4 Maarso 1972, kaasoo Faleenka dhoofintiisa u xidhay Wakaaladda Ganacsiga Ummadda.

IYADOO ay lagama maarmaan noqotay in si deg deg ah looga hortago dhaqan xumida ku jirta Faleenka lagu kala gadanaya Wadanka Gudihiisa.

IYADOO la tixgelinaaya tala jeedinta Wakaaladda Ganacsiga Ummadda.

## WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA

### Qodobka 1aad

Beeyada lagu magacaabo Maydi iyo Moxor oo la sarco in aan lagu ganaax u yaraan Sh. So. 500 (shan bogol) ilaa Sh. So. 5000 Shan Kun), Sanaag iyo Gobolka Bari, iyo Degmada Berbera ee ay Beeyo ku dhowdahay, iyo Degmada Burco oo iib loo wado ay ku soo galayso.

Midda kale oo Beeyo lagu magacaabo oo ka baxdo Muqle iyo Qaroon, Laamaha Gobollada iyo Xarunta Wakaaladda Ganacsiga Ummadda ayaa laga iibinayaa.

### Qodobka 2aad

Gobollada iyo Degmooyinka, oo aan ahayn kuwa ku xusan Qodobka 1aad, in lagu kala gato Maydi iyo Moxor qof kastaba waa ka mamnuuc, Wakaaladda Ganacsiga Ummadd mooyaane.

### Qodobka 3aad

Qof kastoo u hogaansami waaya Xeerkani wuxuu mudan doonaa ganaax u yaraan Sh. So. 500 (Shan boqol) ilaa Sh. So. 5000 (Shan Kun), ama xabid u yaraan 3 (saddex) bilood ilaa 5 (shan) sano, ama labadaba.

Maydiga iyo Moxorka saas lagu qabtana, waa waras (confiscated).

Qodobka 4aad

Xeerkanu wuxuu dhaqan gelayaa durbaba, wuxuuna tirayaa Xeer kastoo ka soo horjeeda.

Waxaa lagu amarayaa qof waliba in uu dhowro, dadka kalena dhowrsiiyo Xeerkaan isaga ah.

Muqdisho, 14 Oktoobar 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, Bogga lamb. 178.*
*Muqdisho, 19 Nofembar 1975.*
*Hantidhawrka Guud*
G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

---

**XEER L.169 ee 15 Disembar 1975.**
**Diiwaan Gelinta Iskaashatada Ganacsiga Muuska Biseel ee Shalamboot.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Go' aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4-10-1973;

ISAGOO ARKAY Arjigii uu soo qoray Guddoomiyaha Iskaashatada Ganacsiga Muuska Biseel ee Shalamboot.

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladii Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada Marka iyo kan Gobolka Shabeelaha Hoose.

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Ganacsnga Muuska Biseel, saldhiggeedu yahay Magaaladda Shalamboot, shaqadeeduna tahay Ganacsiga Muuska, Muuskaasoo ay ka soo iibsanaysa beeraleyda, dabadeedna u sii iimgeynayso suuqyada Waddanka Gudihiisa.

Waxaa laga diiwaan geliyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taasoo waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga lambarkiisu yahay 40ka oo dhaqan galay 4 Oktoobar 1973.

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta Xeerkani lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Iskaashatada Ganacsiga Muuska Biseel ee Shalamboot, waxay yeelanaysa aqoonsi gaar ah oo Sharci ku dhisan; xeer gaarkeeduna wuu dhaqangalayaa.

Muqdisho, 15 Disembar 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud*

---

**XEER L. 170 ee 15 Disembar 1975.**
**Diiwaan Gelinta Iskaashatada Xijiga «HODAN» ee Qardho.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Shaciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4-10-1973;

ISAGOO ARKAY Xeer Guddomiyaha G.S.K. ee lambarkiisu yahay 8, oo soo baxay 23-12-1974, kuna saabsanaa Habka Diiwaan Gelinta Iskaashatooyinka;

ISAGOO ARKAY Arjigii uu soo qorey Guddoomiyaha Iskaashatada Xijiga «Hodon» ee Degmada Gardho, kuna weydiisanaayey in Iskaashatadaasi la diiwaan geliyi.

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladii Guddiga Iskashatooyinka ee Degmada Qardho iyo kan Gobolka Bari Boosaaso;

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Xijiga ee lagu bagacaabo «Hodon» ee saldhiggedu yahay Degmada Qardho, shaqadeeduna tahay guritaanka Xijiga Degmada Qardho, waxaa laga diiwaan galiyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taas oo waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga Lambarkiisu yahay 40ka, oo dhaqan galay 4-10-1973.

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Iskaashatada Xijiga «Hodon» waxay yeelaneysaa aqoonsi gaar ah ee sharci ku dhisan. Xeer-Gaarkeeduna wuu dhaqan galayaa.

Muqdisho, 15 Disembar 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud*

---

**XEER L. 171 ee 15 Disembar 1975.**
**Diiwaan Gelinta Iskaashatada Rootiga «Muruqmaal» ee Magaaladda Jilib.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriaydda Dimoqraadiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4-10-1973;

ISAGOO ARKAY Arjigii uu soo qoray Guddoomiyaha Iskaashatada Rootiga ee lagu magacaabo «Muruqmaal» ee Magaalada Jilib.

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladii Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada Jilib iyo kan Gobolka Shabeelaha Hoose;

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Rootiga ee lagu magacaabo «Muruqmaal», ee saldhigeedu Magaaladda Jilib yahay, shaqadeeduna tahay Ganacsiga Rootiga.

Waxaa laga diiwaan galiyey Xafiiska Iskashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taasoo waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga lambarkiisu yahay 40ka, oo dhaqan galay 4-10-1973.

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Iskaashatada Ganacsiga Rootiga ee lagu magacaabo «Muruqmaal» waxy yeelanaysa aqoonsi gaar ah oo Sharci ku dhisan; xeer gaarkeeduna wuu dhaqangalayaa.

Muqdisho, 15 Disembar 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud*

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDUU arkay dacwada horay ku qoran;
MARKUU arkay waxa ay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga Ganacsinga Ummadda Laanta 3aad, wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;
HADDUU arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

### WUXUU CADEEYNAYAA

Lumida buugga keydka ee lam. 748-4 oo ay ku qornay lacag dhan Shs. 1.075 (kuntodobaatanshan) uu iska lahaa Xasan Maxamed Sheegow.

### WUXUU AMRAYAA

In Jaallaha kor ku magacaaban loo sameeyo buug keyd cusub ka dib markii 30 maalmood ka soo wareegto marki Amarkan lagu shaaciyo Faafinta Rarsmiga ee Dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In buug keydka cusub ee la sameyn doono gacaanta laga saaro Xasan Maxamed Sheegow ma qof isla asagaas ka sita wakaalad Sharci ah ayadoo la sugaayo muddada 30ka maalmood ah ee kor ku xusan.

Xamar, Tr. 13 Nofembar 1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA
*Cabdullahi Daahir Barre*

*(293)*

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDUU arkay weydiinta hor ku qoran;

MARKUU arkay waxa ay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga Ganacsiga Ummadda (eeg warq. lam. 15563 wuxuu ogaaday ay tahay shaqadiisa;

HADDUU arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

### WUXUU CADEEYNAYAA

Lumidda jeegga wareega ee lam. 15563, kuna qornayd Shs. 1,200 (kunlababogol) uu u iska lahaa Jaalle Cali Xasan Xersi.

### WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo jeeg wareega ee cusub ninka kor ku magacaaban 15 beri ka dib marki dekreetadan lagu Shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Cali Xasan Xersi, ama qof isla asagaas wakaalad Sharci ah ka sita ayadoo la sugaayo 15k maalmood ah ee kor ku tilmaaman.

Xamar, Tr. 6 Nofembar 1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA
*Cabdullahi Daahir Barre*

*(294)*

IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA
جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Muqdisho, 10 Disembar 1975 | L. 1 R. 12

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### SHARCI

W. M.

IXEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGARSIINTA, 26 Oktoobar 1975, L. 171 — *Beddelaadda Taariĵada Boostada.* Bog. 972

## BOGGA LABAAD

---

### TALOOYIN ISGARSIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

W. M.

Madbacadda Dawladda — Muqdisho

# BOGGA LABAAD

**XEER L. 171 ee 26 Oktoobar 1975.**

**Beddelaadda Taariifada Boostada.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad tan iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 21aad ee Sharciga Boostada Sharci Lamb. 62 ee 22ka Sebtember, 1971;

ISAGOO ARKAY Xeerka ku saabsan taariifada Boostada Xeer Lam. 1760 ee 12ka Disembar, 1971;

ISAGOO ARKAY Heshiiska u dhexeeya Ururka Boostada Adduunka (U.P.U.) go'aamada lagu gaaray (Lausanne 1974);

ISAGOO TIXGELINAYA Baahida loo qabo in taariifada Boostada tan gudaha iyo tan dibeddaba wax laga baddelo;

ISAGOO KALA ARRINSADAY Xoghayaha Dawladda ee Maaliyadda;

WUXUU XEEREEYEY

Qodobka 1aad

*Beddelaad*

Taariifada Boostada oo hore loogu dhaqmi jiray soona baxday sannadka 1972dii, waxaa lagu beddelay taariifada halkan ku lifaaqan oo ah qayb ka mid ah xeerkaan.

Qodobka 2aad

*Tirtirid*

Wixii amarro ah oo ka soo horjeeda amase aanan waafaqsaneyn xeerkaan waa la tirtiray.

Qodobka 3aad

*Hirgelin*

Xeerkaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jannaayo 1976, waxaanna lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 26 Oktobar 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta
*Dr. Cabdullaahi Cosoble Siyaad*

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Maaliyadda
*Dr. Cabduraxmaan Nuur Xersi*

# TARIFADA BOOSTADA GUDAHA 1976

1) LETTER WARQAHADA.

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | Ilaa | 20 | Gr. | Sh. So. | 0,50 |
| Kabadan | 20 | Gr. | » | 50 | » | » | 1,25 |
| » | 50 | » | » | 100 | » | » | 2,00 |
| » | 100 | » | » | 250 | » | » | 4,00 |
| » | 250 | » | » | 500 | » | » | 8,00 |
| » | 500 | » | » | 1000 | » | » | 14,00 |
| » | 1000 | » | » | 2000 | » | » | 20,00 |

Ugu Badnaan 2 Kg.

2) AEROGARAAMKA.

b) Aerogaraamka Boostada — Sh. So. 0,40

t) Aerogaraamka ah sida wargadda.

3) KAARKA BOOSTADA.

b) Kaarka Boostada keli ah — Sh. So. 0,40

t) Kaarka sawirka leh — » » 0,40

Ugu badnaan 10 Gr.

4) KAARARKA DAABACAN EE HAMBALYADA, DHALASHADA TACISYADA GUURKA IWM.

Galaysan ama gal lahyn:

b) Dhamaantiisa dabacan ama sita wax aan ka badnayn shan eray oo salaan ah, taariikhda iyo saxiixa diraha — So. Sh. 0,30

t) Haday shan eray ka badan ku qoran yihiin oo hambalyo ahi ama dhambaal gaar ahaaneen. Galaysan: sida kaarka Boostada.

Ugu badnaan 15 Gr.

5) ALAABTA DAABACAN.

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | Ilaa | 50 | Gr. | Sh. So. | 0,80 |
